***JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA***

***WASAARADDA SHAQADA IYO ARRIMAHA BULSHADA***

# ***HINDISHE-SHARCIYEEDKA SHAQADA SOOMAALIYA***

***10 MAAJO, 2023***

***Muqdisho–Soomaaliya***

# QEYBTA 1AAD
# QODOBBO GUUD

## CUTUBKA 1AAD

## Magaca iyo Qeexitaanno

### Qodobka 1aad

### Magaca Sharciga

1. Magaca Xeerkan, waxaa loogu yeerayaa "**Sharciga Shaqada Soomaaliyeed" (*Somali Labour Code*).**

### Qodobka 2aad

### Qeexitaanno

Haddii aan si kale loogu qeexin xeerkan dhexdiisa, qeexidda erayada soo socda waa sidan:

1. **"Diikhowga Hawada"** waxaa loola jeedaa walxo wasakh ah oo hawada ku jira, kuwaas oo waxyeello u geysan kara caafimaadka noolaha iyo deegaanka.
2. **"Sarkaal Idman"** waxaa loola jeedaa Sarkaal kasta oo la siiyo awood uu ku fulin karo ficil kasta iyo adeegyada ku xusan xeerkan, kaas oo wakiil ka ah Guddiga Shaqada ee Fadaraalka, Agaasimaha Shaqada, Agaasimaha Bad-qabka iyo Caafimaadka goobta shaqada.
3. **"Xoogsade Maalin Goosad ah"** waxaa loola jeedaa qof kasta oo fulinaya hawl gaar ah, kuna hawl-gala shuruudaha shaqada taas oo beddelkeeda uu ku qaadanayo lacagta uu kasbaday marka shaqadu dhammaato.
4. **"Habraac Shaqo"** waxaa loola jeedaa qoraal kasta oo loogu tala-galay in lagu hago shaqada si loo gaaro waxqabad wanaagsan, haddii ay ahaan laheyd mihnad, xirfad, warshad ama shirkad

5. **“Carruur”** waxaa loola jeedaa qof kasta oo aysan da’diisu gaarin **18** Sano.

6. **“Gorgortan Wadareed”** waxaa loola jeedaa wada xaajood u dhaxeeya loo-shaqeeye, koox loo-shaqeeye ah ama wax ka badan ururro loo-shaqeeyeyaal ah ama wax ka badan ururro shaqaale si:
   **b)** Loo go’aamiyo duruufaha shaqada iyo shuruudaha shaqo-siinta;
   **t)** Loo nidaamiyo xiriirrada u dhaxeeya labada dhinac ee loo-shaqeeye iyo shaqaale;
   **j)** Loo nidaamiyo xiriirrada u dhaxeeya ururro loo-shaqeeyeama ururro shaqaale.

7. **“Heshiis Wadareed”** waxa loola jeedaa heshiis diiwaan-gashan oo ku saleysan shuruudaha iyo xaaladaha shaqo-siinta oo qoraal ah, sida: qoraal dhex mara urur shaqaale iyo urur loo-shaqeeye, koox loo shaqeeye ah ama urur shaqaale.

8. **“Guddi Sare”** waxaa loola jeedaa Guddiga Sare Shaqada Federaalka ee lagu aasaasay qodobka **25[aad]** ee xeerkan.
9. **“Qof Tababaran”** waxaa loola jeedaa qof kastaoo haysta shahaadooyin, leh tababar iyo waayo-aragnimo ku filan oo u suurto-galinaysa in uu qabto, fuliyo waajibaad gaar ah ama shaqo mucayin ah
10. **“Heshiis Shaqo-siin”** waxaa loola jeedaa heshiis la shaaciyey ama mid aanla shaacin, qaab kasta ama ku shaqeyn shaqaale muddo cayiman oo ay ka mid tahay heshiis farsamo barad
11. **“Ku-tiirsane”** waxaa loola jeedaa xubin ka mid ah qoyska qofka shaqaalaha ah ama qaraabadiisa, kaas oo noloshiisu si weyn ugu tiirsan tahay shaqaalahaas

12. **“Agaasime”** waxaa loola jeedaa agaasimaha shaqada, bad-qabka mihnadda iyo caafimaadka ama midkood.
13. **“Naafo”** waxaa loola jeedaa itaal-dari kasta oo ku timaadda qofka jirkiisa, maskaxdiisa, dareenkiisa ama xaalado kale taas oo waxyeeli karta

qofka araggiisa, maqalkiisa, waxbarashadiisa, fikirkiisa ama awooddiisa oo saameyn ku yeelan karta in uu ka qeyb qaadan waayo dhaqan-dhaqaalaha bulshada.

14. **"Shaqaale"** waxaa loola jeedaa qof kasta oo fulinaya hawl-maskaxeed ama mid gacmeed oo uu la galay loo-shaqeeye, noqon kartana heshiis gaar ah ama mid guud oo af ama qoraal ah, taas oo ah shaqo farsamo-barad ama tijaabo ah, laguna helayo xuquuq.

15. **"Loo-Shaqeeye"** waxaa loola jeedaa loo-shaqeeye si sharci ah loogu shaqeeyo, shaqana u dira dad shaqaale ah, shaqadaasuna joogto ha ahaato ama aanay ahayn, midkoodba loo-shaqeeyeyaashaasna waxaa ka mid ah:

    b) Hay'ad dawladeed, dawladi maamusho ama shirkad guud;

    **t)** Loo-shaqeeye dhaxal ah, la wareege ah, wakiil ah ama laysku wareejiyay;

    **j)** Wakiil, Agaasime ama qof kasta oo u xilsaaran inuu matalo loo-shaqeeyaha;

    **x)** Hay'ad fursadaheeda shaqo loo siman yahay, hadafkeeduna yahay in shaqo-siinteedu aan dadka lagu kala takoorin, haddii ay tahay hay'ad Dawladdeed ama mid gaar ah.

16. **"Urur Loo-Shaqeeye"** waxaa loola jeedaa urur kasta oo ay dhisteen loo-shaqeeyayaashu iyada oo ujeeddadu tahay kordhinta iyo difaacidda danaha loo-shaqeeyeyaasha.

17. **"Wakaalad Shaqo-siin"**waxaa loola jeeda qof kasta, shirkad, hay'ad, wakaalad kasta ama hay'ad kale, ha ahaato mid guud ama mid gaar loo leeyahay, taas oo ka dhex-shaqaysa Shaqalaha iyo loo-shaqeeyaha, iyada oo ujeedkeeduna tahay in dadka ay shaqo-siiyaan oo ay ka faa'iiddo, kana hesho macaash,lacag go'an, sida lacagta soo gelitaanka/diiwaan-gelinta dhawrto muddeysan, ama lacag adeegyo kale.

18. **"Dayac"** waxaa loola jeedaa xaddiga qofka shaqaalaha ah ka soo gaaraya goobta shaqada oogadiisa, gudihiisa ama jug qarsoon midkood oo si taxaddir la'aan u dhacda.

19. **“Xiriir”** waxaa loola jeedaa urur diiwaan-gashan oo leh laba ama in ka badan oo ururro shaqaale ah, laba ama in ka badan oo ururro loo-shaqeeyeyaal ah ama laba ama in ka badan oo xiriirro guud ah.

20. **“Juujuubid ama Shaqo Qasab ah”** waxaa loola jeedaa shaqo ama adeeg kasta oo si jajuub ah qof loogu shaqeysto iyada oo loogu gooddinayo ama loogu hanjabayo ciqaab, sida xuquuq la’aan ama Sharaf-diliyo wixii la mid ah ee xeerka shaqada ka soo horjeeda.

21. **“Qiiq/Qaac”** waxaa loola jeeda uu ku jiro Gaas ama Uumi.

22. “**Dareere si Fudud u Ololi Og”** waxaa loola jeedaa dareere kasta, milan ama dhibco uumi ah oo ku guban kara ugu yaraan **32** digrii sentigarayd**(32$^{o}$ C).**

23. **“Digniin Toosin ah”** waxaa loola jeedaa ogeysiis loo soo saaray qof kasta oo ku hawlan arrimo ka hor imaanayaan Bad-qabka mihnadda iyo caafimaadka ee xeerkan ama xeer-hoosaad kasta oo hoos imaanaya si loo saxo xeer-jebinta muddo cayiman.

24. **“Hawlo Warshadeed”** waxaa ka mid ah:

**b)** qodaalka, faagidda macdanta iyo shaqooyinka kale ee wax lagala soo baxayo dhulka hoostiisa;

**t)** Hooso (Garaash), wax-soo-saar, warshad ama meel agab ceeriin yaalo ama alaabo kale lagu sameeyo, loogana shaqeeyo ama lagu baakadeeyo;

**j)** Dhismaha, dib-u-dhiska, dayactirka, hagaajinta, beddelidda ama duminta dhisme kasta, Waddada Tareenka, deked, Marso, Deked yar, kannaal, Biyo-mareen, waddo, waddo-dhuumeed (Tunnel), buundo, kubri, Bullaacad, tuubbo qashin-saar, ceel, telegraphic ama rakibidda telefoonnada, korontada, shaqada gaaska, shaqada biyaha ama shaqo kasta oo dhismo ah, iyo sidoo kale diyaarinta ama aasaasidda hawlahaas ama dhismayaal noocaas ah;

**x)** Gaadiidka rakaabka ama badeecadaha ku yimaada waddooyinka dhulka sida jidadka baabuurta, tareenka, ama waddooyinka dalka ee mara biyaha hoostooda, iyo isku xirka rakaabka ama badeecadaha;

**Kh)** Meelo kale ama hawl kasta Wasiirku marka uu tixgeliyo nooca shaqada wuxuu amrayaa hawl warshadeedka la rabo in la fuliyo.

**25. "Khilaafka Shaqada ama Shaqaalaha"** waxaa loola jeedaa khilaaf kasta oo u dhexeeya:

**b)** Loo-shaqeeye iyo shaqaale;
**t)** Urur loo shaqeeye iyo urur shaqaale;
**j)** Xiriir loo-shaqeeye iyo xiriirro ururro shaqaale;
**x)** Shaqaale iyo shaqaale kale;
**Kh)** Urur shaqaale iyo urur shaqaale kale;
**d)** Shaqaale iyo urur shaqaale;
**r)** Urur shaqaale iyo xiriir ururro shaqaale;
**s)** Urur loo-shaqeeye iyo xiriir ururro loo shaqeeye;

**Taas oo ku xiran:**

**b)** Shaqo-siin ama mid aan aheyn shaqos-iin;
**t)** Shuruudaha shaqo-siinta;
**j)** Xaaladaha shaqada ee shaqaale kasta;
**x)** Xubinnimo, goobo shaqo ama caymis;
**Kh)**Wax kasta oo xiriir la leh heshiis shaqo-siin.

**26. "Shaqo Fudud" Macnaheedu, waa mid aan suurtagal aheyn:**

**b)**In ay wax u dhinto caafimaadka, ama horumarka Carruurta;

**t)**Ka-cagajiidka carruurta imaanshaha iskuulka, ka qeyb-galka carruurta barnaamijyada wacyi-gelinta iyo tababarka xirfadaha ama awoodda ilmuhu uga faa'iidaysan karaan habraacyada khuseeya arrintaan ee uu Wasiirku ansixiyey.

**27. "Xirasho Goob Shaqo"** waxaa loola jeedaa xiritaan goob shaqo, shaqo hakin ama diidmo loo-shaqeeyaha uu diido in ay u shaqeeyaan shaqaalaha, iyada oo ujeeddadu tahay in uu ku qasbo shaqaalaha in ay aqbalaan dalab kasta oo la xiriira khilaafka shaqo ee jira.

**28. "Matoor'** waxaa loola jeedaa shay kasta ama isugeynta qalab loo isticmaalo ama loogu talo-galay in loo adeegsado dhalinta nooc kasta oo tamar/koronto ah si shaqo loogu qabto, ama loo isticmaalo looguna talo-galay in loo

adeegsado horumarinta, helista, kaydinta, haynta, xakameynta, beddelidda, gudbinta, wareejinta ama hubinta nooc kasta oo tamar/koronto ah.

**29. "Halista ugu Weyn ee Rakibaadda" macnaheedu waa rakibaadda:**

**b)** Meel xaddigii ama walxo intii loogu talo-galay in ka badan lagu keydiyo, muddo kastaba;

**t)** Meel kasta oo wax lagu soo saaro, lagu farsameeyo, lagu isticmaalo, lagu maamulo ama loogu keydiyo qaab ay suurta-gal tahay inay keento shil weyn.

**30. "Shil Weyn"** waxaa loola jeedaa shil baaxad leh oo ka dhasha isticmaalka warshad ama Matoor goob shaqo oo hawl loogu qabanayey

**31. "Ilaalin Caafimaad"** waxaa loola jeedaa barnaamij qorshaysan oo marmar baaritaan la sameeyo, kaas oo ay ku jiri karaan baaritaan dhiig, tijaabo caafimaad oo lagu sameeyo dadka la shaqosiiyey, waxaana baaritaannadaas sameynaya xeeldheere caafimaad ama shaqaale mihnad u leh arrimaha caafimaadka.

**32. "Shaqaale Dool ah"** waxaa qof kasta oo si iskiis ah u yimid si uu uga xoogsado gudaha Soomaaliya, waxaana ka mid ah dadka dool ahaan shaqo loogu oggolaado oo aan aheyn kuwa xadduudaha ka soo gala, farshaxanadda ama aqoonyahannada ku joogayo mudo gaaban iyo bad-maaxiinta

**33. "Wasiir"** Waxaa loola jeedaa Wasiirka Federaalka ee u xilsaaran Arrimaha Shaqada.

**34."Wasaarad"** waxaa loola jeeda Wasaaradda mas'uulka ka ah arrimaha shaqada.

**35. "Buuq/Guux"** waxaa loola jeedaa dhammaan dhawaqa tamarta ama hugunka/dhawaaqa matoorrada, kuwaas oo keeni kara maqal la'aan, waxyeellana u geysan kara caafimaadka qofka shaqaala ah ama khatar kale.

**36. "Nadaafadda Goobaha Mihnadda"** macnaheedu waa ka hortagga iyo xakameynta xaaladaha goobta shaqada, taas oo keeni

karta cudur ama saameyn xun ku yeelan karta caafimaadka shaqaalaha.

37. **"Sarkaalka Bad-qabka iyo Caafimaadka"** macnaheedu waa Sarkaal kasta oo lagu magacaabo xeerkan,oo uu ku jiro Agaasimaha

38. **"Buuxiye/Shaqeeye"(Occupier)** waxaa loola jeedaa qofka ama dadka si dhab ah uga shaqeynaya goobta shaqada, ha ahaado milkiile ama yuusan noqon, uuna ku jira loo-shaqeeyaha.

39. **"Shaqaale Leexsan"** Waxaa loola jeedaa qof kasta oo lashaqosiiyey in uu qabto shaqo, balse waa shaqaale ku shaqeynaya guriga ama meel ka baxsan goobta loogu tala-galay shaqada.

40. **"Milkiile"** waxaa loola jeedaa qofka qaadanaya lacagta kirada ama macaashka dhismaha, ama Akoonkiisa ha ugu dhacdo ama wakiilkiisa uu aaminay ha u qaadee, ama qofka qaadanaya kirada iyo faa'iidada haddii dhismaha la kireeyo.

41. **"Gabal Shaqo"** waxaa loola jeedaa shaqo kasta ama adeeg kasta oo heerka lacag bixintu ay ku xiran tahay xaddiga shaqada la qabtay, iyadoo aan la eegeyn baaxadda waqtigii la shaqeynayey.

42. **"Warshad"** waxaa loola jeedaa agab kasta, makiinad, matoor, iyo agab kasta oo loo adeegsado Warshad.

43. **"Dhismooyin ama Goobo Dhisan"** waxaa loola jeedaa meel kasta oo wax la dhigto, gaar ahan;

**b)** Gaari, markab, diyaarad ama Gaari-biyood (baabuur bad iyo berriba loo isticmaalo) haddii ay dhaqaaqayaan ama aanay dhaqaaqeyn;

**t)**Wax kasta oo lagu rakibo dhul ama biyo dushood, ama meel kale, haddii ay ahaan laheyd mid sabbaynaysa badda dusheeda ama badda hoosteeda yaalla, ama ku jira dhul biyo kor dageen ama dhulka hoostiisa; ama

j) Teendho ama guri kasta oo guuri guuri kara.

44. **"Dhaqaajiyaha Koowaad"**waxaa loola jeedaa mishiinka matoorka ama qalabka kale ee bixiya awoodda tamarta.

45. **“Heshiis Tijaabo ah”** waxaa loola jeedaa heshiis shaqo-siin ah, kaas oo aan ka badnayn muddo 12 (labo iyo toban) bilood ah ama wax ka yar, heshiiskaasi waa qoraal waxa uuna qeexayaa in waqtigaasi uu tijaabo yahay qofka shaqaalaha ah.

46. **“Xilliga Tijaabada”** waxaa loola jeedaa xilli shaqaalaha iyo loo-shaqeeyahaba uu midba midka kale iska tijaabinayo.

47. **“Hannaanka Dhaqaajinta Matoorka”** waxaa loola jeedaa adeegsiga wax kasta oo dhaqaaqa, wax dhaqaajiya ama sahla dhaqaajinta bir ama matoor.

48. **“Digniin Gaar ah”** waxaa loola jeedaa ogeysiis la soo saaray ee ku aaddan qof kasta oo ku hawlan ama gacanta ku hayahawl kasta oo:

**b)** ka hor imaaneysa qodobbada xeerkan ama habraac kasta oo hoos yimaada;

**t)** ku lug leh ama ku lug yeelan kara mustaqbalka, khatar dhaawac halis ah ee shaqaale, taas oo keeni karta in hawlihii la qaban waayo ilaa:

- **i.** Xaaladaha ku qoran digniinta lagu qanco;
- **ii.** Xadgudubyada jira la saxo.

49. **“Goob Munaasab ah”** waxaa loola jeedaa goob shaqo ah oo laga heli karo waxa qofku u baahan karo ee buuxinaya shuruudo iyo degganaan ku filan oo munaasab ah, oo ay ku jiraan isbeddello lagama maarmaan ah oo ku habboon, sidoo kale aan ku keeneynin culays aan loo baahnayn, lana ilaaliyo dadka lixaad la'aanta ah si ay u helaanqanaaco iyo jimicsila siman dadka kale, iyadoo la tixgelinayo dhammaan xuquuqda aadanaha iyo xorriyadda asaasiga ah.

50. **“Shaqaale Dhimis”** waxaa loola jeedaa hoos u dhaca shaqada, mihnadda ama xirfadaha, iyada oo aan qofka shaqaalaha ahi eed ku laheyn, taas oo ay keentay shaqo ka saaris uu loo-shaqeeyuhu ku dhaqaaqey, taas oo inta badan keenta in hawshii xafiiska ay baaba’do shaqosiintuna yaraato.

**51. “Diiwaan-geliye”** waxaa loola jeedaa Diiwaan-geliyaha ururrada shaqaalaha iyo ururrada loo-shaqeeyeyaasha ee lagu tilmaamayxeerkan

**52. “Xuquuq”** waxaa loola jeedaa dhammaan lacagaha la siiyo shaqaale gutay ama ka soo dhalaalay shaqadiisa, oo ay ku jiraan wax kasta oo lagu dhiiri-gelinaayo shaqaale

**53. “Khatar”** waxaa loola jeedaa suurta-galnimada dhacdo saameyn xun ku yeelata nolosha sida naafonimo oo ka timaadda walxo dadka ama deegaanka dhibaato u keeni karta, cawaaqib aad u xunna uu ka dhasho.

**54. “Nadaafad Munaasab ah”** waxaa loola jeedaa hagaajinta meelaha kaadida, falaashka musqusha, Biyo-fariisiga, tubbada qashinka qaadda, qashinka, musqusha, godadka Musqusha iyo wax kasta oo la mid ah oo munaasab u ah dadka Naafada ah iyo qaab kasta oo fududeenaya adeegga fayadhawrka goobta shaqada.

**55. “Iskii u Shaqeyste”** waxaa loola jeedaa qof iskii u shaqaysta si uu faa'iido ama kasab u helo isaga oo aan heshiis shaqaalenimo cidna la gelin ama kula jirin.

**56. “Uumi-kuleyliye”** waxaa loola jeedaa weel kasta oo xiran**,** oo uumiga ku soo saaraa cadaadis ka badan ka jawiga dhulka dushiisa ah, oo ay ku jiraan qalabka loo isticmaalo karkarinta biyaha lagu shubo weel kasta oo noocaas ah, iyo weel heer kulkiisu sareeyo oo loo isticmaalo kuleylka si loo helo tamar/uumi.

**57. “Shaqo Joojin”** waxaa loola jeedaa shaqo joojin ay si wada jir ah u sameeyaan shaqaale, ama diidmo midaysan ama diidmo ay si guud iskula fahamsan yihiin shaqaaluhu in ay joojiyaan shaqada oo aanay sii wadin, iyadoo ujeeddadu tahay in ay ka helaan dalabkooda loo-shaqeeyaha ama ururro loo-shaqeeye ee loo-shaqeeyehoodu xubin ka yahay si ay u helaan dalabkooda ku aaddan khilaafka shaqada si waafaqsan xeerkan.

**58. “Qandaraas-hoosaad Qaate”** waxaa loola jeedaa qof ama shirkad qandaraas-hoosaad ka qaata qandaraasle isaga

ooqoranaya shaqaale loo baahan yahay, wuxuuna heshiis qoraal ah lagalayaa qandaraaslihii si loo fuliyo shaqo cayiman ama ay u qabtaan adeegyada lagu heshiiyey oo leh qiima go'an

59. **"Walxo"** waxaa loola jeedaa wax kasta oo dabiici ah ama gacan ku sameysi ah ama maaddo ah, ha ahaadeen adke, dareere, gaas ama uumi.

60. **"Qeybiye"** waxaa loola jeedaa qof ama shirkad iibiye ah maadooyin ama walax ku bixinaya hab iib ah, kireyn, shaqo-siin ama iibsasho, haddii uu yahay maamule ama wakiil.

61. **"Hawl"** waxaa loola jeedaa xaddiga shaqada ee qofka shaqaalaha ahi uu qaban karo caadi ahaan maalintii, marka la tixgeliyo sida uu arko madaxdiisa tooska ah ee shaqada.

62. **"Urur Shaqaale"** waxaa loola jeedaa urur kasta oo shaqaale oo ujeeddadiisa kowaad tahay ilaalinta iyo difaacidda danaha shaqaalaha.

63. **"Dhaqaajiyaha Mashiinka"** waxaa loola jeedaa wax kasta oo mashiin wareejiya, taayar, Tanbuurad, garaangar, nidaam adkeeya ama dabciya garaangarta, buleejada, shiingiyaha ama qalab kale oo muhiim ah kaas oo dhaqaaqa hore u gudbiya ama ka hela mashiin kasta ama qalab kasta.

64. **"Meel Shaqo"** waxaa loola jeedaa meel kasta ama dhismooyin oo ay shaqaale ku shaqeeyaan.

65. **"Isticmaale"** marka laga hadlayo warshad ama mashiin, waxaa loola jeedaa qof isticmaale ah oo danihiisa uga faa'iideysta warshad ama mashiin, kaas oo xaq u leh ilaalintooda, hase yeeshee, waxaan ku jirin kireystaha iyo qofka loo shaqaaleeyey inuu ku shaqeeyo mashiin iyo warshad wax soo-saar.

66. **"Gariir"** waxaa loola jeedaa tamarta makaanikada iyo korontada ah oo u gudubta jirka qofka iyada oo gilgisha ama gariirisa dhibaato ama halis weynnaku ah caafimaadka qofka.

**67. "Haweeney"** waxaa loola jeedaa qof dumar ah oo 18 (sided iyo toban) sano jirta ama ka weyn;

**68. "Shaqaale"** waxaa loola jeedaa qof kasta oo fulinaya hawl ama shaqo oo loo qabanayo loo-shaqeeye lala galay heshiis gaar ah ama mid guud oo afka ama qoraal ah, ama farsamo barad ah ama tijaabo ah, taas oo uu xuquuq ku kasbanayo.

**69. "Goob Shaqo"** waxaa loola jeedaa dhul kasta, dhisme, meel, Markab ama Doon, Diyaarad ama shay shaqaalaha u dhow, agtiisa, gudahiisa, ama korkiisa ah inta uu ku jiro muddada shaqada.

**70. "Qol Shaqo"** waxaa loola jeedaa qol kasta ama qeyb gooni ah, kaas oo qofka shaqaalaha ahi uu ku shaqeeyo.

**71. "Qaabka ugu Xun ee Shaqo-siinta Carruurta"** marka loo eego shaqo-siintada'yarta, ama u isticmaalidda fal kasta oo ay ka mid tahay:

**b)** Dhammaan hab-dhaqanka la midka ah addoonsiga sida iibinta, kala gudbinta, rahan u haysasho iyo ka-ganacsiga carruurta suuqa madow ee addoonsi ahaan loo qabsado, khasab ugu shaqeysiga carruurta ama u adeegsiga iyo hubeyntooda carruurta xilliga colaadaha;

**t)** Isticmaalidda, qorista, u soo bandhigidda ama ku qalqaalinta ka ganacsiga jirka carruurta si loo soo saaro sawirro ama filimo anshax xumi ah;

**j)** Isticmaalidda, qorista, u soo bandhigidda ama ku qalqaalinta carruurta falal sharci darro ah, sida soo saaridda iyo kala gudbinta daroogada suuqa madow, sida ku qeexan xeerarka, heshiisyada iyo cahdiyada caalamiga ah ee khuseeya carruurta;

**x)** Shaqooyinkaas iyo kuwa la nooc ah ama duruufaha iyo xaaladahaku xeeran ee lagu fuliyo, oo dhaawici kara caafimaadka, bedqabka iyo niyadda carruurta.

**72. "Baare Shaqo"** waxaa loola jeedaa Baaraha Shaqada Degmada ama Baaraha Shaqada Gobolka

**73. "Maxkamadda awoodda u leh"** waxaa loola jeedaa Maxkamadda Gobolka, Maxkamadda Sare ama Maxkamadda Dastuuriga.

### Qodobka 3aad

### Baaxadda Xeerka

1. Qodobbada xeerkan ama Xeer-hoosaadkiisa waxaa ay khuseeyaan ama lagu dhaqayaa dhammaan loo-shaqeeyeyaasha iyo shaqaalaha, oo ay ku jiraan kuwa ka shaqeeya adeegga dadweynaha iyo hay'adaha dawladda haddii aanu jirin shuruudo iyo xaalado adeeg shaqo oo lagu maamulo sharci kale.
2. Qodobbada Xeerkan ama xeer-nidaamiyeyaasha hoos yimaada laguma dabaqayo Ciidamada Amniga sida (Xoogga Dalka, Booliska, Asluubta iyo Nabad Sugidda) marka laga reebo kuwa lagu shaqaaleeyey nidaam rayid ah.

## CUTUBKA 2AAD

## MABAADDI’DA GUUD

### Qodobka 4aad

### Xaqa Xoriyadda Mihnadda

Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu doorto Mihnadda shaqo ee uu rabo.

### Qodobka 5aad

### Ilaalinta Xeerka Shaqada iyo Aqoonsiga Kaalinta Shaqaalaaha

Dawladda ayaa iska leh mas’uuliyadda: -

**b)** In ay ilaaliso shaqada noocyadeeda kala duwan iyo hirgelinteeda haddii ay ahaan lahayd shaqo hay’adeed ama mid fulineed, mid aqooneed, mid farsamo ama mid xoogsi;

**t)** In ay dhiirri-geliso xaaladaha saamaxaya in qofka si buuxda u adeegsado xuquuqihiisa, isaga oo gudanaya waajibaadka ku xusan Faqradda 4aad ee xeerkan; iyo

**j)** In ay aqoonsato ahmiyadda kaalinta weyn ee shaqaaluhu ku leeyahiin horumarinta dhaqaalaha dalka, iyadoo la dhiirri-gelinayo, lana xaqiijinayo ka qeybgalkooda xagga qorsheynta iyo maareynta wax-soo-saarka.

## Qodobka 6aad
## Sinnaanta iyo Takoor La'aanta

1. Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu dadka kale ula sinnaado fursadaha shaqa-siinta iyo mihnadaha iyada oo aan lagu takooreyn wax ku shuqul leh: Sinjigiisa, midabkiisa, ceyntiisa jinsi (Lab iyo Dheddig), luqaddiisa, diintiisa, ra'yigiisa siyaasadeed iyo wax kale oo uu aaminsan yahay, jinsiyaddiisa (dhalashadiisa), qoladiisa ama bulshada uu ka soo jeedo, naafo-nnimo, uur, xaaladdiisa maskaxeed, da'diisa ama in uu qabo fayruska dila difaaca jirka aadanaha (HIV Aids), waxaana sidoo kale qofka shaqaalaha ah waajib ku ah in uu dad kale u oggolaaddo xuquuqaha kor lagu xusay ee sinnaanta iyo takoor la'aanta.
2. Waxaa waajib ku ah wasiirka iyo dhammaan saraakiisha wasaaradda, hay'adaha dawladda, iyo loo-shaqeeyeyaasha in ay dhiirri-geliyaan oo ay dammaanad qaadaan u sinnaanta fursadaha, si loo cirib tiro takoorka dhanka shaqa-siinta.
3. Xaqa-u-sinaanta fursadaha shaqo iyo daryeelka shaqaalaha ee la xiriira shaqa-siinta iyo nooca mihnadda iyo waajibaadka dhiirri-gelinta iyo xaqiijinta xaqa u sinnaanta fursadaha shaqada ee ay leeyihiin shaqaalaha waddanka, waxaa si la mid ah xaqaas yeelanaya shaqaalaha doolka ah iyo qoysaskooda ee heysta sharciga deganaanshaha dalka.
4. Iyadoo aan waxyeello ku keeneynin guud ahaanba faqradda (3) ee qodobkan ee la xiriirta shaqaalaha Doolka, si looga hortago, loona cirib tiro wixii xadgudub ah ee loo geysan karo shaqaalaha doolka ah iyo qoysaskooda, ayaa waxaa Wasiirka looga baahan yahay, isagoo la tashanaya hay'adaha kale ee dawladda ee ay khuseyso iyo wakiillada ururrada loo-shaqeeyayaasha iyo wakiillada xoogsatada:
    a) Si loo hubiyo dabaqidaan takoor laheyn ee la xiriirta dhalashada, isirka, diinta ama jinsiga (Lab iyo Dheddig) ee doolka si sharci ah u daggan gudaha JFS, loona siiyo daryeel la mid ah muwaadiniinta dalka sida: xurmeynta arrimaha shaqo iyo habraacyada fursadaha shaqo-siinta, xaaladaha iyo shuruudaha shaqo-siinta, tababarka, xorriyadda ka qeyb-galka iyo wada-xaajoodka gorgortanka guud,

badbaadada bulshada, habraacyada sharciyeed, khidmadda shaqo-siinta, qarashaad caymiska ee shaqaalaha, dammaanad qaadka amniga shaqo-siinta, helidda beddel shaqo-siin, ka nasinta shaqada iyo dib u tababaridda shaqaalaha;

**t)** In la qaado dhammaan wixii tallaabooyin lagama maarmaan ah, kuna haboon:

i. In la xakameeyo dhaqdhaqaaqa qarsoodiga ah ee shaqo-siinta doolka iyo shaqo-siinta aan sharciga waafaqsaneyn ee doolka;

ii. Si wax-ku-ool ah loo ogaado shaqo-siinta sharci darrada ah ee shaqaalaha doolka ah, isla markaana loo qeexo laguna qaado ciqaabta ku aaddan abaabulka dhaqdhaqaaqa shaqo-siinta sharci darada doolka ah, si looga macaasho ama si kale looga faa'iideysto;

iii. Loogu hortago qaban-qaabiyayaasha dhaqdhaqaaqyada sharci darrada ah ee qarsoodiga ah, kuna wajahan soo-galootiga tagaya, sii gudbaya, soo-galaya xuduudaha JFS, iyo ka hortagidda kuwa shaqo-siiya shaqaalaha doolka ah ee sifo sharci darra ah dalka ku soo gala;

iv. Ka hortigidda fududeynta dhoofinta, safrinta iyo soo dhaweynta doolka ah si loo shaqo-siiyo.

5. Loo-shaqeeye waa:

b)Waajib inuu ka saaro siyaasadda shaqo-siinta iyo habraacyada shaqada wixii xadgudub iyo takoorid ah ee ku jira;

t) In aanu si toos ah ama si dadban midna u oggolaan in la faquuqo ama la dhibaateeyo qof shaqaale ah ama mustaqbalka shaqaale noqon raba, iyada oo:

i. Lagu saleynayo Sinji, Midab, Jinsi (Lab iyo Dheddig), Luqad, Diin, aragti siyaasadeed ama ra'yi kale, Jinsiyad, haybta ama asalka bulsho, Naafannimo, Uur, xaalad-maskaxeed, Da' ama Fayruska dila difaaca jirka aadanaha (HIV Aids);

ii. Lagu saleynaayo arrimo kale oo kala soocid, gooni u saarid iyo kala mudnaysiin ah, taas oo baabi'in karta ama wax u dhimi karta u sinnaantii fursadaha shaqo-siinta iyo mihnadda. Wasiirka ayaa caddeyn kara jiritaanka arrintaas ka dib markii uu la tashado

wakiillada loo shaqeeyeyaasha iyo ururrada shaqaalaha ee jooga meelaha laga soo sheegay faquuqa, iyo hay'adaha kale ee ay khuseyso;

iii. La eegayo dhinacyada shaqo-qoridda, tababarka, dallacaadda, heshiiska iyo shuruudaha shaqo-siinta, shaqo ka joojinta iyo arrin kasta oo la xiriirta shaqa-siinta;

iv. Lagu saleynayo xubinamada urur shaqaale ama hawlaha sharciyadda leh ee ururrada shaqaalaha.

6. Waa sharci daro takooridda qofka shaqaalaha ama qof kasta oo raadiniya shaqo-siin iyo xaquuqdiisa lagu aqoonsaday xeerkan.
7. Waxyaabaha soo socda ma ahan takoorid ku saleysan xeerkan:
   b) Fal kasta oo ku aaddan sixidda arrimaha la xiriira kor u qaadidda sinnaanta iyo baabi'inta faquuqa ka jira goobta shaqada;
   t) In aad u kala saartid, u kala reebtid ama u kala dooratid qof kasta dhanka shaqada sababo shuruudaha shaqadaas u baahan tahay darteed
8. Loo-shaqeeye kasta waxaa waajib ku ah inuu shaqaalihiisa siiyo xuquuq siman oo leh qiimo isu dhigma ama isla eg.

9. Marka eedeyn takoor ah la soo-jeediyo, loo-shaqeeyaha waa culays dul saaran in uu caddeeyo in takoorka uusan ka dhicin goobta shaqada sida lagu soo eedeeyay, falka Takooriddaas ama iska bariyeelidda ma ahan mid ku saleysan sababaha lagu caddeeyay qodobada xeerkan.

## Qodobka 7aad
## Shaqo-khasab ah ama Askareynta Carruurta

1. Waxaa reeban shaqo-qoris khasab ama jajuub ah nooc kasta oo ay tahay.
2. Qofna looma oggola in uu qof kale ka caawiyo qorista, tahriibinta iyo isticmaal khasab ah ama shaqo jajuub ah.
3. Erayga ah "Shaqo Khasab ama jajuub ah" laguma dabbaqayo hawlaha soo socda:
   b) Shaqo ama adeeg kasta oo si sharci ah loogu baahday, marka loo eego shaqo adeeg ciidan ah ama shaqo dhammaanteed leh dabeecad

ciidan sida difaaca qaranka, ama marka loo baahdo gurmadka iyo wax ka qabashada masiibooyinka qaran, laakiin aaney ku jirin shaqo-qoris khasab ama jajuub ah iyo askarayn carruureed ee loo adeegsado colaadaha hubeysan;

t) Shaqo ama adeeg kasta oo laga rabo maxbuus uu ku dhacay xukun ay meel-marisay maxkamad awood u leh, taas oo aanu ku jirin qof loo qoray ama lagu meeleeyay shakhsiyaad gaar ah, shirkado ama ururro, hawshaas ama adeeggaas la fulinayo iyadoo ay kormeereyso dushana ka maamuleyso hay'ad dawladeed;

j) Shaqo ama adeeg kasta oo fudud oo ay qabsanayaan xubnaha bulshadu, iyagoo u arkay danahooda gaarka ah, loona gartay in ay ka mid tahay waajibaadka caadiga ah ee bulshada ka saaran dalkooda, iyadoo la tixgelinaayo xubnaha bulshada ama wakiilladoodu xaq ay u leeyihiin in lala tashado;

x) Shaqo ama adeeg kasta oo lagu fuliyey xaalad degdeg ah oo jirta awgeed, ama guud ahaan ama duruuf kasta oo halis gelin karta jiritaanka ama ladnaanta dadka qeyb ka mid ah ama idil ahaantood.

4. Waa xadgudub in laga hor yimaado faqradaha qodobkan. Waxaana la horgeynayaa maxakamadda awoodda u leh, qofka lagu helo wuxuu muteysan karaa ganaax lacageed oo u dhaxeeya **$3,000 (saddex kun) ilaa $10,000 (toban kun)** ama lacag Shillin Soomaali ah oo u dhiganta ama xabsi aan ka badneyn 2 (labo) sano ama labadooda oo la isugu daro.

## Qodobka 8aad

## Xadgudub Damac Galmo iyo Faduullin (Faduullin, Qafal-xumo ama Qash-qashaad Dhaqan Xumo ah)

1. Xadgudub, faduulin, qafal-xumo iyo qash-qashaad (Sexual Harassment) shaqaale waxay ka dhacdaa goobaha shaqada marka loo-shaqeeyaha, wakiilka loo-shaqeeyaha ama shaqaalaha kale:

b) Uu si toos ah ama si dadban uga codsado qof shaqaalaha ka mid ah galmo, taataabasho jirka ah ama dhaq-dhaqaaqyo kale oo galmo la xiriira oo ay ka mid yihiin:

   i. Ballanqaad mudnaan siin leh ee xagga shaqada

ii. Hanjabaad in dhibaato shaqada ah ka soo gaari doonto;
iii. Hanjabaad ku saabsan xaaladda shaqo-siinta hadda ama mustaqbalka ee qofka shaqaalaha ah, haddii ballanqaadkaas ama hanjabaadaas ay caddahay ama maldahan tahay.

t) Inuu adeegsado erayo damac galmood xambaarsan oo qoraal ah ama af ah;
j) Inuu adeegsado waxyaabo muuqaal ah oo dareen galmo kicin leh;
x) Inuu muujiyo dhaq-dhaqaaq jireed oo damac galmo leh taas:

i. Oo uu dhibsanayo ama aanu dhibsaneyn qofka shaqaalaha ahi ee lagula kacayo;
ii. Oo sida ay tahay, raad xun ku reebeysa shaqadiisa qofka shaqaalaha ah, waxqabadkiisa shaqo ama ku qanacsanaantiisa shaqada;
iii. Oo u jeedadeedu tahay abuuris handadaad, cabsi gelin, qash-qashaad, iyo jawi nacayb leh ee goobta lagu shaqeeyo.

2. Loo-shaqeeye kasta waa inuu la tashadaa shaqaalaha ama wakiilladooda, oo uu soo saaro, kuna soo jeediyo dareenka shaqaalaha bayaan la xiriira siyaasad ku saabsan xadgudubka damaca galmo iyo faduullin, taas oo ay lagama maarmaan tahay in ay ku jiraan:

   b) Qeexidda xadgudub damac galmo iyo faduullin oo waafaqsan sida ku xusan qeybtan;

   t) Qoraal:

   i. reebaya xadgudub damac galmo, qash-qashaad, tilmaamo maldahan iyo fuduullin;
   ii. Muujinayadammaanadqaad ah in loo-shaqeeyuhu uu ku dhaqaaqi doono tallaabooyin lagu xaqiijinayo in shaqaalaha aan loo geysan doonin xadgudubdamac galmo iyo faduullin;
   iii. In tallaabo anshaxmarineed oo ku habboon laga qaado qof kasta oo xadgudub damac galmo, qash-qashaad, tilmaamo maldahan iyo faduullinkula kaca qof shaqaalaha ka mid ah;
   iv. In loo-shaqeeyuhu sameeyo habraacay shaqaaluhu ku soo gudbiyaan cabashadooda la xiriirta xadgudub damac galmo, qash-qashaad, tilmaamo maldahan iyo faduullin loo geysto;

v. In loo-shaqeeyuhu qariyo magaca cabtaha ama nooca xaaladaha cabashadiisa, marka laga reebo goortii ay shaacintu lama huraan noqoto si loo qaado tallaabooyin wax lagu saxayo.

3. Loo-shaqeeyaha waa in uu si deg deg ah oo madax banaani ku jirto uu u baaro wixii cabasho ah ee ku aaddan xadgudub damac galmo iyo faduullin leh, isla markaana uu qaado talaabooyin lagama maarmaan ah haddii ay cabashadaasu caddaato.

## Qodobka 9aad
## Xoriyadda Ku Biiridda

1. Shaqaale kasta waxa uu xaq u leeyahay;
   b) In uu ka qeyb galo sameynta urur shaqaale ama xirriiro ururro shaqaale;
   t) In uu ku biiri karo urur shaqaale;
   j) In uu ka tegi karo urur shaqaale.

2. Qof kasta oo shaqaale ah ama shaqo raadinaya waa in aan lagu takoorin in uu isticmaalay xuquuqda xeerkan siinayo darteed;
3. Loo-shaqeeye kasta wuxuu xaq u leeyahay
   **b)**In uu ka qeyb qaato sameynta urur loo-shaqeeye ama xiriir ururro loo shaqeeye;
   **t)**In uu ku biiro urur loo-shaqeeye ama xiriir ururro loo-shaqeeye, si waafaqsan dastuurka KMG JFS ururradaas;
   **j)** In uu ka baxo urur loo-shaqeeye ama xiriir ururro loo-shaqeeye.
4. Loo-shaqeeye waa in aan lagu takoorin in uu isticmaalay xuquuqda xeerkan siinayo darteed.
5. Shaqaale ama loo-shaqeeye kasta waxa uu xaq u leeyahay in aanu ku biirin urur shaqaale ama urur loo-shaqeeye ama xiriir urur ama ururro shaqaale ama loo-shaqeeye, isaga oo aanan luminayn xuquuqdiisii sharciga aheyd.

## Qodobka 10aad
## Xuquuqda Shaqaaluhu Waa Lama Taabtaan

1. Si waafaqsan xeerkan, xuquuqda la siiyay qofka shaqaalaha ahi, ma aha mid laga gaari karo heshiis lagu diidayo, lagu dhimayo ama lagu xaddidayo, heshiis kasta oo noocaas ahna waxaa laga soo qaadayaa wax kama jiraan ah.
2. Xuquuq ama daryeel kasta oo horey loo-shaqeeyuhu u siiyey shaqaale, isaga iskiisa ama heshiis lagula galay, kaas oo shaqaalaha faa'iido dheeraad u ah ayaa mudnaanta leh marka loo eego kuwa ku xusan xeerkan.

## Qodobka 11aad
## Xallinta Khilaafaadka Shaqada

1. Khilaafaadka aan xalkooda laga heleynin qodobbada xeerkan iyo heshiiskii shaqo ee qofka lala saxiixday, waa in lagu gaaraa go'aan waafaqsan mabaadii'da sinnaanta, mabaadii'da guud ee shuruucda shaqada ama baaqyo iyo talooyinka Ururka Shaqaalaha Adduunka oo ay saxiixday Jamhuuriyaddu, mabaadii'da xeerka caadiga ah ee aan ka hor imaaneyn kuwa xeerka shaqada, iyo curfiga iyo shareecada Islaamka.
2. Haddii la isku khilaafo fasiraadda ama dhaqan-gelinta shuruucda ku saabsan arrimaha shaqada, waxaa la qaadanayaa fasiraadda iyo dhaqan-gelinta u roon shaqaalaha.

# QEYBTA II
# MAAMULKA, KORMEERKA IYO BAARISTA SHAQADA

## CUTUBKA 3AAD
## MAAMULKA HEER WASIIR

### Qodobka 12aad

### Wasiirka

1. Wasiirka wasaaradda Shaqada iyo arrimaha Bulshada, mas'uulka ka ah arrimaha shaqada, waxaa lagu magacaabayaa si waafaqsan Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Wasiirka, waa madaxa ugu sarreeya maamulka Wasaaradda u qaabilsan arrimaha shaqada.
3. Awoodaha iyo waajibaadka shaqo ee wasaaradda waxaa ka mid ah:
   b) In ay xaqiijiso u hoggaansanaanta qodobada xeerkan ama xeer nidaamiyeyaasha ama sharci kasta oo nidaaminaya arrimaha shaqada, shaqo-siinta, ilaalinta iyo daryeelka shaqaalaha;
   t) In ay dejiso siyaasado, xeerar,tilmaamo iyo barnaamijyo la xiriira shaqada iyo shaqo-siinta;
   j) In ay ka caawiso, markii laga codsado, ururrada shaqaalaha diiwan-gashan iyo ururrada loo shaqeeyayaasha ee diiwan-gashan ama loo-shaqeeyeyaal ama xiriiradooda iyo qoridda heshiisyada guud ee shaqada;
   x) In ay qaaddo talaabooyinka ku habboon si loo xalliyo khilaafaadka shaqada ee ka dhex dhasha hay'adaha heer qaran ama khilaafaadkaculeyska gaarka ah leh;
   Kh) In ay jiheyso waxbarashada iyo tababarrada xirfadeed ee shaqaalaha iyo meeleynta kuwa shaqo-doonka ah;
   d) In ay mas'uul ka noqoto dhammaan arrimaha ku saabsan xiriirrada shaqada, duruufaha shaqada, shaqo-siinta shaqaalaha, Bad-qabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada, xoogsatada ama dhaqdhaqaaqa muruqmaalka iyo tirakoobka shaqada; iyo
   r) In ay magacawdo saraakiil lagama maarmaanka u ah in ay adeegsadaan awoodaha xeerkan lagu siiyay iyo socodsiinta

hawlaha Wasaaradda isla markaana ay bixiso tilmaamaha ku habboon adeegsiga awoodaha iyo waxqabadka.

4. Si waafaqsan xeerkan iyo shuruucda kale ee hagta adeegga bulshada, Wasiirka wuxuu magacaabayaa saraakiisha soo socota:
   b) Gudoomiyaha Guddiga sare Shaqada Federaalka;
   t) Agaasimaha shaqada;
   j) Agaasimaha Bad-qabka Mihnadaha iyo Caafimaadka goobta Shaqada;
   Kh) Diiwaan-hayaha ururrada shaqaalaha iyo urrurrada loo-shaqeeyeyaasha; Iyo
   d) Saraakiil kale oo lagama maarmaan u ah ujeeddooyinka maamulka shuruucda la xiriira shaqada iyo shaqo-siinta.
5. Wasiirka inta uusan magacaabin saraakiisha sare ku xusan wuxuu hubinayaa in lagu soo xulay tartan iyo daah-furnaan.
6. Wasiirka waa inuu xaqiijiyaa saraakiisha magacaaban gudasha awoodahooda iyo waxqabadka hawl-gudashadooda si habsami leh isugu duwan si loo gaaro halbeegyada hawlaha Wasaaradda.
7. Wasiirka, isagoo adeegsanaya awooddiisa, gudanayana hawlihiisa shaqo, waa inuu si joogta ah u ilaaliyaa mabaadii'da iyo nuxurka seddex geesoodka, kalana tashadaa wakiillada shaqaalaha iyo kuwa loo-shaqeeyeyaasha arrimaha la xiriira siyaasadaha, xeerarka iyo ku dhaqanka khuseeya ama saameeya danaha shaqaalaha iyo loo-shaqeeyaha.

## Qodobka 13aad
## Guddiga Sare Shaqada Federaalka

1. Guddiga sare shaqada Federaalka ayaa mas'uul ka ah nidaaminta iyo kormeerka shaqada iyo xiriirrada shaqo-siinta, daba-galka, xoojinta ku dhaqanka xeerkan iyo shuruuc kasta oo kale ee shaqada, si loogu nidaamiyo shaqada iyo xiriirrada shaqo-siinta.
2. Guddiga Sare Shaqada Federaalka wuxuu si qoraal ahu wakiilan karaa sarkaal kasta oo shaqo qeyb kasta oo ka mid ah awooddiisa, hawlihiisa iyo waajibaadkiisa, isaga oo:
   b) ku xiraya duruufaha awood u wakiilashada, isagoo wax-ka-beddelaya ama kala noqonaya wakiilnimada waqti kasta;

t) wax-ka-beddeli karaa ama diidi karaa go'aannada uu gaaro qofka awooddaas loo wakiishay.

## Qodobka 14aad
## Agaasimaha Shaqada

1. Agaasimaha shaqada ayaa mas'uul ka ah nidaaminta iyo kormeerka maamulka shaqada, dabagalka, baarista ama xoojinta ku dhaqanka xeerkan iyo shuruucda kasta oo kale ee shaqada si ay u nidaamiyaan maamulka shaqada.
2. Agaasimaha shaqada wuxuu si qoraal ah ugu wakiilan karaa sarkaalka shaqada qeyb kasta oo ka mid ah awooddiisa, hawlihiisa iyo waajibaadkiisa, isaga oo:
   b) Ku xiraya duruufaha awood u wakiilashada, isagoo wax-ka-beddelaya ama kala noqonaya wakiilnimada waqti kasta;
   t) Wax ka beddeli karaa ama ka kaaftoomayaa go'aannada uu gaaro qofka awooddaas loo wakiishay;

## Qodobka 15aad
## Agaasimaha Bad-qabka Mihnadda iyo Caafimaadka Goobta Shaqada

1. Agaasimaha Bad-qabka Mihnadda iyo caafimaadka Goobta shaqada ayaa mas'uul ka ah diiwaan-gelinta, nidaaminta iyo kormeerka dhammaan goobaha shaqada iyo daba-galka ama xoojinta ku dhaqanka xeerkan iyo shuruuc kasta oo kale ee shaqada si loo nidaamiyo Bad-qabka, caafimaadka iyo daryeelka Goobta shaqada.
2. Agaasimaha Bad-qabka Mihnadda iyo caafimaadka Goobta shaqada wuxuu si qoraal ah ugu wakiilan karaa sarkaal kasta ee Bad-qabka Mihnadda iyo caafimaadka Goobta shaqada qeyb kasta oo ka mid ah awooddiisa, hawlihiisa iyo waajibaadkiisa, isagoo:
   b) ku xiraya duruufaha awood u wakiilashada, isaga oo wax-ka-beddelaya
   ama kala noqonaya wakiilnimada waqti kasta;
   t) wax ka beddeli karaa ama ka kaaftoomayaa go'aannada uu gaaro qofka awooddaas loo wakiishay.

## Qodobka 16aad
## Magacaabidda Saraakiisha

1. Saraakiisha Wasiirku u magacaabay si waafaqsan qodobka 12(4)(*kh*) waxaa loo magacaabi karaa:
   b) Saraakiil shaqo;
   t) Saraakiil shaqosiin;
   j) Saraakiisha bad-qabka iyo caafimaadka Goobta shaqada.
2. Sarkaalka shaqadu, iyadoo looga jeedo daba-galka ama xoojinta ku dhaqanka xeerkan iyo shuruuc kasta oo kale ee shaqada, kuna saabsan xiriirrada shaqada iyo shaqo-siinta, wuxuu:
   *b)* U baahan karaa in loo soo daabaco galalka ama faylasha shaqada ee ku jira keydka xasuus reebka (arkiifiyo) loo-shaqeeyaha: si uu
      i. U baaro oo hubiyo keydka galalkaas;
      ii. Nuqul ka reebto gal walba oo loo soo daabaco.
   *t)* uga baahan karaa qof kasta oo shaqeynaya ama shaqaale kasta inuu u soo-gudbiyo wixii xog ah ee uu awood u leeyahay, iyadoo laga eegayo:
      i. Magacyada iyo cinwaannada dadka shaqada la siiyey ama cidda shaqada laga helay;
      ii. Lacagta loogu tala-galay shaqada.
   ***j)*** baarayaa:
      (i) Qof kasta oo sarkaalka shaqadu u arko in ay jirto sabab maan-gal ah uu ku rumeysto inuu yahay ama ahaan jiray shaqaale; ama
      (ii) In loo-shaqeeyuhu qofkaas, ama adeegihiisu ama wakiilkiisu ka shaqaaleeyay goobta shaqada ee loo-shaqeeyaha, waxaana looga baahan yahay in qofkaas uu saxiixo caddeyn uu ku xaqiijinayo in uu ka run sheegay warbixintii laga qoray iyo dhammaan waxyaabihii laga wareystay.
   ***x)*** Sarkaalku wuxuu si xor ah u baarayaa saacad kasta habeen amamaalin, wuxuuna geli karaa, kormeeri karaa oo uu baarayaa dhulka, guryaha iyo dhismooyinka kale ogeysiis la’aan, taas oo uu sarkaalku u heysto sabab maan-gal ah oo uu ku rumeysan karo in qof shaqaale ahi deggan yahay ama uu ku shaqeeyo si loo hubiyo dhaqan-galka xeerkan;

***kh)*** Sarkaalka shaqada wuxuu si xor ah oo ogeysiis la'aan ah saacad kasta, habeen ama maalin, dalban karaa:

i. In loo-shaqeeyuhu uu u soo daabaco dukumintiyada tilmaamaya shaqaalaha sida loo shaqaaleeyey;

ii. In shaqaale kasta uu u soo daabaco dukumintiyada tilmaamaya shaqo-siintiisa.

c) Baarayaa oo nuqul ka reebanayaa diiwaanka, buugga keydinta iyo dukumintiyada kale ee la xiriira ama u muuqda in ay la xiriiraan shaqo-siinta. Waxaa kale oo uula wareegayaa dukumintiyada koobaya diiwaanka, buugga ama keydka xasuus reebka kale haddii ay jirto sabab maangal ah oo uu ku rumeysto in caddeyn muujineysa xadgudub lagu sameeyay xeerkan ama sharciyada kale ee shaqada;

***r)*** Gelayaa, baarayaa oo hubinayaa dhammaan musqulaha (Lab iyo Dheddig), goobaha kale ee nadaafadeed iyo socodka biyaha;

***s)*** Uu baarayaa oo hubinayaa dhammaan cunnooyinka la siiyay ama u muuqda in la siinayo shaqaalaha, wuxuuna ka qaadanayaa labo muunad (Sample) oo la tijaabinayo, isla markaasna uu goobjoog ka yahay loo-shaqeeyaha ama wakiilkiisa, iyadoo labadii muunadood si xafidan loo xirayo, mid ka mid ahna loo reebayo loo-shaqeeyaha;

***sh)*** Uu amrayaa in dhammaan dhismayaasha iyo goobaha ay shaqaalaha deggan yihiin ama ay ku shaqeeyaan in xaaladdooda nadaafadeed laga dhigo mid hagaagsan oo aad nadiif u ah;

***dh)*** Iyadoo aanay waxba u dhimmeyn awoodaha kale ee hay'adaha xeer ilaalinta ee heer federaal ama qof kale toona, wuxuu billaabayaa dacwo oogis madani ah ama mid fal-dambiyeed ah oo ku saabsan qodobbo xeerkan oo la jebiyay ama xadgudub loo-shaqeeyuhu ku sameeyay ama sharci kasta oo shaqaale;

c) La wareegayaa shaqaale kasta oo tuhun ka galo in uu carruur yahay, laguna shaqaaleeyay sifo ka soo horjeedda xeerkan iyo shuruucda kale ee shaqada, wuxuuna u celinayaa waalidkiisa, xannaaneeyihiisa ama ciddii kale ee ku habboon;

g) Bixinayaa amarro laga rabo loo-shaqeeyaha inuu u hoggaansamo qodobbada xeerkan; iyo

*f)* Fulinayaa hawlaha iyo tilmaamaha, wuxuuna adeegsanayaa awoodaha kale ee uu siiyay Guddiga Sare ee Shaqada Federaalka.

3. Haddii sarkaalka shaqada uu qaato, diiwaan, gal, keyd-buug ama dukumintiya kale si uu uga guto waajibkiisa, Sarkaalku waa inuu u reebaa loo-shaqeeyaha ama wakiilkiisa warqad caddeyn rasmi ahin uu ka hayo dukumintigaas.
4. Sarkaalka shaqada wuxuu gali karaa dhexdhexaadin laba dhinac oo khilaaf ka dhexeeya, si uu u xalliyo khilaafaadka ku xusan Xeerkan iyo sharci kasta oo ku saabsan xiriirka shaqada iyo shaqo-siinta.
5. Iyadoo ujeeddadu tahay uruurinta xogta suuqa shaqada, Sarkaalka shaqadu wuxuu adeegsanayaa awooodahiisa, isagoo keligii fulinaya hawlaha soo socda ama la kaashanaya saraakiisha kale ee shaqada:

*b)* Wuxuu dalbanayaa in loo soo daabaco galalka shaqo-siinta ee uu u hayo loo-shaqeeyuhu, si uu:

i. U baaro, fatisho, uuna hubiyo xogta ku jirta galalkaas;
ii. Nuqul uga reebto shay walba u baahan yahay.

***t)*** Wuxuu ka dalbanayaa qof kasta oo shaqada ku jira ama dhammaystay ama shaqaale ka baxaya in ay usoo gudbiyaan wixii xog ah ee ay hayaan ee ay awood u leeyihiin bixinteeda oo ku saabsan:

i. Magacyada iyo cinwaannada dadka shaqada loo diray ama kuwa shaqadasoo qabtay; iyo
ii. Xaddiga Lacageedee lagu bixiyay shaqada.

*j)* Sarkaalka shaqada wuxuu si xor ah oo ogeysiis la'aan ah saacad kasta, habeen ama maalin, dalban karaa:

I. In loo-shaqeyuhu uu u soo daabaco dukumintiyada tilmaamaya shaqo-siinta shaqaale kasta;
II. In shaqaaluhusoo daabaco dukuminti kasta oo la xiriira hannaanka shaqo-siintiisa;

*x)* Baarayaa:

I. Qof kasta oo sarkaalka shaqadu uu u arko in ay jirto sabab maan-gal ah oo uu ku rumeysto in uu yahay shaqaale ama ahaan jiray shaqaale;

II. In loo-shaqeeyuhu qofkaas, ama adeegihiisu ama wakiilkiisu ka shaqaaleeyay goobta shaqada ee loo-shaqeeyaha, waxaana looga baahan yahay in qofkaas uu saxiixo caddeyn uu ku xaqiijinayo in uu ka run sheegay warbixintii laga qoray iyo dhammaan waxyaabihii laga wareystay.

*Kh)* Baarayaa oo nuqul ka reebanayaa diiwaanka, buugga keydinta iyo dukumintiyada kale ee la xiriira ama u muuqda in ay la xiriiraan shaqo-siinta. Waxaa kale oo uu la wareegayaa dukumintiyada koobaya diiwaanka, buugga ama keydka xasuus reebka kale haddii ay jirto sabab maangal ah oo uu ku rumeysto in caddeyn muujineysa xadgudub lagu sameeyay xeerkan ama sharciyada kale ee shaqada;

*d)* Fatashayaa, oo nuqul ka mid ah ka sameynayaa dhammaan keydka liiska shaqaale ee loo-shaqeeyeee kahawlgala meel ka baxsan goobta shaqada;

*r)* Wuxuu amrayaa in loo shaqeeye kasta uu u hoggaansamo qodobbada xeerkan;

*s)* In uu fududeeyo meeleynta shaqaalaha; iyo

*sh)* Waa in uu fuliyaa hawl iyo amarro kasta uu bixiyey agaasimaha shaqada, isagoo adeegasanaya awoodihiisa shaqo ee xeerkan tilmaamay;

6. Marka uu la wareegayo Sarkaalka shaqada diiwaan, keyd xasuus-reeb ama dukumintiya kale si uu uga guto waajibkiisa, sarkaalku waa in uu siiyaa loo-shaqeeyahaama wakiilkiisa warqad caddeyn rasmi ah in uu ka hayo dukumintigaas;
7. Iyadoo ujeedadu tahay dhaqan-gelinta xeerkan, sarkaalka Bad-qabka Mihnadda iyo Caafimaadka oo adeegsanaya awoodahan soo socda, una fulinya waajibaadkiisa si madax bannaan ama isagoo kaashanaya Saraalka Shaqada wuxuu:

   *b)* Si xor ah u baarayaa digniin la'aan saacad kasta habeen ama maalin, wuxuuna geli karaa, kormeeri karaa oo uu fatashayaa dhulka, guryaha iyo dhismooyinka kale, taas oo uu sarkaalku u heysto sabab maan-gal ah oo uu ku rumeysan karo in qof shaqaale ahi deggan yahay ama uu ku shaqeeyo si loo hubiyo dhaqan galka xeerkan;

*t)* Sarkaalka shaqada wuxuu si xor ah ogeysiis la'aan saacad kasta, habeen ama maalin u dalban karaa:

i. In loo-shaqeeyuhu uu u soo daabaco dukmintiyada tilmaamaya shaqo-siinta shaqaalaha;

ii. In shaqaaluhu soo daabaco dukuminti kasta oo la xiriira hannaanka shaqo-siintiisa.

*j)* Baarayaa:

i. Qof kasta oo sarkaalka shaqadu uu u arko in ay jirto sabab maan-gal ah oo uu ku rumeysto in uu yahay shaqaale ama ahaan jiray shaqaale;

ii. In loo-shaqeeyuhu qofkaas, ama adeegihiisu ama wakiilkiisu ka shaqaaleeyay goobta shaqada ee loo-shaqeeyaha, waxaana looga baahan yahay in qofkaas uu saxiixo caddeyn uu ku xaqiijinayo in uu ka run sheegay warbixintii laga qoray iyo dhammaan waxyaabihii laga wareystay;

iii. Baarayaa oo nuqul ka reebanayaa diiwaanka, buugga keydinta iyo dukumintiyada kale ee la xiriira ama u muuqda in ay la xiriiraan shaqo-siinta. Waxaa kale oo uu la wareegayaa dukumintiyada koobaya diiwaanka, buugga ama keydka xasuus reebka kale haddii ay jirto sabab maan-gal ah oo uu ku rumeysto in caddeyn muujineysa xadgudub lagu sameeyay xeerkan ama sharciyada kale ee shaqada;

iv. Gelayaa, baarayaa oo hubinayaa dhammaan musqulaha (Lab iyo Dheddig), goobaha kale ee nadaafadeed iyo socodka biyaha;

v. Uu baarayaa oo hubinayaa dhammaan cunnooyinka la siiyay ama u muuqda in la siinayo shaqaalaha, wuxuuna ka qaadanayaa labo muunad (Sample) oo la tijaabinayo, isla markaasna uu goobjoog ka yahay loo-shaqeeyaha ama wakiilkiisa, iyada oo labadii muunadood si xafidan loo xirayo, mid ka mid ahna loo reebayo loo-shaqeeyaha;

vi. Uu amrayaa in dhammaan dhismayaasha iyo goobaha ay shaqaalaha deggan yihiin ama ay ku shaqeeyaan in xaaladdooda nadaafadeed laga dhigo mid hagaagsan oo aad nadiif u ah;

vii. Iyada oo aanay waxba u dhimmeyn awoodaha kale ee hay'adaha xeer ilaalinta ee heer federaal ama qof kale toona, wuxuu billaabayaa dacwo oogis madani ah ama mid faldambiyeed ah oo ku saabsan qodobbo

xeerkan oo la jebiyay ama xadgudub loo-shaqeeyuhu ku sameeyay ama sharci kasta oo shaqaale;

viii. Amrayaa in isbitaal loo diro qofkii shaqaale ah ee buka, kaas oo xaaladda ka jirta goobta shaqadu aanay caawineynin, loo-shaqeeyaha ayeyna waajib ku tahay in uu bixiyo kharashka isbitaalka;

ix. Joojinayaa cunto walba oo loogu talagalay shaqaalaha, taas oo aan ku habbooneyn in la quuto. Cuntadaas oo kale, waxaa lagu gubayaa sarkaalka Bad-qabka iyo caafimaadka goobta shaqada hortiisa;

x. Dalbayaa, iyada oo uu lacagta bixinayo loo-shaqeeyuhu, cuntooyinka kala duwan ee lagama maarmaanka u ah qofka shaqaalaha ah, taas oo aan kharashkeedu ka badneyn qoondadii caadiga aheyd ee loo-shaqeeyuhu siin jiray shaqaalaha;

xi. Hubinayaa dhismooyinka iyo goobaha kale ee shaqaaluhu ay deggan yihiin ama ay ku shaqeeyaan, kuwaas oo sarkaalku u arko in aanay munaasab ku aheyn marka la eego qaabdhismeedkooda, xaaladda ama ku habboonaanta ujeeddooyinkii loo dhisay;

xii. Ku amrayaa loo-shaqeeyaaha inuu siiyo shaqaalaha uu la saxiixday heshiiska shaqo dhar, kabo shaqo, bustooyin iyo qalabka ka hortaga shilalka iyo halista dhaawacyada, kuwaas oo loo-shaqeeyuhu bixinayo qiimahooda;

xiii. Hubinayaa dhammaan daawooyinka la siinayo ee loogu talo-galay in ay isticmaalaan shaqaalaha;

xiv. Lagu amraa loo-shaqeeyaha in uu u hoggaansamo qodobada xeerkan; iyo

xv. Fulinayaa wixii kale oo hawl iyo tilmaamo ah, wuxuuna isticmaalayaa awoodaha kale ee uu siiyo agaasimaha bad-qabkaiyo caafimaaadka goobta shaqada.

## Qodobka 17aad
## Warqadda Awoodsiinta Iyo Kaarka Aqoonsiga

1. Wasiirka wuxuu siinayaa warqadda awood siinta iyo kaarka Aqoonsiga Sarkaal kasta oo idman, Guddiga Sare ee  Shaqada Fedaraalka, Agaasimaha Shaqada iyo Agaasimaha Bad-qabka  iyo caafimaadka goobta shaqada.

2. Guddiga Sare Shaqada Fedaraalka wuxuu warqadda awood siinta iyo kaarka Aqoonsiga siinaya Saraakiisha la shaqaysa. Sarkaalka shaqada waxaa warqadda awood-siinta iyo kaarka Aqoonsiga siinaya  Agaasimaha Shaqada. Sarkaalka ka tirsan Agaasinka Bad-qabka iyo Caafimaadka Goobta Shaqada waxaa  warqadda awood siintaiyo kaarka Aqoonsiga siinaya Agaasimaha Bad-qabka iyo caafimaadka Goobta Shaqada.
3. Sarkaalka Idman marka uu wajibaadkiisa shaqo u gudanayo si waafaqsan xeerkan, waa in uu mar kastatusaa warqadda Awoodsiinta iyo kaarkiisa aqoonsiga qofkii ay khuseyso oo si sax ahna uga dalbadaa.

## Qodobka 18aad
## Awoodda Gelidda Goobaha Shaqada

1. Sarkaalka idman, waxaa loo oggol yahay in uu galo dhisme ama meel kasta oo ay dad ku shaqeynayaan ama ay suurto gal tahay  in ay ka hawl-galaan shaqaale, isagoo wajibaadkiisa shaqo u gudanaya si waafaqsan xeerkan ama sharciyada kale ee shaqada.
2. Sarkaalka idmani waa in uu ogeysiiyaa loo-shaqeeyaha ama wakiilkiisa sababta joogitaankiisa goobta shaqada marka ugu horreysa ee uu fursad u helo, haddii aanu ogeysiintaasi aheyn mid wax u dhimaysa ujeeddadii iyo waajibaad gudashadiisa uu meesha u yimid.
3. Sarkaalka idman waa in aan laga hor-istaagin, lagana carqaladeyn gudashada waajibaadkiisa shaqo si wafaqsan xeerkan, qof kasta oo:
   *b)* Si ula kac ah sarkaalka u hor istaaga ama ku dhiba shaqadiisa; ama
   *t)* Iska dhaga-tira ama ku guul-darreysta in uu u hoggaansamo dalab kasta ama amar kasta oo uga yimaada sarkaalka shaqada, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo dhan **$600 (lix boqol)** ama lacag Shillin Soomaali ah oo u dhiganta ama xabsi aan ka badneyn muddo 3 (seddax) bilood ah ama labadaba.

## Qodobka 19aad
## Iskaashiga iyo IsGacansiinta Hay'adaha Dawladda

Saraakiisha idmani, waxay ka dalban karaan markii loo baahdo hay'adaha Dawladda  iskaashi iyo gacansiin la xiriirta sidii loo dhaqan-gelin lahaa qodobbada xeerkan  iyo xeer-nidaamyaashiisa.

**Qodobka 20aad**
**Ka-reebbid**

1. Sarkaalka idmani waa in uusan:

*b)* Dan toos ah ama mid dadban toona ka yeelan hawl kasta oo uu qabanayo;

*t)* Sheegin, xataa haddii uu  ka tago shaqada, sirta wax soo-saarka iyo tan ganacsiga ama qaabka ay hay'adda u shaqeyso, kuwaas oo uu ogaaday muddadii uu shaqada ku jiray;

*j)* Shaacin halka ay kasoo gaartay cabashada lagu soo wargeliyay ee ku saabsan dhibaatada jirta, jebinta qodobo sharci ama aanu ku handadin loo-shaqeeyaha ama wakiilkiisa in booqashada baaritaankiisu ay ka dhasheen cabashooyinkaas.

**Qodobka 21aad**
**Xasaanadda Saraakiisha Idman**

Saraakiisha idmani, waxa ay leeyihiin awood iyo maqaam la mid ah tan saraakiisha Booliska, hase yeeshee, ku xaddidan oo keliya awoodda iyo waajibaadka uu siinayo xeerkan, xeer-nidaamiyaashiisa iyo sharciyada kale ee shaqada.

**Qodobka 22aad**
**Soo-gudbinta Warbixinnada iyo Ilaalinta Siraha**

1. Guddiga Sare Shaqada Federaalka, Agaasimaha Shaqada iyo Agaasimaha Bad-qabka mihnadaha iyo caafimaadka Goobaha shaqada waxaa looga baahan yahay in ay diyaariyaan oo ay daabacaan warbixinnada sanadlaha ah ee hawlahooda kala duwan, kuwaas oo la doonayo in ay ku jiraan xogaha iyo macluumaadka soo socda:

*b)* Guddiga Sare shaqada Federaalka ama Wakiilkiisa waxay kasoo warbixinayaan:

   i. Horumarka sharciyada la xiriira shaqada iyo xeer-nidaamiyaashooda;
   ii. Shaqaalaha;

iii. Tirakoobka goobaha shaqada iyo shaqaalaha oo ay ku jiraan (dadka baahiyaha gaarka ah qaba iyo kaalmadii loo fidiyay), dacwooyinka la xiriira khilaafaadka shaqada iyo sidii loo maareeyay iyo hakin shaqo ka dhacday qaar ka mid ah qeybaha; iyo
iv. Natiijooyinkii baaritaannada.

*t)* Agaasimaha Shaqada wuxuu ka warbixinayaa;

I. Horumarka siyaasadaha la xiriir shaqo-siinta;
II. Shaqaalaha;
III. Heerka wax-soo-saarka;
IV. Macluumaadka suuqa shaqada iyo heerka shaqo-siinta.

j) Agaasimaha Bad-qabka mihnadda iyo Caafimaadka Goobaha Shaqadu wuxuu ka warbixinayaa:

i. Horumarka shuruucda la xiriirta shaqadiisa, xeer-nidaamiyaashooda iyo anshaxa shaqada;
ii. Shaqaalaha;
iii. Xaaladda goobaha shaqada, tirakoobka goobaha shaqada iyo shaqaalaha oo ay ku jiraan (dadka baahiyaha gaarka ah qaba iyo wixii kaalmo ah ee la siiyay), shillalka Warshadaha iyo cudurada shaqada;
iv. Natiijooyinka baaritaannada; iyo
v. Tirakoobka xad-guduyada la ogaaday iyo ganaaxyada lagu soo rogay.

2. Waxaa reeban in Sarkaalka idman ama qof kale uu soo bandhigo xogo maamul si waafaqsan xeerkan, marka laga reebo:
   i. Mid waafaqsan sharci kasta oo qoran; ama
   ii. Ujeedada dacwad kasta oo looga maarmi waayey si sharci ah ama habraac sax ah oo ku aaddan Xeerkan;

## Qodobka 23aad

## Diiwaan-gelinta Ururrada Shaqaalaha iyo Ururrada Loo-Shaqeeyayaasha

1. Diiwaan-geliyaha ururrada shaqaalaha iyo loo-shaqeeyayaashu wuxuu mas'uul ka yahay diiwaan-gelinta, xeerarka ururrada shaqaalaha, ururrada loo-shaqeeyaha iyo xiriirro kasta oo ay ku midoobaan 2 (labo) urur.
2. Wasiirka ayaa magacaabi kara ku-xigeenka diiwaan-geliyaha, kaaliyeyaasha diiwaan-geliyaha iyo saraakiisha kale ee loogu baahdo ujeeddoyinka xeerkan.
3. Diiwaan-geliyuhu isagoo qoraal istcmaalaya waxa uu ku-xigeenkiisa ku wareejin karaa qeyb ka mid ah awooddiisa, hawlihiisa iyo waajibaadkiisa shaqo.
4. Diiwaan-geliyuhu wuxuu:
   *b)* Shuruudo ku xiri karaa, wax-ka-beddeli karaa ama baabi'in karaa wakiilashadiisa xilligii uu doono; ama
   *t)* Beddeli karaa ama iska dhaafi karaa go'aan kasta oo uu sameeyo qofka uu wakiishay.

## Qodobka 24aad

## Daadejinta Awoodaha iyo Hawlaha Saraakiisha

1. Wasiirka, wuxuu markii loo baahdo abuuri karaa xafiiisyada Guddiga Sare Shaqada Fedaraalka, Agaasimaha Shaqada iyo Agaasimaha Bad-qabka mihnadda iyo Caafimaadka goobaha Shaqada, isagoo u daadejinaya heer ka hooseeya midka heerka Federaal, haddii loo arko in ay muhiim tahay, iyadoo awoodaha, waajibaadka iyo hawlaha ee heer kasta sida ugu haboon loo adeegsanayo.
2. Wasiirku, wuxuu abuuri karaa, uuna hirgelinayaa xafiisyada shaqada iyo Bad-qabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada heer ka hooseeya midka heer federaal, haddii loo arko in ay muhiim tahay, iyada oo awoodaha, waajibaadka iyo hawlaha ee heer kasta sida ugu haboon loo adeegsanayo.

## CUTUBKA 4AAD
## GUDDIGA SHAQADA FEDERAALKA

### Qodobka 25aad
### Asaasidda Guddiga

Waxaa xeerkan gudihiisa lagu aasaasayaa Guddiga Sare Shaqada Federaalka.

### Qodobka 26aad
### Xubnaha Guddiga

1. Guddiga Sare ee Shaqada Federaalka wuxuu ka kooban yahay xubnahan soo-socdo:
   *b)* Guddoomiyaha Guddiga Sare Shaqada Federaalka;
   *t)* Agaasimaha shaqada;
   *j)* Agaasimaha Bad-qabka mihnadda iyo Caafimaadka Goobaha Shaqada;
   *x)* Diiwaan-hayaha Ururrada Shaqaalaha iyo Ururrada loo-shaqeeyeyaasha;
   *kh)* Wakiil ka socda guddiga sare Xallinta khilaafaadka heer federal;
   *d)* Xubno uu magacaabayo Wasiirka Shaqada:
      i. Xubin khibrad iyo aqoon xeel-dheer u leh arrimaha la xiriirka shaqada;
      ii. Xoghayaha guud ee xiriirka ugu matalaadda badan ururrada shaqaalaha;
      iii. Guddomiyaha guud ee xiriirka ugu matalaadda badan ururrada loo-shaqeeyeyaasha;
      iv. 1 (hal) xubin oo laga soo magacaabayo xiriirka ugu matalaadda badan ururrada loo-shaqeeyeyaasha ee ka shaqeeya arrimaha shaqada;
      v. 1 (hal) xubin oo laga soo magacaabayo xiriirka ugu matalaadda badan ee ururrada shaqaalaha;
      vi. 1 (hal) xubin oo madax bannaan, aqoon iyo khibrad durugsan u leh arrimaha xiriirka shaqada, Qodobada Xeerkan iyo Xeerarka kale ee khuseeya Shaqada;

2. Xubin ka socota xafiiska Guddiga Sare Shaqada Federaalka, ayaa noqonaya Xogheynta guddiga.

## Qodobka 27aad
## Awoodaha iyo Waajibaadka Guddiga

1. Guddiga sare Shaqada Federaalka waa in uu talo ka siiyo Wasiirka guud ahaan arrimaha la xiriira shaqada, xiriirka shaqada, shaqo-siinta iyo goobaha shaqada oo ay ku jiraan xaaladaha adeeggooda iyo daryeelka shaqaalaha.
2. Iyadoo aan la xaddideyn awoodahooda guud iyo hawlaha Guddiga Sare Shaqada Federaalka, waxa ay kala talinayaan Wasiirka:
   b) Xeerarka la xiriira shaqada iyo shaqo-siinta, maamulka shuruucda shaqada,xeerarka iyo hab dhaqanka wanaagsan ee shaqada;
   t) Sameynta iyo horumarinta siyaasadaha Shaqada;
   j) Adeegyada guud ee shaqo-siinta;
   x) Xiriirrada shaqada, ururraynta shaqaalaha, xeer-nidaamiyaha iyo korjoogteynta wadarta xiriirrada shaqada;
   Kh) Jiheynta xirfadaha, tababbarrada xirfadaha iyo shaqo-siinta dadka naafada ah;
   d) Horumarinta kheyraadka Aadamiga;
   r) Hannaanka iyo habraacayada baarista shaqada;
   s) Cabirka wax soo saarka iyo horumarintiisa;
   sh) Magacaabidda Golaha Xuquuqda Shaqada;
   dh) Dejinta daryeelka iyo dheefta mag-dhawga, iyadoo la raacayo si waafaqsan qodobbada xeerkan iyo shuruucda kale ee la xiriirta shillalka mihnadaha iyo cudurrada shaqada;
   c) Diiwaan-gelinta, hakinta iyo dib u diiwaan-gelinta ururrada shaqaalaha, kuwa l oo-shaqeeyeyaasha iyo xiriirradooda guud; iyo
   g) Wax kasta oo kale oo la xiriira hawlaha guddiga ee wasiirku talo uga baahdo.
3. Guddiga Sare ee Shaqada Federaalka wuxuu awood u leeyahay:

b) Sameynayaa baaris kasta oo uu u arko in ay lagama maarmaan tahay iyo cilmi baaris la xiriirta shaqada, dhaqaalaha, iyo Siyaasadda Bulshada; iyo

t) Dejinayaa habraacyada la xiriira hawlaha loo xilsaaray.

## Qodobka 28aad
## Sameynta Guddiyada

Guddiga Sare ee Shaqadu, wuxuu sameyn karaa Guddi-hoosaadyo haddii loo arko in  ay lagama-maarmaan u yihiin gudashada hufnaanta, wax-ku-oolnimada awooddooda iyo waxqabadka hawlaha Guddiga.

## Qodobka 29aad
## Xuquuqda Guddiga

Guddoomiyaha iyo xubnaha kale Guddiga, waxaa la siinayaa xuquuq, khidmad ama gunnooyin loogu tala-galay in ay u adeegsadaan kharashaadkooda kala duwan, taas oo uu go'aan ka gaarayo Wasiirka isagoo la tashanaya Wasiirka Maaliyadda.

## Qodobka 30aad
## Habraacyada Xeer-Hoosaadka

Guddiga Sare Shaqada ee Federaalka, wuxuu go'aaminayaa habraacyo iyo xeer-hoosaad u gaar ah oo ku aaddan adeegsiga awoodihiisa iyo wax qabadka hawlihiisa shaqo.

## QEYBTA III
## SAMEYNTA XEER-NIDAAMIYEYAASHA GOOBAHA SHAQADA

### CUTUBKA 5^AAD
### MAAMULKA IYO DHAQAN-GELINTA

**Qodobka 31aad**
**Agaasimaha**

1. Agaasimaha Bad-qabka Mihnadda Goobta Shaqada iyo caafimaadka ayaa mas'uul ka ah maareynta iyo hirgelinta qodobbada qeybtan.
2. Wasiirku, wuxuu magacaabi karaa xubno kale, sida ku-xigeennada iyo kaaliyeyaasha agaasimaha, hadba intii aan looga maarmin caawinta agaasimaha.

**Qodobka 32aad**
**Awoodaha iyo Waajibaadka Agaasimaha**

1. Agaasimaha wuxuu leeyahay awoodaha iyo Waajibaadka soo-socdo:
   b) Diiwaan-gelinta goobaha shaqada;
   t) Horumarinta, hirgelinta iyo dhaqan-gelinta, heerarka Bad-qabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha Shaqada, iyadoo la raacayo hab-dhaqanka iyo xeer nidaamyaasha shaqada, xasuus reebka, si looga sameeyo warbixinno la xiriira heerka dayacnaanta shaqaalaha ee maaddooyinka iyo walxaha halis gelin kara caafimaadka iyo Bad-qabka shaqaalaha;
   j) Dhiirri-gelinta, Bad-qabka mihnadaha iyo caafimaadka dhammaan goobaha shaqada iyo guud ahaan bulshada dhexdeeda si loo dhiiri-geliyo dhaqan caafimaad iyo mid badbaado oo ka hirgala goobaha shaqada;
   x) Fududeynta sameynta barnaamijyo la xiriirra shaqooyinka la isla qaatay sida loo qabanayo ama qeybo loo gooyey oo u gaar ah dadka naafada ah si ay ugu suuro gasho in ay uga soo guuraan shaqooyinka xaddidan (Sheltered Employment), uguna soo gudbaan suuqa shaqada ee furan;

kh) Sameynta barnaamijyo caafimaad iyo tijaabooyin hadba goorta loo baahdo si loo ogaado shilalka cudurrada mihnadda iyo u nuglaanta shaqaalaha cudurrada ka dhasha shaqada;

d) Sameynta Baaritaanno iyo tijaabooyin la xiriira warshadaha iyo qalabka la adeegsadoee goobaha shaqada;

r) Abaabulidda baaritaan caafimaad oo lagu sameynayo xaaladda shaqaalaha, laguna ogaanayo caafimaadka dadka la shaqo-siinaya iyo kormeerro loogu kuur-galayo caafimaadka iyo Bad-qabka goobaha shaqada, si loo ilaaliyo caafimaadka dadka shaqeeya, iyo faya-dhowrka caafimaadka goobaha shaqada;

s) Qaban-qaabinta waxbarasho iyo tababar ku saabsan caafimaadka iyo Bad-qabka mihnadda goobaha shaqada oo loo qabanayo shirkadaha gaarka ah, kooxaha ama shaqsiyaadka iskood u shaqeysta iyo saraakiisha ku hawlan Bad-qabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada;

sh) Ururinta iyo baahinta xogaha iyo macluumaadka ku saabsan Bad-qabka
mihnahada iyo caafimaadka goobaha shaqada;

*dh)* Sameynta cilmi-baaris, tijaabooyin iyo bandhigyo la xiriira Bad-qabka mihnadda iyo caafimaadka, oo ay ku jiraan daraasadaha la xiriira isirrada nafsiga ah ee ku aaddan hababka, farsamooyinka iyo nidaamyada cusub ee lagula tacaalayo dhibaatooyinka Bad-qabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada iyo dhibaatooyinka ka abuurma tiknoolojiyada casriga ah;

c) Horumarinta halbeegyo wax looga qabanayo maaddooyinka sunta ah, qalabka iyo curiyayaasha waxyeelleeya jirka aadamiga, halbeegyadaas oo tilmaamaya heerka dayacnaanta, kuwaas oo suurtagalinaya in si badqab mihnadeed loogu shaqeeyo xilliyada kala duwan ee shaqada;

g) Horumarinta iyo joogteynta barnaamijyo wax-ku-ool ah oo ku saabsan soo ururinta, isku-duwidda iyo falanqeynta tirakoobka Bad-qabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada oo koobaya cudarrada, shilalka iyo dhaawacyada shaqada;

f) Rukhsad-siinta iyo Oggolaanshaha hay'adaha bixiya tababarka la xiriira Bad-qabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada;

q) Awoodaha iyo hawlaha kale ee lagama maarmaanka u ah in uu si habsami leh oo wax-ku-ool ah loogu guto awooddaha iyo waajibaadka uu xeerkani dhigayo.

2. Agaasimaha wuxuu Wasiirka kala talin karaa:
   b) Dejinta iyo horumarinta siyaasad Qaran oo ku saabsan Bad-qabka Mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada;
   t) Soo-jeedinta sharciyo ku saabsan Bad-qabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada oo ay ku jiraan qaabab lagu dhaqan-gelinayo talooyinka iyo heshiisyada Ururrada Shaqaalaha Adduunka iyo kuwa heer Gobol, sidoo kale heshiisyada iyo nidaamyada kale ee la xiriira Bad-qabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada, magdhawga iyo adeegyada kale ee dhaqancelinta shaqaalaha;
   j) Diyaarinta nidaamyo istaraatijiyadeed oo lagu dhiirri-gelinayo qaababka ugu habboon ee Bad-qabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada;
   x) Sameynta, joogteynta iyo horumarinta dhaqan shaqo oo looga hortagayo dhibaatooyinka ka dhasha bad-qab la'aanta mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada;
   kh) Dib u eegista qodobbada xeerkan, xeerarkale iyo xeer-nidaamyo, halbeegyo, hab dhaqanka guud ee hay'adaha gaarka loo leeyahay;
   d) Falanqeynta tirakoobka geerida iyo dhaawacyada la xiriira shaqada; iyo
   r) Arrimaha kale ee saameeya Bad-qabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada ee Agaasimuhu u arko in ay muhiim u yihiin sare u qaadidda tayada goobaha lagu shaqeeyo oo munaasab ah.
3. Agaasimuhu wuxuu dhisi karaa guddi farsamo oo tala-bixineed, ama kooxo la-taliyayaal ah oo ka caawiya inuu si fiican u guto hawlihiisa, una adeegsado awoodihiisa sharci.
4. Agaasimaha ama sarkaal kasta oo idman ee ka hoos shaqeynaya, wuxuu gudbin karaa dacwad, qaban-qaabin karaa ama ka difaaci karaa maxkamadda awoodda u leh horteeda wixii eed ah, macluumaad, cabasho ama dacwado kale oo ka dhashay xeerkan ama gudashada hawlihiisa shaqo.
5. Agaasimaha ama sarkaal kasta oo idman oo ka hoos shaqeynaya, wuxuu waqti kasta, isagoo ku wargeliya qofka ka shaqeeya goobta ama

wakiilkiisa goobta shaqada, ka qaadan karaa muunad (Sample) la xiriirta alaabta loo isticmaalo ama loogu tala-galay in loo adeegsado goobta shaqada, si loo soo baaro, alaabtaas oo uu u arko in ay jebineyso qodob ka mid ah xeerkan, ama uu aaminsan yahay in baaristeeda lagu ogaan karo in ay dhaawacyo jireed u geysan karaan shaqaalaha.

6. Agaasimaha ama sarkaal kasta oo idman oo ka hoos shaqeynaya, wuxuu la wareegi karaa oo uu ka dhigi karaa mid aan waxyeello geysan karin (ama ha burburiyo ama si kale ha yeelee) agab ama walxa kasta oo uu ka helo dhismaha, kuwaas oo uu u hayo sabab maan-gal ah oo uu ku rumeysto in uu agabkaas ama walxahaas ay keeni karaan khatar muuqata ama uu dhaawac halis ah gaarsiin karo shaqaalaha.
7. Agaasimaha ama sarkaal kasta oo idman oo hoos yimaada, wuxuu digniin hagaajin ah siin karaa cid kasta oo uu u arko in:
   b) ay jebiyeen mid ka mid ah qodobbada xeerkan ama xeerar kale ee jira;
   t) ay jebiyeen mid ama dhowr ka mid ah xaaladaha ku xusan qodobbada xeerkan, taasoo ay dhici karto in ay soo noq-noqdaan.
8. Agaasimaha ama sarkaal kasta oo idman oo ka hoos shaqeynaya, wuxuu diginin shaqo ka joojin ah siin karaa qofkii uu u arko in shaqada uu qabanayo ama uu rabo inuu qabto ay dhaawacyo halis ah ku keeni karto shaqaalaha.
9. Agaasimaha ama sarkaal kasta oo idman ee hoos yimaada waa in uu bixiyaa amarro mamnuucid awood fulineed deg deg ah, haddii uu u arko in ay mamnuucistaas tahay mid la xiriirta hawlaha la haayo ama ku dhow in ay sii socdaan, kuwaas oo hoos tagaya xakameynta iyo awoodda qofka ku lug leh in ay gaarto khatar muuqata xagga bad-qabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada.
10. Qof kasta oo la siiyo digniin shaqo ka joojin ah si waafaqsan qodobkan, haddii uu sii wato hawshii laga joojiyay ama qaado tallaabo kale oo xadgudub ku ah digniintii la siiyay, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo dhan **$1000** (kun) doolar ama lacag Shillin Soomaali ah oo u dhiganta ama xabsi aan ka badneyn 4 (afar) bilood ama labadaba.
11. Haddii ay sii wataan hawlaha ogeysiiska ku saabsan ama qaab kasta oo looga soo horjeesanayo ogeysiiskaas, waxaa laba jibaarmaya ganaaxa iyo ciqaabta lagu xusay faqradda 10aad ee qodobkan.

12. Qof kasta oo dood ka qaba digniinta toosinta ah ama digniinta shaqo ka joojinta ah ee la siiyay wuxuu 14 (afar iyo toban) maalmood gudahood, laga billaabo maalinta digniinta la siiyay, cabasho u gudbisan karaa Agaasimaha (haddii digniinta uu siiyay sarkaalka Bad-qabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada) ama wuxuu cabashadiisa u gudbisan karaa Wasiirka (haddii digniinta uu siiyay Agaasimuhu).
13. Agaasimaha ama Wasiirka hadba kii cabasho loo geeyo, markii uu cabashada ka baaraandego kadib, wuxuu hab qoraal ah ku joojin karaa ama ku waafaqi karaa digniintii qofka la siiyay.
14. Qof kasta oo aan ku qancin go'aanka wasiirka, wuxuu cabasho u qaadan karaa maxkamadda awoodda u leh.

## CUTUBKA 6AAD
## SAMEYNTA IYO DIIWAAN-GELINTA

### Qodobka 33aad
### Diiwaanka Goobaha Shaqada

1. Agaasimaha waxaa waajib ku ah in uu hayo diiwaanka goobaha shaqada oo uu booqanayo, iyadoo goob kasta shaqo uu ka diiwaan-gelinayo xogaha gaarka u ah goobahaas iyo waxyaabaha lagama maarmaanka u ah diiwaan-gelinta si waafaqsan Xeerkan.
2. Faahfaahinta laga diiwaan-gelinayo goobaha shaqada waxaa ka mid ah:
   b) Magaca oo seddexan iyo cinwaanka oo faahfaahsan, iyo haddii shaqaaluhu aanu milkiile aheyn;
   t) Meesha ay ku taallo goobta shaqada;
   j) Cinwaanka rasmiga ah ee lagala xiriiri karo goobta shaqada;
   x) Dabeecadda ganacsiga ama shaqada lagu qabanayo ama lagu qaban doono goobta shaqada;
   kh) Tirada iyo jagooyinka shaqo ee shaqaalaha ka hawl-gala goobta shaqada;
   d) Dabeecadda ganacisga haddii ay tahay Warshad, Mashiin,Qalab, Agab kale waxaa muhiim ah in laga diiwaan-geliyo goobta shaqada ee lagu rakibay ama lagu rakibi doono iyo khataraha ugu waaweyn ee laga filan karo;

r) Liiska walxaha kiimikeed ee loo isticmaalay ama loogu tala-galay in lagu isticmaalo goobta shaqada;

s) Awood makaanikeed haddii la isticmaalay ama lafilayo in la isticmaalo; iyo

sh) Taariikhda iyo Lambarka Taxanaha Shahaadada lagu diiwaan-geliyey ama cusbooneysiintooda lagu diiwaan-geliyey.

## Qodobka 34aad
## Diiwaan-gelinta Goobaha Shaqada

1. Qof kasta oo doonaya in uu sameysto goob ganacsi, shaqo ama u isticmaalo dhisme uu ka dhigto goob shaqo waa in uu codsadaa diiwaan-gelin, isaga oo Agaasimaha u diraya qoraal ogeysiis ah oo ay ku jiraan xogtan soo socta:
   b) Magaca iyo Cinwaanka milkiilaha goobta shaqada ama dhismaha;
   t) Ciwaan wixii xiriir ah loogu dirayo goobta shaqada sida dhammaan qoraallada ama xiriirrada Iwm;
   j) Dabeecadda nooca shaqada lagu qabanayo ama la soo jeediyey in lagu qabto goobta shaqada;
   x) Xogta maareeyaha goobta shaqada si waafaqsan xeerkan;
   kh) Liiska iyo noocayada walxaha kiimikeed ee loo isticmaalayo ama loogu talagalay in lagu isticmaalo goobta shaqada;
   d) Haddii ay isticmaasho awood makaanikeed ama wax kale oo la filayo in la isticmaalo iyo dabeecaddooda;
   r) Haddii la isticmaalo mashiin awood cadaadis ku shaqeya ama la filayo in la isticmaalo, haddii ay sidaas tahay, waa in la sheegaa nooca mashiinka, faahfaahintiisa, lambarka u gaarka ah, dalka iyo sannadka la sameeyay;
   s) Haddii la isticmaalay wiish dadka iyo alaabta lagu qaado ama lagu talo jiro in la isticmaalo; haddii ay sidaas tahay, waa in la sheego noociisa, faahfaahintiisa, lambarka u gaarka ah, dalka iyo sannadka la sameeyey; iyo taariikhdii ugu dambeysay ee la mariyay tijaabo lagu hubinayo shaqadiisa, qofkii ugu dambeeyay ee tijaabiyay iyo tanka ugu badan ee uu qaadi karo;

sh) Haddii la isticmaalay mashiinnada biyaha karkariya ama lagu talo jiro in la isticmaalo, haddii ay sidaas tahay, waa in la sheego noociisa, faahfaahintiisa, lambarka gaarka u ah, dalka iyo sannadka la sameeyay, iyo taariikhdii ugu dambeysey ee la tijaabiyey shaqadiisa iyo qofka tijaabiyay; iyo cadaadiska ugu badan ee Mashiinka ku dul qoran ($1lb/inch^2$); iyo

dh) Tirada guud ee shaqaalaha ka shaqeeya, ama lagu talo jiro in ay ka shaqeyn doonaan goobta shaqada;

2. Markii uu helo codsiga diiwaan-gelinta, Agaasimuhu waa inuu qaadaa tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah hubinta in goobta shaqada ama goobta ganacsi ay tahay mid ku habboon hawsha lagu sheegay codsiga diiwaan-gelinta.
3. Marka uu ku qanco codsiga ka dib, Agaasimuhu wuxuu diiwaan-gelinayaa goobta shaqada ama goobta ganacsi, wuxuuna siinayaa codsadaha shahaaddada diiwaan-gelinta.
4. Qof kasta oo ganacsi ama goob shaqo ku shaqeysanaya, isagoo aan haysan rukhsad diiwaan-gelin, "haddii lagu helo" waxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo **dhan $500** ama lacag Shillin Soomaali ah oo u dhiganta ama xabsi muddadiisu ka badneyn **saddex (3) bilood** ama labadoodaba.
5. Haddii uu sii socdo xadgudubku xukunka ka dib, qofkaas wuxuu galay dambi dheeraad ah, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo dhan **$100** ama lacag Shillin Soomaali ah oo u dhiganta ama xabsi muddadiisu ka badneyn 7 (toddobo) maalmo shaqo, ama labadoodaba, maalin kasta oo dembiga sii socdaba.
6. Haddii uu agaasimuhu diido inuu soo saaro shahaadada diiwaan-gelinta, waa in uu qoraal ku sheegaa sababaha diidmadaas.
7. Qofka ka shaqeeya ama milkiilaha ka ah goob shaqo oo diiwaan-gashan waa in uu agaasimaha ugu gudbiyaa qoraal uu ku ogeysiinayo isbeddellada la soo jeediyay in lagu sameeyo xogtii u diiwaan-gashanayd inta aan isbeddalka la sameyn ka hor.
8. Qofka ka shaqeeya goob shaqo ama milkiile ka ah oo magaciisa ku diiwaan-gashan oo aan Agaasimaha soo ogeysiin isbeddeladii soo

kordha, wuxuu gelayaa dambi la mid ah ciqaabaha farqadaha (4) iyo (5) ee isla qodobkan.

9. Qofkii cabasho ama dacwad ka qaba go'aanka Agaasimaha ee ku saabsan diiwaan-gelinta, wuxuu cabasho u qaadan karaa Wasiirka 14 (afar iyo toban) maalmo shaqo gudahood, laga billaabo taariikhda go'aanka.
10. Wasiirka wuxuu magacaabayaa guddi ka kooban wakiilo ka kala socda ururrada shaqaalaha iyo kuwa loo-shaqeeyeyaasha, kuwaas oo uu hoggaaminayo agaasimaha Guud ee Wasaaradda, soona baara sababaha cabashada keentay, ka dibna ka soo gudbiyaan warbixin, si go'aan ku habboon looga gaaro.
11. Waxaa reeban in goob ganacsi ama shaqo laga dhaafo rukhsadda diiwaan-gelinta sabab kastaba ha ahaatee.

## CUTUBKA TODDOBAAD
## XAALADAHA GOOBAHA SHAQADA

### Qodobka 35aad
### Waajibaadka Guud Mas'uulka ka Goobta Shaqada

1. Waxyaabaha soo socda waa waajibaadka guud ee qofka mas'uulka ah:
   b) inuu si guud u hubiyo badqabka mihnadda, caafimaadka iyo daryeelka shaqada dhammaan dadka ka shaqeeya goobta shaqada, taas oo ay ka mid tahay:
      i. inuu taxadar muhiim ah u yeesho hay'adiisa, si loo ilaaliyo nolosha, caafimaadka iyo niyadda shaqaalaha;
      ii. inuu hubiyo in shaqaalaha ay helaan tilmaamaha lagama-maarmaanka u ah ka-hortagga shillalka warshadaha, cudurrada mihnadda ka dhasha iyo khataraha kale ee la xiriira xirfaddiisa shaqo;
      iii. dayactirka makiinadaha, qalabka korontada iyo mashiinnada warshadaha, iyadoo qalabka iyo agabyada kale xaaladdooda la wanaajinayo, si loo xaqiijiyo badqabka guud;

iv. in la helo qalabka muhiimka u ah ee loo istcmaalo badqabka, laguna dhejiyo mashiinnada iyo warshadda meelo ka mid ah;

v. dayactirka qalabka dabdamiska iyo in shaqaalaha loo tababaro isticmaalka qalabkaas;

vi. in la helo goob dayactir, hab, iyo habraacyo shaqo oo ammaan ah oo aan wax khatar u keenayn caafimaadka shaqaalaha;

vii. in la helo nidaamyo lagu xaqiijanayo ammaanka iyo khatar la'aanta caafimaadka goobta, kaas oo la xiriira isticmaalka, ka shaqeynta, kaydinta iyo raridda alaabta iyo walxaha kale;

viii. in loo helo meelo si fudud looga bixi karo, oo amman ah oo aan lahayn wax khatar caafimaad ah;

ix. in lagu wargeliyo dhammaan Shaqaalaha; halista ka imaan karta teknooloojiyada cusub iyo khataraha muuqda, lana hubiyo in qof kasta oo shaqeeya uu ka qeyb qaato dhaqan-gelinta iyo dib-u-eegista hababka bad-qabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada; iyo

x. bixinta qalabka, qalab sahlahawlaha, fududeeya iyo wixii kale oo taageero ah ee ay u baahan yahiin isticmaalkooda dadka naafada ah.

*t)* in la qaado tallaabooyin qiimeyn ah oo la xiriirta khataraha ku aaddan shaqaalaha ku hawlan badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada, iyadoo laga duulayo natiijooyinkii ka soo baxay qiimeyntaas, si loo qaado tallaabooyin ka-hortag iyo ilaalin;

*j) i*n sarkaalka badqabka mihnadda iyo caafimaadka ee qeybtan loo diro nuqul ka mid ah warbixintii qiimeynta khatarta ee la sameeyay si waafaqsan Sharcigan;

*x) i*n la qaado tallaabooyin degdeg ah oo lagu joojinaayo hawl kasta oo loo arko in ay halis ku tahay badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada isla markaana laga daadgureeyo si habboon dhammaan shaqaalaha ku sugan goobta;

*Kh)* in la diyaariyo dib u sixid qoraal lagu sameeyo mar kasta oo ay ku habboon tahay qodobbada siyaasadda guud badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada, lana dejiyo nidaam lagu dhaqan-gelinaayo siyaasaddaas

qoran, isla markaas sixiddaas lagu wargeliyo dhammaan shaqaalaha ka hawl gala goobaha shaqada; iyo

*d)* lama eryi karo qof kasta oo shaqaale ah, waxba looma dhimi karo, lama faquuqi karo, loomana diidi karo fursadaha shaqo ee jira, hoosna looma dhigi karo darajadiisa, iyadoo lagu ciqaabayo qofka shaqaalaha ahi, sababtuna ay tahay:

(i) in qofka shaqaalaha ah uu ka cawday arrin uu u arkay in aysan ammaan aheyn ama ay khatar ku tahay caafimaadkiisa; iyo

(ii) in qof kasta oo shaqaale ah ee xubin ka noqday Guddiga badqabka mihnadda iyo Caafimaadka goobta shaqada kaasoo  loo dhisay dabagalka, meel-marinta Sharcigan ama isagoo gutay hawlihiisa shaqo ee ku aaddan xubinnimada Guddigaas.

*r)* waa in  goobta kasta ee shaqo laga dhisaa Gudddiga badqabka mihnadda iyo Caafimaadka, si waafaqsan xeer-nidaamiye wasiirka soo-saaray, xubin ka mid ahna waa in ay noqotaa dadka naafada ah ee ku sugan goobtaas, haddii:

(i) ay ka shaqeeyaan shaqaale ka badan 20 (labaatan) qof; ama

(ii) agaasimuhu uu amro sameynta guddigaas, Gudddiga badqabka mihnadda iyo Caafimaadka.

*s)* si aan waafaqsaneyn Sharcigan, lama jari karo, lamana dhimi karo xuquuq shaqaale oo la xiriira badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada; iyo

*sh)* in la qabanqaabiyo baaris qoto dheer oo lagu sameeyo badqabka mihnadda iyo Caafimaadka goobta shaqada ugu yaraan sanadkiiba mar, baaristaas waxaa sameynaya lataliyaha badqabka mihnadda iyo Caafimaadka goobta shaqada, kaas oo qoraya warbixinta baarista, una diraya Agaasimaha warbixintaas.

2. Qofkasta oo ku guuldarreysta ama ku fashilma, kana soo bixi waaya ku qeexan qodobkan, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo dhan **US$1000** ama lacag Shillin Soomaali ah oo u dhiganta ama xabsi ay muddadiisu ka badneyn 4 (afar) bilood ama labadooda oo la isugu darayo.
3. Qof kasta oo shaqaale ah oo aaminsan in dayac uu loo-shaqeeyuhu ka dhacay awgiis, naftiisuna ay ammaan ahayn, halisna ku jirto, khatar muuqato oo caafimaad nafeed ahna uu wajahayo, wuxuu xaq u leeyahy shaqaaluhu in uu u gudbiyo loo-shaqeeyaha wargelin qoraal ah oo si

faahfaahsan u tilmaameysa khatarta jirta. Sidaa daraadeed, Shaqaaluhu kuma muteysan karo ganaax ama shaqo ka joojin ama fal kale oo waxyeello ku keeni kara adeegsiga xuquuqdiisa awgeed.

## Qodobka 36aad
## Daryeel

1. Mas'uul kasta waxaa waajib ku ah:

   b)in uu u diyaariyo qalab uu ku fariisto, kuna habboon qofkasta oo ka shaqeeya howl istaag lagu qabanayo, lana helo fursad shaqaalaha ay ku nastaan waqti cayiman, kuna soo laabtaan shaqada;

   t) in uu keeno biyo la cabbo oo nadiif ah, kuwaas oo ku filan shaqaalaha oo dhan, si fududna loo heli karo xilliga lagu guda jiro saacadaha shaqada;

   *j) i*n uu ku rakibo (dhejiyo) goobta shaqada qalabka gargaarka deg dega ah, uuna qaado tallaabooyin suurto gelinaya in gurmad lagama-maarmaan ah oo deg deg ah la siiyo qofkasta oo ku dhaawacma ama ku xanuunsada shaqada;

   *x) i*n laga helo goobta shaqada qol dhar beddelasho ah oo ay shaqaalaha isticmaalaan; iyo

   kh) in uu u sameeyo shaqaalaha naafada ah daryeel dhammeystiran oo baahidooda ku filan xilliga shaqada.

2. Mas'uul kasta oo u hoggaansami waaya waajibaadka ku xusan Qodobkan, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo dhan **US$500** ama lacag Shillin Soomaali ah oo u dhiganta ama xabsi muddadiisu aysan ka badneyn 3 (seddex) bilood ama labadoodaba.

## Qodobka 37aad
## Caafimaadka Goobaha Shaqada

Mas'uul kasta waxaa waajib ku ah;

1. in uu hubiyaa in caafimaadka goobtu tahay mid hagaagsan oo ku habboon, iyadoo goobta loo sameynaya hawo nadiif ah, lana gaarsiinaya hawadaas qol kasta.
2. Mas'uulku waa inuu hubiyaa:

*b)* in goobta shaqadu aysan aheyn xilliga shaqada meel ciriiri ah oo shaqaaluhu isdul dhooban yihiin, taasoo qofka ka shaqeynaya, kuna keeni karta halis, dhaawac iyo khatar caafimaad; iyo

*t)* in goobta shaqadu ay tahay meel waasac ah oo si fudud loogu shaqeyn karo, waana in ay leedahay meelo bannaan oo lagu kala nafiso, lana tixgelinayo nooca shaqada, lagana heli karo hawo ku haboon shaqaale kasta.

3. Mas'uul kasta waa inuu hubiyaa in qeyb walba oo ka mid ah goobta shaqada ee shaqaalaha ku shaqeynayaan ama ay marayaanin ay leedahay iftiin ku filan kuna habboon, ha ahaado iftiin dabiici ah ama mid la sameeyay.
4. Mas'uul kasta waa in uu hubiyo in goobta shaqada ay tahay mid nadiif ah, oo aysan jirin wax ur ah oo kasoo baxaya bullaacadaha, musqulaha, isla markaana aysan jirin sawaxan ama dhawaaq oo shaqaaluhu dhibsadaan.
5. Mas'uul kasta waa in uu hubiyaa in tubooyinka (qasabadaha) qaada biyaha wasaqda ah, u gudbinaya bullaacadaha dhulka hoostiisa maraya, kuwaas oo loo baahanyahy in aysan yeelan wax qoyaan ah oo uu shaqaaluhu ku sibxan karaan.
6. Mas'uul kasta waa in uu u yeelaa qalab ku habboon oo qashinka looga qaado goobta shaqada.
7. Mas'uul kasta waa inuu goobta shaqada u yeelaa musqulo ku habboon shaqaalaha naafada ah, lana sameeyo musqulo u kala soocan Lab iyo Dheddig iyo qeybo wax lagu dhaqdo ,shaqaalahana ay ka heli karaan, nadiifna ah, aadna u habeysan.
8. Mas'uulkiiu hoggaansami waayo arrimaha ku xusan qodobkan, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo dhan **US$500** ama lacag Shillin Soomaali ah oo u dhiganta ama xabsi aan muddadiisu ka badneyn seddex (3) bilood ama labadoodaba.

## Qodobka 38aad
## Badqabka Goobaha Shaqada

1. Dhammaan warshadaha, mashiinnada waaweyn iyo qalabka kaleba:
   *b)* haddii uu yahay mid rakiban ama mid guurguura, waa in loo adeegsadaa oo kaliya shaqadii loogu talagalay, kuna shaqeeyo shaqaale aqoon iyo karti u leh isticmaalkiisa; iyo
   *t)* waa insi xilliyeysanu baaraa qof karti iyo takhasus u leh qalabkaas, si loo ogaado in xaaladdoodu wanaagsan tahay oo aysan khatar gelineyn badqabka iyo caafimaadka shaqaalaha iyo qofkasta oo soo booqda goobta shaqada.
2. Qofkasta oo si toos ah uga shaqeeya ama isticmaala warshadaha, mashiinnada waaweyn iyo qalabka kale, kaasina waa in uu leeyahay aqoon ku filan, si loo hubiyo in shaqada ama howlgalka, isticmaalkuna aysan wax halis ah u keeneynin badqabka iyo caafimaadka qofkaas, shaqaalaha kale ama cid kasta ee soo gashagoobta shaqada.
3. looma oggola Qof kastaoo farsamo barad ah in uu u dhawaado Mashiinnada culus, Agabka, iyo qalabka kale ilaa uu la joogo kormeerihiisa tababarka, lana helo wax ka difaaca khataraha iyo halista ka imaaneysa shaqada adag, bey'adaama loo diyaariyo jawi ammaan ah.
4. Qofna lagama shaqasiin karo mashiin ama shaqo kale oo sababi karta caafimaad xumo ama dhaawac jireed, iyadoo aan si buuxda loogu sheegin khatarta uga imaan karta shaqadaas iyo waxyaabaha loo baahan yahay inuu ka feejignaado, lana hubiyo in:
   *b)* shaqaaluhu uu helo tababar ku filan oo ku saabsan shaqada mashiinka ama hawsha kale; iyo
   *t)* shaqaaluhu uu markasta kormeer ku sameeyo qof aqoon iyo waayo-aragnimo u leh mashiinka ama shaqada.
5. Tababarka lagusoo sheegay farqadda (4) ee Qodobkan, waa in la qabtaa markii:
   *b)* shaqaale cusub la qorayo;
   *t)* qof la beddelayo ama shaqo kale loo dhiibayo;
   *j)* mashiinno iyo qalab cusub soo baxaanama mashiinnada iyo qalabka shaqada oo la beddelayo; iyo
   *x)* tiknoolojiyad cusub la soo bandhigaayo ama la adeegsanayo.

6. Tababarka waa in uu ahaadaa:
    *b)* mid la socda isbeddelka cusub iyo khataraha imaan kara;
    *t)* mid si joogto ah loo qabto xilliyo kala duwan oo muddeysan; iyo
    *j)* mid shaqaalaha aan wax u dhibeynin, lana qabtaa saacadaha shaqada gudahooda.
7. Mas'uul kasta waa in uu hubiyaa in shaqaalaha kale iyo qandaraaslayaasha ka howlgala goobta shaqadu ay heleen tilmaamo ku habboon oo la xiriira halista badqabka mihnadda iyo caafimaadka, loona sheegaa nidaamka gargaarka degdegga ah ee laga helayo goobta shaqada inta howshu socoto iyo tallaabooyinka la qaadayo haddii ay timaaddo xaalad degdeg ah.
8. Mas'uul kasta waa in uu u sameeyaa shaqaalaha qalab gaar ah oo ay ku jiraan qalabka ka-hortaga khataraha iyo kuwa loogu tala galay shaqaalaha naafada ah ee ku sugan goobta shaqada iyo deegaanka, lana qaadaa tallaabooyin munaasab ah, si looga hortago in uu yimaado dhaawacyo iyo shilal ka dhaca goobta shaqada.
9. Wasiirka wuxuu soo saari kara habraac kaddib markii uu la tashado ururrada shaqaalaha iyo ururrada loo-shaqeeyayaasha, si baaris caafimaad oo ku habboon lagu sameeyo shaqaale ama kooxo shaqaale ah oo ka howl-gala goob ay ku sugan yihiin, una baahan in loo sameeyo qorshe maan-gal ah, si loo ilaaliyo badqabka iyo caafimaadka ee heerar kala duwan ee goobta shaqada oo leh:
    *b)* cudurro lagu arkay goobta shaqada oo uu hayo sabab maan-gal ah oo uu ku rumeysto in uu ka dhashay nooca shaqada ama xaaladda goobta shaqada;
    *t)* in ay sabab u tahay isbeddelka ku dhacay qaabka shaqada, walxo loo isticmaalay hab cusub ee shaqada ama maaddooyin kale oo lagu soo kordhiyay qaabka shaqada, kuwaasoo keeni kara in ay timaado khatar, dhaawac soo gaari kara caafimaadka qofka ka hawl-gala goobta shaqada; iyo
    *j)* ay jiri karto halis dhaawac ku ah caafimaadka qofka shaqaalaha, kana soo gaari karta maaddooyin ama walxa cusub oo la keenay warshadda, si loogu shaqeeyo, halisna ka imaan karta isbeddel kasta ee ku yimaada xaaladda guud ee warshadda.

10. Xeer-nidaamiyeyaasha loo dajinayo qeybtan ayaa Lagu waajibinaya in kormeer caafimaad ay ku sameeyaan shaqaale aqoon iyo khibrad u leh, kana diiwaan-gashan agaasinka, kuwaas oo soo buuxiyey shuruudaha looga baahan yahay in la diiwaan-geliyo si waafaqsan ujeeddooyinka Sharcigan.

11. Haddii Wasiirku ay u caddaato in goobta shaqada ay ka jirto arrimo halis caafimaad ku keeni karta Shaqaalaha, wuxuu soo saarayaa amarro iyo haggeyaal lagama-maarmaan ka dhigaya in la sameeyo arrimahan soo socda:

    *b)* in baaris caafimaad lagu sameeyo shaqaalaha ka hor inta aan la shaqaalaysiin, inta ay ku guda jiraan shaqada iyo marka ay shaqada ka baxaan ama laga joojiyo kadibba; iyo

    *t)* in la sameeyo baaritaan caadi ah ama mid gaar ahaaneed ama in daraasad caafimaad lagu sameeyo daawada iyo nadaafadda warshadda guud ahaan.

12. Kharashka ku baxaya baaritaannada lagu sheegay farqadda (11), ee Qodobkan, waxaa bixinaya loo-shaqeeyaha.

13. Loo-shaqeeyuhu waa inuu hubiyaa in baaritaanka lagu sheegay qaybtani la qabanayo, iyadoo qofka shaqaalaha ahi uusan lumineyn wax xuquuq ah oo uu shaqeysan lahaa iyo in haddii ay suurtogal tahay in baaritaanka la sameeyo inta lagu guda jiro saacadaha shaqada ee caadiga ah.

14. Shaqaalaha cusub iyo kuwii hore u shaqeynayey, waxaa waajib ku ah in ay maraan baaritaan caafimaad, si waafaqsan Sharcigan.

15. Loo-shaqeeye kasta, waxaa waajib ku ah in shaqaalaha ka shaqeeya goobaha shaqada ama shaqo kasta oo halis ah, uu siiyaa qalab ilaalin ama ka hortag oo tayo leh oo ku habboon kana mid yihiin Dhar, Gacma-gashiyo, Kabo, Ookiyaalo iyo Koofiyado ay isaga difaacaan khataraha ka jira goobaha ay yaalliin waxyaabaha qoyan iyo maaddooyinka halista ah.

16. Loo-shaqeeye kasta waa waajib inuu bixiyaa Ookiyaalo ama Shaashadoku habboon oo waxtar leh si loo ilaaliyo indhaha shaqaalaha ku hawlan shaqo halis gelin karta ama dhaawici karta indhaha shaqaalaha.

17. loo-shaqeeye kasta oo leh goob shaqo, waa inuu sameeyaa qeyb u gaar ah oo u xiran alxanka, si looga ilaaliyo shaqaalaha aan aheyn kuwa alxanka in hillaaca alxanku uu Indhaha ka saameeya ama ka rido.
18. Qofkasta oo ku xadgudba qodobkan ama xeer-nidaamiyayaashiisa, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo dhan **US$500** ama lacag Shillin Soomaali ah oo u dhiganta ama xabsi aanay muddadiisu ka badneyn 3 (seddax) bilood ama labadoodaba.

## Qodobka 39aad
## Diiwaan-gelinta Tababar

1. Loo-shaqeeye kasta ee goob shaqo waxaa waajib ku ah in uu u diyaariyo diiwaan oo lagu qorayo faahfaahinta tababarrada billowga ah iyo tababar xilliyeedka la siiyo shaqaalaha ka shaqeeya goobta shaqada.
2. Faafaahinta lagu qorayo diiwaanka waxaa ka mid ah:
   *b)* taariikhda, muddada, habka iyo nooca tababarka;
   *t)* heerka aqoonta iyo waayo-aragnimada ay leeyihiin dadka tababarka bixinaya ee la xiriira maaddooyinka iyo habka tababarku uu ku saabsan yahay;
   *j)* shaqaalaha la tababarayo iyo xilalka ay ka hayaan goobta shaqada; iyo
   *x)* nooca qiimeynta iyo wax-ku-oolnimada tababarka.

## Qodobka 40aad
## Wargelinta Cudurrada Mihnadda iyo Shilalka Ka Dhaca Goobaha Shaqada

1. Loo-shaqeeye kasta waxaa waajib ku ah inuu soo wargeliyo agaasimaha ama sarkaalka badqabka mihnadda iyo caafimaadka ee aaggiisa dhammaan shilalka, naafonimada joogtada ah ama tan aan aheyn, dhimasho, dhawaac iyo cudurrada Mihnadda ee ka dhasha goobta shaqada, uuna ku keydiyo diiwaan u gaar ah.
2. Faahfaahinnada ay tahay in diiwaankaas lagu qoro waxaa ka mid ah:
   *b )* taariikhda iyo nooca shilka;
   *t)* shaqaalaha dhaawacmay iyo nooca dhaawacooda, kuwa ka bogsooday, kuwa si joogta ah u naafoobay iyo kuwa dhaawaca dartiis u dhintay;

*j)* nooca cudurka ka dillaacay goobta shaqada, shaqaalaha uu ku dhacay, goortii la diiwaan-geliyay iyo qofkii diiwaan-geliyay; iyo

*x)* loo-sheeqeeyaha taallaabooyinkii uu qaaday markii uu ogaaday shilka dhacay ama cudurka ka dillaacay goobta shaqada.

**Qodobka 41aad**

**Wargelinta Xogta Shillalka iyo Cudurrada Mihnadda ee Goobaha Shaqada**

1. Loo-shaqeeye kasta waxaa waajib ku ah in uu si dhakhso ah ugu gudbiyo Agaasimaha ama sarkaalka badqabka mihnadda iyo caafimaadka aaggiisa dhammaan wixii keenay shillalka dhacay, kuwa si joogta ah u naafoobayama sababay dhimasho iyo dhaawac bogsaday iyo kiisaska cudurrada mihnadda ee laga helay goobta shaqada.
2. Warbixintu waa in ay ahaataa mid qoraal ah, waana in ay ku jiraan faafaahinada lagu caddeeyay Qodabka 40aad faqraddiisa (2) ee Sharcigan.
3. Warbixinta waa in ay la socoto nuqul ka mid ah kormeerkii iyo baaristii la sameeyay ama warbixintii caafimaadka ee la diyaariyey.

**Qodobka 42aad**

**Xarumaha Caafimaadka**

1. Goob kasta oo shaqo ee sida caadiga ah ay ka shaqeeyaan in ka badan 10 (toban) shaqaale ah, waa in laga helaa sanduuqa gargaarka degdegga ah.
2. Goob kasta oo shaqo ama xarun kasta gaar ahaanteeda oo sida caadiga ah ay ka shaqeeyaan in ka badan 100 shaqaale ah, waa in ay yeelataa goob bukaan eegto ah iyo shaqaale caafimaad oo tababaran kuna filan.

**Qodobka 43aad**

**Gurmadka Shaqaalaha Dhaawacma iyo Kuwa Xanuunsada**

Loo-shaqeeyaha waa in uu leeyahay nidaam uu sida ugudeg degga badan ugu gaarsiin karo goob caafimaad shaqaalaha ku xunuunsada ama ku dhaawacma goobta shaqada, kuwaasoo ay xaaladdooda caafimaad aan wax looga qaban karin xarumaha shaqada, wixii kharash ah ee ku baxa gurmadkaas loo-shaqeeyaha ayaa bixinaya.

## Qodobka 44aad
## Dhejinta Habraaca Badqabka Mihnaddaiyo Caafimaadka Shaqaalaha

1. Loo-shaqeeye kasta waxaa waajib ku ah in uu habraacaiyo qodobada khuseeya Badqabka mihnadda iyo Caafimaadka uu gaarsiiyo dhammaan shaqaalaha ku sugan goobta shaqada, kuna dhejiyo habraacaas meel ku habboon oo shaqaale kasta uu ka arki karo.
2. Habraacyada iyo qodobada Badqabka mihnadda iyo Caafimaadka waa inay ku qoran yihiin Af ay shaqaaluhu fahmi karaan.

## Qodobka 45aad
## Meel-marinta Hannaanka iyo Habraacyada Badqabka Mihnadda iyo Caafimaadka Goobaha Shaqada

1. Wasiirka wuxuu soo saari karaa hannaan iyo habraacyo ka dib markii uu la tashado wakiillada ururrada shaqaalaha iyo kuwa loo-shaqeeyaha ee khuseeya badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada, heerka badqabka mihnadda iyo caafimaadka guud ama mid gaar u ah goobo shaqo ama hey'ado oo ay ka mid yihiin shaqooyinkooda ee la xiriira:

   *b)* warshadaha, Mishiinnada iyo Qalabka, oo ay ka mid yihiin:

   i. dhaqaajiyayaasha kowaad (Prime Movers);
   ii. gudbinta Mashiinnada kale;
   iii. qalabka korontada ku shaqeeya ee gacanta lagu qaadan karo;
   iv. dhismaha iyo dayactirka xayndaabka ama dayrka la adeegsano;
   v. beddelidda iyo Rakibidda Mashiinno cusub;
   vi. mashiinnada iswada (Self Acting);
   vii. mashiinnada wax qaada iyo wiishashka;
   viii. silsiladaha, xargaha iyo kuwa dallaca ama qaada qalabka loo baahan yahay
   ix. wiishashka waaweyn iyo qalabka kale ee wax lagu qaado;
   x. makiinnadaha sameeya haamaha iyo kunteenarrada;
   xi. haamaha iyo Tubbooyinka dhaliya cadaadiska, dareeraha iyo gaasaska la nadiifiyey; iyo
   xii. warshadda Qaboojiyaasha waaweyn.

t) qalabka iyo Dharka badqabka;

*j)* ka-hortagga iyo xakameynta dabka;
x) kiimikooyinka halista ah;
*Kh) sii*-deynta Qaaca khatarta ah;
*d)* dikhowga hawada, buuqa iyo gariirka; iyo
r) U-carbinta Badbaadada iyo habraaca daadgureynta.

## QEYBTA IV:
## SHAQO-SIIN

### CUTUBKA SIDDEEDAAD
### ADEEGGA HESHIISKA CAADIGA AH

#### Qodobka 46aad
#### Qaabka Heshiiska

1. Heshiiska shaqo-siinta wuxuu noqon karaa qaab Af ah ama qoraal ah.
2. Caddaynta ama burrinta eedeymaha shuruudaha shaqo-siinta ee lagu qeexay heshiis Af ah, qeyb Af ah iyo qeyb qoraal ah, waa mas'uuliyadda loo-shaqeeyaha.
3. Heshiis shaqo-siin kasta waa in uu ahaadaa qoraal, haddii muddadiisa shaqo ay tahay 3 (seddax) bilood oo xiriir ah iyo waxii kabadan
4. Ka hor inta aan la dhaqan-gelin shaqo-siinta, sarkaalka shaqada ee awoodda u leh waa in uu hubiyaa heshiiska in uu waafaqsan yahay qodobada Sharcigan, xeer nidaamiyeyaasha ama sharciyada kale ee khuseeya shaqada.
5. Sarkaalka shaqada ee awoodda u leh haddii ay u caddaato inay jiraan wax ka soo horjeeda qodobada Sharcigan, xeer-nidaamiyeyaasha ama sharciyada kale ee shaqo-siinta, sarkaalku wuxuu:-
    - *b)* farayaa dhinacyada in ay dib-u-sixid ku sameeyaan heshiiska, si loo hubiyo in uu heshiisku waafaqsan yahay qodobbada Sharcigan;
    - *t)* farayaa dhinacyada haddii ay u-hoggaansami waayaan muddo 30 (Soddan) Maalmood shaqo gudahood ee taariikhda heshiiska la galay, dib- u-sixidda heshiiska lagu sameeyey waxaa loo qaadanayaa in uu buray,waana waxba kama jiraan, hasa yeeshee, xuquuqda dhinacyada ee Sharcigani lagu qeexay waa in la

dhawraa, muddadii uu shaqaaluhu shaqeynayay xuquuqdiisa shaqaalinnimo waa u ansax.

## Qodobka 47aad
## Faahfaahinta Shaqo-siinta

1. Iyadoo la raacayo qodobbada Sharcigan ama xeer-nidaamiyaashiisa, heshiiska qoraalka ah ee shaqo-siinta waa in lagu caddeeyaa tilmaamaha soo socda:
   *b)* magaca, Da'da, Jinsiga (Lab iyo Dheddig), Cinwaanka iyo mihnadda shaqaalaha;
   *t)* haddii qofku yahay naafo iyo nooca naafanimadiisa;
   *j)* magaca loo-shaqeeyaha Cinwaankiisa iyo mihniddiisa;
   *x)* shaqa qeexidda shaqo-siinta;
   *kh)* taariikhda shaqada la billaabayo;
   *d)* muddada heshiiska;
   *r)* saacadaha iyo goobta shaqada;
   *s)* xuquuqda la siinayo qofka shaqaalaha ah iyo muddada lagu bixinaayo, heerka kororka, habka xisaabinta xuquuqda iyo faahfaahinta dheefaha kale; iyo
   *sh)* qodobada iyo Shuruudaha la xiriira:
      i. fasax sanadeedka iyo fasaxyada kale; iyo fasaxa loo lacageynayo;
      ii. Shaqo gudasho la'aan ka dhalatay xanuun ama dhaawac, oo ay ka mid tahay wixii dhaqaale ah ee la siinayo qofka xanuunsan; iyo
      iii. hawlgabka, qorshaha hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha.
   *dh)* muddada qofka shaqaalaha waajib ku ah in uu kusoo gudbiyo codsigiisa ogeysiiska shaqo-ka-tegista, si loo soo afjaro heshiiska shaqo-siinta.
   *c)* wixii heshiisyo wadareed ah ee si toos ah u saameynaya qodobbada heshiiska iyo shuruudaha shaqo-siinta;
   *g)* haddii shaqaalaha looga baahan yahay inuu ka shaqeeyo dalka dibadiisa muddo ka badan hal bil:
      i. mMuddada ay tahay qofkaas shaqaalaha ahi in uu shaqeeyo;
      ii. nooca lacagta uu xuquuq ahaan ku qaadanayo;

iii. wixii xuquuq dheeraad ah oo la siinayo qofka shaqaalaha ah iyo wixii dheefah oo uu qofka ku helayo inuu dalka dibaddiisa ka shaqeynayo darteed; iyo

iv. wixii heshiis iyo shuruudo ah ee la xiriira dib-u-soo celinta shaqaalaha.

f) habraaca hakinta ama dhammaadka heshiiska; iyo

q) xeerarkaiyo qodobada kale ee la xiriiraqaabka anshax-marinta.

2. Waa in helitaanka qoraalka faahfaahinta shaqo-siinta, tixraacyadiisa oo dhan iyo dukumintiyada kale ee la cuskaday qaarkood loo fududeeyaa shaqaalaha.
3. Mar kasta oo faahfaahinta heshiiska wax iska bedelaan, loo-shaqeeyuhu isagoo la tashanaya shaqaalihiisa, waa in uu ku sameeyaa dib-u-eegis lagu saxayo is-bedelkaas, waana inshaqaalaha uu ku wargeliyaa si qoraal ah oo ku saabsan wax ka beddelka ku yimid heshiiska.

## Qodobka 48aad
## Waajibaadka Loo-Shaqeeyaha

1. Loo-shaqeeyaha waxaa waajib ku ah arrimahasoo socda:

*b)* in uu bixiyo ujuurada lagu heshiiyay, isagoo raacaya shuruudihii, goortii iyo meeshii la isku raacay bixinta ujuurada sida heshiiskaku cadeeyay si waafaqsan Sharcigan,xeer-nidaamiyayaashiisa ama heshiisyo wadareedkii jiray;

*t)* in uu qaado, si waafaqsan Sharcigan iyo xeer-nidaamiyeyaashiisa tallaabooyin ku habboon oo uu ku wanaajinayo xaaladaha badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada, oo ay ku jirto ka hortagidda dhaawacyada shaqada.

*j)* in shaqaalaha si lacag la'aan ah loogu sameeyo marag-furka iyo caddeynta waayo aragnimada shaqada marka ay codsadaan;

*x)* inuu tixgelin buuxda siiyo cabashooyinka dhabta ah ee shaqaalaha;

*kh)* in uu fuliyo waajibaadyada kale ee ku xusan Sharcigan, xeer-nidaamiyeyaashiisa ama shuruucda kale ee shaqada;

*d)* in aysan wax ka goyn karin ama ka hakin karin qeyb ka mid ah lacagaha shaqaalaha iyo lacagta kale ee uu muteystay, marka laga reebo meelaha uu banneeyey Sharcigani;

*r)* in aysan weydiinsan karin, kana qaadan Karin shaqaalaha ah lacag caddaan ama haddiyado ah nooc kasta oo ay yihiin, isagoo uga beddelanaya shaqo-siin ama wax la xiriira qodobbada heshiiskii iyo shuruudihii lagu shaqaaleysiiyay shaqaalaha;

*s)* in aan lagu qasbin ama lagu boorrin shaqaalaha inay badeecadaha ka iibsadaan dukaammada ama goobo cayiman; iyo

*sh)* in aysan saameyn ku yeelan shaqaalaha aragtidiisa siyaasadeed ama ururrada shaqaale ee uu daacadda u yahay darteed.

**Qodobka 49aad**

**Waajibaadka Shaqaalaha**

1. Shaqaalaha waxaa waajib ku ah arrimaha soo socda:

   *b)* in uuka shaqeeyo ilaalinta danta shirkadda iyo danta guud ee wax-soo-saarka Qaranka isagoo markasta maanka ku haya nooca shaqo ee laga doonayo;

   *t)* inuu dhawro tilmaamaha ku saabsan qaabka fulinta iyo nidaamka shaqada ee uu soo-saaro loo-shaqeeyaha ama ciddii kale ee uu u wakiisho, si waafaqsan Sharcigan;

   *j) in* uu si weyn u ilaaliyo hantida shirkadda ee lagu aaminay.

## CUTUBKA SAGAALAAD
## HESHIISKA FARSAMOBARADKA

**Qodobka 50aad**

**Qeexid, Ujeedooyin iyo Wax-ka-Dhaafid**

1. Heshiis farsamo barad waa xiriir shaqo-siin gaar ah oo qoraal ah, loo-shaqeeyuhuna uu ballanqaadayo in uu qofka farsamo baradka ah siinayo ama uu u keenayo cid siisa tilmaamo tababar, si uu u noqdo shaqaale xirfadle ah oo tababaran.
2. Tababar xirfadeedka farsamo baradku wuxuu ka kooban yahay tababar farsamo oo gacanta laga qabanayo iyo mid qoraal iyo akhris ah.

3. Ujeeddada tababar howleedku waa in la siiyo qofka farsamo baradka ah xirfadaha lagama-maarmaanka u ah shaqada lagu qori doono, ka dib markii uu si tartiibtartiib ula soo qabsado hawsha.
4. Ujeeddada laga leeyahay tilmaamaha wax barasho waxa ay tahay in qofka farsamobaradka ah la siiyo aqoon farsamo ee uu u baahan yahay. si uu u noqdo shaqaale leh xirfad dhammeystiran.
5. Wixii kharashka wax lagu baranayo waxaa bixinaya loo-shaqeeyaha.
6. Heshiiska farsamo baradka waxaa laga dhaafayaa dhammaan wixii kharashaad ah iyo lacagta diiwaan-gelinta.

## Qodobka 51aad
## Faafaahin

1. Heshiis kasta oo farsamo barad waa in uu ka koobnaadaa arrimaha soo socda:-
   - *b)* magaca, Nooca Ganacsiga ama Shaqada iyo Cinwaanka loo-shaqeeyaha;
   - *t)* magaca, Da'da, Xaaladda Qoysnimo, Dhalashada iyo Cinwaanka farsamo baradka;
   - *j)* shaqo, Farshaxan ama Ganacsi wax kastaoo ay tahay ujeeddada farsamo- baradka;
   - *x)* adeegyada farsamo-baradka uu ballanqaaday in uu fulinaayo;
   - *kh)* muddada farsamo baradka iyo goobta uu ka shaqo geli doono;
   - *d)* lacagta la siinaayo farsamo-baradka oo ah ujuurada iyo daryeel kale muddada lagu jiro farsamo baradnimada; iyo
   - *r)* jiifka iyo waxbarashada ee farsamo baradka.

## Qodobka 52aad
## Muddada iyo Xaaladda Farasamo-baradka

1. Dhalinyarada ay da’doodu u dhaxeysa 15 ilaa 30 Sano ayaa loo qaadan karaa farsamo-baradnimo, iyadoo ku xiran markasta xaddidaadda dhanka da’da iyo xayiraadaha kale ee shaqo-siinta ee uu dhigayo Sharcigan iyo xeer-nidaamyeyaashiisa ama shuruucda kale ee dalka.
2. Muddada heshiiska farsamobaradnimada waain aysan ka badnaan 3 (Saddex) Sano.

3. Muddada farsamo-baradku uu u shaqeeyey 2 (labo) loo-shaqeeye ama in ka badan oo kala duwan in la isu geeyaa markii la xisaabinayo muddada ugu badan ee qofka loo oggol yahay in uu farsamo-baradnimo ku shaqeeyo, waxaase shardi ah in muddada 2 (labada) farsamo-barasho u dhexeysaa aysan ka badneyn 1 (hal) sano, sidoo kale, 2 (labada) xirfadood ee uu baranayey waa in ay isku nooc yihiin.
4. Saacadaha shaqada ee farsamo-baradku waa in aysan ka badnaan **7 (**Toddoba**)** Saacadood Maalintii iyo **42 Saacadood** Toddobaadkiiba.
5. Waqtiga ku baxay tababar qoraalka waxaa lagu tirinayaa saacadaha farsamo-baradka ee caadiga ah.
6. Hawlaha farsamo-baradka, nooc kasta oo ay yihiin waxaa ka mamnuuc ah in la qabto inta u dhaxaysa **10:00 PM** ilaa iyo **6:00 Am**

## Qodobka 53aad
## Baaris caafimaad

Ka hor inta aan la qaadan qofka farsamobaradka ah, loo-shaqeeyuhu waa in uu marsiiyaa baaris-caafimaad, si loo hubiyo in uu ku habboon yahay mihnadda loo tababaraayo.

## Qodobka 54aad
## Shaqo Sii-wadasho

Haddii ay dhammaato muddada farsamo-baradka, heshiiskiina aan la joojin, farsamo-baradku wuxuu sii wadi doonaa inuu ku shaqeeyo howl u dhiganta shahaadada uu ku helay imtixaankii laga qaaday, muddada farsamo-baradka uu ku jiraan waxaa loogu xisaabinayaa muddadii uu hore u tababartay.

## Qodobka 55aad
## Waajibaadka Loo-Shaqeeyaha

1. Waajibaadka loo-shaqeeyaha ka saaran farsamo-baradka waa:
   *b)* in uu siiyo ama uu keeno cid siisa farsamo-baradka tilmaamaha tababarrada ee u suurta-gelinaya in uu yeesho aqoonta uu u baahan yahay, si uu u noqdo shaqaale xirfadle ah oo tababaran;

*t)* inuu iskaashi la yeesho hay'adaha dawliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee ka mas'uulka ah abaabulidda koorsooyinka tilmaamaya ee lagu kaabayo tababarka gacanta.

*j)* in xuquuqda la siinayo farsamop-baradka ay noqotaa mid ku filan oo u qalanta;

*x)* in uu hubiyo in farsamo-baradka aan loo dhiibin howl ka baxsan awooddiisa jireed ama howl aan xiriir la laheyn mihnadda loo tababaraayey;

*kh)* in uu siiyo farsamo-baradka dhammaan xuquuqdiisa oo aan waxba laga jarin, uuna siiyo waqti ku filan ee uga qeyb-qaadan karokoorsooyinka lagama- maarmaanka ah ee la xiriira tababarkiisa,uuna hubiyo in farsamo-baradku uu ka qeyb-qaatay koorsooyinkaas;

*d)* in uu siiyo farsamo-baradka waqtiga uu u baahan yahay in uu uga qeyb-qaato imtixaannada uu ku heli lahaa shahaadada uu mudan yahay;

*r)* in uu ku wargeliyo qofka farsamo-baradka mas'uulka ka ah horumarka uu tababartuhu ka sameeyay tababarradii la siiyay; iyo

*s)* in u hubiyo in farsamo-baradka aan loogu shaqeyn sidii shaqaalaha joogtada ah, loona dirin shaqooyin xamaali ah.

## Qodobka 56aad

## Waajibaadka Farsamo-baradka (Apprentice)

Waajibaadka saaran farsamo-baradka waa:

*b)* in uu u hoggaansamo loo-shaqeeyaha ama ciddii uu u wakiisho howsha tababarka, waana in uu raaco timaamaha la siinayo;

*t)* in uu u guto shaqadiisa si ay ku dheehan tahay mas'uuliyad;

*j)* in uu si joogta ah u xaadiro qaadasha koorsooyinka waxbarasho ee mihnidaha tababbarka la xiriirta; iyo

*x)* in uu ilaaliyo shuruudaha heshiiska tababbarka.

## Qodobka 57aad

## Imtixaanka Qiimeynta

1. Marka uu farsamo-baradku dhammeysto tababbarrada gacanta iyo kuwa koorsooyinka ee uu soo qaatay, wuxuu geleyaa imtixaanno lagu hubinayo aqoonta uu u leeyahay xirfadda la baray.

2. Shahaadooyinka la siiyey dhammaadka xilliga tababarka waa in lagu qoraa, laguna keydiyaa diiwaanka shaqada.

### Qodobka 58aad
### Shaqo-siin Khasab ah

Loo-Shaqeeye kasta oo ay u shaqeeyaan 20 shaqaale ama in ka badan, waa in ay qaataan ugu yaraan hal qof oo farsamo-barad ah. 20 (Labaatankii) qof oo shaqaale ah waa in la qaataa 1 (hal)farsamobarad.

## CUTUBKA TOBANAAD
## QANDARAASYO HOOSAAD

### Qodobka 59aad
### Ogeysiiska iyo Soo-gudbinta Nuqullada

1. Qandaraas-hoosaad-qaatuhu waa in uu goob kasta oo shirkaddiisa shaqo uga socoto ama goobo qandaraas-hoosaad isaga laga qaatey leeyahay, si joogta ah oo muuqata loogu soo-bandhigaa ogeysiisyada, laguna faafiyaa in uu yahay qandaraas-hoosaad-qaate, kuna qoraa Magaca, Shaqada iyo Cinwaanka qandaraas bixiyaha uu qandaraas-hoosaadka ka haysto.
2. Marka uu jiro heshiis qoraal ah oo u dhexeeya qandaraas-hoosaad-qaataha iyo qandaraas bixiye kasta, qandaraas-bixiyaha waxaa waajib ku ah inuu laba nuqul oo qandaraaska ah u gudbiyo sarkaalka shaqada ee awoodda u leh, isagoo tilmaamaya meesha ay ku taal goobta shaqada laga fulinayo.

### Qodobka 60aad
### Mas'uuliyadda

1. Haddii goob shaqo lagu qabanayo ay tahay **Hooso Shaqo** (Garaash) ama goobo ganacsi kale oo uu leeyahay qandaraasluhu ama goobo kale oo aysan laheyn, qandaraasluhu wuxuu shaqada iyo mas'uuliyadda shaqaalaha kala wareegayaa qandaraas-hoosaad-qaataha, haddii qandaraas-hoosaad-qaatuhu uu kaco ama musallafo oo uu iska bixin waayo deyntii lagu lahaa. Heshiiskan u dhexeeya qandaraaslaha iyo

qandaraas-hoosaad-qaataha wuxuu ansax noqonayaa haddiiaanu sidaas si ka duwan qoraynin.

2. Haddii ay dhacaan xaaladaha noocaas oo kale ah ee uu Shaqaalaha xuquuqdiisa waayo, qofka Shaqaalaha ahi wuxuu xaqiisasi toos ah uu ugu yeelanyaa qandaraaslaha.
3. haddii heshiiskii hore oo ay wadagaleen shaqaalaha uu qandaraas-qaataha siineyn xuquuq dheeraad ah, shaqaalaha qandaraas-hoose-qaatuhu waxay xaq u leeyihiin inay helaan xuquuq dhaqaale iyo daryeel la mid ah kan ay qaataan shaqaalaha qandaraaslaha ee heshiiska qandaraas kula jira qandaraas-hoosaad-qaataha.

## CUTUBKA KOW & TOBANAAD
## XAALADAHA IYO SHURUUDAHA

### Qodobka 61aad
### Xaaladaha ugu Yar ee Aasaasiga u ah Shaqo-siinta

1. Qodobbada cutubkan waxay tilmaamayaan xaaladaha ugu yar iyo shuruudaha aasaasiga u ah heshiiska shaqo-siinta.
2. Haddii xaaladaha iyo shuruudaha heshiiska shaqo-siinta la waafajiyey xeer-hoosaadyo waafaqsan heshiis wadareed laba dhinac ay isla ogolaadeen ama lagu xusay sharci qoran ama xukun Maxkamadda khuseyso ay soo saartay ama amar kale oo Maxkamadeed, ay shaqaalaha u dhammaan xaaladaha ku xusan qodobbada cutubkani waxaa la qaadanayaa xaaladaha iyo shuruudaha shaqaalaaha ay dantoodu ku jirto.

### Qodobka 62aad
### Saacadaha Shaqada

1. Saacadaha shaqada waxaa loola jeedaa muddada uu qofka shaqaalaha ahi xaadirka ku yahay goobta shaqada oo aysan ku jirin saacadaha nasashada ee qoran ama loogu heshiiyay si waafaqasan Sharcigan iyo xeer-hoosaadyada ama shuruucda kale ee dalka.
2. Saacadaha shaqada caadiga ah ee shaqaaluhu, haddii ay tahay mid ku xaddidan Waqti, gabal shaqo, ama shaqo go'an, si kastoo loo xisaabiyo, waa

in aysan ka badan 8 (siddeed) saac maalintiiba ama 48 saac toddobaadkiiba.

3. Saacadaha la shaqeeyey ee dheeraadka ku ah saacadaha caadiga ah ee shaqada waa:
   *b)* in aysan ka badnaan in 2 (laba)saac maalintiiba oo ah 12 saacadood todobaadkii; iyo
   *t)* saacadaha dheeraadka ah ee uu shaqaale shaqeeyey wuxuu ku kasbanayaa xuquuq ka badan saacadihii caadiga ahaa ee shaqada, waana in aysan ka yaraan 50% saacaddiiba.

## Qodobka 63aad
## Shaqooyinka aan Xiriirka Aheyn

Mihnadaha aan shaqadooda xiriir aheyn ama joogitaan shaqaale looga baahan yahay ama hawlo daryeel ah, saacadahooda shaqada ee caadiga ahi waa toban (10) saacadood maalintii ama 60 saacadood todobaadkii.

## Qodobka 64aad
## Fasaxyada Nasashada ee Todobaadka

1. Shaqaale kasta wuxuu xaq u leeyahay hal maalin oo nasasho ah toddobaadkiiba, kaas oo sida caadiga ah noqonaysa maalinta Jimcaha.
2. Marka laga reebo awoodaha gaarka u ah wasiirka ee ku xusan faqradda 5 (shanaad) ee isla qodobkan, maalinta nasashada waxay ka kooban tahay ugu yaraan 24 saac oo xiriir ah toddobaadkiiba.
3. Ilaa iyo intii suurtagal ah, nasashada todobaadlaha ah waa in waqti isku mid ah la siiyaa dhammaan shaqaalaha ku shaqeeya hal goob.
4. Shaqaaluhu waxa ay sidoo kale xaq u leeyihiin in ay helaan nasasho maalmaha munaasabadaha qaranka ee dawladdu aqoonsan tahay.
5. Wasiirka marka uu la tashado wakiillada ururrada shaqaalaha iyo kuwa loo-shaqeeyeyaasha, wuxuu tilmaamo ka soo saarayaa mihnadaha u baahan fasaxyo gaar ah sida:
   *b)* Fasaxyada u baahan kara si kaltan ah;
   *t)* Wax ka beddelista fasax dhaqameedyada iyadoo la tixgelinayo duruufaha gaarka ah;

*x)* In uu soo rogo fasaxyo ka badan 1 (hal) toddobaad, iyadoo la tixgelinayo daruufaha gaarka ah.

## Qodobka 65aad
## Fasaxyada Qaranka

1. Qofka shaqaalaha ah wuxuu xaq u leeyahay in uu helo xuquuqdiisa oo buuxda maalmaha uu ku jiro fasaxyada Qaran ama fasaxyada guud.
2. Qofkii shaqaale ah ee shaqeeya maalin fasax ah, wuxuu xaq u leeyahay in mushaarkiisa loogu kordhiyo xuquuq aan ka yareyn boqolkiiba konton (50%) saacaddiiba.
3. Haddii shaqaale uu shaqeeyo maalmaha Munaasabadaha Qaranka iyo fasaxyada guud, wuxuu muteysanayaa boqolkiiba konton (50%) ee mushaarka asaasiga ah.
4. Fasaxyada Qaranku waa sidan:
    - *b)* maalinta Shaqaalaha ee 1da May (Hal Maalin);
    - *t)* maalinta Midowga ee 1da Luulyo (Hal Maalin);
    - *j)* maalinta Calanka ee 12ka Oktoobar (Hal Maalin);
    - *x)* maalinta qorista Afka Soomaaliga 21ka Feebaraayo (Hal Maalin);
    - *kh)* maalinta Ciidul-Fitri (Laba Maalmo shaqo);
    - *d)* maalinta Ciidul-Adxaa (Afar Maalmo Shaqo);
    - *r)* maalinta Xuriyadda ee 26ka Juun (Hal Maalin);
    - *s)* maalinta Dhalashada Nabi Muxamed (N.N.K.H) ee 12ka Rabiicul-Awal (Hal Maalin); iyo
    - *sh)* Fasaxyada kale ee caadiga ah ee Dowladdu ogolaato kuna soo saarto faafinta rasmiga ah.

## Qodobka 66aad
## Biyaha

Loo-shaqeeye kasta waxaa waajib ku ah inuu siiyo biyo nadiif ah oo ku filan, kuna habboon isticmaalka shaqaalaha ka shaqeeya goobta shaqada, sidoo kale waa in uu deegaanka shaqaalahana siiyaa biyo nadiif ah.

## Qodobka 67aad
## Cuntada

1. Loo-shaqeeyaha waxaa waajib ku ah in uu siiyo cunto shaqaalihiisa marka si cad loogu heshiiyo oo kaliya ama ay ku qoran tahay waqtiga la gelayo heshiiska shaqo-siinta.
2. Loo-shaqeeyuhu waa in uu hubiyaa in shaqaalaha si habboon loo quudiyo, uuna u keeno maacuun ku filan iyo qalabka wax-karinta, uuna u diyaariyaa cunto kariye, kharashkana waxaa bixinaya loo-shaqeeyaha.
3. Qodobbada ku xusan faqradda (1 )(2) ee qodobkan, loo-shaqeeyaha mas'uuliyadi kama saarna qofka shaqaalaha ah muddada uu ka maqan yahay goobtiisa shaqada.

## Qodobka 68aad
## Daryeelka Caafimaadka

1. Loo-shaqeeyuhu wuxuu mas'uul ka yahay daryeelka caafimaadka shaqaalaha haddii ay ku caddahay heshiiska shaqada ama siyaasadda loo-shaqeeyaha, haddii aysan ka hor-imaaneynin qodobbada Sharcigan.
2. Loo-shaqeeyuhu waa in uu hubiyaa in shaqaalaha naafada ah ay helaan daryeel caafimaad oo munaasab ah, marka ay ku sugan yihiin goobta shaqada.
3. Loo-shaqeeyuhu waa inuu si deg deg ah u qaadaa talaabo kasta oo ku habboon sidii lagu soo ogeysiin lahaa jirrada qofka shaqaalaha ah, marka ugu horreysa ee lagu arko xanuunka.
4. Loo-shaqeeyaha waxaa laga dhaafayaa mas'uuliyadda haddii:
   *b)* uu caddayn karo inuusan ogeyn in shaqaaluhu uu xanuunsan yahay;
   *t)* uu qaaday dhammaan tallaabooyinkii lagama-maarmaanka u ahaa in la soo ogeysiiyo; iyo
   *j)* ay jirto duruuf awooddiisa ka baxsan in uu ogaan waayo in qof shaqaalaha ka mid ahi jirran yahay.
5. Qodobkani ma khuseeyo xaaladaha soo socdo:
   *b)* haddii qofka shaqaalaha ahi uu jirraday ama uu dhaawac soo gaaray, isagoo shaqada uga maqan si sharci-darro ah ama cudurdaar la'aan ah;

*t)* haddii la caddeeyo in qofka shaqaalaha ah sabab uu u yahay xanuunkiisa ama isagu dhawaac is-gaarsiiyay;

*j)* haddii daaweynta caafimaad ee shaqaalaha si lacag la'aan ah ay ku bixineyso dawladda ama laga bixinayo qorshe ceymis oo loogu talo-galay in shaqaalaha laga kaabo, kaasoo ku saleysan sharci qoran.

## Qodobka 69aad

## Fasax Sannadeedka

1. Qof kasta oo shaqaale ah wuxuu xaq u leeyahay 30 (sodon) maalmo shaqo oo fasax ah sanad kasta, iyadoo xuquuqdiisiina ay u socoto, ka dib markii uu shaqeeyay hal sano oo buuxda oo xiriir ah.
2. Marka shaqada laga joojiyo shaqaalaha sannado xiriir ah ka dib oo uu shaqeeyay, wuxuu xaq u yeelanayaa in loo qoondeeyo 1 (hal) bil oo fasax 12 ( laba iyo toban) biloodkii kasta ee uu shaqeynayay, dhinaca kale haddii shaqaalaha shaqada laga joojiyey sannadkii oo aan u buuxsamin, waxaa loo xisaabinayaa jajabka bilihii sannadkaas oo ay ku jirto bisha ugu dambeysay ee uu shaqeeyay haddii ay ka badan tahay 15 (shan iyo toban) cisho.
3. Marka xiriirka shaqada ka istaago shaqaalaha ka hor inta aysan qaadan fasaxyadii uu xaqa u lahaa, waxaa la siinayaa xuquuqdii bil kasta oo uusan fasaxeeda qaadan.
4. Fasax sanadeed kastaoo sida joogtada ah loo qaato, waxaa la bixinayaa waqti uu gooyay loo-shaqeeyuhu, isagoo la tashanaya shaqaalaha ama wakiilkooda, isla markaasna tixgelinaya baahida goobta shaqada iyo danta shaqaalaha labadaba.
5. Loo-shaqeeyuhu waa in uu qofka shaqaalaha ah ugu yaraan 7 (toddobo) cisho ka hor ku sii wargeliyaa xilliga uu u qoondeeyay in uu fasax sanadeedkiisa qaato.
6. Muddo gaaban oo aan ka yareyn 6 (lix) maalmo-shaqo oo xiriir ah wuxuu shaqaaluhu ka hormarsan karaa ama ka qaadan karaa fasaxiisii sannadlaha ahaa haddii baahida shaqadu sidaasku jirto.
7. Waqtiga la bixiyay ogaysiiska joojinta shaqada ee labada dhinac waa in aysan ku jirin fasax sanadeedka.
8. Dhammaan xuquuqda la siinayo qofka shaqaalaha ah bilawga fasaxa sanadlaha ah waa in la siiyaa xuquuqdiisa marka uu qaadanayo fasaxa.

## Qodobka 70aad
## Fasax Jirro

1. Qofkasta oo shaqaale ah oo ka baxay muddadii tijaabada, hadduu jirrado, waxaa waajib ku ah:
   *b)* in uu la yimaado warqad caafimaad oo caddeyneysa in uusan shaqeyn karin xanuunka dartiis, taasoo uu soo qoray dhakhtar rasmi ah oo leh aqoonta cudurka uu sheeganayo;
   *t)* in muddo saddex maalin gudaheed ah loogu wargeliyo loo-shaqeeyaha, loo-shaqeeyuhuna waa inuu tixgeliyaa xanuunka shaqaalaha u shaqeeya; iyo
   *j)* muddada fasaxa jirrada shaqaalaha waxay noqonayaan:
      i. Haddii aysan ka badnayn 15 (shan iyo tobon) maalmo shaqo, wuxuu shaqaaluhu xaq u yeelanayaa mushaarka maalmahaas oo dhammeystiran;
      ii. 30 maalmo shaqo ee ka dambeeya mudda 15 (shan iyo tobon) ka ah, wuxuu xaq u yeelanayaa kala bar mushaarka maalmaha uu maqnaado;
      iii. 45 maalmo shaqo wixii ka dambeeya wuxuu noqonayaan maalmo mushaar la'aan ah;
      iv. mar walba wixii ka badan (45) maalmo-shaqo waxay ku xirnaan doonaan nooca heshiiska dhinacyada ay wada galaan; iyo
      v. Qofkasta oo shaqaale ah oo aan ka baxin muddadii tijaabada, kuna xanuunsada shaqada shaqada bannaankeeda, waxaa la raacayaa waxa ku qoran heshiiska ay wadagaleen labada dhinac, hase yeeshee, haddii uusan jirin wax ku tilmaaman heshiiskooda, waxaa la tixgelinayaa wixii labada dhinac ay markaas ku heshiiyaan.
2. Qofku hadduu u jirrado sabab dhankiisa ah sida inuu isticmaalay maandooriye, xaq uma yeelanayo fasaxa qodobkan ku qoran.
3. Qofka shaqadu ay ku sababto jirro, wuxuu xaq u yeelanayaa magdhaw u dhigma dhibka gaaray.

## Qodobka 71aad
## Fasax Gaar ah

1. Loo-shaqeeyuhu waa in uu siiyaa shaqaalaha fasax gaar ah, oo mushaarkiisa u dhammeystiran yahay, kuwaas oo noqon karan sida:
    i. fasax guur, kaas oo noqonaya (3 ilaa 7) maalmo-shaqo;
    ii. fasax Xaj ama Cimro, kuwaasoo noqonaya muddada arrimaha Xajka ama Cimrada ay socdaan; iyo
    iii. xaaladda ku xusan faqradda (1)(ii) ee qodobkan, waxay ku xiran tahay la imaanshaha fiisaha (Visa) Xajka ama Cimrada;
2. Loo-shaqeeyuhu markii uu doono wuxuu siin karaa qofka shaqaalaha ah fasax uu isagu u gartay ama danqasho, si uu shaqaaluhu ugu soo qabsado hawl isaga u gaar ah, una noqota dhiirri-gelin.
3. Fasaxa ciidaha (ciidul-adxaa, Ciidul-fitri) waa mid labo (2) maalin oo haddii ay ku soo aadaan maalin fasax kale ah sida fasaxa jimcaha iyo ama fasax sharcigu jideeye loo rarayo maalinta xigta, maalmaha xurriyadda (26 Juun, 1Julaay) iyo maalinta dhalashada Nabigeena Muxamad SCW (12 Rabiicul-Awal). Iyo maalinta shaqaalaha 1May.

## Qodobka 72aad
## Diiwaanka Fasaxa

1. Loo-shaqeeyuhu waa inuu hayaa diiwaanka guud ee muujinaya macluumaadka fasaxyada:
    *b)* taariikhda shaqo-siinta qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha;
    *t)* taariikhda uu qaatay fasaxa;
    *j)* muddada fasaxyada;
    *x)* nooca fasaxyada; iyo
    *kh)* xuquuqda shaqaalaha.

## CUTUBKA LABA & TOBANAAD
## GO'AAMINTA IYO ILAALINTA XUQUUQDA

### Qodobka 73aad
### Xuquuq

1. Xuquuq (Remuneration) waa caddad lacageed ee loo-shaqeeyuhu uu ku siiyo qofka shaqaalaha ah in u dhiganta shaqadii uu qabtay, iyadoo aan laga jarin wax lacag ah, marka laga reebo lacag loo jarayo sifo sharciga waafaqsan oo loogu talagalay arrimahan soo socda:
   *b)* in lacagta loo jarayo ceymiska ama hawlgabka qofka shaqaalaha ah;
   *t)* in lacagta lagu darayo raashinka lagu cuno goobta shaqada, taasoo loo oggolaaday loo-shaqeeyuhu in uu ka bixiyo ujuurada shaqaalaha;
   *j)* lacag jaris kasta oo waafaqsan sifo sharci ah oo markaas dhaqangal ah oo loo-shaqeeyaha u oggolaanaya in uu lacag ka jaro ujuurada shaqaalaha; iyo
   *x)* lacag lagu jarayo Codsiga uu soo qortay qofka shaqaalaha ah, taas oo aysan jirin wax dan ah, toos ah ama dadbanoo ugu jiri karta loo-shaqeeyaha.

### Qodobka 74aad
### Ku-filnaasho iyo U-sinnaansho

1. Qofkasta oo shaqaale ah wuxuu xaq u leeyahay in uu helo xuquuq ku filan oo waafaqsan tayada iyo tirada shaqadiisa, xuquuqdaas oo dammaanad qaadaysa nolol ku habboon sharafta iyo karaamada Aadanaha.
2. Marka la go'aaminayo saamiga xuquuqda, waa in aysan jirin kala-takoorid ku saleysan lab iyo dheddig, midab, isir, da', jinsiyadda dhalashada, af guri, diinta, asal, naafanimo, uur, fayriska yareeya difaaca jirka (HIV/Aids), aragtida ra'yi siyaadeed ama ka tirsanaan urur siyaasadeed ama mid shaqaale, xuquuqda iyo waajibaadka shaqaalaha oo dhan waa u siman yihiin Sharcigan shaqada.
3. Xuquuq isku mid ah waa in la siiyaa dadka qabanaya shaqo isku mid ah, oo kuna salaysan nooca shaqada, hufnaanta, qiimaha shaqada iyo muddada intaba

4. Qiimeyn kasta oo lagu sameynayo sinnaanta xuquuqaha waa in markasta loo adeegsado ujeeddooyin iyo heerar wax-ku-ool u ah shaqada.

## Qodobka 75aad
## Hanaanka

1. Bixinta xuquuqda waxaa lagu saleyn karaa **halbeeg waqti** sida: (bil, 15 shan iyo toban maalmo-shaqo, toddobaad, maalin ama saacad) ama **halbeeg shaqo** sida:( gabal-shaqo ama shaqo-go'an).
2. Loo-shaqeeyuhu waa inuu hore ugu sii sheego qofka shaqaalaha ah:
   *b)* qeybaha uu ka kooban yahay sheyga uu ka shaqeynayo, shaqada la qabanayo iyo qiimaha lagu bixinayo midkiiba; iyo
   *t)* tirada shaqada la qabanayo iyo waqtiga ay qaadaneyso in lagu dhammeeyo.
3. Loo-shaqeeyaha iyo shaqaaluhu waxay ku heshiin karaan in qeyb ka mid ah xuquuqda ay noqoto mid ah faa'iido-wadaag saamiyada, khidmad ku xiran wax-soo-saarka ama adeegga la qabtay ama gunnooyin lagu bixiyo wax u dhigma lacag (in kind), si kastaba ahaatee:
   *b)* gunnooyinkaas waa in ay munaasab ay u yihiin adeegsiga qofeed iyo dheefta ay helayaan shaqaalaha iyo qoysaskooda; iyo
   *t)* qiimaha ku xiran gunnooyinka noocan ah waa in ay noqdaan kuwa daahfuran, maan-galna ah.
4. Haddii uusan jirin heshiis wadareed shaqo oo si kale u sheegaya ama heshiis si gaarah loola galay qofka shaqaalaha, saamiga uu qofka shaqaalaha ah ku leeyahay faa'iidada shirkaddu waxay ku xiran tahay faa'iidada saafiga ah (Net Profit) ee usoo harta loo-shaqeeyaha.
5. Markii aanu jirin heshiis wadareed shaqo oo dhigaya ama wax kale oo ay ku heshiiyeen dhinacyadu, khilaafyada soo kala dhexgala labada dhinac, waxaa lagu xallinayaa si waafaqsan Caadooyinkaiyo Dhaqammada Degaankaas ka jira, hase yeeshee,haddii aysan jirin caadooyin iyo dhaqamo deegaas ka jira waxaa khilaafka lagu xallinayaa si waafaqsan nidaamka u sinnaanshaha Caddaaladda.

## Qodobka 76aad

## Ujuurada Ugu Yar

Iyadaoo la tixgelinaayo xaaladda dhaqaale iyo kuwo bulsho ee Dalka ku sugan yahay, Wasiirka ayaa go'aamin kara Ujuurada ugu yar oo ay qaadanayaan heerarka kala duwan ee shaqaaluhu, ka dib, markuu la tashado Golaha Jaan-goynta Xuquuqda, uuna dhegeysto talooyinka Guddiga Shaqada Federaalka.

## Qodobka 77aad

## Dheef Kale oo Dheeraad ah

1. Loo-shaqeeye waa in uu:
   b) siiyaa shaqaalaha degaan marka uu ushaqo tegayo meel ka fog degaankiisa caadiga ah;
   t) siiyaa shaqaalaha cunto lacag la'aan ah ama lacag cunto ugu filan, marka qofka shaqaalaha ah uu ka shaqeeyo meel ka baxsan degaankiisa caadiga ah, isla markaana aysan jirin goob shaqaaluhu ku wada cunteeyaan;
   j) siiyaa shaqaalaha Gaadiid shaqada geeya kana soo celiya, marka shaqaaluhu uu ka shaqeeyo magaalo ama degmo ka fog degaankiisa caadiga ah;
2. Wasiirku markuu wadatashi la sameeyo cida ay khuseyso wuxuu go'aamin karaa:
   *b) m*arka ay jiraan xaalado kale oo ah in shaqaalaha la siiyo degaan, Gaadiid ama Goobo ay ka wada Cunteeyaan; iyo
   *t) d*heefaha kale ee dheeraadka ah oo ay tahay in loo-shaqeeyuhu siiyo shaqaalaha.

## Qodobka 78aad

## Gunnooyinka Ciidaha

1. Qof kasta oo shaqaale ah wuxuu xaq u leeyahay gunno Ciideed u dhiganta 15 (shan & toban) Maalmo shaqo Xuquuqdood, taas oo barna la siinayo dhammaadka bisha Ramadaan, barka kalena la siinayo horraanta Ciidda Carrafo, hase yeeshee shaqaalaha aan muslimka aheyn, haddii ay codsadaan, waxaa gunno Ciideedkooda la wada siinayaa hal mar oo ku began xiliga oo ah bilowga bisha Ramaddaan..

2. Shaqaalaha aan shaqeyn 1 (hal) sano oo dhammeystiran waxay xaq u leeyiihiin gunno ku qiimeysan intii bilood oo ay ka shaqeeyeen 12 (laba iyo tobankii) biloodba oo ay ku jiraan bilihii ay ka shaqeeyeen wax ka badan 15 (shan iyo toban) beri, kuwaas oo laga soo qaadayo bil buuxda.
3. Marka shaqaalaha laga joojiyo shaqada, wuxuu xaq u leeyahay in la siiyo gunnooyin ku qiyaasan bilihii uu sanadka ka shaqeeyay ama jajabka bishii ugu dambeysay ee uu ka shaqeeyay in ka badan 15 (shan iyo toban) cisho, gunnadaas oo la siinayo ka dib markii xisaabtiisa la xiro.
4. Marka xuquuqda shaqaaluhu ku saleysan yahay inta shey ee qofku soo saaray ama khidmad boqolley ah oo loogu dhuftay wax-soo-saarkiisa guud, gunnada shaqaalaha waxaa lagu cabbirayaa celceliska lacagtii uu ku helay intii shey ee uu soo-saaray ama celceliska wixii uga soo baxay khidmadda boqolleyda ee loogu dhuftay wax-soo-saarkiisa guud 3 (seddaxdii) billood ee ugu dambeysay ama bilo ka yar, markii laga jaro wixii kharash ah ee lagu leeyahay qofka, haddii ay khidmadaasi tahay mid hal mar la wada bixinayo iyo haddii kaleba.

## Qodobka 79aad

## Nooca iyo Muddada Lacag Bixinta

1. Iyadoo la raacayo qodobbada Sharcigan ama xeer-nidaamiyeyaashiisa, Xuquuqda shaqaalaha waa in lagu bixiyaa lacagta sharciga ah.
2. Bixinta ujuurada ee qaab ballanqaad ah, qaan-sheegato, boonooyin ama qaab kale oo loo ekeysiiyey mid sharci ah waa reeban tahay.
3. Lacagta waa in lagu bixiyaa goobta shaqada iyo maalinta ugu dambeysa ee muddada mushaar bixinta.
4. Marka dhaqan sidaas ahi goobta shaqada uusan ka jirin, xuquuqda waa in lagu bixiyaa waqti joogta ah oo aan ka badneyn 15 (shan iyo toban) cisho marka shaqaaluhu aanu joogto aheyn, hasa yeeshee, shaqaalaha rasmiga ah waa in bixinta xuquuqdooda uusan ka badnaanin muddo bil ah.
5. Marka laga hadlayo gabal shaqo oo socotay in ka badan 15 (shan iyo toban) cisho, qofka shaqaalaha ahi wuxuu dalban karaa in lasii siiyo xuquuqdiisa shan iyo toban maalmo shaqo oo u dhiganta shaqadii la qabtay,oo aan ka yareyn boqolkiiba **80%.**
6. Marka uusan jirin heshiis qoraal ah oo si kale sheegaya, xubnaha shaqaalaha ee mushaharkoodu ku saleysan yahay saami boqolley oo loogu dhuftay wax-soo-saarkooda guud, wuxuu xaq u leeyahay in loogu dhufto khidmadda loogu dhufto shaqaalaha ka howlgala laamaha la midka ah laantiisa shaqo.
7. Khidmadda gunno ee shaqo ganacsi la sameeyay 3 (saddexda) bilood waa in la bixiyaa dhammaadka rubuca ku xiga.
8. Saamiga faa'idooyinka lagu yeesho faa'iidada guud ee shirkaddu hesho sanad-miisaaniyadeed kasta, waa in la dhiibaa horraanta sanad-miisaaniyadeedka ku xiga.

## Qodobka 80aad

## Warqadaha Lacag Bixinta

1. Bixinta xuquuqda waxaa lagu caddeeyaa warqad lacag bixineed oo uu saxiixay qofka shaqaalaha ah ama uu suulka saaray haddii uu yahay mid aan wax qorin.
2. Warqadaha lacag bixinta waa in uu keydiyaa loo-shaqeeyuhu oo dhigaa Meesha ay yaallaan Dokumiintiyada kale ee muhiimka ah, waana in uu soo saaraa markii uu ka dalbado Sarkaalka Shaqada.

## Qodobka 81aad

## Dhisidda Goleyaasha Xuquuqda

1. Wasiirku wuxuu dhisi karaa Golaha Xuquuqda ee heer Federaal si ay u go'aamiyaan xuquuqda, muddada iyo shuruudaha shaqada ugu yar ee heer Federaal.
2. Wasiirka wuxuu ansixinayaa Goleyaasha Xuquuqda oo ay soo dhisteen Wasiirrada Shaqada ee heer Maamul Goboleed, Golahaas oo go'aaminaya xuquuqda, muddada iyo shuruudaha shaqada ee heer Maamul Goboleed iyo wixii ka sii hooseeya.
3. Magacaabista goleyaashu, waxay ku soo baxaysaa wareegto lagu baahiynayo faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, taas oo laga rabo in:
   *b )* ay caddeyso:
      (i) Waajibaadkooda shaqo, oo ay ku jirto muddada shaqadu; iyo
      (ii) Magacyada xubnaha la magacaabay.
   *t)* ay cayinto muddada uu Goluhu u baahan yahay si baaritaan uu ku sameeyo, warbixinna ugu diyaariyo Wasiirka; iyo
   *j)* ay u yeerto wakiillada ka socda dhinacyada danaynaya.
4. Golaha Xuquuqda ee heer Federaal ee uu magacaabayo Wasiirku,wuxuu ka kooban yahay xubnaha hoos ku xusan, kuwaas oo laga rabo in ay leeyihiin aqoon iyo waayo-aragnimo ay ku go'aamin karaan muddada iyo shuruudaha ugu yar ee shaqo-siinta, waxayna ka kooban yihiin:
   *b) g*uddoomiye;
   *t) x*ubno aan ka badneyn 3 (saddex) oo ay soo magacaabayaan wakiillada ururrada shaqaalaha;
   *j)* xubno aan ka badneyn 3 (saddex) oo ay soo magacaabayaan wakiillada ururrada loo shaqeeyeyaasha; iyo
   *x)* xubno madaxbannaan oo aan ka badneyn 3 (seddax).

## Qodobka 82aad

## Waajibaadka iyo Awoodaha

1. Shaqooyinka Goluhu waa in:
   *b)* ay baaraan Xuquuqda iyo xaaladaha shaqada;
   *t)* u yeero, soona dhoweeyo xubnaha ay wakiillada daneeyeyaasha ahi si Af ama qoraal ahay kusoo magacaabeen; iyo

*j)* ay Wasiirka u soo-jeediyaan talooyin ku saabsan Xuquuqda iyo xaaladaha shaqada ee ugu yar.

2. Goluhu marka uu howshiisa gudanayo waa in uu tixgelin weyn siiyaa arrimaha soo socda:
   *b)* baahida shaqaalaha iyo qoysaskooda, iyagoo tixgelin siinaya heerka guud ee ujuurada dalka, heer nololeedka maciishadda, xuquuqda la siiyo howlgabka iyo heerarka nolosha ee kooxaha kale ee bulshada;
   *t)* isirrada dhaqaalaha, oo ay ku jiraan shuruudaha looga baahan yahay horumarka dhaqaale,heerarka wax-soo-saar, rabitaanka joogteynta iyo sare u-qaadista heerka shaqo-siinta iyo baahida loo qabo dhiirri-gelinta maal-gashiga.
   *j)* awoodda loo-shaqeeyeyaasha ay u leeyihiin in ay shaqadooda ku guuleystaan;
   *x)* howlaha ganacsatada yaryar, kuwa dhexe iyo kuwa aadka u sii yaryar;
   *kh)* qiimaha heerka maciishadda ee nololeed;
   *d)* yareynta heerka saboolnimada;
   *r)* heer ugu hooseeyaee nolosha;
   *s)* saamaynta ay suurtagal tahay ee in shuruudo la soo jeediyay ee shaqo-siinta ee hadda jirtaama shaqo abuuristaba; iyo
   *sh)* wxii arrimo kale ee la xiriira.
3. Marka goluhu gudanayo shaqadiisa, wuxuu:
   *b)* su'aalo waydiin karaa qof kasta oo bixin kara macluumaad la xiriira baaritaanka;
   *t)* si qoraal ah, uga codsan karaa qof kasta inuu siiyo wixii macluumaad, buug, dukuminti ama sheykale ah oo la xiriira baaritaanka; iyo
   *j)* qaban karaa doodo dadweyne.
4. Qof kasta oo sabab sharci ah haysan diida ama ka gaabsada:
   *b)* in uu ka jawaabo su'aal kasta oo la xariirta baaritaanka; ama
   *t)* in uu dhiibo macluumaad, buug ama dukumenti kasta oo uu ka codsaday Goluhu, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo dhan **US $ 200** ama lacag Shillin Soomaali ah oo u dhiganta ama xabsi aan ka badneyn 1 (hal) bil ama labadoodaba.

## Qodobka 83aad
## Dalabka Xuquuqaha

1. Talooyinka Golaha Xuquuqda Shaqada uu usoo gudbiyo Wasiirka, marka la faafinayo waxaa loo isticmaalayaa magaca ah "**Dalabka Xuquuqaha**".
2. Ka hor inta aan la faafin Dalabka Xuquuqaha, Wasiirku wuxuu soo saarayaa ogeysiis, kaas oo:
   *b) c*addaynaya in la soo jeediyey ama lassoo saaray dalab ujuuro;
   *t)* caddaynaya goobta laga heli karo nuqullada qabya-qoraalka dalabka;
   *j) s*oo dhoweynayaa talooyinka laga dhiibanayo qabya-qoraalka dalabka, muddo ku habboon oo aan ka yareyn 30 (Soddon)Cisho laga soo billaabo markii ogeysiiska la daabacay.
3. Qof kasta oo wax ka qaba dalabka qabya-qoraalka wuxuu muddada la cayimay dhexdeeda kusoo gudbin karaa ra'yigiisa, kaas oo haddii uu diidan yahay qabya-qoraalka aragtidiisa ku billaabaya:
   *b) w*axyaabaha uu ku sababeeyay diidmadiisa; iyo
   *t) w*axyaabaha uu soo jeediyay in dalabka qabya-qoraalka laga tiro, lagu daro ama si kale loo qoro.
4. Wasiirku wuxuu:
   *b)* u gudbiyaa Dalabka ujuurada diidmada laga keenay iyo tixgelinta talooyinka kaleba; iyo
   *t)* ka codsan karaa Golaha Xuquuqda Shaqada in ay ka baraan degaan arrinta oo ay talo ka bixiyaan diidmada lasoo jeediyay.
5. Haddii Wasiirka ay soo garaan diidmooyin, talooyin,ama uu sidaas ku aqbalo; iyo haddii aysan wax diidmo ah soo gaarinba, Wasiirku wuxuu qabyo-qoraalka Dalabka Xuquuqahau gudbinayaa Golaha Wasiirrada muddo 21 **(**kow iyo labaatan**)** maalmo shaqo gudahood si waafaqsan Sharcigan. Go'aanka Golaha Wasiirradu ka soo saaraan dalabka xuquuqaha waxaa lagu daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda;
6. Dalabka Xuquuqda:
   *b)* wuxuu dejiyaa heerka ugu hooseeye ee xuquuqda;
   *t)* wuxuu caddeeyaa arrimaha keeni kara in loo-shaqeeyuhu lacag ka gooyoxuquuqda shaqaalaha iyo inta ugu badan ee laga jari karo;

*j)* wuxuu sheegayaa xadka ugu badan ee loo-shaqeeyuhu lacag ahaan u goosan karo raashinkii uu shaqaalaha siiyayka dib markii shaqaalaha iyo loo-shaqeeyuhu isla oggolaadaan tayada cuntada iyo qiimaha lacageed ee ay ku kaceyso lana helo oggolaanshaha sarkaalka shaqada;

*x)* wuxuu kala caddeynayaa shaqada ku saleysan hawl-qabad (task-based) iyo midda gabal shaqo ah (Piece Work);

*kh)* wuxuu kala caddeynayaa shaqada dibadda lagu soo qabtay, shaqada aan joogtada aheyn iyo heshiis shaqo;

*d)* wuxuu dejiyaa heerarka ugu hooseeya faya-dhowrka shaqaalaha deggan dhismaha loo-shaqeeyaha;

*r)* wuxuu kala caddeynayaa wax kasta oo ku saabsan xuquuq bixinama xaaladaha shaqada;

*s)* wuxuu qodobbo kala duwan ku tilmaami karaa heerarka shaqaale ee kala duwan; qodobbada qaarkood wuxuu ka beddeli karaa,dalab xuquuq hore u jirayna wuu baabi'in karaa.

7. Markii la dajiyo Amarka Xuquuqda:

   *b)* wuxuu ka koobnaanayaa shuruudaha iyo xaaladaha shaqada ee ugu yar; iyo

   *t)* wuxuu qeybka mid noqonayaa heshiis kasta oo qofeed ama mid wadareed,marka laga reebo haddii heshiiska ay ku jiraan qodobbo dan u ah shaqaale ama dhammaan shaqaalaha.

8. Loo-shaqeeyaha ku guuldarreysta inuu:

   *b)* siiyo shaqaalaha dalabkani khuseeyo xuquuqda ugu yar ee ku qeexan dalabkan;

   *t)* ku dhaqo shaqaalaha xaaladaha shaqo ee lagu qeexay dalabka, wuxuu galayaa dambi, waxayna Maxkamadda awoodda u leh amri kartaa, iyadoo ay wehliyaan ciqaab, iyo in uu bixiyo lacag la'eg farqiga u dhaxeeya lacagtii ku qorneyd amarkii ujuurada iyo qaddarka lacagtii uu isagu si dhab ah u bixiyay

9. Sarkaalka  shaqada ayaa ka wakiil ah shaqaalaha, wuxuu furi karaa dacwad ka dhan ah loo-shaqeeyaha si uu usoo celiyo lacagta ay shaqaaluhu ku leeyihiin, sababtuna ay tahay  loo-shaqeeyaha oo ku guuldarreystay in uu:

   *b)* siiyo shaqaalaha xuquuqda ugu yar ee dalabka oggol yahay; iyo

   *s)* ku dhaqo shaqaalaha xaaladaha shaqo ee ku qeexan dalabkan.

## Qodobka 84aad
## Ilaalinta

1. Ujuurada Shaqaalaha ka maqan waxay mudnaan wayn ka tahay qaansheegadka hantida guud ee loo-shaqeeyaha marka loo eego dhammaan deymaha kale ee shirkadda lagu leeyahay.
2. Xuquuqda qofka shaqaalaha ah marna lagama jari karo, loomana qoondeyn karo, wax kalena luguma xiri karo, marka laga reebo qaddar aan ka badneyn afar meelood meel **(1/4)** ka mid ah Xuquuqda.
3. Lacagaha lagu leeyahay Dawladda ama hay'ad Dawladeed oo kale shaqo loo qabtay darteed ma qaadan karo dhinac saddexaad, mar haddii ay tahay lacagtaas mid la xiriirta xuquuqdii loo-shaqeeyaha siin lahaa shaqaalaha.
4. Dhammaan xuquuqda uu shaqaaluhu xaqa u yeeshay waa in la siiyo, si waafaqsan xiriirka shaqada, waxaana ku imaaneysa xayiraad xaddidan, haddii aan lagu bixin muddo 3 (saddex) sano gudahood ah oo kasoo billaabata maalintii uu qofka shaqaalaha ahi xaqa u yeeshay lacagtaas.
5. Wasiirku wuxuu soo saarayaa wareegto uu ku war-gelinayo loo-shaqeeyaha aan diiwaangashaneyn ama aan degganeyn Jamhuuriyadda inuu bixiyo lacag rahan ah oo u dhiganta xuquuqda ay bishii qaataan dhammaan shaqaalaha u shaqeeya ama uu ku talo jiro in uu shaqaaleeyo mustaqbalka.
6. Rahanta laga qaadayo loo-shaqeeyaha wuxuu dhigayaa Akoon gaar ah oo Wasaaraddu uga furan Bankiga dhexe, caddeynta lacag bixinta ayuu keenayaa xafiiska Wasaaradda, Lacagtaas looma isticmaali karo wax aan ka aheyn in lagu bixiyo ujuurada iyo xuquuqda kale ee uu muteysto shaqaalaha u shaqeeya loo-shaqeeyahaas.Haddii loo-shaqeeyuhu uu iska bixin waayo xuquuqdii lagu lahaa,waxaa lacagtaas lagu soo saari karaa saxiixyada loo-shaqeeyaha ama wakiilkiisa iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, waxaana faahfaahin doona habraac gaar ah uu soo saarayo Wasiirka oo arrintaas khuseeya.
7. Marka uu geeriyoodo qof shaqaale ah, sabab kasta ha ku timaadee, laguna soo wargeliyo ama uu ogaado loo-shaqeeyihiisu, loo-shaqeeyuhu waa in uu sida ugu dhaqsaha badan ee suuragalka ah markaa ka dib ogeysiiska geerida ugu diraa sarkaalka shaqada. isagoo ku qoraya foomka cayiman ee loogu talagalay, haddii uusan jirin sarkaalka shaqada, waa in uu ogeysiiska

geerida u diraa Guddoomiyaha Degmada ama Saldhigga Booliska Degmadii uu shaqaalaha dhintay ka shaqeynayay.

8. Haddii qofka shaqaalaha ahi ee geeriyooda inta uu socdo heshiiskiisa shaqo, wakiillada sharciga ah ee qofka shaqaalaha ahi waa in ay keenaan Warqadda Caddeynta Geerida, waxayna xaq u yeelanayaan ujuuradii iyo xuquuqihii kale ee shaqaalaha iyo hantiidiisiibain lagu bixiyo muddo 30 (Soddon)maalmo-shaqo gudahood laga billaabo maalintii uu geeriyooday.
9. Loo-shaqeeyaha qofka geeriyooday waxaa waajib ku ah in uu 7 (toddoba) maalmo-shaqo gudahooda laga billaabo maalintii uu lacagta bixiyay, u soo gudbiyo sarkaalka shaqada dokuumiintiyadii caddeynta lacagbixintaas.
10. Haddii muddo 3 (seddex) bilood ahi ay kasoo wareegto geeridii shaqaalaha:
    *b) o*o la waayo wax wakiillo sharciyeysan ah oo soo dalbada mushaarkii iyo hantidii shaqaalaha geeriyooday; ama
    *t) u*u loo-shaqeeyuhu ka shakiyo ama uu diido dalabka looga soo codsaday mushaarka iyo hantida shaqaalaha geeriyooday, loo-shaqeeyuhu waa in uu sarkaalka shaqada ku wargeliyaa dhammaan mushaarkii iyo hantidii qofka dhintay ku lahaa, intaa ka dib si loo maamula xaaladdaas, waxaa faahfaahin doona habraac gaar ah oo uu soo saarayo Wasiirka, oo waafaqsan sharciga la xiriira dhaxalka ama sharciyada kale ee qoran ee ku saabsan bixinta hantida dadka geeriyooday.
11. Haddii qof shaqaale ahi, isagoo shaqadiisa gudanaya la dilay ama uu soo gaaro dhaawac keenayin uu shaqadiisa gudan kari waayo muddo 3 (Saddex) maalmo shaqo gudahood, loo-shaqeeyuhu waa in uu sida ugu dhaqsiyaha badan sarkaalka shaqada u gudbiyaa warbixin faahfaahsan oo la xiriirta xaaladda shaqaalahaas.

## Qodobka 85aad

## Lacag Ka-jaris, Ganaax iyo Anshax Marin

1. Ma jirto wax laga jari karo qofka shaqaale ah oo aan ka aheyn kuwa uu qorayo Sharcigan, xeer-hoosaadyadiisa iyo shuruucda kale ee dalka ama uu dhigayo heshiis wadareed shaqo  oo aan ka aheyn lacag dib-u-celin ah oo caddeyn qoraal wadata oo loo-shaqeeyuhu uu u hormariyay shaqaalaha.

2. Qofkasta oo shaqaale ah ee iskiisa shaqada fasax la'aan uga maqnaada, wuxuu weynayaa dhamman xuquuqdii uu heli lahaa muddadii uu maqnaa.
3. Qofkasta oo shaqada cudurdaar la'aan ka maqnaada 7 (toddoba) maalmo-shaqo oo xiriir ah ama inka badan, waxaa loo qaadanayaa in uu shaqada si rabitaankiisa iskaga tagay.
4. Qofkasta oo shaqaale ah haddii uu gudan waayo waajibaadkii shaqo ee lagula heshiiyay, iyadoo aan isla markiiba la soo saarin amar lagu joojinayo heshiiskiisii shaqo-siinta, waxaa lagu anshaxmarinayaa sidan:
   *b)* waxaa la siinayaa digniin qoraal ah;
   *t)* waxaa shaqada laga joojinayaa muddo aan ka badneyn 7 (toddoba) maalmo-shaqo oo lacag la'aan ah.
5. Loo-shaqeeye kasta waa inuu si deg deg ah shaqaalaha ugu wargeliyaa tallaabooyinka ka dhanka ah ee laga qaadayo kuna xusan faqradaha (4)(b )( t) ee qodobkan.

## CUTUBKA SEDDEX IYO TOBANAAD
## DIIWAANNADA SHAQO-SIINTA

### Qodobka 86aad
### Diiwaannada Laga Rabo in uu Keydiyo Loo-Shaqeeyuhu

1. Loo-shaqeeyaha waxaa waajib ku ah inuu hayo diiwaannada soo socda:
   *b)* liiska dhammaan shaqaalaha uu shaqaaleeyay ee uu la galay heshiis qoraal ama Af ah (Written or Oral);
   *t)* faahfaahinta ku saabsan carruurta uu shaqaaleeyay;
   *j) w*ixii la xiriira hab-dhaqan siyaasadeed (Policy Statement) ama xeer-dhaqan shaqo ah oo Sharcigani waajibiyay, oo ay ka mid yihiin kuwa la xiriira Xadgudub Damac Galmo iyo Faduullin (Sexual Harassment);
   *x)* heshiisyada qoran iyo heshiis wadareedyada;
   *kh)* faahfaahin kasta oo waajib ku ah in uu hayo loo-shaqeeyuhu;
   *d)* diiwaan kasta ee loo-shaqeeyaha looga baahan yahay inuu abuuro, heysto kuna shaqeeyo;
   *r)* qoraallada caddeynaya lacag ka-jarista shaqaalaha ee la oggolyahay;

s) rahanta loo dhigayo ujuurada shaqaalaha;
sh) qoraallada digniinta;
dh) ogeysiiskajoojinta heshiiskii shaqada ee kasoo baxday shaqaalaha ama loo-shaqeeyaha;
c) waraaqaha shaqo ka saaris;
g) faahfaahinta fasaxa dhalmada;
f) faahfaahinta fasaxa jirrada;
q) faahfaahinta la xiriirta deegaanka marka loo-shaqeeyuhu uu shaqaalaha dejiyo deegaan;
k) faahfaahinta ku saabsan inta ujuurada shaqaalaha kaga soo aadeyso gunnada guriga la dejiyey;
m) faahfaahinta ku saabsan garaamka raashinka, haddii ay munaasab tahay.

2. Loo-shaqeeye kasta waa in uu u oggolaadaa sarkaalka idman, haddii uu ka dalbado in uu soo gudbiyo qoraalladii la keydiyay muddo kasta oo ka mid ah 36 (lix iyo soddonkii) bilood ee lasoo dhaafay, si loo baaro.

## Qodobka 87aad
## Qoraal Been-Abuur ah

Qofkasta oo sameeya, sababo oggolaanayo in xog been abuur ah la geliyo diiwaanka ama dukuminti kale la abuuro, la keydiyo, lana ilaaliyo isaga oo og in xogta la gelinaayo diiwaankaas ama dukumintigaas uu yahay mid la soo been abuuray ama isaguba ka qeyb noqday been abuurkaas, ka dibna loo soo gudbiyey sarkaalka idman,waxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo dhan **US$1000** ama lacag Shillin Soomaali ah oo u dhiganta ama xabsi aan ka yareyn (6) bilood ama labadaba.

## CUTUBKA AFAR IYO TOBANAAD
## CEYMISKA IYO ILAALINTA SHAQAALAHA

### Qodobka 88aad
### Ceymiska iyo Ilaalinta Shaqaalaha

Wasiirka waxaa waajib ku ah, isagoo la tashanaayo ururrada shaqaalaha iyo ururrada loo-shaqeeyaha in uu abuuro siyaasado & xeer-nidaamiye lagu dhaqan-geliyo Sharcigan oo la xiriira nidaaminta iyo istaraatiijiyado lagu ilaalinayo shaqaalaha, oo ay ka mid yihiin kaalmeynta shaqaalaha, caymiska shaqaalaha iyo hannaanka sinnaanta shaqaalaha iyo la socodka isbeddalka iyo wax ka qabadka suuqa shaqada.

## CUTUBKA SHAN IYO TOBANAAD
## HESHIISKA SHAQO-SIINTA DIBEDDA

### Qodobka 89aad
### Awoodda Gelidda Heshiiska

1. Heshiiska shaqo-siinta dibeddu waa heshiis lagu galay Dalka gudahiisa, haseyeeshee shaqada gebi ahaanteed ama qeyb ka mid ah lagu qabanayo Dalka bannaankiisa, taas oo shaqaalahana looga baahan yahay in ay muddada heshiiska inteeda badan ku qaataan meel Dalka ka baxsan, si waafaqsan Sharcigan, shuruucda kale ee qoran, siyaasadaha iyo Habraaca Shaqo-siinta Dibadda ee shaqaalaha Soomaaliyeed.
2. Heshiiska shaqo-siinta dibedda waa in lagu qoraa foom cayiman oo dhinacyadu saxiixeen, ayna xaqiijisay Waaxda ku shaqada leh ee Wasaaradda.
3. Qofna looma oggola in uu galo heshiis shaqo-siin Dibedeed oo aysan oggolaan Waaxda ku shaqada leh ee Wasaaradda.
4. Inta aan oggolaanshaha la siinin, Waaxda ku shaqada leh ee Wasaaradda waa in ay ku qanacdaa marka hore in heshiiku ka maran yahay khiyaano, jajuub, saameyn khaldan, ka been sheegid iyo marin-habaabin keeni karta in qofka shaqaalaha ahi uu ku khaldamo (Sirmo) gelidda heshiiskaas oo ah:

*b)* in la helo raalli ahaanshaha shaqaalaha heshiiska lala galay;

*t)* heshiisku waa inuu ku saleysnaadaa Foomka cayiman ee sare ku xusan;

*j)* in xaaladda iyo shuruudaha shaqo-siinta ee heshiisku qorayo ay waafaqsan yihiin qodobbada Sharcigan, uuna hubiyo in qofka shaqaalaha ah uu si sax ah u fahmo;

*x) in* qofka Shaqaalahaah caafimaadkiisu taam yahay, uuna fulin karo waxqabadka shaqada ee uu heshiisku qorayo; iyo

*Kh) q*ofka Shaqaalaha ah looma adeegsan Karo in uu qabto shaqo kale muddada lagu jiro heshiiska shaqada ilaa uu ka dhamaanayo heshiiska dibedda.

## Qodobka 90aad
## Dammaanad

1. Markaay Waaxda ku shaqada leh ee Wasaaradda ula muuqato in loo-shaqeeyaha gelaya heshiis shaqo-siin dibadeed oo aan degganayn ama aan ku laheyn ganacsi Dalka gudahiisa ,loo-shaqeeyuhu waa inuu dhigaa lacag rahan ah si waafaqsan foomka cayiman iyo laba dammiin oo deggan Dalka gudahiisa oo ay oggolaatay Waaxda ku shaqada leh ee Wasaaradda.
2. Haddii loo-shaqeeyaha uu u joogo wakiil sharciyeysan, degganna dalka, Waaxda ku shaqada leh ee Wasaaradda waxay dalban kartaain wakiilku uu bixiyo rahanta, wakiilkuna uu qof ahaantiisana u ballanqaado in uu ku dhaqmayo shuruudaha heshiiska rahanta, kumana xirnaan doonto arrintani in uu la socodsiiyo ciddii wakiilatay.

## Qodobka 91aad
## Ku-qalqaalinta ama ku Khasbidda Shaqo Dibadeed Heshiis La'aan

1. Qof ama shirkad kasta oo:

*b) s*haqo siiya, ka shaqeeya ama isagoo og gacan ka geysta shaqo-siintiisa ama hawlgaliya qof ujeeddada laga leeyahay shaqo-siintaas ay tahay in loo diri doono shaqo dibadda ka ah Dalka;

*t)* ku qalqaaliya, isku daya in uu tashkiiliyo, ku khasbaama isku daya in uu ku khasba qof shaqaale ah in uu u safro meel ka baxsan Dalka si aan waafaqsaneyn Sharcigan, qofkaasi waxaa lagu ciqaabayaa ganaax

lacageed oo dhan **US $5000** ama lacag Shillin Soomaali ah oo u dhigantaama xabsi aan muddadiisu aysan ka yareyn 1 (hal) sano ama labadooda oo la isugu daray.

## CUTUBKA LIX IYO TOBANAAD
## MAAREYNTA SHAQADA

### Qodobka 92aad
### Agaasime ama Sarkaal Idman

1. Qeexida Cutubkan Agaaasiamah ama Sarkaalka Idman:

   *b)*“agaasimaha” waxaa loola jeedaa Agaasimaha Waaxda Shaqada; iyo

   *t)* “sarkaalka Idman” waxaa loola jeedaa Agaasimaha Shaqada.

2. Iyadoo aan laga leexaneynin hawlahooda iyo waajibaadkooda guud, Agaasimaha Shaqada iyo Sarkaalka idman, waa in ay u fududeeyaan hubinta iyo horumarinta:

   *b)* baxnaaninta, dhaqan-celinta iyo adeegyada dadka lixaadkoodu dhimman yahay oo ay ku jiraan barnaamijyada tababarka Shaqaalaha ka howlgala Adeegyadaas; iyo

   *t)* barnaamijyada ku saabsan tababarka xirfadaha iyo adeegyada shaqada dadka lixaadkoodu dhimman yahay.

### Qodobka 93aad
### Ogeysiisyada

1. Loo-shaqeeyaha ayaa laga doonayaa inuu ku wargeliyo Agaasimaha markii jago ka bannaanaato shirkaddiisa ama goobtiisa shaqo, waana inuu kusoo qoraa foomka cayiman, kaasoo ay ku qoran yihiin macluumaadka soo socda:

   *b)* magaca loo-shaqeeyaha iyo cinwaankiisa oo buuxa;

   *t)* faahfaahinta booska bannaan;

   *j)* shahaadada ugu hooseysa ee looga baahan yahay qofki ijagadan soo dalbanaya;

   *x)* goobta iyo nooca shaqada, ha ahaato shaqo joogto ah, mid ku meel-gaar ah ama heshiis muddo cayiman leh, iyo

*kh)* macluumaadka kale ee Agaasimuhu uu u baahan karo.

2. Jago waxay bannaanaataa markii:

    *b)* loo-shaqeeyuhu uu abuuro jago u baahan shaqaale buuxiya ama uu go'aansado in uu buuxiyo jago bannaanaatay; iyo

    *t)* loo-shaqeeyuhu ka joojiyoshaqaale shaqada ama loo-shaqeeyuhu uu baabi'iyo jagadaas.

3. Marka shaqo la oggeysiiyey Agaasimaha in ay bannaan tahay la buuxiyo ama la baabi'iyo, loo-shaqeeyuhu waa inuu qoraal ahaan ugu wargeliyaa Agaasimaha muddo laba toddobaad gudahood ah.
4. Loo-shaqeeye waxaa looga baahan yahay inuu 5 (shan) maalmo shaqo gudahood ugu gudbiyo sarkaalka Idman magaca iyo xirfadaha shaqaale kasta oo u shaqeynayay, shaqadana laga joojiyay sabab kasta ha ahaatee.
5. Qofka shaqaalaha ah ee ku jira diiwaanka guud ee liiska keydka shaqadoonka, waxaa looga baahan yahay in uu shaqo billaabiddiisa ku ogeysiiyo sarkaalka idman 7 (toddoba) maalmo shaqo gudahood, haddii loo shaqaaleeyay si waafaqsan qodobada cutubkan.
6. Qofka ku jira liiska keydka shaqadoonka, haddii uu shaqo la'aan sii ahaado, waa in uu is diiwangelintiisa ka cusbooneysiistaa sarkaalka idman seddexdii biloodba mar, laga soo billaabo maalintii uu is diiwaan-geliyay

## Qodobka 94aad
## Diiwaan-gelinta Shaqaalaha

1. Qof kasta oo doonaya inuu shaqo helo, waxaa looga baahan yahay inuu iska diiwaan-geliyo Diiwaanka Guud ee keydka shaqa doonka ee uu hayo sarkaalka idmani.
2. Qofna looma oggola inuu iska diiwaan-geliyo wax ka badan hal sarkaal idman oo kaliya.
3. Qofna looma oggola in lagu qoro diiwaanka guud ee shaqa doonka, haddii aanu weli gaarin da'da ugu yar ee shaqada loo oggol yahay sida Sharcigan qabo ama Xeer-nidaamiye ama Sharciyada kale ee Dalka ee la xiriira oggolaanshadaShaqo-siinta.

4. Diiwaan-gelinta ka dib, sarkaalka idmani wuxuu qofka shaqa doonka ah usoo saarayaa kaarka diiwaan-gelinta, kaasoo u sameysan qaabka ku tilmaanan Xeer-nidaamiyayaasha.
5. Dadka soo codsanaya diiwaan-gelinta, waa in diiwaan-gelinta shaqa doonka loo geliyaa sida ay usoo kala horreeyaan.
6. Haddii qof diiwaangashanaa ee mar intuu shaqo helay haddana, shaqadii laga saaray, uu doonayo in mar kale liiska shaqa doonka lagu daro, wuxuu diiwaanka ka gelayaa halka uu marayo marka uu codsiga dambe keensado.
7. Sarkaalka idman waa inuu qof kasta oo la diiwaan-gelinayo ku diiwaan-geliyaa liiska u gaarka ah mihnadiisa shaqo, shaqo walbana waa inay leedahay diiwaan u gooni ah.

## Qodobka 95aad
## Meeleynta Shaqaalaha

Meeleyntu waa adeeg bulsho, waana in loo fuliyaa si waafaqsan qodobbada Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyayaashiisa.

## Qodobka 96aad
## Shaqosiinta Shaqo-doonka

1. Loo-shaqeeyaha wuxuu u madax-bannaan yahay inuu ciddii ku habboon dalabkiisa shaqo fulisana shuruudaha shaqada, ka qaadan karo dadka ku jira diiwaanka guud ee shaqa doonka.
2. Shaqosiintaasi ma khusayso:
   *b)* Loo-shaqeeyaha xaaskiisa ama eheladiisa isaga la nool ee uu dhaqaaleeyo;
   *t)* qofka xil agaasime ama maamuleka haya hay'ad;
   *j)* shaqaalaha ka shaqeeya adeeggyada guryaha;
   *x)* shaqaalaha loogu talogalay shaqooyinka warshadaha, ganacsiga ama beerahaoo ay ka shaqeeyaan 4 (afar ) qof;
   *kh)* shaqaalaha ka shaqeynaya shaqooyinka ku-meel-gaarka ah ee aan soconeyn wax ka badan 7a (toddob) maalmo shaqo.
3. Shaqaalaha laga shaqosiiyey Adeegga hay'adaha gaarka ah heer Federaal iyo dawlad-goboleedyada Dalka, wakaaladaha madaxabannaan iyo

hay'adaha ay dawladdu qeyb ka tahay, waxaa shaqosiintooda loo marayaa saraakiisha idman ee goobahooda jooga, iyadoo  shaqaaluhu ay gelayaan imtixaan la baahiyey oo tartan furan loo galay oo ay goob-joog ka yihiin wakiillo ka socda Guddiga SareShaqo-siinta Federaalka (GSShF).

## Qodobka 97aad
## Araajida Shaqo-siinta Shaqaalaha

1. Marka laga reebo arrimaha ku xusan farqadaha qodobka 96aad ee Sharcigan, loo-shaqeeye kasta ee doonaya inuu dadka shaqosiiyo, waxaa looga baahan yahay inuu soo ogeysiiyo Sarkaalka Idman ee jooga degaanka laga shaqosiinayo.
2. Sarkaal idmani wuxuu diiwangelinayaa ogeysiiska uu soo gudbiyey loo-shaqeeyuhu si hadhaw diiwaanka shaqada looga saaro ciddii shaqada la siiyey.
3. Araajida lagu codsanaya shaqaalaha waa inay ku cad yihiin:
   *b)*tirada looga baahan yahay nooc kasta oo shaqo ah iyo shaqada laga rabo;
   *t)*aqoonta looga baahan yahay;
   *j)*xaaladaha iyo shuruudahaShaqo-siinta, iyo
   *x)* muddada suura-galka ah ee ay shaqadu soconeyso.
4. Araajida shaqada waa in lagu soo dalbadaa magaca shaqa-doonka haddii:
   *b)*shaqaalaha looga baahan yahay shaqo ku dhisan ammaano oo qofka loo dhiibanayo goobaha tababbarada lagu qabto, xarumaha shaqada ama hantida kale ee shirkadda.
   *j)*qof shirkadda tababbar farsamo barad ah ku dhammeystay;
   *x)*uu yahay Shaqaale horey goobtaas uga soo shaqeeyay.
5. Sarkaalka idmani, markuu helo ogeysiiska loo-shaqeeyaha, waa inuu ku qancaa in xaaladaha iyo shuruudaha loo soo bandhigayo qofka shaqa-doonka ah ay waafaqsan yihiin qodobbada Sharcigan,Xeer-nidaamiyayaashiisa ama heshiis wadareedkii shaqo ee la wada-galay, haddii uu jiray.

## Qodobka 98aad

## Mudnaanta iyo TixraacaShaqo-siinta

1. Marka laga reebo xaalado gaar ah, shaqa-doonka waxaa loo oggol yahay in ay magacyadooda ku soo dalbadaan shaqada, shaqaaluhu waa inay shaqada u helaan sida ay uga kala sarreeyaan natiijada imtixaanka. waxaana diiwaanka guud loogu qorayaa sida ay u kala sarreeyaan.
2. Shaqa-doonka ku nool degmada ay ku taallo goobta shaqada ayaa xaq u leh mudnaanta koowaad, haddii uu soo buuxiyo shuruudaha shaqada.
3. Shaqaale shaqadiisa ku waayay shaqaale dhimis guud oo la sameeyey ayaa ugu mudan in dib loogu bandhigo ku soo noqoshada shaqada muddo hal sano gudaheed ah laga soo billaabo maalintii shaqada laga saaray.
4. Marka shaqaale la siiyo warqad tixraac shaqo wanaag ah, sarkaalka idmani wuxuu raacinayaa warqad ku socota loo-shaqeeyaha isaga oo tixraacaya warqaddii loo soo qoray.

## Qodobka 99aad

## Loo-Shaqeeyayaashu Way Diidi Karaan Inay Aqbalaan Shaqaalaha Qaarkood

1. Loo-shaqeeyaha wuxuu xaq u leeyahay in uu imtixaano, xusho shaqaalaha uu qaadanayo, si uu u xaqiijiyo kartidooda farsamo ama ku habboonaanta shaqada loo dhiibayo.
2. Loo-shaqeeyuhu wuxuu diidi karaa shaqaale uu hore shaqada uga ceyriyay sababo macquul ah oo jiray dartood.
3. Marka loo-shaqeeyuhu qaadanaayo shaqaale, sarkaalka idman ee degmadaas waa in uu goob-joog ahaadaa.

## Qodobka 100aad

## Hawlgelinta Tooska ah ee Shaqaalaha

1. Loo-shaqeeyuhu wuxuu si toos ah u hawlgelinkaraa shaqaale, haddii hawlgelintaas lagu sababeyn karo baahi degdeg ah oo jirta si looga fogaado dhibaato nafeed iyo mid agabeed oo la filan karo.
2. Mar kasta oo shaqaale si toos ah loo hawlgeliyo muddo ka badan hal (1) toddobaad, loo-shaqeeyuhu waa inuu u diraa sarkaalka idman magaca

shaqaalaha, nooca shaqada uu qabanayo, baahida keentay in toos loo hawlgeliyo iyo xaaladaha shaqada.

**Qodobka 101aad**
**Ka-dhaafid**

Wasiirku oo la tashanaya hay'adaha ay khuseyso ee dawladda, ururrada loo-shaqeeyaha iyo kuwa shaqaalaha, wuxuu ka dhaafi karaa ama ka dabcin karaa qodobbada cutubkan muddo cayiman oo si toos ah u taabanaya xaaladaha nolosha shaqaalaha, shaqada, qeybaha wax soo saarka iyo dhaqan-dhaqaale.

**Qodobka 102aad**
**Dembiyada ka Dhalan kara Jebinta Qodobbada Cutubkan**

Loo-shaqeeye kasta oo jebiya mid ka mid ah qoddabada cutubkan ku jira,waxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo u dhaxeeya **$300 ilaa $1000** ama lacag Shillin Soomaali ah oo u dhiganta.

## CUTUBKA TODOBO IYO TOBANAAD
## SHAQO KA-SAARIS

**Qodobka 103aad**
**Shaqo Ka-saaris Ogeysiis Leh**

1. Mid kasta oo ka mid ah dhinacyadaheshiiska wada galay, waa uu ka bixi karaa heshiiska, isagoo bixinaya ogeysiis qoraal ah oo:
   *b)*aan muddadiisu ka yareyn toban (10) maalmo shaqo shaqaalaha muruqmaalka ah;
   *t)*aan Muddadiisu ka yareyn Soddon (30) maalmo shaqo, shaqaale aan muruqmaalka aheyn.
2. Looma baahna in wax ogeysiis ah la bixiyo marka muddada heshiiska shaqadu aanay ka badneyn 1l (ha)bil.
3. Inta lagu jiro muddada ogeysiiska, xiriirka shaqadu wuxuu ku sii soconayaa qaabkii asalka ahaa, wuxuuna haysanayaa dhammaan awooddiisa asaasiga

ah, marka laga reebo haddii cidda ogeysiiska loo diray ay dalbato in lagu joojiyo markii ogeysiisku soo gaaray.

## Qodobka 104aad
## Magdhawga Beddalka Shaqo Ka Saaris Ogeysiis La'aan

Mid kasta oo ka mid ah dhinacyada heshiiska wada-galay, wuu ka bixi karaa heshiiska ogeysiis la'aan, Dhinaca heshiiska ka baxay, wuxuu bixinayaa beddalka xuquuqdii uu lahaan lahaa muddadii ogeysiiska, haddii uu shaqeyn lahaa, sida uu qabo Sharcigan iyo Xeerarka-hoosaadyadiisa.

## Qodobka 105aad
## Habka u Beddelidda Shaqo-siin Shaqaale Ku-meel-gaar ah Heshiis Shaqo

1. Shaqaale ku-meel-gaarka ahi haddii:
   *b)*uu shaqeeyo dhawr maalmo shaqo oo xiriir ah, kuwaas oo isugeyntoodu aanay ka yareyn 1 ( hal) bil;
   *t)* uu qabanayo shaqo ayna suura-gal aheyn in lagu dhammeystiro, ama uu shaqeeyo maalmo shaqo oo xiriir ah oo isugeyntoodu ay u dhiganto 3 ( seddex) bilood ama ka badan, heshiiska shaqo-siinta ee shaqaale ku-meel-gaar ah, wuxuu noqonayaa mid mushaarkiisu bille yahay, wuxuuna yeelanayaa shuruudaha heshiiska shaqo ee shaqaalaha joogtada ah.
2. Marka la xisaabinayo mushaarka iyo maalmaha shaqo ee xiriirka ahee ku xusan farqadda (1) ee qodobkan, shaqaalaha ku-meel-gaarka ahi wuxuu xaq u leeyahayin mushaarkiisa loogu daro 1 (hal ) maalin nasasho oo lacag ah, 6 (lixdii ) maalmo shaqo ee uu shaqeeyaba iyo maalmaha nasashada ama wixii fasax Qaran ah ee soo dhexgala maalmahaas uu shaqeynayey oo loo xisaabinayo xuquuq la mid ah tan maalmaha caadiga ah ee shaqada.
3. Shaqaalaha ku-meel-gaarka ah ee heshiiskiisa shaqosiin loo beddelay si waafaqsan farqada (1) ee qodobkan, kaasoo si joogto ah u shaqeynayey 2 (laba ) bilood ama ka badan, laga billaabo taariikhdii laga dhigay shaqaale ku- meel-gaar ah, wuxuu xaq u yeelanayaa qodobbada iyo shuruudaha heshiiska shaqo-siin ee lala galo shaqaalaha joogtada ah.

## Qodobka 106aad
## Muddada Tijaabada ah

1. Muddada heshiiska tijaabadu kama badan karto 3 (seddax) bilood, balse waxaa lagu kordhin karaa muddo dheeraad ah oo aan ka badneyn 3 (seddax) bilood kale, haddii lagala heshiiyo qofka shaqaalaha ah.
2. Loo-shaqeeyaha looma oggola inuu qofna ku shaqo siiyo muddo tijaabo ka badan inta lagu jideeyay farqada (1) ee qodobkan.
3. Dhinac ka mid ah dhinacyada wada-galay muddada tijaabada waa uu ka bixi karaa, haddii uu bixiyo ugu yaraan 7 (toddoba) maalmo shaqo oo ogeysiis ah, ama haddii loo-shaqeeyuhu ka baxayo muddada ogeysiis la'aan, wuxuu bixinayaa xuquuqdii 7 (toddoba) maalmo shaqo oo shaqo ah.
4. Haddii loo-shaqeeyuhu uusan si cad u joojin muddada tijaabada ah oo muddadiisu dhammaato iyadoo aan wax ogeysiis ah laga helin labada dhinac, muddada tijaabada ah waxaa loo qaadanayaa in muddadu noqotay mid joogto ah.
5. Marka muddada tijaabada loo beddalo mid joogto ah, muddadii uu shaqeeyey ee tijaabada ahayd ka hor inta aan la joogtayn, waxaa loo tixgalinayaa muddada heshiiska adeegga shaqadiisa.
6. Inta lagu guda jiro muddada tijaabada ah, haddii ay timaado jirro, shil, gudasho shaqo qaran, waajibaad madani ah ama masiibo dabiici ah, haddii aan heshiiska si kale loo joojin, waxaa loo arkaa in la kordhiyey muddada tijaabada si waafaqsan Sharcigan.

## Qodobka 107aad
## Shaqaale Dhimis

1. Loo-shaqeeyaha looma oggola inuu ka baxo heshiiska shaqada, isaga oo ku sababeynaya inuu shaqaalihii ka maarmay, ilaa uu:
   - *b)* Loo-shaqeeyuhu wargeliyo urur shaqaale oo shaqaaluhu xubin ka yahay;
   - *t)* Loo-shaqeeyuhuku wargeliyo sarkaalka shaqada ee mas'uulka ka ah goobta shaqaaluhu uu ka shaqeeyo sababta shaqaale ka maarmidda keentay, wargelintaasina waa inay dhacdaa bil ka hor taariikhda la qorsheeyay shaqo dhimista la xiriirta shaqaalaha laga maarmay;

*j)*haddii shaqaaluhu aanu xubin ka aheyn urur shaqaale, waa in loo-shaqeeyuhu uu qoraal ku ogeysiiyo qofka shaqaalaha ah naf ahaantiisa iyo sarkaalka shaqadaba;

*x)*marka la doonayo in la dhimo shaqaale ama laga maarmo shaqaalaha qaarkood, waxaa lagu kala saarayaa waayo-aragnimadooda, sidii ay shaqada ugu soo kala horreeyeen, xirfaddooda, kartidooda iyo kalsoonida lagu qabi karo shaqaale kasta ama waxaa la eegayaa qeybaha shaqada gaarka ah oo ay saamaysey shaqaale dhimistu;

*kh)*marka uu jiro heshiis wadareed shaqo oo u dhexeeya loo-shaqeeye iyo urur shaqaale ee qeexaya xuquuqda la bixinayo, haddii ay dhacdo in la eryo shaqaale shaqadiisii laga maarmay, xuquuqdaas oo kale ayuu helayaa shaqaalihii aan xubin ka aheyn urur shaqada laga saaro;

*d)*haddii shaqaale la gaaray xilligii fasaxiisa, shaqo dhimisna shaqada looga saaray, wuxuu xaq u helayaa in la siiyo lacagtii fasaxa oo gacansaar ah;

*r)*haddii shaqaale shaqo dhimis shaqada looga saaro, iyadoo aan la siin bil ogeysiis ah, waa in loogu beddelaa bil mushaar ah beddalka ogeysiiska; iyo

*s)*Shaqaalaha laga maarmay shaqaalanimadooda uu siiyo magdhaw u dhigma sanadkiiba bil (30) mushaarkeed intii sanadood ee uu soo shaqeeyay, kaas oo lagu saleynaayo bishii ugu dambeysay mushaarkeeda.

2. Farqada (1) ee qodobkani, ma khuseeyo marka sababta shaqaale dhimistu ay ku timid shirkadda oo musalaftay ama ay kacday darteed.
3. Wasiirku wuxuu soo saari karaa nidaam looga dalbanayo in loo-shaqeeye kasta oo heysta tirada ugu yar ee shaqaale ah inay shaqaalaha ka badbaadiyaan khatarta shaqo dhimista iyagoo raacaya nidaamka ceymiska shaqo la’aanta oo waafaqsan Sharciga Ceymiska Qaran, kaasoo heysta dammaanad sharci ah ama shirkad kasta ee ceymis oo ay dawladdu aqoonsan tahay.

## Qodobka 108[aad]
## Dhaqan Xumo

1. Loo-shaqeeyaha marka uu qofka shaqaalaha ah shaqada uga saarayo arrimo la xiriira anshax xumo, waxqabad yari ama karti darro jireed, waa inuu qofka shaqaalaha ah Af uu garanayo ugu sheegaa sababta shaqada looga saarayo, uuna sababeeyaa anshax xumada, waxqabad la'aanta ama karti-darrada jireed ee uu qabo shaqaaluhu, uguna sharxo luuqadda qofka shaqaalaha ahi uu fahmi karo, sababta uu loo-shaqeeyuhu shaqada uga joojinayo, sidoo kale, qofka shaqaalaha ahi wuxuu xaq u yeelanayaa inuu u yeerto qof shaqaalaha ka mid ah ama xubin matesha urur shaqaale oo uu isagu doorto, kaasoo goob-joog ka noqda dhegeysiga sharraxaadda.
2. Ka hor inta aan shaqada laga joojin qofka shaqaalaha ah ogeysiin la'aan, waa in loo-shaqeeyaha uu dhagaystaa, uuna tixgeliyaa wixii caddeymo ah ee uu isku difaacayo shaqaaluhu, oo ay ku jiraan dukumiinti ama marqaatiyaal. Shaqaaluhu wuxuu keensan karaa qof difaaca oo isaga matela.
3. Haddii la isku fahmi waayo in lagu xalliyo khilaafkaas goobta shaqada, waxaa loo tixraacayaa nidaamka xallinta khilaafaadka ee ku xusan qodabada Sharcigan.

## Qodobka109[aad]
## Caddeynta Sababta Shaqo ka Saarista

1. Eedayn kasta oo sababi karta in laga baxo heshiiska shaqada, loo-shaqeeyaha waxaa looga baahan yahay inuu caddeeyo sababta ama sababaha heshiis ka baxa ah, haddii uu ku guul darraysto loo-shaqeeyuhu inuu caddeeyo sababahaas, heshiis ka baxaas waxaa loo aqoonsanayaa waxba kama jiraan iyo caddaalad darro xagga Sharcigan.
2. Sababta ama sababaha heshiis ka baxa waa waxyaalaha loo-shaqeeyuhu uu adeegsado waqtiga heshiis ka baxa, taasoo sababtay in loo-shaqeeyaha uu joojiyo adeeggii qofka shaqaalaha ah. Waxyaalahaas lama qaadanayo haddii aysan maan-gal ahayn si waafaqsan Sharcigan.

## Qodobka110aad
## Shaqo Ka Saaris Degdeg ah

1. Shaqo ka saarista degdegga ahi waxay dhacdaa marka loo-shaqeeyuhu uu joojiyo shaqaalanimadii shaqaalaha ogeysiis la'aan ama uu soo ogeysiiyo muddo ka yar waqtigii uu shaqaaluhu xaqa u lahaa ama waqti ka yar muddadii uu Sharcigani dejiyay ama heshiiska shaqo-siinta qorayey.
2. Iyadoo la tixraacayo qodobbada Sharcigan, waxaa reeban shaqo ka saaris degdegga ah.
3. Loo-shaqeeyaha wuxuu shaqo ka saaris degdeg ah sameyn karaa oo kaliya, marka qofka shaqaalaha ahi uu si ulakac ah u jebiyo waajibaadkii shaqo, kaasoo heshiiska shaqo-siinta dhexdiisa lagu yiraahdo **"dhaqan xumo culus".**
4. Mid kasta oo ka mid ah arrimaha soo socda ayaa lagu tilmaami karaa anshax xumo culus, waxaana ka mid ah, haddii:
   *b)*shaqaaluhu fasax ama sabab sharci la'aantood uu ka maqnaado goobtii shaqo ee loo cayimay;
   *t)*inta lagu jiro saacadaha shaqada, uu qofka shaqaalaha ahi noqdo saqraan, taasina ay keento inuusan diyaar u aheyn ama uuna awood u laheyn inuu shaqadiisa si qumman u guto;
   *j)*shaqaaluhu si ulakac ah u dayaco shaqo ay waajibkiisa aheyd in uu qabto; ama haddii uu si xun oo xilkas darro ah u sameeyo shaqo laga rabay inuu si qumman u qabto;
   *x)*shaqaaluhu ku hadlo ereyo gef ama aflagaado ah, ama uu u dhaqmo qaab aflagaado ku ah loo-shaqeeyihiisa ama ciddii kale ee uu shaqada u wakiisho;
   *kh)*shaqaaluhu si ulkac ah u buriyo ama u diidoin uu qaato amar sharci ah oo uu siiyey loo-shaqeeyihiisu ama ciddii kale ee uu shaqada u wakiisho;
   *d)*iyadoo la isticmaalayo awood sharci oo wax lagu xiro taas oo waafaqsan Sharcigan, haddii qofka shaqaalaha ah loo xiro fal-dambiyeed keeni kara ciqaab xabsi oo aan ka yareyn muddo 14 (afar iyo toban ) maalin, haddaan qofkii shaqaalaha ahaa lagu sii deyn dammaanad ama si kale oo sharci ah; ama

*r)* shaqaaluhu galo fal-dambiyeed waxyeello ku ah loo-shaqeeyaha ama hantidiisa; ama uu jiro tuhun leh asaas maan-gal ah ah oo loogu maleyn karo in shaqaaluhu uu galay fal-dambiyeed.

5. Arrimaha noocaas ah ama go'aanka uu loo-shaqeeyuhu ku gaaro in uu shaqo ka saaris degdeg ah sameeyo si waafaqsan farqadda (4) ee qodobkan, kama hor istaagayso loo-shaqeeyaha ama shaqaalaha, sida ay u kala horreeyaan, inay ka doodaan eedaha lasoo jeediyay sida ay u waafaqsan yihiin xaqiiqada dhabta ah; ama jiritaanka arrimo aan halkan lagu xusin oo loo cuskan karo shaqo ka saarista degdeg ah ee shaqaalaha.

## Qodobka 111aad
## Shaqo Ka Saaris Caddaalad Darro ah

1. Shaqo ka saarista uu sameeyo loo shaqeeyuhu, waxaa loo arkayaa caddalad darro, haddii:

*b)*Loo-shaqeeyuhu uu ku guul-darraysto in uu caddeeyo:
   (i) in sababta shaqoka saaristu ay sax tahay;
   (ii) in sababta shaqo ka saaristu ay tahay sabab gaar ah oo la xiriirta anshaxa, mas'uuliyadda iyo kartida shaqaalaha, ama ay ku saleysan tahay hawlgalka shaqada ee loo-shaqeeyaha; iyo
   (iii) in Shaqo ka saarista loo maray habraacii loo baahnaa.

*t)* haddii la caddeeyay in loo-shaqeeyuhu uusan u dhaqmin si waafaqsan caddaalad iyo sinnaanta marka uu sameynayey shaqo ka saarista shaqaalaha, iyadoo la tixgelinayo:
   (i) Nidaamka loo-shaqeeyuhu uu u maray go'aanka shaqo ka saarista qofka shaqaalaha ah, sidii in qofka lala wadaagay go'aankii shaqo ka saarista iyo sida loo maareeyay rafcaankii uu shaqaaluhu ka qaatay go'aankaas;
   (ii) habdhaqanka iyo kartida shaqaalaha ee ilaa taariikhdii shaqo ka saarista;
   (iii) ilaa iyo inta uu loo-shaqeeyuhu u hoggaansamay shuruudaha sharciga ee la xiriira shaqo ka saarista, oo ay ku jirto soo saarista shahaadada shaqada iyo shuruudaha habraaca ee lagu xusay qodobka 122aad eeSharcigan;

(iv) tallaabooyinkii hore ee loo-shaqeeyaha ee la xiriira nooca xaaladaha keenay shaqo ka saarista; iyo

(v) jiritaanka waraaqo digniin hore ah oo la siiyay shaqaalaha.

2. Shaqo ka saarista cadaalad darrada ah ee shaqaaluhu waa ay reeban tahay;
3. Shaqaalihii si joogto ah ugu shaqeynayay loo-shaqeeyahiisa muddo aan ka yareyn 13 (seddex iyo toban ) bilood inta aan shaqada laga saarin, wuxuu xaq u leeyahayin uu ka dacwoodo in si xaq darro ah shaqada looga saaray.

## Qodobka 112aad
## Ka Cabasho Caddaalad Darro iyo Shaqo Ka Saaris Degdeg ah

1. Qofkii shaqaale ah oo si degdeg ah shaqada looga saaro ama heshiskiisa shaqo si caddaalad darro ah looga baxo, wuxuu 3 (seddex ) bilood gudahood cabasho ugu gudbin karaa Sarkaalka Shaqada, kaasoo marka uu labada dhinac si fiican u dhegeysto ka dib, dhinacyada u gudbin doona go'aan uu u arko xalka ugu fiican ee khilaafka 2 (labada ) dhinac.
2. Xaqa uu shaqaaluhu u leeyahay in uu cabasho usoo guddbiyo si waafaqsan farqadaha qodobkan, waxaa u dheer xaqa uu siinayo heshiis wadareedka shaqada iyo Maxkamadda awooda u leh.

## Qodobka 113aad
## Magdhawga Shaqo ka Saarid Khaldan ama Heshiis ka Bixid Cadaalad Darro ah

1. Haddii hal dhinac uu kaligii ka baxo heshiiska shaqada ama uu sameeyo shaqo ka saaris sharci darro ah ama aan wadan sabab maan-gal ah, dhinaca kale wuxuu xaq u yeelanayaa inuu dalbado magdhaw.
2. Marka sarkaalka shaqada uu u arko in shaqo ka saarista degdegga ah ama heshiis ka bixiddu ay tahay caddaalad darro, sarkaalka shaqadu wuxuu kula talin karaa, ama maxkamadda ku amri kartaa, loo-shaqeeyaha in:
   *b)* uu dib-u-soo-celiyo shaqaalaha, ulana dhaqmo si xushmad leh, taas oo ah in aan marna shaqadiisa la joojin; ama

*t)* uu dib-u-siiyo shaqaalaha shaqo la mid ah shaqadii uu qaban jiray intii aan shaqada laga saarin; ama uu geeyo shaqo kale ooman-gal ah ah, lana mushaar eg tii hore;

3. Inta Sarkaalka shaqadu aanu ku talin, ama Maxkamadda awoodda u lehaanay amrin, dib u soo celinta ama dib-u-hawl gelinta shaqaalaha, waa in la tixgeliyaa mid ka mid ah ama dhammaan arrimaha soo socda:

   *b)* rabitaanka shaqaalaha;

   *t)* sidaxaaladahashaqo ka saaristu ay ku dhacday, ilaa iyo xadka ay gaarsiisan tahay, haddii ay jirto, in uu shaqaaluhu ku lug lahaa ama uu gacanka geystay shaqo ka saariddiisa iyo sida dhaqangal ku noqon karto talada dib-u-soo-celinta ama dib u hawl gelinta;

   *j)* mabda'a guud ee Sharcigan waa in aanay jirin hab gaar ah oo ay isugu xigaan qabashada waajibaadka heshiiska shaqo, marka laga reebo xaalado gaar ah oo aad dhif iyo naadir u ah;

   *x)* dheeraanta muddada uu shaqaaluhu la shaqeynayey loo-shaqeeyaha;

   *kh)*rajada uu qofka shaqaalaha ahi ka qabo muddada ay sii socon doontoShaqo-siinta uu kula jiro loo-shaqeeyaha, marka laga reebo taariikhda uu heshiiskoodu ku eg yahay;

   *d)*fursadaha uu shaqaaluhu u heysto sida uu loo-shaqeeye kale uga heli karo shaqo la mid ah ama ku habboon shaqadii laga saaray;

   *r)*qiimaha magdhaw kasta oo uu sharcigujideeyay;

   *sx*aqa uu u leeyahay in uu u dacwoodo xuquuqdiisa ama ujuuradiisa aan la siin, kharashaadka kale iyo xuquuqaha uu leeyahay shaqaaluhu;

   *sh)*kharashkaqofka shaqaalaha ahi uu galay sababo la xiriira shaqo ka saaristiisii;

   *dh)*dabeecadahaqofka shaqaalaha ahi uu la yimid, taas oo ay keentay ama ka qeybqaadatayshaqa ka saaristiisa;

   *c)*shaqaale kasta oo ku guul darraysta in uu si maangal ah u yareeyo khasaarooyinka ka dhashay shaqo ka saaristii xaqdarrada aheyd; iyo

   *g)* magdhaw kasta, oo ay ku jiraan lacagaha xaqsiinta ah, iyada oo la xushmeynayo heshiishka dhammaaday, taasoo uu dhiibay loo-shaqeeyuhu, uuna guddoomay shaqaaluhu.

## Qodobka 114aad
## Hakinta Xiriirka Shaqo-siinta

1. Xiriirka shaqada waa in la hakiyo haddii hawsha shaqadu ay si ku meelgaar ah u joogsato ama loo-shaqeeyuhu uu ogeysiis u soo diro shaqaalaha 7 (toddoba) maalinka hor ama uu boorka shaqada kusoo dhejiyo;
2. Ogeysiiskan waa in muddadaas oo kale lagu gaarsiiyaa sarkaalka idman ee ku shaqada leh, iyada oo la raacinayo sababta keentay shaqo hakinta ku-meel-gaarka ah iyo muddada ay sii soconeyso shaqa hakintaas;
3. Hakinta xiriirka shaqadu waa in aanay ka badnaan 30 (soddon) maalmo shaqo, iyada oo uu sarkaalka shaqadu awood u leeyahay in uu muddada kordhiyo oo uu ka dhigo ilaa 90 (sagaashan) maalmo shaqo ka dib markii la tashado loo-shaqeeyaha, haddii xaaladaha jira iyo duruufaha xilliyada degaanku ay sidaas kallifayaan;
4. Xiriirka shaqada waa in sidoo kale la joojiyaa haddii:
    *b)* shaqaalaha loogu yeero shaqo millatari;
    *t)* shaqaalaha la xanibo muddo aan ka badneyn seddex (3)bilood arrin la xiriirta xeerka nidaamka degganaanshaha iyo xasiloonida guud, ka dibna uu shaqada kusoo laabto markii lasoo daayey;
    *j)* haddii qofka shaqaalaha ah loo xiro dambi kale, laakiin ugu dambeyntii la sii daayo oo uu ku noqdo shaqada;
5. Marka loo eego faqradda (4)ee (t) iyo (j) ee qodobka 114aad, shaqaaluhu wuxuu xaq u leeyahay in lagu celiyo shaqadiisa, muddada shaqa hakintana, waxaa loo xisaaabinaya maalmo uu shaqeystay;
6. Haddii qof shaqaale ah lagu xiro dembi ku lug leh shaqosiintiisa, shaqaalahaas wuxuu xaq u leeyahay in uu ka helo loo-shaqeeyaha seddexmeelood meel ka mid ah **1/3** (saddex meel hal meel) mushaarkiisa asaasiga ah ilaa inta lagu xukumayo, haddii dambiga lagu waayo ee lasoo daayo, wuxuu xaq u yeelanayaa inuu dib u helo xuquuqihii u uruuray ee mushaarka ka haray, haddii xukun ku dhacana wuxuu weynayaa dhammaan xuquuqiihi mushaarka ka dheeraadka ahaa ee xeerkani siinayay.

## Qodobka 115aad
## Musallafidda Loo-Shaqeeyaha

1. Loo-shaqeeyaha musallafay (kacay) waxaa loola jeedaa Sharcigan gudahiisa waa haddii:

*b)*Loo-shaqeeyuhu uu yahay qof, kaas oo:

(i) lagu dhawaaqay ama lagu xukumay in uu musallafay, wadahadal ama wadaxaajood la galay dadkii deynta ku lahaa;

(ii) geeriyooday, hantidiisana ay tahay in loo maamulo hab waafaqsan sharciga dhaxalka Islaamka.

*t)* Loo-shaqeeyuhu yahay shirkad:

(i) amar xiritaan ama xukun maamul oo ka soo baxay Maxkamad ama iyaga si iskood ah u go'aansadeen in ay shirkadda xiraan, iyada oo la xushmeynayo shirkadda;

(ii) Maxkamadi ayu magacaawday wakiil lagu aaminay hantidii iyo milkayaddii shirkaddii musallaftay (kacday), si uu ula wareego mas'uuliyadda bixinta deymaha iyo dhammaan wixii shirkaddalagu lahaa.

2. Marka shaqaaleloo-shaqeeyohooda musalafay ay codsi qoraal ah u soo dirsadaan ama qof wakiil u ah Wasiirka, uuna ku qanco in:

   *b)* shaqaalaha loo-shaqeeyohooda uu musalafay ama kacay;

   *t) Shaqo-siinta* Shaqo-siinta shaqaalaha ay dhammaatay;

   *j)* waqtiga ku habboon in shaqaalaha ay xaqooda helayaan in la siiyo dhammaan ama qeyb ka mid ah deyntii xuquuqdooda;

   *x)* Wasiirka waxaa uu tixgelinayaa xaquuqda ka maqan shaqaalaha, sidaas darteed loo-shaqeeyaha waxaa waajib ku ah in uu shaqaalaha siiyo xuquuqdoodii deynta ku aheyd.

3. Wasiirka oo la tashanaya ururrada loo-shaqeeyeyaasha wuxuu abuurayaa Sanduuq gaar ah, kaasoo loo-shaqeeyayaasha iyo ciddii kale ee ka qeyb qaadaneysa ay ku shubayaan qaaraan suurtagelinaya in la bixiyo xuquuqda ku xusan farqadda (2) ee qodobkan, si loo awoodo bixinta lacagaha lagu tilmaamay qaybta labaad waana in:

   *b)*la sameeyaa habraac lagu maamulo dhaqdhaqaaqa Sanduuqa;

*t)*loo adeegsadaa bixinta xuquuqda shaqaalaha iyo loo-shaqeeyihii musallafay kaliya.

4. Waxaa muhiim ah in la magacaabo wakiil la aaminay oo kumeelgaar ah(Interim Trustee) ama xaraashaha musallafka (Liquidator) iyadoo la tixigelinayo heshiis hoosaad dhexmaray loo-shaqeeyaha iyo ciddii deynta ku laheyd ama wakiilka la aaminay oo lagu wareejiyey hantidii loo-shaqeeyaha kacay, sidaas awgeed,wasiirka waa in aanu amrin bixinta wax lacag ah ilaa uu ka helo waraaq qoraal ah qofka loo magacaabay maamulidda qaddarka deynta ee aan la bixin, lana filayo in ay helayaan shaqaalihii ka dibna ciddii kale ee deynta lahayd.
5. Wakiilka la aaminay, isaga oo fulinaya codsiga Wasiirka, waa inuuusoo diyaariyaa warbixin dhan oo tifaftiran sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah.
6. Marka wakiilka la aaminay uu bixiyo dhammaan wixii deymo ah ee lagu lahaa musallafaha, wasiirku wuxuu amrayaa dhammaan haraaga hantida inay ku sii jirto Sanduuqa kor ku xusan, taasoo loo adeegsan karo oo kaliya xaalad tan la mid ah ee lagu soo tilmaamay Qodobka 115aad faqradihiisa (2) iyo (3) ee Sharcigan.

## Qodobka 116aad
## Xaqsiinta Sannadka

1. Markii uu dhammaado heshiiska Shaqo-siinta ee u dhexeeya labada dhinac, sabab kasta ha keentee, hal sano oo shaqo xiriir ah ka dib, loo-shaqeeyaha waa in uu bixiyaa, ama ciddii dhaxalkiisa leh haddii uu geeriyoodo, in uu bixiyo lacag u dhiganta hal bil mushaarkeed sanad kasta oo uu shaqeeyayba, haddii heshiis ka wanaagsan aanu u dhaxeyn labada dhinac.
2. Haddii muddada uu shaqeeyay ka yar tahay hal sano, shaqaaluhu wuxuu xaq u leeyahay xaqsiin ku qiimeysan celceliska muddada uu shaqeynayey.
3. Marka ay shaqadu tahay shaqo xilliyeed ama ay muddada shaqadu gaaban tahay, shaqadu noocii ay doonto ha ahaatee, shaqaaluhu wuxuu xaq u yeelanayaa bedalka xaqiisa 10% (boqolkiiba toban) ee ujuurada ugu dambeysay; haddii aanay jirin uroonaansho dheeraad ah ee shaqaalaha.

4. Lacagtaas xaqsiinta ee lagu sheegay faqradaha (1), (2), (3) ee qodobkan, ma yeelanayaan xaqsiintaas, haddii qofka shaqaalaha ah lagu xukumo dembi sababay in ay waxyeello soo gaartay loo-shaqeeyaha.
5. Xisaabinta Xaqsiin-sanadeedka waxaa lagu qiimaynayaa mushaarkii ugu dambeeyay ee uu qaato shaqaalaha ama celceliska sanadihii uu shaqeeyay hadba middii dan u ah.

## Qodobka 117aad
## La Kala Wareegid Goob Shaqo

Haddii laba loo-shaqeeye oo nool ay si sharci ah ugu kala wareegaan mas'uuliyadda goob shaqo; ama qof dhintay mas'uuliyaddiisii lagu wareejiyo ama laga kireeyo qof seddexaad, heshiiskii shaqo ee jiray ma isbeddelayo oo isla heshiiskaas ayey ku wada shaqeynayaan shaqaalaha iyo loo-shaqeeyaha cusub.

## Qodobka 118aad
## Arrimaha Mamnuuca ka ah ee Qof Shaqada Looga Saari Karin

1. Arrimaha soo socda ma ahan sababo banneyn kara in qof shaqaale ah shaqada laga saaro ama tallaabo anshaxmarin ah looga qaado:
   *b)* haweenka uurka leh, ama sabab kasta oo la xiriirta uurkooda;
   *t)* fasax qof shaqaale ah oo socda, ama in loo soo jeediyo fasax qofka shaqaalaha ah inuu qaato fasax uu xaq u lahaa ee lagu xusay heshiiskaShaqo-siinta, kaas oo waafaqsan Sharciga shaqada;
   *j)* xubinnimourur shaqaale darteed ama in loo soo jeediyo shaqaalaha xubin ka noqosho urur shaqaale;
   *x)* ka qeyb-galka ama in loo soo jeediyo shaqaale in uu ka qayb galo dhaqdhaqaaqa iyo hawlaha urur shaqaale waqti ka baxsan saacadaha shaqada ama, oggolaanshaha loo-shaqeeyaha, saacadaha shaqada dhexdooda;
   *kh)* shaqaalaha oo raadsada in uu qabto xafiiska urur shaqaale ama ku shaqeeyo sarkaal urur shaqaale ama wakiil shaqaale;

*d)* shaqaalaha oo diida ku biirista urur shaqaale ama ka baxa urur shaqaale oo uu horey ugatirsanaa;

*r)* wax la xiriira sinjiga shaqaale, midabkiisa, qabiilkiisa, ahaanshihiisa Lab iyo Dheddig,fikirkiisa siyaasadeed ama ku-xirnaanshihiisa koox siyaasadeed, dalka uu kasoo jeedo,jinsiyaddiisa, asalkiisa bulsho, xaaladda xaas ahaaneed, xaaladda HIVAIDS iyo naafanimadiisa;

*s)* cabashada shaqaalaha, soo jeedinta cabasho ama dacwado kale oo sharci ah oo ka dhan ah loo-shaqeeyihiisa, marka lagareebo cabashada loo arkay inay tahay mid mas'uuliyad darro aan sal laheyn; ama

*sh )*ka qeyb-galka shaqo joojin sharci ah.

## Qodobka 119aad
## Dheefta Duugta (Geerida)

Haddii uu dhinto qof shaqaale ah isagoo shaqeynayo, loo-shaqeeyuhu waa inuu siiyaa cidda dhaxalka shaqaalaha iska leh lacag duug ah oo aan ka yareyn mushaarka 15 (shan iyo toban) maalmo shaqo oo ah kaalmada adeegga kharashka aaska.

## Qodobka 120aad
## Shahaadada Adeegga

1. Loo-shaqeeyuhu waa inuu siiyaa shaqaalaha shahaadada caddeynta adeegga marka ay dhammaato shaqada, haddii shaqada aanay ka yareyn 4 (afar) toddobaad oo xiriir ah.
2. Shahaadada adeegga ee lagu bixinayo si waafaqsan faqradda (1) ee qodobkan, waa inay ku jiraan arrimaha soo socda:

   *b)* Magaca loo-shaqeeyaha iyo Cinwaankiisa Boostada;

   *t)* Magaca shaqaalaha;

   *j)* Jagada, shaqada shaqaalaha uu hayey;

   *x)* Taariikhda ay billaabatayShaqo-siinta shaqaalaha;

   *kh)* Dabeecadda iyo goobta caadiga ah ee shaqadiisa;

   *d)* Taariikhda ay joogsatay shaqada; iyo

   *r)* Faahfaahintii kale ee lagu dari karo.

3. Si waafaqsan farqadda (1) ee qodobkan, loo-shaqeeyuhu kuma khasbana in uu shaqaalaha siiyo maragfur, tixraac ama shahaado ku saabsan dabeecadda iyo waxqabadka shaqaalaha.
4. Loo-shaqeeyihii si ula kac ah ugu guuldarraysta in shaqaalaha uu siiyo shahaadada adeegga si waafaqsan farqadda (1) ee qodobkan,, ama loo-shaqeeyihii ku qora shahaadada adeegga qoraal uu ogyahay in ay been tahay; loo-shaqeeyahaasi waxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo dhan **$300** (saddex boqol) oo doollarka mareykanka ah ama lacag Shillin Soomaali u dhiganta.

## QEYBTA V
## DARYEEL GAARAH

### CUTUBKA SIDDEED IYO TOBANAAD
### QODOBBO GUUD

#### Qodobka 121aad
#### Qeexidda "Shaqada Habeenkii"

Ujeeddada qaybtan, 'Shaqada Habeenkii' waxaa loolaa jeedaa shaqo kasta oo la qabto inta u dhaxaysa saacadaha 10:00 PM (Habeennimo) ilaa 6:00AM (Subaxnimo).

#### Qodobka 122aad

#### Shaqo Reebban

1. Waa sharci-darro in carruurta laga shaqeysiiyo habeenkii goobaha warshadaha, ganacsiga, beeraha iyo qeybaha kale oo kuwaas ku xiran, marka laga reebo meelaha ay xubnaha isku qoyska ah oo keliya ka shaqeeyaan.
2. Mamnuucidani ma khuseyso shaqaalaha ay da'doodu gaartay 16 sano:
   *b)* Haddii ay ka shaqeeyaan shaqo nooceedu yahay in habeen iyo maalinbala shaqeyn karo;
   *t)* Haddii uu jiro heshiis ka reebaya in ay ka shaqeeyaan Hawlaha Caadiga ah ee la qabanayo.

3. kiisaska hoos yimaada Farqada (2) (t) ee qodobkan, loo-shaqeeyuhu waa inuu si dhakhso ah u wargeliyaa sarkaalka idman, isaga oo u sheegaya xaaladaha in lagu shaqeeyo ayna lama huraanka tahay, tirada carruurta shaqeysa, saacadaha la shaqeynayo iyo inta habeenkii shaqada lagu jiri karo;
4. Shaqada habeenkii waxa lagu xaqsiinayaa kororsiimo aan ka yareyn 25% (labaatan iyo shan boqolkiiba) xuquuqda caadiga ah marka laga reebo shaqada caadiga ah ee kaltanka.

## Qodobka 123aad

## Awoodaha Wasiirka ee la Xiriira Shaqada Habeenkii

1. Iyada oo aan loo eegin faqradaha hoos yimaada qodobka 122aad, Wasiirka oo la tashanaya wakiilada ururrada shaqaalaha iyo loo-shaqeeyeyaasha wuxuu:

*b)* yareyn karaa waqtiga habeenkii la shaqeeyo gaar ahaan meelaha cimiladooda laga digo; iyo

*t)* fasaxayaa oo sheegayaa xaaladahaShaqo-siinta carruurta ee habeenkii shaqaynaysa inta lagu gudo jiro xilliyada iyo xaaladaha marka ay shaqadu tahay mid ku xiranalaabooyinka ceeyriin oo howshooda socoto ama xaalado la mid ah, lana filan karo haddii la hakiyo in ay dhaqso u hallowdo, haddii tallaabadani ay lagama-maarmaan u tahay badbaadinta hanti khasaaraysa.

# CUTUBKA 19AAD
# CARRUURTA

## Qodobka 124aad
## Macnaha "Shaqo-siin"

1. Cutubkan erayga “Shaqo-siin”waxaa loola jeedaa shaqo-siinta carruurta oo ay ku jirto xaaladaha:
   *b)* Carruurta la siinayo shaqo uu ku caawinayo qof kale kaaliye ahaan, shaqadaas oo ay ujeeddadeedu tahay in carruurtu lacag ku helaan; iyo
   *t)* uu jiro adeeg heshiis shaqo bixin, adeeg bixiyahana uu yahay curruur, iyada oo si toos ah ama si dadban loogu adeegayo loo-shaqeeyaha ama wakiilkiisa, waana in uu jiraa qadar lacageed oo la isku afgarto inta ay doonto ha la ekaato.

## Qodobka 125aad
## Carruur

1. Wasaaradda oo la tashaneysa ururrada shaqaalaha iyo loo-shaqeeyeyaasha ayaa soo saareysa siyaasad iyo xeer-nidaamiyeyaal lagu faahfaahinaya noocyada shaqo ee khatarta ah ama caafimaadka carruurta u daran ama shaqooyinka u baahan xoog ama feejignaan dheeraad ah, qeybtani waxaa looga baahan yahay in isbeddal lagu sameeyo, lana tilmaamo da'da ugu yar ee carruuri shaqeyn karto
2. Marka aan la hubin da'da Carruurta, waa in lagala tashadaa dhaqtar oo aqoon gaar ah u leh arrimaha da’da.

## Qodobka 126aad
## Shaqo-siinta Carruurta

1. Carruurta da'doodu u dhaxayso **13 ilaa 15** sano oo aan weli dhammeystirin waxbarashadooda waajibka ah, waxaa loo oggolaan karaa in ay qabtaan shaqooyin fudud.
2. Shaqosiinta carruur da'doodu ka yartahay 18 sano, waa in uu lahaadaa awood jireed iyo mid maskaxeed.

3. Da'da ugu yar ee loo oggolaan karo nooc kasta oo shaqosiin ah ama shaqo nooceeda, duruufaha iyoxaaladaha lagu fulinayo, laga yaabo haddii lagu shaqeeyo inay halis galiyaan caafimaadka, badqabka ama qiyamka carruurta waa 17 sano.

4. Sidaku xusan faqrada (3) ee qodobkan, laga bilaabo da'da 16 sano, iyada oo shuruud looga dhigayo dhismaha jirka, caafimaadka, badqabka iyo niyadda carruurta si buuxdana loo ilaaliyo ayna helaan casharro ku filan ama tababar ku saabsan hawsha ay qabanayaan.

5. Qodobbada qaybtaani ma khuseeyaan shaqada ay qabtaan guud ahaan carruurta dugsiyada caadiga ah, Barashada mihnadaha, xirfadahaiyo farsamooyinka, xarumaha kale ee tababarrada, ama hay’adahaay ka shaqeeyaan carruurta ay da’doodu ka yartahay **15** jir, waana in la fuliyaa hawshaas si waafaqsan Sharciagan, siyaasadaha iyo xeer-nidaamiyeyaasha shaqada, waxaana xuddun u ah in la helo:

   *b)* Koorso waxbarasho ama tababar uu marka hore mas'uul ka yahay dugsi ama hay'ad tababar;

   *t)* Barnaamij tababareed oo inta badan ama gebi ahaanba la qabanayo, barnaamijkaas oo leh manhaj la aqoonsan yahay; ama

   *j)* Barnaamij hagitaan ama hanuunin ah, kaas oo loogu talo-galay in lagu fududeeyo xulashada mihnadda ama qaabkale oo tababar.

6. Xaddidaadda la xiriirta da'da oggolaashaha shaqada ma khuseeyaan qoysaska iyo meheradahooda yaryar ee soo saara waxyaalaha laga isticmaalo dalka, kuwaas oo aan si joogto ah u shaqosiinin shaqaale toos u shaqeeya.

7. Marka laga soo tago qodob kasta oo sharciqoran ah, qofna looma oggola inuu shaqosiiyo, isticmaalo, qoro, ama u bandhigo carruur hawl shaqo oo ay ka dhalaneyso si xun ugu shaqeysiga carruurta, ama shaqo ka soo horjeedda da’da ugu yar ee qawaaniinta shaqadu oggoshahay.

8. Wasaaraddaoo la tashaneysa ururrada shaqaalaha iyo kuwa loo-shaqeeye waxay soo saareysaaxeer-nidaamiyefaah faahinaya shaqo kasta, hawlaha ama heshiis kasta oo waxyeello u geysanaya caafimaadka, badqabka iyo qiyamka carruurta.

9. Qof kasta oo lagu eedeeyey in uu galay dembi shaqosiin carruureedsida ku xusan Sharcigan, waqtiga uu dembiga ka galayeyna carruurta la isku

khilaafay da’da uu markaas jiray, maxkamadda awoodda u leh dhegeysiga dacwadda oo tixgelineysa xaaladahaas oo la xiriirta da'da carruurta. Maxkamadda ayaa mas’uul ka ah caddeynta da’da.

10. Sida ku cad Sharcigan, xukun, go’aan ama amar maxkamadeed laguma burin karo caddeymo da’da qofka oo dib laga keenay kuwaas oo aan hore maxkamadi u caddeynin ama aan si sax loo sheegin.

11. Mar kasta oo ay su'aal ka timaaddo da' shaqaale carruur ah, caddeyn ku filanna loo heli kari waayo, sarkaal caafimaad ayaa go’aaminaya da'da shaqaalahaas carruurta, isagoo adeegsanaya muuqaalkiisa/keeda, baaris caafimaad ama wixii macluumaad ah ee la heli karo, da'daas la go’aamiyey ayaana loo adeegsanayaa ujeeddooyinka Sharcigan, ilaa iyo inta laga soo caddeynayo wax taa ka duwan, go’aamintaas la sameeyey ayaana ahaan doonta da’da runta ah ee shaqaalaha carruurta ah.

12. Qofka shaqosiiya, ku lug yeesha, ama adeegsada carruur, si aan waafaqsaneyn Sharcigan (qodobbada cutubkan), waxa uu galay dembi.

13. Qofkii u adeegsada carruur hawl kasta oo ka mid ah ku shaqeysashada ama si xun uShaqo-siinta carruurta,waxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo u dhaxeysa **US$ 1000 (kun) ilaa$ 5000 (shan kun) oo doollarla mareykanka ah** ama lacag Shillin Soomaali u dhigantaama xabsi aan ka badneyn 12 (laba iyo toban) bilood ama labadaba.

14. Qofka la soo eedeeyay waxaa u furan in uu isdifaaco haddii uu hayo sabab maangal ah oo uu ku rumeysto in carruurta la sheegayo ay da’doodu ka weyn tahay xadka da’da dacwada ku xusan.

15. Haddii carruurtu ku naafowdo, geeriyoodo ama uu la il darnaado dhaawac jireed oo soo gaaray sababo la xiriira loo-shaqeeyaha oo si xun ugu shaqeystay carruurta, kuna xadgudbay qodob ka mid ah cutubkan, marka lala akhriyo ciqaabo kale, waxaana la hor geynayaa maxkamadda awoodda u leh.

16. Loo-shaqeeye mas’uul kama aha ciqaabaha faqradda **(15) ee qodobkan:**

    *b)* haddii uu dhaco dhaawac caafimaad, kaas oo si toos ah ama si dadban aanu sababin ku xadgudubyo shaqo oo loo-shaqeeyuhu sameeyey;

*t)* haddii dacwada lagu soo oogo sida Sharcigan ku xusan, iyada oo ficilka ama dayaca sababay dhimashada ama dhaawaca, la caddeeyey in shaqaaluhu shaqadaka baxay ka hor inta aanu dhibku gaarin.

## Qodobka 127aad
## Diiwaanka Shaqo-siinta Carruurta

1. Loo-shaqeeyahii shaqosiiya carruur waa in uu hayaa diiwaan ay ku jiraan xogta carruur kasta oo u shaqeeya, xogtaas oo ay ka mid tahay:

   *b)* Da'da iyo goobta dhalashada;

   *t)* waqtiga soo gelidda iyo ka bixidda shaqada; iyo

   *j)* xogihii kale ee faahfaahinaya xaaladda carruurta ee la heli karo.

## Qodobka 128aad
## Baaris Caafimaad

1. Carruurta waa in aan la shaqosiininilaa loo-shaqeeyaha uu mariyo baaritaan caafimaad si loo xaqiijiyo in ay ku habboon yihiin dhammaan ama qaar ka mid ah waajibaadka loo-shaqaaleynayo.
2. Baaritaanka hore ee caafimaadka ka dib, loo-shaqeeyuhu waa inuu carruurta mariyaa baaritaan caafimaad sanadkiiba mar ilaa ay ka gaaraan 18 sano.
3. Saraakiisha adeegyada caafimaadka waa in ay sameeyaan baaritaancaafimaad oo kale, waana in ay bixiyaan caddaymaha baaritaankaas oo munaasab ah.
4. Marka la ogaado in carruurta caafimaad ahaan aanu awoodin in uu shaqadiisa sii wato, isla markaasba heshiiskaShaqo-siinta si toos ah ayuu uburayaa.

## CUTUBKA LABAATANAAD
## HAWEENKA

### Qodobka 129aad
### Shaqo-siinta Haweenka

1. XaaladahaShaqo-siinta haweenka waxaa lagu soo saarayaa siyaasado iyo xeer-nidaamiyeyaal faahfaahinaya, hase yeeshee, Wasiirka oo la tashanaya wakiillada ururada shaqaalaha iyo wakiillada loo-shaqeeyayaasha, wuxuu marka uu tixgeliyo xaalado gaarka ah iyo kuwa deg degga ah soo saari karaa:
   *b)* amarro ama habraacyo qeexaya nooca shaqooyinka ka reebban haweenka uurka leh iyo hooyooyinka nuujinaya;
   *t)* Waxa uu nidaaminayaa xaaladaha goobta shaqada si loo ilaaliyo caafimaadka iyo fayo qabka haweenka uurka leh iyo hooyooyinka nuujinaya iyo carruurtooda;
   *j)* Waxa uu sheegayaa shuruudo gaar ah iyo xaalado ay haweenku ku shaqeyn karaan, iyada oo loo eegayo nooca dabeecaddooda, laakiin shuruudahan waa in aanay keeneyn takoor.

### Qodobka130aad
### Fasax Dhalmo

1. Waxaa reeban in haweeney shaqaale ah shaqada looga saaro muddada ay uurka leedahay, ka dib markay soo caddeeyaan dhaqaatiirtu, ayna la timaaddo warqadda caddeynta uurkeeda, marka laga reebo xaaladaha soo socda:
   *b)* haddii la xiro ama ay kacdo (Musallafto) goobta ay ka shaqeyneysay haweeneyda;
   *t)* haddii uu Dhammaado muddada heshiiskeedii shaqada.
2. Haweeney shaqaale ah waxay xaq u leedahay marka ay la timaado warqad dhaqtareed caddeyneysa taariikhda la filayo inay umusho, waxayna xaq u yeelaneysaa 14 (afar iyo toban) toddobaad oo ah fasax dhalmo, iyadoo leh mushaarkeeda oo buuxa, fasaxaasoo ugu yaraan 6 todobaad oo ka mid ah fasaxa dhalmada, ayna qaadanayso dhalmada ka

hor, iyadoo ay u shaqeyneysay shaqo-bixiyaha ugu yaraan lix bilood oo xiriir ah, marka laga reebo jirro dhab ah oo dhaqaatiirtu xaqiijisay.

3. Marka uu dhammaado fasaxa dhalmada, haweenka shaqaalaha ah waxaa xaq loogu leeyahay in ay si dhaqso ah ugu soo noqdaan shaqadii ay hayeen markii ay qaadanayeen fasaxa dhalmada ka hor.
4. Haweeney Shaqaale ah waxa ay xaq u leedahay fasaxa dhalmo oo keliya iyadoo si qoraal ah ku soo wargelinaysaloo-shaqeeyaha muddo 7 (toddobo) maalmo shaqo gudahood, ka hor ama ka dib waqti laga yaabo inay macquul tahay xaaladaha ay rabto inay isku diyaariso fasaxa dhalmada waqti cayiman iyo muddada ay ku soo noqoneyso shaqada markaas kadib.
5. Haweeney Shaqaale ah waxa ay xaq u leedahay fasaxeeda sanadlaha ah oo ka baxsan fasaxa dhalmada
6. Shaqaalaha labka ah oo loo dhalay wuxuu xaq u leeyahay fasax muddo 1 (hal) toddobaad ah, oo mushaar buuxa ah, marka uu soo caddeeyo dhalmada xaaskiisa.

## Qodobka 131aad
## Naas-nuujinta

Haweeney shaqaale ah oo ilma nuujinaysa waxay xaq u leedahay inay labo waqti nuujiso maalintiiba (min hal saac), muddo hal sano ah oo ka ka billaabanaysa marka ay ka soo laabato fasaxa dhalmada. Nuujintana waxaa lagu tirinayaa saacadaha shaqada oo kale, xuquuqdeeda mushaareedna ma saameynayso.

## CUTUBKA KOW IYO LABAATANAAD
## DADKA NAAFADA AH

### Qodobka 132aad
### Xaqa Shaqada iyo Takoor La'aantaShaqo-siinta

1. Dadka naafada ah waxay xaq u leeyihiin in ay shaqeystaan, iyadoo dadka kale si siman ula shaqeystaan, waxaana ka mid ah sidan; in fursadaha shaqada ay ula siman yihiin dadka kale, waxayna xaq u leeyihiin in ay si xor ah u doortaan xirfadooda shaqo oo ku habboon suuqa shaqada iyo bii'ada, waana in aan lagu takoorin shaqada naafonimadooda awgeed, ha ahaato waqtiga shaqo xayeysiinta, shaqo qoridda, inta ay socoto shaqadu ama marka ay dhamaato intaba.
2. Wasiirka, Guddomiyaha Guddiga sare Shaqada ee Federaalka, AgaasimahaShaqo-siintaShaqo-siinta, Agaasimaha Badqabaka iyo Caafimaadka iyo Diiwaanhayaha Ururrada Shaqaalaha iyo Ururrada loo-shaqeeyayaasha iyadoo la tixgelinaayo mid kasta awooddiisa shaqo ee Sharcigan, waxaa waajib ku ah in ay ilaaliyaan, horumariyaan, xaqiijiyaan xaq u yeelashadaShaqo-siintaShaqo-siinta dadka naafada ah, iyaga oo qaadaya tallaabooyin munaasib ah sida:
   *b)* In la ilaaliyo xuquuqda dadka naafada ah, iyagoo lala simayo dadka kale xaggaShaqo-siintaShaqo-siinta, duruufo shaqo oo ku habboon, fursado loo siman yahay, xuquuq siman oo u dhiganta shaqada, badqabka iyo caafimaadka goobaha shaqada, in laga ilaaliyo xadgudubka iyo in si deg deg ah loo abaaro cabashadooda;
   *t)* In la xaqiijiyo in dadka naafada ah ay awood u yeeshaan shaqo gudashadooda, xaqa ka mid noqoshada ururro shaqaale iyagoo dadka kale ula siman;
   *j)* In ay awood u yeeshaan dadka naafada ah helitaanka tababbarrada guud ee farsamada gacanta, barnaamijyada hanuuninta farsamadaha, xirfadaha gaar ka ah, adeegga meelayntaShaqo-siintaShaqo-siinta, iyo tababbar xirfad kobcin joogta ah si aqoontooda iyo xirfadahooda sare loo qaado;
   *x)* In kor looqaado fursadahaShaqo-siintaShaqo-siinta dadka naafada ah iyo hormarinta aqoontooda ku habboon suuqada shaqada iyo

sidoo kale, in laga caawiyo, laguna ilaaliyo shaqada ay haystaan, loona sameeyo shaqo ku celin kuwooda shaqada laga saaray sababo aan macquul aheyn;

*kh)*In loo abuuro fursado ay iskood ugu shaqeysan karaan dadka naafada ah, loona diyaariyo jawi u suurtagalin kara abuurid aragti ganacsi cusub, sidoo kale in la hormariyo awoodda iskaashatooyinka jira, iyo ugu dambeyn in la gaarsiiyo in ay bilaabaan shaqo ganacsi oo iyaga u gaar ah;

*d)*In sare loo qaado fursadahaShaqo-siintaShaqo-siinta ee dadka naafada ah hay'adaha dawliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay intaba, iyada oo loo marayo siyaasado iyo halbeegyo u adeegaya barnaamijyo si gaar ah loogu dhiiragaliyo dadka naafada ah;

*r)*In la xaqiijiyo in dadka naafada ahi ka helaan goobaha shaqada soo dhaweyn, dhiirigelin macquul ah iyo jawi shaqo oo ku habboon duruufahooda gaarka ah;

*s)*In kor loo qaado in dadka naafada ahi ay helaan waaya-aragnimo shaqo oo ku habboon suuqa shaqada furan;

*sh)*In kor loo qaado xirfadaha dadka naafada ah, mihnadaha dib u dhaqancelintooda, ku nagaashadooda shaqada iyo in ay dib ugu noqdaan barnaamijyada shaqo abuurka ee khuseeya dadka naafada ah; iyo

*dh )*In la xaqiijiyo in dadkaas naafada ahi aan shaqada lagu bahdilin, laguna dhibin, laguna khasbin ama aan lagu waajib yeelin shaqo aysan qaban Karin duruufahooda gaarka ah darteed, ayna helaan xuquuq la mid ah sida shaqaalaha kale;

3. Qof kasta oo shaqaale naafo ah waa in aan lagu takoorin shaqada naafanimadiisa darteed, ha ahaato, xilliga xayeysiinta ama inta lagu guda jiro habraaca shaqo qorista,Shaqo-siintaShaqo-siinta, iyadoo la tixgelinaayo noocyadaShaqo-siinta, shaqo ka saarista iyo arrimo kasta oo khuseeya kobcinta xirfaddooda, badqabka iyo caafimaadka goobahooda shaqada.

## Qodobka 133aad
## Hawl-gelin Shaqo oo ku Habboon

Loo-shaqeeye kasta waa inuu xaqiijiyaa in shaqaalaha naafada ah ee u shaqeeya in uuu dejiyo nooca iyo xaddiga shaqada naafonimadooda iyo in aan lagu meeleyn shaqo khatar ama halis ku ah nabadgelyadooda iyo caafimaadkooda intaba, iyadoo oo loo eegayo awooddooda wax qabad iyo xadka naafonimadooda.

## Qodobka 134aad
## Bixinta Taageerada Lagama Maarmaanka ah

Loo-shaqeeye kasta waa inuu hubiyaa in shaqaalaha naafada ah la siiyo taageerada lagama-maarmaanka u ah inuu waajibaadkiisa shaqo u guto si kalsooni oo degganaan leh.

# QEYBTA VI
# CUDURRADA, DHAAWACYADA IYO SHILALKA MIHNADDA

## CUTUBKA LABO IYO LABAATANAAD
## MAAMULKA

### Qodobka 135aad
### Agaasimaha

1. Ujeeddooyinka qaybtan, "Agaasime" waxaa loola jeedaa Agaasimaha badqabka mihnadda iyo caafimaadka.
2. Awoodaha iyo howlaha soo socoda ayaa Agaasimahu leeyahay iyada oo la tixgelinayo arrimaha ku xusan qaybtan:
   *b)*In uu diiwaan-geliyo loo-shaqeeyayaasha;
   *t)*Inuu kormeero hirgelinta qaybtan eexeerkan;
   *j)*In uu xaqiijiyo in dhammaan loo-shaqeeyayaashu ay hubiyaan shaqaalahoodaay ku jiraan ceymis;
   *x)* In uu xaqiijiyo si munaasab ahna uu u ilaaliyo dadka naafada ah, loogana hortago shilalka mihnadda, dhaawacyada iyo cudurada si aanay u imaan wax sababaya naafanimo dheeri ah;

*kh)*In uu helo warbixinnada shilalka iyo in uu sameeyo baaritaanno iyo wareysiyo la xiriira qaabka shilalkaas;

*d)*In uu hubiyo shaqaalaha dhaawacmay in ayheleen Magdhaw si waafaqsan qodobbadaSharcigan iyo xeer hoosaadyadiisa.

3. Agaasimaha waxaa ka caawinaya hirgelinta awooddiisa iyo fulinta waajibaadkiisa shaqocid kasta oo loo arko in ay muhiim u tahay meelmarintamaamulka qodobada qaybtan ee ku xusan xeerkan.

## Qodobka 136[aad]

## Diidmooyinka iyo Cabashooyinka Laga Qaato Go'aanada Agaasimaha

1. Qof kasta oo ka cabanaya go'aanka Agaasimaha ee ku aaddan arrin kasta oo hoos timaada qeybtaan,waa in muddo 60 (lixdan) maalmo shaqo gudahooda uu ku soo gudbiyaa qoraal diidmo ah oo uu uga soo horjeedo go'aanka agaasimaha, diidmadaas oo faahfaahsanna uu u soo gudbiyaa Agaasimaha.
2. Agaasimaha wax aa looga baahan yahay, muddo 14 (afar iyo toban)maalmo shaqo gudahood ah marka ay diidmada soo gaarto ka dib:

   *b)*In uu bixiyo qoraal jawaab u ah diidmada, isaga oo go'aankiisii hore beddelaya ama ku adkeysanaya, soona raacinaya sababaha uu u qaatay go'aanka diidmada laga keenay;

   *t)*In uu u diro nuqul ka mid ah warbixinta qof kasta oo uu saameeyey go'aanka.
3. Marka qofuu ka cawdo jawaabta Agaasimaha, waxa uucabasho u qaadan karaan maxkamadda awoodda u lehmuddo 30 (soddon) maalmo shaqo gudahood ah ka dib marka uu helo jawaabta Agaasimaha.

## CUTUBKA SADDEX IYO LABAATANAAD

## WAAJIBAADKA AGAASIMAHA, LOO-SHAQEEYAHA, SHAQAALAHA EE KU AADDAN SHILALKA MIHNADDA, DHAAWACYADA IYO CUDURRADA SHAQADA

### Qodobka 137aad
### Waajibaadka Guud ee Loo-Shaqeeyaha

1. Marka la eego Qeybtan;arrimaha soo socda waa waajibaadka loo-shaqeeyaha:
   *b)*In uu xaqiijiyo oo si munaasab u ilaaliyo dadka naafada ah, iyadoo laga hortagayo shilalka mihnadda, dhaawacyada iyo cudurrada shaqada si aanay u imaanin wax sababaya naafanimo dheeri ah;
   *t)*Loo-shaqeeyayaasha wa in ay yeeshaan siyaasad caymis oo u gaar ah taas oo waafaqsan siyaasadda caymiska qaranka;
   *j)*In uu iska diiwaan-geliyo, uuna muddada Agaasimuhu u cayimay kusoo gudbiyo dhammaan faahfaahinta iyomacluumaadka la xiriira shaqadiisa, iyo wixii kale oo xog ah oo uu Agaasimuhu ka dalbado;
   *x)*Muddo 30 (soddon) maalmo shaqo gudahood, haddii uu isbeddel ku yimaado macluumaadka iyo faahfaahintii la soo gudbiyey, waa in lagu soo wargeliyaa Agaasimaha;
   *kh)*In lakeydiyodhammaaan xasuus reebka diiwaannada, qoraallada kale ee dakhliga iyo xogaha shaqaalaha ugu yaraan muddo 6 (lix) sano oo ka bilaabaneysa taariikhdii la diiwaan-geliyey xogtii ugu dambeysay, waxaana loogu soo saari karaa dukumintiyada kor ku xusan dalabka Agaasimaha si loo baaro,loona diiwaan-geliyo ama dib loogu soo saaro waqti dambe, haddii loo baahdo;
   d) Waa in Agaasimaha lagu wargeliyo sida ugu dhaqsiyaha badan muddo 7 (toddoba) maalmo shaqo gudahood ka dib shil dhaco ama cudurro shaqo la ogaado in qof shaqaale ah uu ku dhaawacmay shil ama ka dhashay goobta cudurro mihnadeed;
   *r)* Waa in la siiyaa shaqaalaha iyo ku tiirsanayaasha la nool nuqul ka mid ah ogeysiiska shilka ee loo-shaqeeyuhu u soo gudbiyey Agaasimaha,

haddii ay dalbadaan, iyada oo loo eegayo dalabka magdhawga shaqaalaha ama ku tiirsanayaashooda;

*s)*Muddo 7 (toddoba) maalmo shaqo gudahood ka dib marka ay timaado warbixinta caafimaad ama dukuminti kale ama macluumaad la xiriira sheegashada magdhawga, warbixinta, ama macluumaadka waa in loo gudbiyaa Agaasimaha;

*sh)*Waa in la xalliyo Magdhaw  sheegasho kasta oo uu ku soo oogo agaasimuhu.

2. Loo-shaqeeyihii ku guuldarreysta ama dayaca inuu fuliyo mid ka mid ah waajibaadyada, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo dhan **US$ 500** (shan boqol) oo doollarla mareykanka ah ama lacag Shillin Soomaali ah oo u dhigantaama xabsi ilaa muddo aan ka badneyn 3 (seddex)   bilood ama labadaba.

## Qodobka 138aad
## Waajibaadka Guud ee Shaqaalaha

1. Qeybtan soo socota waxa ay tilmaamaysaa waajibaadka shaqaalaha:

*b)*In si taxadir iyo feejignaan leh looga shaqeeyo goobta shaqada, iyo in la hubiyo in aanu qofna sameyn habdhaqan naftiisa ama qof kale kasta oo jooga goobta shaqada u keeni kara halis dhaawac ama mid dhimasho;

*t)*In shil kasta oo dhacaya inta lagu jiro shaqada loogu sheego loo-shaqeeyaha si Af iyo qoraalba ah, iyo in Agaasimaha, saldhiga booliska degmadaloo diro nuqul qoraal ahiyoAf lagu wargaliyo muddo 24 (afar iyo labaatan) saac gudahood ah marka uu shilku yahay dhimasho;

*j)*Marka shil, dhaawaca ama xanuun dhacay looga warbixinayo loo-shaqeeyaha ama Agaasimaha, waa in warbixinta lagu daraa macluumaadka iyo dukumintiyada lagama-maarmaankau ah ama ay dalbadaan loo-shaqeeyaha ama Agaasimaha;

*x)*Marka uu qofku dalbado ama helo Magdhaw , haddii Agaasimaha ama loo-shaqeeyuhu uu codsado, waa in qofkaasi laftiisu tagaa goorta iyo goobta caafimaad ee ku cayiman warqadda ogeysiiska, si loogu sameeyo baaris caafimaad, taas oo uu sameynayo xeeldheere

caafimaad oo uu tilmaamay Agaasimuhu ama loo-shaqeeyuhu, sidoo kale uu oggolaaday shaqaaluhu ama wakiilkiisa; iyo

*kh)* Waa in shaqaaluhu uu soo codsado Magdhaw si waafaqsan Sharcigan muddo 12 (laba iyo toban) bilood gudahood ah taariikhda shil ama dhaawac dhacay ama xanuun shaqadu keentay ka dib; haddii uu shaqaaluhu geeriyoodo, mas'uuliyaddu waxa ay ku wareegaysaa qofka wakiilka u ah shaqaalaha.

2. Sida uu dhigayo Sharcigan xuquuqaha waa ay laalmayaan, haddii shil, dhaawaca ama xanuun aan lagu wargelin looshaqeeyaha laba iyo toban 12 (laba iyo toaban) bilood gudahood taariikhda shilka, dhaawaca ama xanuunku dhacay ka dib.
3. Ku soo wargelin la'aanta loo-shaqeeyaha shil ama dhaawac dhacay ama xanuun shaqadu keentay, ma baabi'ineyso magdhawga laga rabo loo-shaqeeyaha haddii ay caddaato in loo-shaqeeyuhu uu ogaaday dhacdadaas, muddo 12 (laba iyo toaban) bilood ka hor si kastaba haku soo gaartee.
4. Ku wargelin la'aanta looshaqeeyaha shil ama dhaawac dhacay ama xanuun shaqadu keentay, si kasta oo khaldan oo wax loogu soo sheego ma baabi'ineyso magdhawga laga rabo mar:

*b)* Haddii loo-shaqeeyaha aanu dembi weyn ku laheyn wargelin la'aanta, khaladka ama saxnaan la'aanta wargelinta, haddiiba uun loo sheegay, sax iyo khalad wax ay doontaba ha ahaatee ama dib laga saxay;

*t)* Haddii wargelin la'aanta, khaladka ama saxnaan la'aanta warbixintu ay aheyd mid lama filaan ah ama ay sabab u aheydmaqnaasho shaqaaluhu ka maqnaa dalka.

## Qodobka 139aad
## Waajibaadka Agaasimaha

1. Haddii loo-shaqeeyuhu uu ku guul darraysto inuu soo sheego shil ama dhaawac dhacay ama xanuun shaqadu keentay ama macluumaadkii uu Agaasimuhu ka codsaday, markaa Agaasimuhu wuxuu:

*b)* Sameynayaa baaritaan, waxana bixinaya kharashka baaritaanka loo-shaqeeyaha, taas oo ah qaan lagu lahaa;

*t)* Loo-shaqeeyaha waxaa lagu soo rogayaa ganaax.

2. Ka dib markii ay soo gaartay wargelintashilama dhaawac dhacay ama xanuun shaqadu keentayama uu ogaado in qof shaqaale ah shil ku dhaawacmay ama cudurrada mihnadda,Agaasimaha waxaa looga baahan yahay inuu sameeyo baaritaannada lagama maarmaanka ah si uu u go'aamiyo wixii sheegasho ama mas'uuliyad ah ee waafaqsan Sharcigan.
3. Marka uu Agaasimuhuansixiyo wixii sheegasho ah ee laga raboloo-shaqeeyaha ama caymiyaha, waa in sheegashadaas uu ku soo oogo loo-shaqeeyaha ama caymiyaha, si ay u xalliyaan muddo 90 (sagaashan) maalmo shaqogudahood ah.
4. Agaasimaha ayey  waajib ku tahay, in muddo 30 (soddon) maalmo shaqo gudahood uu lacagta u qabto, kuna siiyo lacagtiisa shaqaalahii soo sheegtay ama ehelkiisa.
5. Loo-shaqeeyihii ama caymiyihiibixin waaya Magdhawga laga dalbadaywaxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo dhan **US $500** (shan boqol) oo doollarka mareyka ah ama lacag Shillin Soomaali ah oo u dhigantaama xabsi aan ka badneyn 6 (lix) bilood ama labadaba.

## Qodobka 140aad
## Daryeel Caafimaad

1. Loo-shaqeeyahawaxa  waajib kuah in uu keeno, hagaajiyo qalabka iyo adeegyada loogu talagalay gargaarka deg degga ah ee shaqaalihiisa, si loo adeegsado haddii uu dhaco shil.
2. Loo-shaqeeye kasta oo ku guuldareysta in uu u hogaansamo faqradda (1)ee qodobkan waxa uu galay dembi.
3. Wasiirka marka uu la tashado Agaasimaha, wuxuuogeysiis ku soo gudbinayaafaafinta rasmiga ah, marka laga reebo in loo-shaqeeyaha ama koox loo-shaqeeyayaal ahi ay qeybtan nidaamyo kale oo ay u sameysteen xallinta shilalka si waafaqsan xeerkan.
4. Haddii shaqaale uu ku dhaawacmo shil ama xanuunka kusii siyaado, uuna u baahan yahay in la geeyo isbitaal uu ka helo adeeg caafimaad ama laga wareejinayo isbitaal oo la geynayo xarun caafimaad oo ku taal deegaanka shaqaalaha, loo-shaqeeyuhu waa inuu keenaa gaadiidkii lagu geyn lahaa.

5. Loo-shaqeeyaha waa inuu bixiyaa dhammaan kharashaadka lagu soo dallaco shaqaalaha shil ama dhaawac ku dhacay ama xanuun shaqadu keentay, kharashaadkaas oo ay ka mid noqon karaan:
   *b)*Daawaynta ilkaha, caafimaadka, qalliinka ama daawada isbitaalka;
   *t)*Adeegyada kalkaaliyaha xirfadlaha ah;
   *j)*Daawada iyo dharka qalliinka;
   *x)*Socdaalka, nolol maalmeedka iyo waxyaabaha la xiriira safarka caafimaad ee shaqaalaha, safarkaas oo loo aadayo meel ka mid ah dalka, halkaas oo dhaqtarkiisu kula taliyey in uu isku soo daweeyo ayna joogaan xeeldheerayaal caafimaad;
   *kh)*Keenidda, Hagaajinta, dayactirka iyo beddelidda agabka macmalka ah, ulaha cuuryaamiinta, iyo qalabka kale ee ay isticmaalaan dadka jir ahaan naafada ah.
6. Waxyeello kasta oo soo gaarta qalabka ama aaladaha ku qeexan faqrada5[aad]ee xarafka (*kh*) waxaa loo tixgelinayaa inuu yahay dhaawac.
7. Xeeldheere caafimaad ee baaraya Shaqaalaha Dhaawacmay, waa in muddoafar iyo toban(14)maalmo shaqo gudahood ah baaritaanka koowaad lagu sameeyo shaqaalahashil ku dhaawacmay. Haddii la ogaado in cudur ka dhashay shaqada Muddo (14) afar iyo toban maalmo shaqo gudahood, waa in xeeldheere caafimaad warbixin caafimaad u soo gudbiyaa caymiskiisa,loo-shaqeeyahaiyo Agaasimaha.

## CUTUBKA AFAR IYO LABAATANAAD
## MAGDHAWGA, DEMBIYADA, SHURUUCDA GAARKA AHIYO XEER-NIDAAMIYEYAASHA

### Qodobka 141aad
### Xaqa Magdhawga

1. Loo-shaqeeye kasta waa inuu bixiyaaMagdhaw si waafaqsan qodobbada Sharcigan, haddii shaqaale uu ku dhaawacmo ama uu cudur shaqada ka dhashay waxyeelo ka soo gaartayinta uu shaqada ku jiray.
2. Shaqaale xaq uma laha Magdhaw, haddii shil, dhaawac ku dhacay, ama cudur shaqadu keentay aanay ka dhalaneyn naafanimo halis ah ama dhimasho, shilkaas oo ku yimid dhaqan xumo iyo ula kac iyo bareer qofka shaqaalaha ahi uu sameeyey.
3. Shil mihnadeed ama cudur ka dhasha shaqo, kaas oo keena naafanimo halis ah ama dhimasho ku timaadda shaqaalaha, waxaa loo qaadanayaa mid ka dhashay shaqada, haddii shilku yahay mid ka yimid ficil uu sameeyay qofka shaqaalaha ah, isaga oo kudadaalaya danta shaqada ee loo-shaqeeyaha, iyada oo aan loo eegeyn xaaladda uu ku sugnaa, waqtigii uu shilku dhacayey sida:
   *b)*Ku xadgudbid sharci ama wacyigelin uu bixiyey loo-shaqeeyaha ama wakiilkiisa;
   *t)*Isaga oo aan ku socon tilmaamaha loo shaqeeyaha.
4. Muddada qofka shaqaalaha ah loo sii wado ama laga soo wado goobta shaqada, iyada oo lagu qaadayo gaadiid shirkaddu leedahay oo uu amray loo-shaqeeyuhu, wixii shil ah ee yimaada waa kuwa la mid ahkuwa ka dhaca goobta shaqada.
5. Dhaawac kasta oo natiijadiisu noqoto naafonimo daran, haddii ayku keeneysoshaqaalahanaafanimo joogta ah oo gaareysa boqolkiiba afartan (40%) ama ka badan.
6. Agaasimuhu wuxuu diidi karaa in Magdhaw la siiyo shaqaale isagoo cuskanaya Sharcigan haddii:
   *b)*Waqti kasta oo Shaqaale laga ogaaday in uusi bareer ahama been abuur ah ugu soo bandhigo loo-shaqeeyaha in uu ku dhacay

dhaawac halis ah ama cudur shaqada ka soo gaaray ama cudurro kale oo halis ah;

*t)*Ay u caddaatay Agaasimaha, in shaqaale uu qarsado cudur ama uu diido in gargaar caafimaad uu soo dalbado ama loo fidiyo dhaawac ama cudur daba dheeraaday awgiis, xaalkana uu gaaray heer dhimasho ama in la gooyo xubin ka mid ah jirkiisa oo ay keentay diidmada ama dayacaadda shaqaalaha, dhaawacaas ama cudurkaasi ha ahaado mid shilka shaqada sababay ama mid ka hor jiray.

7. Haddii, la soo sheegto Magdhaw si waafaqsanxeerkan, ayna muuqato in heshiiska shaqada ama farsamobaradku uu yahay mid aan ansax aheyn, waxaa suurtagal ah in Agaasimuhu uu ansixiyo sheegashada Magdhawga sida haddii heshiisku uu ansax ahaa goortii shilka dhacay
8. Iyada oo loo eegin qodobada ka soo horjeeda ama xeer kasta oo jira, Magdhawgu waa inaanu noqon:

   *b)*Mid la qoondeeyay ama la ballan qaaday;

   *t)*Mid awood loo adeegsado ama nooc kasta oo fulin ah iyada oo la raacayo xukun ama amar maxkamadeed;

   *j)*Mid looga bixinayodeyn lagu lahaa qofka xaqa u leh Magdhawga.
9. Qodob kasta oo heshiis ka mid ah, kaas oo dhigaya in shaqaale lagu magacaabo, ama u muuqda in lagu magacaabo, lagu ruqseeyo ama u muuqda in la ruqseenayo ama la doonayo in uu ka tanaasulo xaq uu lahaa marka loo eego Sharcigan waa mid aan ansax aheyn.
10. Magdhaw dhimasho shaqaale oo lagu muteystay si waafaqsan xeerkan,looma siin karo u-hare (survivor) qeyb ka mid ah xuquuq mushaar ama hanti uu ku lahaa shirkadda.

## Qodobka 142aad
## Xad-gudubyada iyo Ciqaabaha

1. Si waafaqsan Sharcigan, qof kasta oo abaabula sheegasho Magdhaw, ama jawaab celin, ogeysiis, warbixin ama qoraal kasta oo lagu soo gudbiyey ama lagu soo bandhigay iyadoo la adeegsanayo Sharcigan oo si ula-kac ah u sameeya ama sababa in la sameeyo qoraal been abuur ah iyadoo loola jeedo in dhaqaale lagu helo, waxa uu galay dembi.

2. Qofkii lagu helo dembiga ku xusan faqradda 1aadee Qodobkaon, iyada oo loo cuskanayoSharcigan oo aan loo heyn ciqaab kale,waxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo dhan**US$1000** (kun) oo doollarka mareykanka ah ama lacag Shillin Soomaali ah oo u dhiganta ama xabsi ilaa muddo aan ka badneyn 6 (lix) bilood ama labadaba.
3. Qof kasta oo laga doonayo in uu soo gudbiyo macluumaad looga dalbaday si waafaqsan faqradda (1) ee qodobkan ama xeer-nidaamiyaashiisa qofkaas oo:
   *b)* ku guuldarreysta in uu ku soo gudbiyo waqtiga loo cayimay dhexdiisa;
   *t)* dalbada ama sababa in loo dalbo xog, taas oo uu og yahay in ay been tahay;
   *j)* ku guuldarreysta markii laga dalbo in uu bixiyo macluumaad ama sharaxaad la xiriirta xuquuqda uu dalbanayo, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo dhan **US $ 500** ama lacag Shillin Soomaali ah oo u dhiganta;
   *x)* haddii sharci-jebin qofka lagu xukumay uu ku sii socdo waxa uu noqonayaa dembi kale oo lagu ciqaabayo iyada oo lagu ridayo ganaax lacageed oo aan ka badneyn **US$ 25** (labaatan iyo shan) oo doollarka Mareykanka ah ama lacag shilin Soomali u dhiganta, maalin kasta oo xadgudubku sii socdaba
4. Haddii fal-dembiyeedka lagu xukumayqodobkan aytahayShirkad amaGuddoomiye, Agaasime kasta amaSarkaal kasta oo ka tirsan shirkadda, waxay galayaan dembi la mid ah kii uu galayqofkii la xukumay, ilaa inta uu qofkaasisoo caddeeyo in falka ama ficilka sababay dembiga uu ku dhacay ogaalama oggolaansho la’aan haysata qofka.

## Qodobka 14aad

## Ansixinta Shuruucda Gaarka ah, Xeer-Nidaamiyayaasha La Xiriira MagdhawgaShilalka Mihnadaha, Dhaawacyada iyo Cudurrada Shaqada

1. Wasaaradda oo la tashanayso wakiillada ururrada shaqaalaha iyo kuwa loo-shaqeeyayaasha waxa ay sameyneysaa siyaasado, xeer-nidaamiyeyaal

iyo qawaaniin kale oo lagu dhaqayoShilalka mihnadaha, dhaawacyada dhaca, cudurrada shaqadu keentayoo ay ka mid yihiin kuwa soo socda:

*b)*Go'aaminta heerka dhaawaca;

*t)*Shilalka mihnadaha ee dhaca inta uu shaqaaluhu ku jiro tababarka ama adeegyada gurmadka degdegga ah;

*j)*Shilalka mihnadaha, dhaawacyadadhaca, cudurrada shaqadu keentay marka shaqaale loo diro meel dalka ka baxsan;

*x)*Habka xisaabinta dakhliga shaqaalaha;

*kh)*Go'aaminta nooca ama xaddiga Magdhawga, oo ay ka mid yihiin:

i. Magdhawga shaqaale u baahan gargaar joogto ah;
ii. Magdhawga ama magdhaw waqti ku eg oo la siinayo qof naafo buuxa ama bar naafo ah;
iii. Magdhawga naafanimada joogtada ah;
iv. Magdhawga shaqaale kal hore qaatay Magdhaw, iyo
v. Xaddiga magdhawga haddii dhimasho dhacdo;

*d)*Habka bixinta Magdhawga; iyo

*r)*Sheegashooyin la xiriira dhinaca saddexaad.

2. Wasiirku, isagoo la tashanaayo wakiillada ururrada shaqaalaha iyo kuwa loo-shaqeeyayaasha waxa uu abuuri karaa habraacyo ujeeddadeedu tahay in ay si wanaagsan u dhaqan galaan qodobbada xeerkan, iyada oo aan wax u dhimeyn guud ahaan awoodda kor ku xusan, wasiirku waxa uu abuuri doonaa habraacyo:

*b)* Jideynayaa hannaan, qaabab iyo khidmado;

*t)* Jideynayaa wax kasta oo ay tahay in lagu qoro xeerkan;

*j)* laga raboloo shaqeeyayaasha iyo ceymisyada dalka ka howlgala gaar ahaankuwa looshaqeeyayaasha kaceymiya qaamaha uu xeerkani tilmaamayoin ay si xilliyeysan u bixiyaan qaamaha iyo wixii kale ee daryeel ah ee Wasiirku u arko lama huraan, waana in ay muddo go’an u yeelaan bixinta qaamahaas.

## QEYBTA VII
## XIRIIRKA SHAQO WADAREEDKA

### CUTUBKA 25AAD
### XORRIYADDA KU BIIRISTA

**Qodobka 144aad**

**Xaqa iyo Xorriyadda ku Biirista Ururada Shaqaalaha**

1. Waa sharci darro in laga qayb qaato fal kasta oo midab-takoor ah ama ficil kasta oo xakameynaya xuquuqda xorriyadda ku biirista, gaar ahaan:
   *B )*Shaqo-siin shaqaale oo shuruud looga dhigayo in shaqaalahaasi aanu ku biiri karin urur shaqaale ama aanu ka tegi karin xubinnimada urur shaqaale;
   *t)* Shaqa ka saaris ama si kale u dhibaateyn shaqaale, iyada oo sabab u tahay in uu xubin ka yahay urur shaqaale ama sababo la xiriira ka qeyb-galka hawlaha urur shaqaale.
2. Waa sharci darro in loo-shaqeeye uu ku lug yeesho ficil kasta oo faragelin ah, oo ay ka mid tahay faragelin maaliyadeed ee abuurid amahawlgelin urur shaqaale.
3. Shaqaale kasta waxa uu xaq u leeyahay:
   *b)* Ka-qayb-qaadashada sameynta urur shaqaale ama xiriirka guud ururrada shaqaalaha;
   *t)* Ku biirid urur shaqaale;
   *j)* Ka tegidurur shaqaale.
4. Xubin kasta oo ka tirsan urur shaqaale waxay xaq u leedahay iyadoo laga duulayo dastuurka ururka:
   *b)* Ka qayb qaadashada hawlaha sharciga ah;
   *t)* Ka qayb-galka doorashooyinka mas'uuliyiinta iyo wakiilladooda;
   *j)* Isu soo taagid doorasho iyo magacaabid uu u qalmo sida sarkaal, haddii la doorto ama la magacaabana uu xafiiska qabto;
   *x)*Isu soo taagid doorasho ama raadin magacaabid in uu wakiilka noqdo urur shaqaale iyo, haddii la doorto ama la magacaabana, uu fuliyo

shaqooyinka wakiil urur shaqaale si waafaqsan qodobbada Sharcigan ama qodobbada heshiis wadareedka.

5. Xubin kasta oo ka tirsan urur shaqaale oo xubin ka ahxiriirka guud ee ururrada shaqaalaha oo ku xiran si waafaqasan dastuurka xiriirka guudwuxuu xaq u leeyahay:
   *b)*In uu ka qaybqaato hawlo sharci ah;
   *t)* In uu ka qayb-galo doorashooyinka saraakiisha ama wakiilladooda;
   *j)* In uu isu soo taago doorasho ama uu raadiyomagacaabis xafiis ama sarkaal, haddii loo doorto ama loo magacaabo, wuxuu qabanayaa xafiiska;
   *x)* In uu isu soo taago doorasho ama uu raadiyomagacaabis isagoo wakiil ka ah xiriirka, haddii loo doorto ama loo magacaabo,wuxuu qabanayaa hawlaha wakiilnimada si waafaqsan qodobada Sharcigan ama heshiis wadareedka.

## Qodobka 145aad
## Ilaalinta Xuquuqda Shaqaalaha

1. Qof kasta oo shaqaale ah ama shaqo doon ah, waa sharci darro in lagu takooro isagoo adeegsanaya xuquuq kasta oo uu siinayoxeerkan
2. Waxaa sharcidar ro ah in lagu kaco fal amalagu handado in uu sameeyo mid ka mid ah arrimahan soo socda:
   *b)* In laga dalbado, lagu amro shaqaale ama qof shaqodoon ah in aanu xubin ka noqon ama uu ka tanaasulo xubinimada urur shaqaale;
   *t)* Ka horistaagid shaqaale ama shaqodoon adeegsiga xaquuqda ay leeyihiinama ka qeyb qaadashodacwo oo khuseysain uu adeegsado xuquuqdiisa si waafaqsan xeerkan;
   *j)* Shaqo ka saaridda ama si kale ugu diididshaqaale ama qof shaqo doon ah:
      i. Sababo la xiriira xubinnimada urur shaqaale ee mar hore, imminka ama la filayo in uu ku biiro;
      ii. In uu ka qayb qaato sameynta ama hawlaha sharciga ah ee urur Shaqaale;
      iii. In uu adeegsado xuquuq kastauu leeyahay, ama ka qayb qaadashada dacwo oo ku xusanxeerkan;

iv. in uu ku guuldarreysto, diido ama amro in uu sameeyo wax loo-shaqeeyuhu aanu sharci ugu laheyn shaqaalaha.

3. Waa sharci darro in wax la siiyo ama loo ballan qaado si loogu faa'ideysto (sandareerto) shaqaale ama shaqo doon,iyada oo looga beddelanayo in uu ka tanaasulo xuquuq uu leeyahay ama in aanu ka qaybqaadan dacwooyinka Sharcigan ku xusan
4. Faqradda 3[aad] ee qodobkan kama hor istaagayso dhinacyada in ay ka doodaan oo ay heshiis ka gaaraan sidii loo xallin lahaa dooddaas.

## Qodobka 146[aad]
## Xaqa iyo Xorriyadda ku Biirista Ururada loo-shaqeeyaha

1. Loo-shaqeeye kasta waxa uu xaq u leeyahay:
   *b)* In uu ka qayb qaato sameynta urur looshaqeeye ama xiriirka guudee looshaqeeyeyaasha;
   *t)* Sida uu qabo dastuurkoodu, in uu ku biiro ururrada looshaqeeyeyaasha ama xiriirka guud loo-shaqeeyaayaasha.
2. Xubin kasta oo ka mid ah ururrada loo-shaqeeyeyaasha waxa uu xaq u leeyahay sida uu qabo dastuurka ururka, in:
   *b)* uu ka qaybqaato hawlahooda sharciga ah;
   *t)*uu Kaqaybqaaato doorashada mid ka mid ah xubnaha ururka ama mas'uuliintiisa sar sare;
   *j)*uu u istaagto doorashada ama uu raadsado magacaabis sida xafiis ama sarkaal, haddii la doorto ama loo magacaabana, uu qabto xafiiska;
   *x)*Inuu isu soo taago doorasho ama uu raadiyo magacaabis isagoo wakiil ka ah xiriirka loo shaqeeyaha, haddii loo doorto ama loo magacaabo, wuxuu qabanayaa hawlaha wakiilnimada si waafaqsan qodobada Sharcigan ama heshiis wadareedka.
3. Looshaqeeye kasta, xubin haka ahaado ama aanu ka ahaanin ururrada looshaqeeyeyaasha,kaas oo isna xubin ka ah xiriirka guudee loo-shaqeeyeyaasha, wuxuu xaq u leeyahay sida uu qabo dastuurka xiriirka guud in:
   *b)* uu ka qaybqaato hawlahooda sharciga ah;

*t)* uu Kaqaybqaaato doorashada mid ka mid ah shaqaalihiisa ama mas'uuliintiisa sar sare;

*j)*In uu isu taago doorasho ama uu raadiyo in loo magacaabo sida xafiis ama mas'uuliintiisa sar sare ee ururka;

*x)*In uu isu soo taago doorasho ama uu u qalmo magacaabis isagoo wakiil ka ah xiriirka loo shaqeeyaha, haddii loo doorto ama loo magacaabo, wuxuu qabanayaa hawlaha wakiilnimada si waafaqsan qodobada Sharcigan ama heshiis wadareedka.

4. Loo-shaqeeye ka shaqeeya adeeg sharciayaa laga yaabaa inuu adeegsado xaqa uu u leeyahay inuu u istaago doorasho oo uu xil ka qabto urur loo-shaqeeye ama xiriirka guud ee loo-shaqeeyeyaasha isagoo wakiil ka ah.

## Qodobka 147aad
## Ilaalinta Xuquuqda Loo-Shaqeeyaha

1. Loo-shaqeeye kasta, waa sharci darro in lagu takooro isagoo adeegsanaya xuquuq kasta oo uu siinayo Sharcigan.
2. Waxaa sharcidarro ah in lagu kaco fal amalagu handado in uu sameeyo mid ka mid ah arrimahan soo socda:

   *b)* In laga dalbado, lagu amro loo-shaqeeye in aanu xubin ka noqon ama uu ka tanaasulo xubinimada urur Loo-shaqeeye;

   *t)* Ka hor istaagid loo-shaqeeye adeegsiga xaquuqdiisa ama dacwo khuseysa inuu isticmaalo xuquuqdiisa si waafaqsan Sharcigan;

   *j)* Si kastaba in lagu duudsiiyo loo-shaqeeye:

      i. Sababo la xiriira xubinnimada urur loo-shaqeeye ee mar hore, hadda, ama la filayo in uu ku biiro;
      ii. In uu ka qayb qaato sameynta ama hawlaha sharciga ah ee urur Loo shaqeeye;
      iii. In uu adeegsado xuquuq kastaoo la siiyey, ama ka qayb qaadashada dacwoku xusanxeerkan;
      iv. In uu ku guuldarreysto ama diidowax  loo shaqeeyuhu aanu sharci u laheynin uu sameeyo.

3. Waa sharci darro in wax la siiyo ama loo ballan qaado dan gaar ahsi looga faa'iideysto (Sandareerto)loo-shaqeeye,iyada oo looga beddelanayo in uu

ka tanaasulo xuquuq uu leeyahay ama in aanu ka qaybqaadan dacwooyinka Sharcigan loogu oggolaaday

4. Faqradda (3) ee qodobkan kama hor istaagayso dhinacyada in ay ka doodaan oo ay heshiis ka gaaraan sidii loo xallin lahaa dooddaas.

## Qodobka 148aad

## Xuquuqda Guud iyo Waajibaadka Ururrada Shaqaalaha, Ururrada Loo-Shaqeeyeyaasha iyo Xiriirrada Guud

1. Ururka shaqaalaha iyo ururrada loo-shaqeeyuhu waxa ay leeyihiin xuquuqahaan soo socda:
   *b)* In la galo heshiis shakhsi ama mid wadareed, iyada oo loo raacayoxaaladaha shaqada, si ay u bariyeelaan,una xoojiyaan xuquuqaha ku jira heshiiska iyo in ay qaadaan ficil kasta oo sharci ah oo ka dhasha heshiisyadaas siwaafaqsan Sharcigan;
   *t)* In lagu wargeliyo hay'adaha awoodda u leh dhammaan ficillada keeni kara nacaybka danaha guud ee mihnadaha shaqaalaha uu matalo;
   *j)* In la helo xuquuqda lahaanshaha hantida guurtada iyo ma guurtada ah si loogu isticmaalo oo kaliya ujeeddooyinka loo aasaasay ururrada shaqaalaha ama loo-shaqeeyeyaasha;
   *x)* In la saameeyo tallaabo kasta oo sharci ah oo lagu gaarayo himilooyinka iyo ujeeddooyinka loo asaasay.
2. Ururrada shaqaalaha, iyo ururrada loo-shaqeeyeyaasha iyo xiriirrada guud waxa ay leeyihiin waajibaadyada soo socda:
   *b)* In lagu wargeliyo Diiwaan hayaha Shaqaalaha iyo Ururrada loo-shaqeeyayaasha muddo 10 (toban)aalmo shaqo gudahood dhammaan isbeddelada xubinnimada guddiga maamulka iyo wixii wax-ka-beddel ah ee dastuurkooda ama xeer-hoosaadkooda oo leh nuqullo rasmi ah oo caddaynaya dukumeentiga khuseeya;
   *t)* In lagu wargeliyo Diiwaanhayaha la soo sheegay sanad kasta tirada xubnaha cusub ee ku soo biiray iyo kuwa ka baxay;
   *j)* In la fuliyo waajibaad kasta ee uu soo rogay xeerkan,xeer-nidaamiyayaashaSharcigan ama qaanuun kale, kuwaas oo waajibaadkoodu aanu farageliney n maamulka gudaha iyo hawlaha ururrada shaqaalaha, ururrada loo-shaqeeyeyaasha iyo xiriirka guud.

## Qodobka 149aad
## Madax-bannaani

Urur kasta oo shaqaale, loo-shaqeeyeyaasha iyo xiriirrada guud waxa ay xaq ugu leeyihiin Sharcigan gudihiisa:

## Qodobka 147aad
## Ilaalinta xuquuqda loo-shaqeeyaha

1. Loo-shaqeeye kasta, waa sharci darro in lagu takooro isagoo adeegsanaya xuquuq kasta oo uu siinayo xeerkani.
2. Waxaa sharci darro ah in lagu kaco fal ama handadaad ama mid ka mid ah uu sameeyo Arrimahan soo socda:
   b) In laga dalbado, lagu amro loo-shaqeeye in aanu xubin ka noqon ama uu ka tanaasulo xubinimada urur loo shaqeeye;
   *t)* Ka horistaagid loo-shaqeeye adeegsiga xaquuqdiisa ama dacwo khuseysa in uu isticmaalo xuquuqdiisa si waafaqsan xeerkan;
   j) Si kastaba in lagu duudsiiyo loo-shaqeeye:
      i. Sababo la xiriira xubinnimada urur loo-shaqeeye ee mar hore, hadda, ama la filayo in uu kubiiro;
      ii. In uu ka qayb qaato sameynta ama hawlaha sharciga ah ee urur loo shaqeeye;
      iii. In uu adeegsado xuquuq kasta oo la siiyey, ama ka qayb qaadashada
      iv. dacwo kuxusan xeerkan;
      v. In uu ku guuldarreysto ama diido wax loo shaqeeyuhu aanu sharci u laheynin uu sameeyo.
3. Waa sharci darro in wax la siiyo ama loo ballan qaado dan gaar ah si looga faa'iideysto (Sandareerto)loo-shaqeeye,iyada oo looga beddelanayo in uu ka tanaasulo xuquuq uu leeyahay ama in aanu ka qaybqaadan dacwooyinka xeerkan loogu oggolaaday
4. Faqradda (3) ee qodobkan kama hor istaagayso dhinacyada in ay ka doodaan oo ay heshiis ka gaaraan sidii loo xallin lahaa dooddaas.

## Qododka 148aad

## Xuquuqda guud iyo waajibaadka ururrada shaqaalaha, ururrada loo-shaqeeyeyaasha iyo xiriirrada guud

1. Ururka shaqaalaha iyo ururrada loo-shaqeeyuhu waxa ay leeyihiin xuquuqda soo socda:
   b) in la galo heshiis shakhsi ama mid wadareed, iyadoo loo raacayo xaaladaha shaqada, si ay u bariyeelaan, una xoojiyaan xuquuqaha ku jira heshiiska iyo in ay qaadaan ficil kasta oo sharci ah oo ka dhasha heshiisyadaas siwaafaqsan xeerkan;
   t) in lagu wargeliyo hay'adaha awoodda u leh dhammaan ficillada keeni kara nacaybka danaha guud ee mihnadaha shaqaalaha uu matalo;
   j) in la helo xuquuqda lahaanshaha hantida guurtada iyo ma guurtada ah si loogu isticmaalo oo kaliya ujeeddooyinka loo aasaasay ururrada shaqaalaha ama loo-shaqeeyeyaasha;
   x) in la qaado tallaabo kasta oo sharci ah oo lagu gaarayo himilooyinka iyo ujeeddooyinka loo aasaasay.

2. Ururrada shaqaalaha, iyo ururrada loo shaqeeyeyaasha iyo xiriirrada guud waxa ay leeyihiin waajibaadyada soo socda:
   b) in lagu wargeliyo diiwaanhayaha Shaqaalaha iyo Ururrada loo shaqeeyayaasha muddo toban 10 (toban) maalmood gudahood ah dhammaan isbeddelada xubinnimada guddiga maamulka iyo wixii wax-ka-beddel ah ee dastuurkooda ama xeer-hoosaadkooda oo leh nuqullo rasmi ah oo caddaynaya dukumeentiga khuseeya;
   t) in lagu wargeliyo Diiwaanhayaha la soo sheegay sanad kasta tirada xubnaha cusub ee ku soo biiray iyo kuwa ka baxay;
   j) in la fuliyo waajibaad kasta ee uu soo rogay xeerkan, xeer-nidaamiyeyaasha xeerkan ama qaanuun kale, kuwaas oo waajibaadkoodu aanu faragelineyn maamulka gudaha iyo hawlaha ururrada shaqaalaha, ururrada loo-shaqeeyeyaasha iyo xiriirka guud.

## Qodobka 149aad
## Madax-bannaani

1. Urur kasta oo shaqaale, loo-shaqeeyeyaasha iyo xiriirrada guud waxa ay xaq ugu leeyihiin xeerkan gudihiisa sida soo socota:
   b) in uu sameysto dastuur iyo xeerar,
   t) in uu wakiiladiisa si xorriyad buuxda ku doorto;
   j) inay nidaamiyaan maamulkooda iyo hawlahooda iyada oo la raacayo mabaadi'ida guud ee xeerkan;
   x) dejinta barnaamijyadooda;
   kh) ka qayb qaadashada sameynta xiriirka guud ee ururrada shaqaalaha ama xiriirka guud ururrada loo-shaqeeyeyaasha;
   d) in uu ku biiro xiriirka guud eeururrada shaqaalaha ama xiriirka guudururrada loo-shaqeeyaasha sida uu qabo dastuurkooda, iyo in ay ka qaybqaataan hawlaha sharciga ah;
   r) ku biirista, iyo ka qeyb-galka arrimaha urur shaqaale heer gobaleed iyo heer caalamiba, urur loo-shaqeeyeyaal kasta oo caalami ah, ururrada shaqaalaha adduunka sida ugu habboon, iyo in gacan laga geysto ama laga helo kaalmo dhaqaale oo ka timaadda ama la siiyo ururradan.

2. Heshiis kasta oo shaqo lagusiinayo si wadar ah, haddii uu dhammaado ka hor ama ka dib dhaqan-galka xeerkan, kaas oo ka hor imaanaya ama xaddidaya qodob ka mid ah qaybtan, waa mid aan sharci aheyn, ilaa iyo inta qodobada heshiiskaas ay si muuqata u oggolaado mooyee.

## Qodobka 150aad
## Khilaafaadka ka dhalan kara cutubka

1. Haddii uu jiro muran ku saabsan fasiraadda ama ku dhaqmidda qodob kasta oo ku xusan cutubkan, dhinac kasta dooddooda oo qoraal ah waxa uu ula laaban karaan:
   b) guddiga Sare Xallinta Khilaafaadka heer Federaal si uu u magacaabo dhex-dhexaadiye sida ku xusan xeerkan;
   t) haddii muranka aan lagu xallin dhex-dhexadinta, waxaa loo gudbin doonaa maxkamadda awoodda u leh.

2. Dacwo kasta oo ku xusan xeerkan:
    b) dhinacii ku andacooda in lagu xad-gudbay xaq ama ilaalin uu xeerkani siiyay, waxaa waajib ku ah in uu caddeeyo dhabnimada eeddiisa;
    t) dhinacii lagu eedeeyey in uu ku lug leeyahay xad-gudubkaas, waxaa waajib ku ah inuu caddeeyo in habdhaqan koodu aanu ku xadgudbin wax kasta oo ka mid ah cutubkan.

**Qodobka 151[aad]**

**Xayiraadda ururrada, mas'uuliyadda dembiyada ciqaabta Iyo kuwa madaniga ah**

1. Abuurid ururro shaqaale oo Ujeeddooyinkoodu yihiin in lagu xayiro ururro kale oo kaliya waa sharci darro, waana in la joojiyo xubin ka noqoshadooda, waxaa ka dhalan kara dacwad ciqaabeed.
2. Heshiis kasta oo lagu galay magaca ururr waa in la joojiyaa, lana baabi'yaa.

**Qodobka 152[aad]**

**Nuxurka dastuurka iyo qawaaniinta**

1. Dastuurka ama xeerarka urur kasta oo ka mid ah ururrada shaqaalaha iyo loo- shaqeeyeyaasha waa inay ku jiraan qodobbo ku saabsan arrimaha soo socda:
    b) magaca iyo cinwaanka;
    t) goobta xafiiskooda;
    j) wadarta tirada xubnaha;
    x) waxyaabaha loo aasaasay, ujeeddooyinka ay ku habboon tahay in loo isticmaali karo dakhligooda ama hantidooda;
    kh) habka loo sameeyo wax looga beddelo,dib u eegis, burinta dastuurka iyo qawaaniinta;
    d) magacaabista, doorashada, ka saarista xubinnimada hawl-wadeenada iyo saraakiisha sar sare;
    r) nidaamka keydinta iyo heynta xisaabaadka ee khasnajiga;
    s) nidaamka maalgelinta raasamaalka iyo hantidhawrka sanadlaha ah ama xiliyeysan;

sh) nidaamka baarista buugaagta iyo magacyada xubnaha taas oo uu sameynayo qof kasta oo daneynaya dakhligooda ama hantidooda;
dh) nidaamka qabashada go'aannada dooroshooyinka mas'uuliyiinta iyo saraakiisha sar sare, wax ka beddelka dastuurka, bannaanbaxyada, baabi'iniyo arrimaha kale ee saameynta ku leh guud ahaan xubnaha ururrada shaqaalaha;
c) xuquuqda xubin kasta ay u leedahay in ay fursad u hesho in ay codeyso;
g) nidaamka qaddarka diiwaan-gelinta iyo khidmadda laga rabo in ay bixiyaan xubnaha;
f) nidaamkakala diridda ururka.

### Qododbka 153aad
### Soo-gudbinta Nuqullada Xeerarka Asaaska Ururrada

Laba nuqul oo ah Xeerarka Asaaska ururka shaqaalaha ama ururka loo shaqeeyeyaasha iyo wax-ka-beddel kasta, waa in loo soo gudbiyaa diiwaanhayaha ururrada shaqaalaha iyo ururrada loo-shaqeeyeyaasha wakhtiga dhisidda ama wax-ka-beddelka ururka, hadba xaaladda sida ay tahay.

## CUTUBKA LIX IYO LABAATANAAD
## SAMEYNTA IYO DIIWAAN GELINTA URURRADA SHAQAALAHA URURRADA LOO-SHAQEEYAYAASHA

### Qododbka 154aad
### Ururrada iyo ujeeddooyinka

Urur shaqaale ama urur loo-shaqeeye waa in hadafkooda koowaad uu ahaadaa ilaalinta, dabagalka, dhowrista danaha shaqaalaha, loo-shaqeeyaha iyo hormarinta wax soo saarka dalka, haddii ay tahay ururka shaqaalaha ama loo-shaqayeeyeyaasha.

## Qodobka 155aad
## Hawlaha Ururrada Shaqaalaha

1. Hawlaha ururrada shaqaalaha waxaa ka mid ah:
   b) wakiilnimada iyo ilaalinta danaha shaqaalaha, danahaas oo la xiriira xaaladdooda shaqo iyo xiriirka ay la leeyihiin maamulka;
   t) fududeynta kaqaybgelinta shaqaalaha qorsheynta iyo maareynta hay'adda ay ka shaqeeyaan;
   j) in la hubiyo in maamulku si adag u ilaaliyo Xeer-nidaamiyeyaasha ku saleysan shaqada, daryeelka bulshada, bixinta ujuurada, hagaajinta nadaafadda iyo ka badqabka shilalka;
   x) la socodsiinta mas'uuliyiinta dawladda ee awoodda u leh sida loogu takrifalo looguna danaysto shaqaalaha.

## Qodobka 156aad
## Asaasid Urur

1. Qof kasta oo ku hawlan shaqo, isaga iyo dad kaleba, waxay abuuri karaan urur shaqaale, waxayna xor u yihiin in ay ku biiraan urur shaqaale oo ka shaqeeya mihnaddiisa.
2. Loo-shaqeeye kasta wuxuu ka qeyb qaadan karaa abuurista urur loo-shaqeeye ama ku biiri
3. Iyada oo la tixraacayo qodobbada xeerkan, xubin kasta waxay waqti kasta ka bixi kartaa urur shaqaale, si kasta oo ay u jiraan shuruudo lid ku ah.
4. Iyadoo la tixraacayo qodobbada xeerkan, loo-shaqeeye kasta wuxuu waqti kasta ka bixi karaa urur loo-shaqeeye, si kasta oo ay u jiraan shuruudo lid ku ah.
5. Si xor ah ayey isugu biiri karaan Ururrada shaqaaluhu si ay u sameystaan xiriir guud oo danahooda caadiga ah ilaaliya.
6. Si xor ah ayey isugu biiri karaan ururrada loo-shaqeeyeyaashu si ay u sameystaan xiriir guud oo danahooda caadiga ah ilaaliya
7. Farac kasta oo ay leeyihiin ururro shaqaale ama ururro loo-shaqeeye waxay ka bixi karaan ururradooda,iyada oo aan wax shuruud ah lagu

xirin, waxayna ku xiran tahay oo keliya dastuurka xiriirka guud waxa uu qabo.

8. Ururrada shaqaalaha iyo ururrada loo-shaqeeyaha, waxay dhammaan qodobbada xeerkan iyo xeer-nidaamiyeyaashooda ugu adeegsanayaan xiriirradooda guud sida ugu habboon.

**Qodobka 157aad**

**Arjiga diiwaan-gelinta urur shaqaale ama urur loo-shaqeeye**

Urur shaqaale, Urur loo-shaqeeye ama xiriir guud waa inay diiwaanhayaha ka codsadaan diiwaan-gelintooda.

**Qodobka 158aad**

**Shuruudaha Diiwaan-gelinta Urur Shaqaale**

1. Urur shaqaale ayaa dalban kara diiwaan-gelin haddii:
   b) uu dalbado diiwaan-gelin si waafaqsan xeerkan;
   t) uu ku dhaqmay dastuur waafaqsan shuruudaha xeerkan;
   j) uu xafiis, iyo cinwaan ku leeyahay JFS;
   x) uu leeyahay cinwaan boosto (P.O. Box);
   kh) magaciisu aanu la mid ahayn mid ka mid ah urur shaqaale ee hadda jira, kaas oo keeni kara marin habaabin iyo jahwareer;
   d) Shirka lagu gaaray go'aanka diiwaan-gelinta ay ka soo qeybgaleen ugu yaraan afartan (40) xubnood;
   r) uu ka madax bannaan yahay si toos ah ama si dadbanba gacan loo-shaqeeye ama urur loo-shaqeeyeyaal;
   s) ujeeddada kaliya ee urur shaqaale ay tahay fulinta hawlaha iyo danaha ururka shaqaalaha.

**Qodobka159aad**

**Shuruudaha Diiwaan-gelinta Urur Loo-shaqeeye**

1. Urur loo-shaqeeye ayaa codsan kara diiwaan-gelin haddii:
   b) uu dalbaday diiwaan-gelin si waafaqsan xeerkan;

t) uu ku dhaqmay dastuur waafaqsan shuruudaha xeerkan;
j) uu xafiis, iyo cinwaan ku leeyahay JFS;
x) uu leeyahay cinwaan boosto (P.O. Box);
kh) magaciisu aanu la mid ahayn mid ka mid ah urur loo-shaqeeye ee hadda jira, kaas oo keeni kara marin habaabin iyo jahwareer;
d) Shirka lagu gaaray go'aanka diiwaan-gelinta ay ka soo qeybgaleen ugu yaraan toban (10) loo-shaqeeye ;
r) uu ka madax bannaan yahay si toos ah ama si dadbanba gacan urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ee urur loo-shaqeeye
s) ujeeddada kaliya ee urur loo-shaqeeye ay tahay fulinta hawlaha iyo danaha ururka loo- shaqeeyaha.

## Qodobka 160aad

## Shuruudaha diiwaan-gelinta xiriirrada guud ee ururro shaqaale

1. Shuruudaha diiwaan-gelinta xiriirradaguudee ururro shaqaale waa in:
b) uu dalbado diiwaan-gelin si waafaqsan xeerkan;
t) uu ku dhaqmay dastuur waafaqsan shuruudaha xeerkan;
j) uu xafiis, iyo cinwaan ku leeyahay JFS;
x) uu leeyahay cinwaan boosto (P.O. Box);
kh) dastuurkoodu uu caddaynayaa in xubnahoodu ay ka diiwaan gashan yihiin urur shaqaale oo kaliya;
d) lagu aasaasay shir ay ka soo qeyb-galeen wakiillada ugu yaraan saddex (3) urur shaqaale oo diiwaan-gashan oo ay la socdaan guddiyadooda fulinta ee idman;
r) magaciisu aanu la mid aheyn mid ka mid ah urur shaqaale ama xiriir guud ee hadda jira, kaas oo keeni kara marin habaabin iyo jahwareer.
s) uu ka madax bannaan yahay si toos ah ama si dadbanba gacan urur loo shaqeeye ama xiriir guud ee loo-shaqeeyeyaal;

## Qodobka 161aad
## Shuruudaha diiwaan-gelinta xiriirrada guud ee ururrada loo-shaqeeyeyaasha

1. Shuruudaha diiwaan-gelinta xiriirrada guud ee ururrada loo-shaqeeyeyaasha waa in:
   b) uu dalbado diiwaan-gelin si waafaqsan xeerkan;
   t) uu ku dhaqmay dastuur waafaqsan shuruudaha xeerkan;
   j) uu xafiis, iyo cinwaan ku leeyahay JFS;
   x) uu leeyahay cinwaan boosto (P.O. Box)
   kh) uu xiriirka guud caddeeyoin ay xubnahoodu ka diiwaangashan yihiin ururrada loo-shaqeeyeyaasha oo kaliya;
   d) lagu aasaasay shir ay ka soo qeyb-galeen wakiillada ugu yaraan saddex (3) urur loo-shaqeeye oo diiwaan-gashan oo ay la socdaan guddiyadooda fulinta ee idman;
   r) magaciisu aanu la mid ahayn mid ka mid ah urur loo-shaqeeye ama xiriir guudee hadda jira, kaas oo keeni kara marin habaabin iyo jahwareer;
   s) uu ka madax bannaan yahay si toos ah ama si dadbanba gacan urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ee urur loo-shaqeeye;

## Qodobka 162aad
## Arjiga diiwaan-gelinta

1. Codsi ku saabsan diiwaan-gelinta urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud waa in La'adeegsadaa foomka diiwaan-gelinta ee xafiiska diiwaan-hayaha oo ay ku lifaaqan yihiin:
   b) lacagta loo qoondeeyay diiwaan-gelinta;
   t) nuqul rasmi ah oo caddeynaya dastuurka ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyaha ama xiriirka guud; iyo
   j) nuqul rasmi ah oo cadddeynaya diiwaanka xaadiriska iyo kulan-qorka (meeting minutes) kulamada, lagu aasaasay ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyeyaasha ama xiriirka guud.

x) Arjiga diiwaan-gelinta urur shaqaale waa in ay saxiixaan shan (5) xubnood oo ka tirsan ururka shaqaalaha.

Kh) Codsiga diiwaan-gelinta urur loo-shaqeeye waa in ay saxiixaan saddex

2. xubnood oo ka mid ah ururka loo-shaqeeyeyaasha.
3. codsiga diiwaan-gelinta xiriirka guud waa in ay saxiixaan saddex (3) xubnood oo ka tirsan xiriirka guud.
4. Diiwaan-geliyuhu wuxuu:
   - b) u baahan karaa macluumaad dheeraad ah iyada oo ujeeddadu tahay qiimeynta arjiga diiwaan-gelinta;
   - t) codsadaha diiwaan-gelinta siin karaa fursad uu ku saxo codsiga muddada uu u cayimay diiwaan-geliyuhu.
5. Haddii magaca la soo bandhigay ee urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ay isku mid yihiin ama ay isku dhow yihiin mid ka mid ah urur hadda jira, kaas oo keeni kara marin habaabin iyo jahwareer, diiwaan-hayuhu waa inuu:
   - b) ka dalbadaa codsadaha diiwaan-gelinta in uu beddelo magaca ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyaha ama xiriirka guud ee uu soo codsaday;
   - t) aanu diiwaan-gelin ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyaha ama xiriirka guud ilaa uu isbeddel ku habboon sameeyo.

## Qodobka 163aad

## Diiwaan-gelinta ururrada shaqaalaha, ururrada loo-shaqeeyeyaasha ama xiriirka guud

1. Haddii diiwaan-geliyuhu uu ku qanco, in urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ee codsaday diiwaan-gelinta uu waafaqo shuruudaha xeerkan, diiwaanhayuhu waa inuu diiwaan-geliyaa ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyaha ama xiriirka guud, uuna:
   - b) soo saaraa shahaadada diiwaan-gelinta rasmiga ah (foomka cayiman);
   - t) geliyaa magaca iyo macluumaadka ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyaha ama xiriirka guud diiwaanka ku habboon.

2. Shahaadada diiwaan-gelinta ee lagu soo saaray faqrada (1) ee qodobkan waa caddeyn rasmi ah in ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyaha ama xiriirka guud si sax ah loo diiwaan-geliyey sida ku cad xeerkan, ilaa laga xaqiijiyo in shahaadada lagala noqday ama laga hakiyey.

## Qodobka 164aad
## Diidista diiwaan-gelinta

1. Haddii diiwaan-geliye aanu ku qancin in urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud in uusan buuxin shuruudaha diiwaan-gelinta, uuna diido codsiga diiwaan-gelinta, diiwaan-geliyuhu waa inuu qaab rasmi ah (foomka cayiman) ugu wargeliyaa sababaha diidmada.
2. Diiwaan-geliyuhu waa inuu siiyaa ururrada shaqaalaha, ururrada loo-shaqeeyeyaasha ama xiriirka guud fursad ay kaga jawaabaan sababahaas, afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood.
3. Haddii ay dhacdo in diiwaan-geliyuhu aanu ka noqon go'aanka ah in aanu diiwaan-gelin, urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud, waxaa cabasho loo qaadan karaa wasaaradda. Cabashada waa in lagu soo-gudbiyaa muddo labaatan iyo siddeed (28) maalmo shaqo gudahood ah oo ka bilaabata maalinta go'aanka diidmada la gaaray.
4. Wasaaraddu waa in ay go'aamisaa cabashada kuna wargelisaa go'aanka ururrada shaqaalaha, ururrada loo-shaqeeyeyaasha ama xiriirka guud iyo sababaha uu go’aankaas ay u qaadatay mudddo 28 maalmo shaqo gudahood ah oo laga billaabo marka ay hesho cabashada.
5. Ururrada shaqaalaha, ururrada loo-shaqeeyeyaasha ama xiriirka guud ee aan ku qanacsaneyn go'aanka wasaaradda waxa ay cabasho u qaadan karaan maxkamadda awoodda u leh.

## Qodobka165aad
## Waxyaabaha Sharci ahaan ka Dhalan Kara Diiwaan-gelinta

3. Urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud waxaa loo diiwaan-geliyaa sida hay’ad sharci ah oo leh:

b) jiritaan waara iyo astaan guud ee lagu garto;

t) awoodda, iyadoo magaceeda adeegsaneysa, in ay:

i. dacwooto ama la dacweeyo;
ii. Gasho heshiisyo;
iii. Yeelato, iibsato, la soo wareegto ama iska wareejiso hanti guurto ama maguurto ah;
iv. Sameyso dhammaan waxyaabaha kale ee muhiimka u ah danaha jiritaanka hay'adda.

4. Laguma soo oogi karo dacwad magdhow urur shaqaale, urur loo-shaqeeyexiriir guud, saraakiishooda sare ama xubnahooda in ay qabsadeen ama ay ka baaqsadeen hormarinta hawlahoodii gaarka u ahaa ee sharcigooda u oggol yahay.
5. Iyadoo la tixgelinayo qodobbada xeerkan, ururka, maamulka, baabi'inta iyo kala diridda urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud, waxaa marka koowaad xukuma dastuurkooda, marka labaadna xeerarka guud ee ay leeyihiin ururrada sharciyeysan ee xafiisyadoodu ku yaallaan dalka.

## Qodoka166[aad]
## Waxyaabaha ka dhalan Kara is-diiwaan-gelin la'aanta

1. Qofna ma sii wadi karo wax ficil ah oo ku saabsan abuurista urur shaqaale ama urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ilaa:
   b) Laga diiwaan-geliyo sida ku xusanxeerkan;ama
   t) Inta laga tixgelinayoarjigiisadiiwaan-gelinta.
2. Marka laga soo tago qodobka ku xusan faqradda 1[aad], urur shaqaale, urur loo- shaqeeye ama xiriir guud waxa ay qaban karaan hawlaha looga baahan yahay xaqiijinta fulinta shuruudaha diiwaan-gelinta.
3. Qodobbada qaybtan ma khuseeyaan hawl kasta oo la fuliyey iyada oo ay ujeeddadu tahay:
   b) difaacidda dacwadaha ka dhan ah urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud;
   t) kala dirista urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud iyo xaraashidda hantidooda si waafaqsan qawaaniintooda.

6. Marka laga soo tago sida ku qeexan xeerkan, qofna looma oggola inuu u sheegto ama u dhaqmo sidii sarkaal ama mas'uul ka tirsan urur shaqaale, urur loo-shaqeeyee ama xiriir guud oo aan diiwaan-gashaneyn ama diiwaan-gelintiisa la baabi'iyey.

### Qodobka 167aad
### Xafiis Diiwaan-gashan

1. Urur kasta oo shaqaale, loo-shaqeeye ama xiriir guud waa in:
   b) uu leeyahay xafiis rasmi ah, cinwaan guud iyo cinwaan boosto oo dhammaan xiriirrada iyo ogeysiisyada loogu soo hagaajin karo;
   t) ay u soo sheegaan diiwaan-geliyaha wixii isbeddel ah ee lagu sameeyo xafiiskooda rasmiga ah cinwaan guud iyo cinwaan boosto, si diiwaan-geliyuhu ugu geliyo macluumaadkooda diiwaanka ku habboon.
2. Waa sharci darro in urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud in:
   b) ay Shaqeeyaaniyaga oo aan laheyn xafiis rasmi ah oo diiwaangashan;
   t) ay ku guuldareystaan in ay soo ogeysiinwaayayaan xafiiskooda iyo cinwaankooda ama isbeddel kasta ee xafiiska ama cinwaanka lagusameeyey sida ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan.

### Qodobka 168aad
### Laamaha

1. Urur shaqaale, loo-shaqeeye ama xiriir guud waa inay ka codsadaan Diiwaanhayaha foomka cayiman si uu ugu diiwaan-geliyo laamahooda.
2. Shuruudaha arjiga diiwaan-gelinta laanta ee uu sameeyo diiwaanhayuhu, waxaa laga rabaa sharuudo la mid ah midda diiwaan-gelinta xarunta dhexe ee ururka, haddii aanay jirin shuruudo kale.

## Qodobka 169aad
## Midoobid

1- Urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ee diiwaangashan, waa ay la midoobi karaan mid ama dhawr urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud, hadba xaaladdu sida ay tahay.
2- Waxaa midoobi kara ururro shaqaale, ururro loo-shaqeeye ama xiriirro guud iyada oo aan la baabi'in jirtaankooda, sidoo kalena aan la kala qaybin miisaaniyadda ururrada midoobaya.
3- Sida qeybtan ku xusan,midoobidda ururro shaqaale, ururro loo-shaqeeye ama xiriirr guud waxay dhici kartaa oo keliya haddii:
    - b) mid kasta oo ka mid ah ururrada midoobaya uu sameeyey cod bixin qarsoodi ahoo waafaqsan shuruudaha u cayiman;
    - t) ugu yaraan boqolkiiba konton (50%) xubnaha mid kasta oo ka mid ah ururada midoobaya ee xaqa u leh in ay codeeyaan, waa in ay codeeyeen;
    - j) Si midowgu ansax u noqodo, tirada xubnaha u codeeynaya midowga la soo-jeediyey waa in ay ka badataa ugu yaraan (2/3) tirada xubnaha guud ee codeeyey.
4- Ogeysiiska soo-jeedinta midowga ururro shaqaale, ururro loo-shaqeeye ama xiriirro guud waa in loo adeegsadaa foomka cayiman, waana in ay saxiixaan wakiilka idman ee qeyb kasta oo ka mid ah ururrada midoobaya.
5- Marka ururrada midoobay isku diiwaan-geliyo sida ku cad xeerkan, Diiwaan-geliyuhu waa in uu:
    - b) ku soo saaro shahaadada mideynta foomka cayiman ee horay loo dejiyey;
    - t) ka saaraa ururrada midoobay diiwaannadii hore.
6- Diiwaan-geliyuhu ma diiwaan-gelin karo ururro midoobay, haddii magacooda la mid yahay, ama uu u eg yahay mid ka mid ah midowyada ururro ama xiriirro guud eejira, taas oo laga yaabo in ay keento marin habaabin ama jahwareer.
7- marka uu diiwaanhayuhu diiwaan-geliyo ururro midoobay:
    - b) dhammaan hantida, xuquuqda, waajibaadka iyo mas'uuliyadaha ururrada midoobay waxa ay ku wareegaysaa Ururka lagu midoobay;

t) ururka lagu middoobay waxa uu la wareegayaa ururradii midoobay iyada oo loo eegayo:

i. xuquuq kasta oo lagu midoobay;

ii. dhaqaale kasta oo lagu aasaasay qaanuunkooda ama sharuuc kasta oo kale;

iii. dacwad kasta, amar maxkamadeed, abaalmarin dhexdhexaadiye, heshiis-wadareed ama heshiis kale ah waa in aanay ka hor istaagindhinacyada in ay dib-uga- gorgortamaan heshiisyadii horeyu jirey;

iv. wax kasta oo xubin ka mid ah ururrada midoobay ay ku oggolaatayqoraal oo ay horey u bixin jirtay ama la joogo xilligii ay bixin jirtay,ha ahaato qaaraan ama tabaruclooga qaadi jiray si xilliyeysan.

## Qodobka 170aad

## Wargelinta Wax-ka-beddelka Magaca ama Dastuurka

1. Urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ayaa waxa uu go'aansan karaa:
   b) in uu wax ka beddelo dastuurkiisa; iyo
   t) in uu wax ka beddelo magaciisa.
2. Urur shaqaale, urur loo- shaqeeye ama xiriir guudoo diiwangashan ayaa waxa ayka codsan karaan diiwaan-hayaha in uu u ansixiyo wax ka beddelka magacaama dib u eegista dastuurka iyo qawaaniinta ururka iyada oo loo soo gudbinayo diiwaan-hayaha:
   b) lagu soo ogeysiiyo foomka cayiman oosi dhammaystiran loo soo buuxiyey, uuna soo saxiixay Xoghayuhu;
   t) nuqul ka mid ah go'aanka wax ka beddelka oo faahfaahsan;
   j) shahaaddo uu saxiixay xoghayaha oo sheegaysa in go'aanka loo ansixiyey si waafaqsan dastuurka iyo qawaaniinta.
3. Ogeysiiska wax ka beddelka ku xusan faqrada 2aad ee qodobkan, waa in loo gudbiyaa Diiwaan-hayaha muddo afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood ah wixii go'aan ah ee lagu beddelay magaca ama dastuurka.

## Qodobka 170aad
## Wargelinta Wax-ka-beddelka Magaca ama Dastuurka

1. Urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ayaa waxa uu go'aansan karaa:
   b) Inuu wax ka beddelo Dastuurkiisa; iyo
   t) Inuu wax-ka-beddelo Magaciisa.
2. Urur shaqaale, urur loo- shaqeeye ama xiriir guudoo diiwan-gashan ayaa waxa ay ka codsan karaan Diiwaan-hayaha inuu u ansixiyo wax-ka-beddelka magaca ama dib-u-eegista dastuurka iyo qawaaniinta ururka iyadoo loo soo gudbinayo diiwaan-hayaha:
   b) Lagu soo ogeysiiyo foomka cayiman oo si dhammaystiran loo soo buuxiyey uuna soo saxiixay Xoghayuhu;
   t) Nuqul ka mid ah Go'aanka wax-ka-beddelka oo faahfaahsan; iyo
   j) Shahaado uu saxiixay xoghayaha oo sheegaysa in go'aanka loo ansixiyey si waafaqsan dastuurka iyo qawaaniinta.
3. Ogeysiiska wax-ka-beddelka ku xusan faqrada (2) ee qodobkan waa in loo gudbiyaa Diiwaan-hayaha muddo 14 (afar iyo toban) maalmood shaqo gudahood ah wixii go'aan ah ee lagu beddelay magaca ama dastuurka.
4. Marka la helo ogeysiiska wax-ka-beddelka magaca ama dastuurka, Diiwaan-hayuhu waa inuu ku soo wargeliyaa ugu yaraan 21 (labaatan iyo kow) maalmood shaqo gudahood wargeyska maalinlaha ah ee dalka ka soo baxa iyo faafinta rasmiga ah ee dawladda, iyadoo lagu muujinayo wixii diidmo ah oo ku saabsan wax-ka-beddelka ay xubnaha ururku ku sameeyeen magaca ama dastuurka ururka iyo marka diidmo noocaas ah ay timaaddo, Diiwaanhayuhu waa inuu baaraa cabashada iyo gunta waxyaabaha ay ku salaysan tahay wuxuuna:
   b) arrintan u gudbin karaa Maxkamadda awoodda u leh;
   t) diidi karaa inuu aqbalo wax-ka-beddelka la soo jeediyey; iyo
   j) sameeyn karaa amar kasta oo diiwaan-hayuhu u arko in ay ku habboon tahay duruufaha jira.
5. Diiwaan-geliyuhu wuxuu oggolaan karaa wax-ka-beddelka magaca ama dastuurka, haddii uu waafaqsan yahay nidaamka iyo shuruudaha diiwaan-gelinta ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyaha ama xiriirka guud.

6. Diiwaan-hayuhu waa inuu ku soo saaraa foomka cayiman shahaadada wax-ka-beddelka magaca ama dastuurka
7. Wax-ka-beddel kasta oo lagu sameeyo magaca ama dastuurka iyo qawaaniinta urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud oo diiwaangashan, waxa ay dhaqangeli kartaaoo kaliya marka diiwaanhayuh uuu oggolaado sida ku xusan qodobada qeybtan.
8. Wax-ka-beddelka magaca urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud:
   b) ma saameynayso xuquuqdiisa ama waajibaadkiisa; iyo
   t) cilladeyn karto dacwo kasta oo sharci ah oo laga keeno ama ka soo horjeedda. Dacwo kasta oo lagu soo oogayna intii uu jiray magacii hore waa la sii wadi karaa ama la billaabi karaa kaddib marka magaca cusub loo bixiyey.
9. Haddii Diiwaanhayuhu uu diido inuu oggolaado wax-ka-beddelka qodobada qeybtan, diiwaanhayuhu wuxuu soo saarayaa war qoraal ah oo ku saabsan go'aankaas iyo sababaha uu ku diiday.
10. Urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud kasta oo aan ku qanacsaneyn go'aanka diiwaan-hayaha, wuxuu adeegsan karaa si waafaqsan qodobka 165aad ee xeerkan.

## Qodobka 171aad
## Baabi'in ama Hakin Diiwaan-gelin

1. Diiwaanhayuhu waa inuu baabi'iyaa ama hakiyaa diiwaan-gelinta urur shaqaale, urur-loo-shaqeeye ama xiriir guud haddii:
   b) Ururka la kala diray; iyo
   t) diiwaan-hayuhu uu ku qanco inuu ururku jiritaankiisa dhammaaday.
2. Diiwaan-hayuhu waxa uu baabi'in karaa ama uu hakin karaa diiwaan-gelinta urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud haddii Diiwaan-hayuhu uu ku qanco in ururka:
   b)Lagu diiwaan-geliyey Musuq-maasuq, matalaad been-abuurah ama khalad;
   t) Ku shaqaynayo si aan waafaqsaneyn qodobada xeerkan;
   j) Loo isticmaalayo ujeeddo aan sharci aheyn;

x) Uu ku guuldarreystay inuu u qabto doorasho si waafaqsan shuruudaha xeerkan; iyo

kh) aanu madax-bannaaneyn.

3. Diiwaan-hayuhu waa in aanu baabi'in ama hakin diiwaanka urur shaqaale, urur-loo-shaqeeye ama xiriir guud sida ku xusan faqrada (2) ee qodobkan ilaa laga siiyo:

   b) ogeysiis ugu yaraan 2 (laba) bilood ah, iyadoo ujeeddadu tahay in la baabi'inayo ama la hakinayo diiwaankiisa iyadoo la isticmaalayo foomka cayiman;

   t) Tixgelin matalaadda ay ururradu sameysteen muddo 2 (laba) bilood gudahood ah.

4. Haddii Diiwaan-hayuhu uu baabi'iyo ama hakiyo diiwaan-gelinta urur shaqaale, urur-loo-shaqeeye ama xiriir guud, Diiwaanhayuhu waa inuu:

   b) ku wargeliyaa ururradago'aankaas isagoo adeegsanaya foomka cayiman;

   t) caddeyaa sababaha go'aankaas loo qaatay.

5. Urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud, waxa ay Maxkamadda awoodda u leh cabasho uga qaadan karaan go'aanka Diiwaan-hayaha.

6. Maxkamadda awoodda u leh ayaa go'aan kagaareysa, marka laga reebo cabashooyinka Dastuurka Soomaaliya ee la xiriira xad-gudubyada xuquuqda aasaasiga ah.

## Qodobka 172aad
## Kala-dirid

1. Iyadoo loo eegayo qodobada xeerkan ama sharci kale, diiwaan-hayuhu wuxuu ka codsan karaa Maxkamadda awoodda u leh in ay kala dirto urur kasta oo shaqaale, urur-loo-shaqeeye ama xiriir guud, kaas oo loo arko in hawlahoodu ay khatarku yihiin danaha xubnaha ururrada.
2. Urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud waxaa kala diri kara xubnahooda iyadoo la raacayo qodobbada dastuurkooda.
3. Marka urur shaqaale, urur-loo-shaqeeye ama xiriir guud xubnahoodu kala diraan iyagoo adeegsanaya foomka cayiman, ogeysiiska kala diristana waa in:

b) loo gudbiyaa Diiwaanhayaha muddo 14 ( afar iyo toban) maalmood shaqo gudahood ah laga billaabo taariikhda go'aanka kala dirista;

t) ay saxiixaan:

(i) wakiilka idman;

(ii) urur shaqaale oo ka mid ah 5 (Shan) xubnood ama 3 (saddex) xubnood oo ka mid ah urur-loo-shaqeeye ama saddex (3) xubnood oo xiriir guud ah.

4. Diiwaan-hayaha waxaa looga baahan yahay:

b) In uu qoraal ku soo saaro shahaadada kaladirista isagoo adeegsanaya foomka cayiman;

t) In uu diiwaan-geliyo kaladirista, haddii uu ku qanco in ay waafaqsan tahay dastuurka ururrada.

5. Kala dirid urur shaqaale, urur-shaqaaleeye ama xiriir guud wuxuu dhaqan gelayaa taariikhda kala dirista la diiwaan-geliyo.

### Qodobka 173aad
### Cabasho ka Qaadashada Go'aanka Diiwaan-hayaha

1. Qof kasta oo aan ku qanacsaneyn go'aanka Diiwaan-hayaha sida ku cad qodobka 172aad ee xeerkan, wuxuu cabasho u qaadan karaa Maxkamadda awoodda u leh muddo 30 (soddon) maalmood shaqo gudahood ah laga billaabo taariikhda go'aanka Maxkamadda.
2. Maxkamadda awoodda u leh ayaa go'aan ka gaareysa, marka laga reebo cabashooyinka Dastuurka Soomaaliya ee la xiriira xad-gudubyada xuquuqda aasaasiga ah.

## CUTUBKA TODDOBO IYO LABAATANAAD
## XUBINNIMADA IYO MAAREYNTA

### Qodobka 174aad
### Xubinnimada Urur Shaqaale

1. Iyadoo la raacayo qodobbada xeerkan:

b) qof kasta oo da'diisu tahay 18 (toban iyo sideed) sano ama ka weyn wuxuu ku biiri karaa urur shaqaale;

t) qof kasta oo da'diisu u dhaxeysa 15-17 (toban iyo shan) ilaa (toban iyo todoban) sano ayaa ku biiri kara urur shaqaale, balse looma magacaabi karo, loomana dooran karo xil fulineed ee ururrada;

## Qodobka 175[aad]
## Xubnaha Cod-bixinta ee Urur Shaqaale

Ma noqon karo xubin cod bixiye urur shaqaale ilaa ururkaasi uu ka yeesho cinwaan rasmi ah ama xafiis uu ku leeyahay JFS gudaheeda;

## Qodobka 176[aad]
## Saraakiil Sare

1. Saraakiisha sar sare ee urur shaqaale, urur-loo-shaqeeye ama xiriir guud ayaa la dooran karaa ama la magacaabi karaa,hase yeeshee, waa inay:
   b) deggan yihiin gudaha JFS;
   t) haystaan Warqad Dhalasho, kaarka aqoonsiga qaranka ama baasaboor;
   j) Hore u jirin xukun Maxkamadeed oo ka hor istaagaya qabasho xil xafiis dadweyne ama aanu hore looga hor istaagin xafiis dadweyne.
2. Qofna looma oggola inuu ka noqdo sarkaal sare in ka badan hal urur shaqaale ama urur-loo-shaqeeye ama xiriir guud.
3. Sarkaal xil sare ka haya urur shaqaale wuxuu sidoo kale xil sare ka qaban karaa xiriirka guud ee ururkiisa shaqaale ee uu ka mid yahay.
4. Sarkaal sare oo ka tirsan urur-loo-shaqeeye waxaa uu sidoo kale xil sare ka qaban karaa xiriirka guudee ururrada loo-shaqeeyeyaasha uu ka mid yahay.
5. Qofkii lagu helay fal-dembiyeedyo, khiyaano ama been-abuur, looma oggola inuu xil sare ka qabto urur shaqaale ama urur-loo-shaqeeye.
6. Waa sharci darro in loo-shaqeeye uu u wareejiyo shaqo kale ama uu ka saaro shaqada uu hayey, xubin kasta oo ka tirsan urur shaqaale kaasoo ah sarkaal sare, isaga oo aan marka hore oggolaansho ka helin ururka shaqaalaha ee ay khusayso.

## Qodobka 177aad
## Doorashada Saraakiisha Sare

1. Saraakiisha sare urur shaqaale, urur-loo-shaqeeye ama xiriir guud waxaa loo dooranayaa si waafaqsan dastuurkooda diiwaan-gashan.
2. Dastuurka urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud waa in:
   b) aanay ku jirin qodob si aan caddaalad aheyn u kala soocaya xubnaha xafiisyada hayo iyo musharrixiinta kale ee doorashooyinka u sharxan;
   t) Doorashooyinku noqdaan codbixin qarsoodi ah, oo ay ka qeyb qaataan dhammaan xubnaha ururka, ugu yaraan 5 (shantii) sano mar.
3. Sida qodobkan ku xusan, doorashada saraakiisha sare waa in diiwaanhayaha lagu wargeliyaa iyadoo la adeegsanayo foomka cayiman, muddo 14 (afar iyo toban) maalmood shaqo gudahood marka ay doorashadu dhacdo ama wax isbeddel ah ku yimaado.
4. Xubin aan loo dooran ama loo magacaabin si waafaqsan dastuurka u yaala urur shaqaale, urur-loo-shaqeeye ama xiriir guud,looma oggolo in ay u dhaqanto ama sheegato sarkaal sare ee urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ama laan urur.
5. Khilaafaadka ka dhasha doorashooyinka la qabtay, khilaafaadkaas oo ah mid toos ah ama mid dadban ee qeybtan, waxaa loo gudbin karaa Maxkamadda awoodda u leh.
6. Diiwaan-hayuhu waxa uu soo saari karaa tilmaamo ku socda urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud si loo xaqiijiyo in doorashooyinka loo qabtay si waafaqsan qeybtan dastuurkoodana waafaqsan.

## Qodobka 178aad
## Wargelinta Saraakiisha Sare

1. Urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud waa inay si cad u muujiyaan in:
   b) xafiiskooda diiwaangashan, iyaga oo soo sheegaya dhammaan magacyada iyo xilalkooda;
   t) xafiiska laan kasta sida lagu sheegay faqrada (1) (b) ee, waxaana intaa dheer magacyada iyo xilalka saraakiisha laanta.

### Qodobka 179aad
### Waajibaadka Saraakiisha Sare

Waajibaadka saraakiisha sare ee urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud waa inay matalaan oo ilaaliyaan danaha xubnahooda, iyagoo aan wax u dhimeyn xuquuqda xubnaha u leeyihiin in ay si toos ah ula xiriiraan sarkaalka idman ama Maxkamadda awoodda u leh.

## CUTUBKA SIDEED IYO LABAATAN
## LACAGAHA, HANTIDA, IYO XISAABAADKA IYO DHEEFAHA

### Qodobka 180aad
### Saraakiisha Sare oo ah Guddiga Sare ee Maamulka

1. Dastuurka urur Shaqaale, urur loo-Shaqeeye iyo xiriir guud waa inuu siiyaa:
   b) dhammaan saraakiisha sare ee ururka lagu aaminay ilaalinta, dhawridda iyo in ay si mas'uuliyad ku dheehan tahay u isticmaalaan una adeegsadaan ururka guud ahaan, waxaana loo arkaa inay u yihiin ilaaliyaasha hantida ururka;
   t) saraakiisha SarSare waxaa lagu dhaqayaa xeerka iyo xeer-nidaamiyaasha Guddiga Sare, iyadoo kalsoonida iyo aaminaadda lagu qabo la mid tahay tan Guddiga Sare haddii loo magacaabi lahaa maamulka hantida guurtada iyo ma-guurtada ee ururka.
2. Iyadoo loo eegayo qodobbada faqradda (1) iyo (3), Guddiga Sare waxa ay magacaabi karaan ama dooran karaan 3 (saddex) ka mid ah saraakiisha sare ee ururka iyagoo si gaar ah ugu xilsaaran hawl gaar ah.
3. Qof kasta oo aan lagu xukumin dembi ah khiyaano, been-abuur ama musuq-maasuq iyo wax is daba-marin, waxaa loo oggol yahay inuu ka mid noqdo Guddiga Sare.
4. Qof kasta oo loo magacaabay Guddiga Sare waa inuu u hoggaansamaa xilka iyo waajibaadka Guddiga Sare sida ku xusan shuruucda ama xeer-nidaamiyaasha Guddiga Sare u degsan.

5. Hantida urur shaqaale, urur-loo-shaqeeye ama xiriir guud ee diiwan-gashan, haddii ay tahay guurto ama maguurto, Guddiga Sare waxa lagu aaminay adeegsiga iyo uga faa'iideynta ururka iyo xubnahiisa.
6. Haddii isbeddel ku yimaado mid ka mid ah xafiis Guddiga Sare, ma saameynayso hantida urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ee diiwaan-gashan, muddada ku meel gaarka ah waxa ay mas'uuliyaddu ku wareegeysaa Guddiga Sare iyadoo aan hantidii ay sideedii tahay oo waxba laga wareejinin, cid kalena loo xilsaarin, ilaa qofkii xafiiska qabta ayey ammaanadu ugu wareegeyso.

## Qodobka 181aad
## Qaaraanka Xubnaha

1. Xubin ka mid ah urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ayaa laga yaabaa inay bixiyaan qaaraan ku waajibay, kaas oo noqon kara qaaraan, khidmad bille ah iyo wixii kale ee dastuurkoodu jideeyey.
2. Loo-shaqeeye lacag kama jari karo shaqaale u soo gudbiyey loo-shaqeeyahiisa ogeysiis qoraal ah oo uu ku caddeynayo in uu iska casilay xubinnimada ururka.
3. Ogeysiiska is casilaadda ah ee ku xusan faqrada (2) ee qodobkan, wuxuu hirgelayaa bisha ogeysiiska la keenay midda ku xigta.
4. Loo-shaqeeyuhu waa inuu u gudbiyaa nuqulka ogeysiiska is casilaadda ah ururka shaqaalaha.

## Qodobka 182aad
## Lacag ka Jarista Shaqaale la Ururreyn karo oo ku Jira Heshiis Wadareed

Ma jiro urur shaqaale oo loo oggol yahay in uu ku amro shaqaale aan xubin ka aheyn inuu bixiyo qaaraanka ururka shaqaalaha, ama uu ku wargeliyo loo-shaqeeye in shaqaale aan xubin ka aheyn ururka uu loo-shaqeeyuhu lacag ka jaro una soo gudbiyo ururka shaqaalaha iyadoo sababta dhabta ah ay tahay keliya in qofku yahay mid ka mid noqon kara ururka iyo in jagada shaqaaluhu ku shaqeeyo lagu dabaqayo nidaamka heshiis wadareedka dhexmaray ururka shaqaalaha iyo loo-shaqeeyaha.

## Qodobka183aad
## Qodobbo Guud ee Lacag Ka-Jarista

1. Lacag kasta oo laga jaro shaqaalaha si waafaqsan qodobbada qeybtan, waa in lagu shubaa xisaabta ururka shaqaalaha ee loo qoondeeyey muddo 10 (toban) maalmood shaqo gudahood ah ka dib maalintii la jaro.
2. Urur shaqaale wuu ka noqon karaa, joojin karaa ama wax-ka-beddali karaa heshiis ay isla gaareen loo-shaqeeye iyo urur shaqaale haddii uu ogaado ururku in:
   b) xogtii iyo macluumaadkii ku jiray heshiiska la galay lakhiyaanay ama Lacagtii loo isticmaalay ujeeddo aan wafaqsaneyn heshiiska;
   t) lacagta aan lagu shubin xisaabta loo qoondeeyey;
3. Lacag kasta oo laga jaro ujuurada xubin ka mid ah urur shaqaale oo ka mid ah xubnaha loo-shaqeeyaha si waafaqsan qodobkan, waa in xubintu ay ka soo baxdaa mas'uuliyadda ka saaran bixinta khidmadda ururka uu waajibyay.
4. Ma jiro loo-shaqeeye loo oggol yahay inuu lacag ka jaro ujuurada shaqaale iyadoo ay ujeeddadu tahay in lacag la siiyo urur kasta, haddii aanay waafqsaneyn qodobada xeerkan.
5. Ururka shaqaaluhu marka uu lacagta helo, waa in uu 14 (afar iyo toban) maalmood shaqo gudahood ku soo qoro warqad uu ku sheegayo in uu lacagtii helay.
6. Loo-shaqeeyuhu waa inuu u hoggaansamaa heshiiska ay isla gaareen urur shaqaale, isagoo bixinaya lacagta qaaraanka kuna shubaya xisaabta ama xisaabaha kale ee loo qoondeeyey.
7. Wasiirka oo la tashanayo wakiillada ururro shaqaale iyo ururro loo-shaqeeye waxa uu soo-saari karaa in shaqaalaha laga jari karo qaaraan loogu adeegayo gurmad iyo dan guud oo Qaran.
8. Urur loo-shaqeeye ama xiriir guud wuxuu dastuurka dhigi karaa in xubnahiisu ay bixiyaan lacagaha qaaraanka ama khidmad ah iyadoo shuruuddu tahay xubinimada ururka.

## Qodobka 184aad
## Isticmalka  Lacagaha

1. Iyadoo la raacayo shuruucda iyo qodobada xeerkan, ujeeddooyinkan soo socda oo keliya ayaa urur shaqaale, ururloo-shaqeeye ama xiriir guud u isticmaali karaan lacagahooda:
   b) bixinta mushaarka, gunnooyinka iyo kharashaadka guud ee ururka;
   t) bixinta kharashka maamulka ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyaha ama xiriirka guud oo ay ku jiraan baarista xisaabaadkooda;
   j) dacwad oogis ama difaaca wax kasta oo sharci ah oo urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ama xubin kasta oo ka tirsan ururradaas, marka la soo dacweeyo ama la difaacayo si loo xaqiijiyo ama loo ilaaliyo xuquuqdooda ama xuquuqda xubin kasta oo ka mid ah ururka, arrin kasta oo khuseysa shaqo-siin ama meel-marinta sharci kasta oo ku saabsan shaqada;
   x) sameynta doodo lagu difaacayo khilaafaadka ganacsiga isagoo matalaya ama ka wakiil ah xubin kasta oo ka mid ah ururka;
   kh) mag-dhowga xubnaha khasaaraha ka dhasha khilaafaadka ganacsiga;
   d) bixinta gunnooyinka xubnaha ama qofka ku tiirsan haddii ay ku timaaddo dhimasho, hawlgab, xanuun ama shil shaqo; iyo
   r) bixinta qaaraanka iyo khidmad xiriir guud kasta oo diiwaan-gashan, kaas oo lagu biiray.

## Qodobka 185aad
## Mamnuucidda Bixinta Ganaaxyada ama Lacagaha Ciqaabta

Lacagaha urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud, waa in aan loogu bixin si toos ah ama si dadban intaba, dhammaan ama qeyb ka mid ah ganaax ama ciqaab lagu soo rogo qof ay Maxkamad xukuntay, marka laga reebo ganaaxa ama ciqaabta lagu soo rogey ururka ama xiriir guud sida ku cad xeerkan ama Xeer-nidaamiyeyaashiisa.

## Qodbka 186aad

## Ku-takrifalka Lacagta iyo Hantida Kale

Diiwaan-hayaha, 3 (saddex) qof ama in ka badan waxay ka codsan karaan maxkamadda awoodda u leh in ay xannibto bixinta lacagaha urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud oo loo isticmaalo si sharci-darro ah ama kharashaad aan loo fasaxin.

## Qodbka 187aad

## Diyaarinta iyo Awoodda Xisaabaadka Faahfaahsan

1. Qeybtan, "Sarkaal" waxaa loola jeedaa mas'uul kasta oo u xilsaaran ururinta, bixinta, keydinta, ilaalinta miisaaniyadda, lacagaha iyo xisaabaadka urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud.
2. Sarkaal kasta waxaa looga baahan yahay inuu soo bandhigo xisaab celin sax ah oo ku saabsan dhammaan lacagaha uu ka qabtay ama uu ku bixiyey:
   b) Urur shaqaale, urur loo-shaqeeyeama xiriir guud iyo xubnahooda:
      i. marka uu iscasilayo ama ka tagayo xafiiska;
      ii. ugu yaraan 1 (hal) mar sannad kasta waqtigaas oo ay dhici karto in lagu caddeeyo sharciyada urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud;
      iii. waqti kasta oo ay ka dalbadaan xubnaha urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ama sharciga ururka ku qoran.
   t) diiwaan-hayaha, marka uu ka codsado Diiwaan-haye;
   j) isaga oo Caddeynaya:
      i. dhammaan lacagaha uu qabtay ama uu bixiyey Sarkaalku tan iyo markii uu xafiiska la wareegay ama haddii Sarkaalku uu horay u soo gudbiyey xisaab iyo taariikhda xisaabtii ugu dambeysay;
      ii. lacagta haraaga aheyd marka Sarkaalku uu la wareegay xisaabta;iyo
      iii. dhammaan xisaabaadka la gudbiyey, rahanta, amaahda ama hantida kale ee ururka ee loo xilsaaray Sarkaalka in uu hayo, ama ilaaliyo.
3. Xisaabta waa in ay baaraan dad aqoon fiican u leh xisaab-xirka ama dad uu ururku u magacaabay, nuqul ka mid ah xisaab-xirkana waa in loo gudbiyaa diiwaan-hayaha muddo 30 (sodon) maalmood shaqo gudahood ah.

4. Sarkaal kasta oo ka tirsan urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ama qof kasta oo:
   b) dayaca ama ku guuldarraysata inuu u hoggaansamo mid ka mid ah qodobada qeybtan;
   t) si ula kac ah u sameeya, amra, sababa, dalbo ama qalqaaliyo iib, in lagu daro qoraal been ah, la geliyo ama laga saaro xisaab-xirkii, wuxuu galay dembi si waafaqsan qeybtan.

**Qodbka 188aad**
**Baarista Xisaabaadka iyo Xusuus Reebka**

1. Xisaabaadka urur shaqaale, urur-loo-shaqeeye ama xiriir guud iyo liiska xubnahoodu waa inay u furan yihiin inuu baaro:
   b) sarkaal Sare ama xubin ka mid ah ururka waqtiga lagu qeexay dastuurkooda;
   t) diiwaan-hayaha ururka ama qof kasta oo qoraal diiwan-hayaha ugu idmaday inuu baaro waqti kasta oo munaasab ah.
2. Waa dembi qof kasta oo xanniba ama is-hortaaga diiwaan-hayaha, ama qofkasta oo uu u idmaday diiwaan-hayuhu baarista xisaabaadka ururka.
3. Diiwaan-hayuhu, waqti kasta, wuxuu u yeeri karaa sarkaal sare oo ka mid ah urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud in uu soo gudbiyo xisaabaad faahfaahsan ama lacagaha laan kasta xilliga uu dalbado iyo hadba macluumaadka diiwaan-hayuhu dalbado.
4. Waa dembi qofkii ku guuldarreysta inuu u hoggaansamo codsiga Diiwaan-hayaha sida ku xusan faqradda (3) ee qodobkan.

**Qodobka 189aad**
**Ku-takrifal Hanti**

1. Maxkamadda awoodda u leh waxay:
   b) ku amrikartaa qof kasta oo mas'uul ka ah ama u xilsaaran in uu maamulo hanti kasta oo uu leeyahay urur shaqaale, urur-loo-shaqeeye ama xiriir guud ee ku xadgudba qawaaniinta ama si sharci

darro ah u isticmaala ama lacag u xayiro si uu gaarsiiyo hantidaas ama siiyo lacagtaas Guddiga Sare; iyo

t) ka hakin kartaa shaqada sarkaal kasta oo ku xadgudba faqrada (1)(b).

2. Cabashada la xiriirta qeybtan,waxaa soo gudbin kara;
   b) diiwaan-hayaha;
   t) xubin ka mid ah urur shaqaale, ururka loo-shaqeeye ama xiriir guud.

## Qodobka 190aad
## Xisaab-xirka Sannadlaha ah

1. Wakiilka idman ee urur shaqaale, urur loo-shaqeeye, ama xiriir guud diiwaan-gashan waxaa laga rabaa in uu si sannadle ah ugu soo gudbiyo Diiwaan-hayaha waqtiga loo cayimay:
   b) warbixinta guud ee ku saabsan dhammaan lacagaha la qabtay iyo kharashaadka baxay inta lagu guda jiray sanadka dhammaanaya:
      i. dhammaan lacagaha la helay deeq ama tabarucaad;
      ii. wixii kaalmo caawinaad ah ee laga helay ilo kala duwan;iyo
      iii. liiska hantida iyo deymaha ee sannad-maaliyadeed.
   *t)* nuqul ka mid ah warbixinta hanti-dhawrka oo ay ku jiraan macluumaad gaar ah oo faahfaahsan loona diyaariyey hannaan cayiman;
   j) liiska tirada Hantida guud;
   x) nuqul ka mid ah qawaaniintooda la dhaqan-gelyey,kuwa wax laga bedelay iyo dhammaan qawaaniintooda cusub; iyo
   kh) Liiska dhammaan isbeddellada saraakiisha sarsare ee sanadkii hore.
2. Xubin kasta oo ka mid ah urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud waxa ay xaq u leeyihiin in marka ay codsadaan ay lacag la'aan ku helaan, nuqul ka mid ah warbixinta guud ee ku xusan faqrada 1 (kowaad) ee qodobkan.
3. Waa damiin wakiil idman oo ka mid ah urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud in uu:
   b) ku guul-darreysto inuu u hoggaansami waayo shuruudaha qeybtan;

t) si-ula-kac ah u sameeya, amra, sababa, dalbo ama qalqaaliyo iib, in lagu daro qoraal been ah, la geliyo ama laga saaro dukumintiyada, wuxuu gelay dembi si waafaqsan qeybtan.

## CUTUBKA SAGAAL IYO LABAATANAAD
## AQOONSASHADA URURRADA SHAQAALAHA

### Qodobka 191aad
### Aqoonsasho

1. Loo-shaqeeye, ay ku jiraan loo-shaqeeye dawladeed, waa in uu aqoonsadaa urur shaqaale iyada oo ay ujeeddadu tahay in uu galo heshiis wadareed haddii ururka shaqaalaha uu si sax ah u diiwaangashan yahay
2. Koox ka mid ah loo-shaqeeyeyaasha, ama ururro loo-shaqeeye, oo ay ka mid yihiin urur loo-shaqeeye dawladeed, waa inay aqoonsadaan urur shaqaale iyada oo ay ujeeddadu tahay in uu gali karo heshiis wadareed, haddii ururka shaqaaluhuinta badan uu matalo shaqaale la ururreyn karo oo u shaqeeya koox loo-shaqeeye ahama ururro loo-shaqeeye xubno ka ah.
3. Meesha aanu ka jirin urur shaqaale oo inta badan matalaya shaqaalaha, ururrada shaqaalaha ee matalaya xubnaha, waa in ugu yaraan loo suurto geliyaa wada xaajoodka, si wada jir ah ama si gooni ah, iyaga oo wakiil ka ah xubnahooda.
4. Loo-shaqeeye, koox loo-shaqeeye ah ama urur loo-shaqeeye sida ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan iyo ururro shaqaale eeku xusan faqradda 3aad ee qodobkan, waxaa looga baahan yahay inay soo gaaraan heshiis aqoonsi oo qoraal ah oo muujinaya shuruudaha loo-shaqeeye ama urur loo-shaqeeye ay ku aqoonsadeen urur shaqaale ama ururro shaqaale.
5. Haddii uu jiro khilaaf ku aaddan dhinaca xuquuqda ee urur-shaqaale lagu aqoonsanayo kuna saabsan heshiis-wadareed si waafaqsan qeybtan, baabi’inta heshiiska aqoonsiga, ururka Shaqaaluhu waxaa uu khilaafkaas u gudbin karaa maxkamadda awoodda u leh, iyadaoo ay mudnaan gaar ah siinaysa dacwaddaas in si deg deg ah loo galo.
6. Heshiiska aqoonsi waa in ay ku jirtaa xubnaha ururka shaqaalaha ee goobta shaqada ku sugan in ay soo doortaan wakiillada ururka shaqaalaha

iyaga oo raacaya dastuurka ururka shaqaalaha, marka laga reebo arrimo kale oo laga yaabo in ay ku jiraan.

7. Wakiilka urur shaqaale ee lagu soo doortay faqradda 6[aad] ee qodobkan wuxuu xaq u yeelanayaa:
   b) In uu ku matalo xubnaha arrimaha cabashadaiyo dhegeysiga anshax-marinta goobta shaqada;
   t) Qabashada wixii hawle kale ah ee lagu sheegay heshiiska aqoonsiga ama dastuurka urur shaqaale.
8. Marka laga reebo arrimo kale oo laga yaabo in ay ku jiraan, heshiiska aqoonsiga waa in uu dhigaa in loo-shaqeeye uu awood u siiyo saraakiisha ama wakiillada idman ee ururka shaqaale in uu geli karo goobaha ama dhismayaasha shaqada ee loo-shaqeeyaha si ay ula socdaan hawlaha sharciga ah ee ururka shaqaalaha oo ay ku jiraan:
   b) Qorista xubnaha urur shaqaale;
   t) Kulamada lala yeesho xubnaha urur shaqaale iyo loo-shaqeeye kale waqti ka baxsan saacadaha shaqada;
   j) Matalaadda xubnaha urur shaqaale si ay ula macaamilaan loo-shaqeeyaha; iyo
   x) Qabashada cod bixinta iyadoo la raacayo dastuurka ururka shaqaalaha.
9. Loo-shaqeeye waxa uu:
   b) soo rog ikaraa shuruudo maan-gal ah oo ku aaddan goobta iyo goorta xuquuq kasta lagu xusay qeybtan, si looga feejignaado carqaladaha aan munaasabka aheyn ee ku imaan kara hawlaha iyo badqabka goobta shaqada;
   t) ka dalban karaa saraakiisha ama wakiillada urur shaqaaleed soo codsanaya oggolaansho-siin gelid,lana yimaadaan caddeymo aqoonsi oo muujinaya xilalkooda.
10. Khilaaf kasta oo ka dhasha oggolaansho-siin gelid, ama shuruudaha lagu bixinayo oggolaanshaha, waxaa si degdeg ah loogu gudbin karaa Maxkamadda awoodda u leh.

## CUTUBKA SODONAAD
## HESHIIS-WADAREEDYO

### Qodobka 192aad
### Dhinacyada Heshiisku Khuseeyo

1. Ujeeddooyinka qeybtan, heshiis wadareed waa heshiis la xiriira shuruudaha iyo xaaladaha shaqada ee ay gaareen wakiillada 1 (hal) ama dhowr urur shaqaale oo dhinac ah, iyo wakiillada hal ama dhowr loo-shaqeeyeoo dhinaca kale ah.
2. Heshiis-wadareedka waa inuu ahaadaa mid qoraal ah oo ay saxiixaan:
   *b)* sarkaalka madaxa fulinta ee loo-shaqeeyaha, madaxa fulinta ama xoghayaha guud ee urur loo-shaqeeye kaas oo qayb ka ah heshiiska ama wakiil uu u xilsaaray qofkaas;
   *t)* xoghayaha guud ee urur kasta oo ka mid ah urur shaqaale oo qayb ka ah heshiiska ama wakiil uu u xilsaaray xoghayaha guud.

### Qodobka 193aad
### Habraaca Diyaarinta Heshiiska

1. Heshiis wadareed Shaqaale waa inuu ku salaysnaado mabaadii'da guud ee xeerarka shaqada, waa in si xor ah dhinacyadu uga wada xaajoodaan, heshiisyadaas oo u dhaxeeya loo-shaqeeye, koox loo-shaqeeye, ururro loo-shaqeeye oo dhinac ah iyo 1 (hal) iyo wixii ka badan ururo shaqaale oo dhinac kale ah.
2. Nuxurka heshiisku waa in uu tixgeliyaa siyaasadda qaran ee ku aaddan bulshada.
3. Heshiis wadareedka shaqaale waa in ay ahaadaan qaab qoraal ah, waa in loo gudbiyaa nuqul ka mid ah Diiwaan-hayaha, urur shaqaale, urur loo-Shaqeeye iyo Guddiga Sare Shaqada ee federaalka.
4. Marka laga wada-xaajoonayo heshiis wadareedka, loo-shaqeeye kasta waxaa looga baahan yahay in uu soo bandhigo dhammaan macluumaadka laga wada-xaajoonayo kaas oo u oggolaanaya urur shaqaale in uu si wax ku ool ugala xaajoodo loo-shaqeeye, isagoo matalaya shaqaalaha.

Macluumaadkaas waa in ay qarsoodi ahaadaan, loona shaacin cid aan shaqo ku laheyn wada-xaajoodkaas.

5. khilaaf kasta oo khuseeya shaacinta macluumaadka si waafaqsan qodobada qeybtan, waa in qoraal ahaan loogu gudbiyaa dhinacyada ay khuseyso sida; Guddiga Sare Federaalka ee Xallinta Khilaafaadka Shaqada, si ay u xalliyaan, haddii ay xallin waayaan, waxaa si deg deg ah loogu gudbinayaa maxkamadda awoodda u leh.

## Qodobka 194aad
## Dulucda Heshiis Wadareedka

1. Iyadoo la raacayo qodobbada xeerkan ama xeer-nidaamiyeyaashiisa, heshiis-wadareedku ay isku waafaqsan yihiin dhinacyadu waa in lagu qeexaa arrimaha soo socda:
   b) dhinacyada heshiiska galaya;
   t) qeybaha shaqaalaha ee ay khuseyso;
   j) muddada uu jirayo heshiiska;
   x) habraaca heshiisiinta ama dhexdhexaadinta haddii uu khilaaf yimaado; iyo
   kh) habraaca iyo shuruudaha lagu baabi'in karo, lagu cusbooneysiin karo ama dib lagu eegi karo.

## Qodobka 195aad
## Diiwaan-gelin Heshiis

1. Heshiis-wadareed kasta waa in loo gudbiyaa Wasaaradda muddo 14 (afar iyo toban) maalmo shaqo gudahood ah marka la soo gabagabeeyo.
2. loo-shaqeeye kasta ama urur loo-shaqeeye ee dhinac ka ah heshiiska waxaa Waa waajib ku ah in ay Wasaaraddu u gudbiyaan Heshiiska si loo diiwaan-geliyo.
3. Haddii loo-shaqeeye ama urur loo-shaqeeye ku guul darraysto inay u soo gudbiyaan heshiis wadareedkaWasaaradda sida ku xusan faqradda (1) iyo (2) ee qodobkan, ururka shaqaalaha ayaa soo gudbin kara.

4. Wasaaradda waxa ay dib u eegis ku sameyn kartaa heshiis wadareedyada si ay u xaqiijiso in ay waafaqsan yihiin qodobada xeerkan iyo sharci kale oo xiriir la leh.
5. Wasaaradda waa in ay ku diiwaan-gelisaa heshiiska muddo 14 (afar iyo toban) maalmo shaqo gudahood, marka ay xaqiijiso in heshiisku uu buuxiyey shuruudaha sharciga ah iyo habraacyada looga baahan yahay.
6. Marka ay Wasaaradddu go'aansato in heshiisku aanu buuxin shuruudaha, waa in ay ku wargelisaa muddo 14 (afar iyo toban) maalmo shaqo gudahood dhinacyada ay khuseyso ee looga baahan yahay in ay saxaan, kuwaas oo looga baahan yahay in ay ku soo jawaabaan muddo 14 (afar iyo toban) maalmo shaqo gudahood, markaa waa in Wasaaraddu sii waddaa shuruudaha lagu xusay faqradda 5aad ama faqraddan ee qodobkan hadba tii ku habboon.

## Qodobka 196aad
## Saameynta Sharciga ee Heshiis Wadareedka

1. Muddada Heshiis-wadareedku wuxuu dabrayaa:
   b) Dhinacyada heshiiska galay;
   t) Dhammaan xubnaha urur shaqaaleee u shaqeeya loo-shaqeeye, koox loo-shaqeeye ah ama xubnaha ka mid ah ururrada loo-shaqeeyayaasha ee heshiiska dhinac ka ah;
   j) loo-shaqeeyayaasha xubinta ka ah ama ka noqday urur loo-shaqeeye, kaas oo ilaa xad heshiiska qayb ka ah, ilaa iyo inta heshiisku la xiriiro shaqaalahooda.
2. Shuruudaha heshiis wadareedka waxaa loo arkaa in uu ku jiro heshiiska shaqosiinta ee shaqaale kasta oo uu daboolaya heshiis wadareedka.
3. Heshiis wadareed wuxuu noqonayaa
   *b*) mid la meel-marin karo oo la hirgeliyo marka ay diiwaan-geliso Wasaaradda;
   *t*) mid dhaqan-gal ah laga billaabo taariikhda ay isku afgarteen dhinacyadu.

## Qodobka 197aad
## Qodobbo Aad Ugu Roon Shaqaalaha

Heshiis-wadareed waxaa ku jiri kara qodobbo ay shaqaaluhu aad uga roon kuwa ku jira xeerkan iyo xeer-nidaamiyeyaashiisa ama sharci kale, laakiin waa in aaney khilaafin qodobbada waajibka ah ee xeerkan.

## Qodobka 198aad
## Ka Dhaafidda Khidmada Shaabadda iyo Diiwaan-gelinta

Heshiis-wadareedka waa laga dhaafayaa dhammaan khidmadda shaabadda, daabacaadda iyo khidmadda diiwaan-gelinta.

## Qodobka 199aad
## Xuduudaha iyo Muddada Ansaxnimada Heshiiska

1. Heshiis-wadareedka shaqaalaha:
    b) Waxaa loo gali karaa heer Qaran, Gobol, Degmo ama Deegaan maxalli ah, Warshad ama heer Shirkadeed;
    t) Muddada uu shaqaynayo waa in aanay ka badneyn 3 (saddex) sano, waana in aanay ka yareyn 1 (hal) sano;
    j) wuxuu shaqeynayaa muddada uu ansaxa yahay, marka laga reebo haddii ay dhacdo xaalad isbeddel weyn oo saameyn toos ah ku leh fulinta heshiiska.
2. Marka uu waqtigiisu dhaco heshiiska haddii aanay diidmo ka imaanin dhinacyada midkood, waa sii soconayaa muddo la mid ah kii hore.
3. Haddii laga baxayo heshiiska waa in la keenaa wargelin ugu yaraan 3 (saddex) bilood ka hor taariikhda uu dhacayo.

## Qodobka 200aad
## Ka Qeyb Noqosho Heshiiska Xiga

Urur kasta oo shaqaale ama loo-shaqaaye oo aan ku jirin sameynta heshiis-wadareed shaqaale wuxuu qeyb noqon kara heshiiska xiga.

## Qodobka 201aad
## Dhaqan-gal Heshiis Wadareed

1. Haddii loo-shaqeeye uu qabto hawlo ganacsi oo kala duwan, kalana madax-bannaan, heshiis-wadareedka lagu maamulayo mid kasta oo ganacsi gooniga ah, waxaa lagu dhaqayaa xiriirka shaqo ee mid kasta khuseeya.
2. Heshiiska shaqo-siinta shakhsiga ah waa inaanu ka hor imaan heshiis-wadareedyada, marka laga reebo qodobbo u roon oo ay dani ugu jirto shaqaalaha.

## Qodobka 202aad

## Baabi'in Heshiis-wadareed

1. Iyada oo la raacayo qodobbada xeerkan, heshiis-wadareed waxa lagu baabi'in karaa:
    - b) marka dhinacyadu ay isla oggolaadaan ama sababo la isla oggolaaday oo ku jira heshiiska, dhinacyada waa in ay xaaladahaas ogeysiiyaan Waaxda Shaqada ee Wasaaradda;
    - t) marka lagu beddelo heshiis midkan ka dambeeya;
    - j) marka ay jiraan xaalado lama filaan ah ama duruufo aan laga waaban karin (Force Majeure), oo ay ansaxiso maxkamadda awoodda u leh.

## Qodobka 203aad
## Heshiisyo Shaqo oo Dheeraad ah

Iyadoo lagu dhaqayo qodobbada heshiis-wadareedyada xaalado gaar ah oo la qabanayo, heshiisyo dheeraad ah ayey geli karaan dhinacyada oo u dhaxeeya loo-shaqeeyaha iyo ururka shaqaalaha ee ay khusayso.

## Qodobka 204aad
## Xiriirrada Shaqo-siinta ee Aan ku Xirneen Xeer-nidaamiyeyaal Wadareed

Shaqaalaha rayidka ah ee ku jira maamulka Dawladda waxaa laga reebay qodobbada qeybtan, iyagoo ku xiran in Dawladdu u dejiso nidaam gaar ah oo haga gorgortanka guud ee la xiriira qeybaha shaqaalaha dawladda.

## Qodobka 205aad
## Xallinta Khilaafaadka

1. Loo-shaqeeye, koox loo-shaqeeyeyaal ah ama ururro loo-shaqeeye iyo urur shaqaale ayaa gaari kara heshiis-wadareed dhigaya in:
   b) heshiis laga gaaro nooc kasta oo khilaafaad ganacsi ama hawl ah, kaas oo lagu tilmaamay dhexdhexaadiye madaxbannaan oo dhexdhexaad ah, isagoo lagu magacaabay heshiis ay dhinacyadu wada gaareen; iyo
   t) ka-garnaqidda nooc kasta oo khilaafaad ganacsi ama hawl ah ee ku qeexan heshiis wadareedka oo uu qaaday garqaade madax-bannaan oo dhexdhexaad ah oo lagu magacaabay heshiis wadareed ay dhinacyadu wada gaareen.
2. Dhinacii u soo gudbiyey dhex dhexaadiye khilaaf uu doonayo in lagu xalliyo qodobbada heshiis wadareed lagu gaaray si waafaqsan faqradda 1aad ee xeerkan, looma baahna inloo sii gudbiyo Guddiga Sare xallinta Khilaafaadka ee heer Federaal, hase yeeshee, wuxuu Guddiga Sare ka dalban karaa in ay ka caawiyaan raadinta dhexdhexaadiyeku habboon.
3. Go'aanka uu gaaray garqaade ama dhexdhexaadiye marka loo eego heshiis wadareedka ku xusan farqadda 1aad ee qodobkan waa kama dambeys, waana mid aan laga bixi karin:
   b) waxaana cabasho looga qaadan karaa maxkmadda awoodda u leh;
   t) maxkamadda awoodda u leh waxay dhinac iska dhigi kartaa marka ay hesho sababkale oo Sharcigu aqoonsan yahay; ama
   j) Maxkamadda awoodda u leh waa ay dhaqan-gelin kartaa go'aanka uu gaaray garqaade ama dhexdhexaadiye.

4. Codsiga dib u eegista go'aan ka gar-qaadista ama dhexdhexadinta waa in loogu soo-gudbiyaa Maxkamadda awoodda u leh muddo 30 (soddon) maalmo shaqo gudahood ah laga billaabo maalinta go'aanku soo baxay.

## CUTUBKA KOW IYO SODDONAAD
## GUDDIGA BAARISTA

### Qodobka 206aad
### Magacaabista iyo Waajibaadka

1. Wasiirku, wuxuu wareegto ku soo saarayaa magacaabista  guddi baaris, guddigaas oo baraaya arrin kasta oo wasiirku u arko in ay la xiriirto, khuseeyso khilaaf  kasta oo shaqo ama guud ahaan khilaafaadka shaqada, ama khilaaf nooc kasta ama heer kasta ee khilaaf shaqo ah, khilaafkaasi ha ahaado mid lagu soo wargeliyey Wasiirka ama yuusan ahaan sida ku xusan xeerkan.
2. Marka Wasiirku uu arrin u gudbiyo Guddiga  Baarista ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, waxaa Wasiirku uu Guddiga Baarista u gudbin karaa wixii kale ee arrin ah ee uu u arko in loo baahan yahay in Guddiga loo gudbiyo.
3. Guddiga Baaristu waxa uu ka kooban  yahay 3 (saddex) xubnood ama ka badan, oo guddoomiye huna uu ku jiro, ama hadba tiradii wasiirku u arko in loo baahan yahay, Wasiirkuna waxa uu sarkaal ka tirsan u magacaabi karaa inuu noqdo Xoghayaha Guddiga Baarista.
4. Wasiirku ayaa si deg deg ah u buuxin kara jago kasta ee ka bannaanaato Guddiga Baarista.

### Qodobka 207aad
### Warbixinnada

Guddiga Baaristu waa in ay baaraan oo warbixin ka diyaariyaan arrin kasta oo loo soo gudbiyo, warbixintana u gudbiyaan Wasiirka, iyaga oo soo raacinaya talooyin ku habboon, kolkaas oo wasiirkuna uu go'aamiyo sidii wax looga qaban lahaa xallinta arrintaas.

## CUTUBKA LABO IYO SODONAAD
## XALLINTA KHILAAFAADKA SHAQADA

### Qodobka 208aad
### Khilaafaadka Shaqada ee Dhinacyada

1. Dhinac kasta waxaa uu u soo gudbinayaa Baaraha Shaqada Degmada (District labour Inspector) khilaafaadka xudduuddiisa ka jira ee shaqadasi loo dhexdhexaadiyo, kaasoo isku deyaya inuu ku xalliyo khilaafka mudo 14 (afar iyo toban) maalmo shaqo gudahood ah laga billaabo taariikhda loo soo gudbiyay.
2. Dhinacii aan ku qancingo'aanka Baaraha Shaqada Degmada, waxaa uu muddo **14 (afar iyo toban)** maalmo shaqo gudahood ah oo ka billaabata taariikhda go'aanku soo baxayu gudbinayaa Baaraha Shaqada Gobolka, si uu u xalliyo khilaafka muddo **14 (afar iyo toban )**maalmo shaqo gudahood ah, laga billaabo maalinta uu qabto.
3. Dhinacii aan ku qancin go'aanka Baaraha Shaqada Gobolka waxaa uu muddo **14 (afar iyo toban)**maalmo shaqo gudahood ah oo ka billaabata taariikhda go'aanku soo baxay u gudbinayaa maxkamadda awoodda u leh.

### Qod 209aad
### Baaraha Shaqada Gobolka

1. Wasiirka oo tixraacaya qodobada xeerkan waxa uu magacaabayaa Baaraha Shaqada Gobolka iyo Kaaliyaashiisa iyo Waajibaadkooda shaqo.
2. Baaraha Shaqada Gobolka iyo Kaaliyaashiisa waxa ay ka koobnaanayaan 4 (afar) Baare iyo Xogheyn sidan:
   b) baaraha shaqada gobolka (Guddoomiye);
   t) kaaliye baare shaqo 3 (seddex) xubno; iyo
   j) xoghaye-Baare- (Xubin).

## Qodobka 210aad
## Khilaafaad Wadareed Shaqo

1. Khilaafaad Wadareedka Shaqo waxaa marka hore lagu xallinayaa heshiis 2 (laba) geesood (Urur Shaqaale iyo Urur Loo-shaqeeye), haddii lagu guuldarreysto xallinta khilaafkaas waxaa loo gudbinayaa Baaraha Shaqada Gobolka.
2. Haddii Baaraha Shaqada Gobolka ku guuldarreysto xallinta khilaaf wadareedka shaqo waxaasi toos ah loogu gudbinayaa maxkamadda awoodda u leh.

## Qodobka 211aad
## Cabashada Laga Qaato  Go'aannada Maxkamadda Gobolka

Cabashadalaga qaato go'aannada Maxkamadda Gobolka waxaa loo gudbinayaa maxkamadda awoodda u leh.

## Qodobka 212aad
## Xuquuqda Shaqo joojin iyo Xirasho Goob Shaqo (Lockouts)

1. Xuquuqda Shaqo joojinta waxaa loo adeegsanayaa si waafaqsan xeerarka laga dejiyey.
2. Shaqo joojinta waa xaquuq aasaasi ah oo uu leeyahay shaqaale kasta si waafaqsan xeerkan, xuquuqahaas waxaa adeegsan kara shaqaalaha, ururrada shaqaalaha iyo xiriirrada guud ee ururrada shaqaalaha.
3. Shaqaalaha dawladda iyo kuwa hay’adaha gaarka ah waxay si siman u adeegsan karaan xuquuqda Shaqo joojinta, marka laga reebo:

   b) shaqaalaha adeegga rayidka ee joogtada ah oo ku hawlgala magaca Qaranka;

   t) Shaqaalaha ka shaqeeya adeegyada guud ee aasaasiga ah si waafaqsan xeerkan, waa kuwa khatar gelin kara guud ahaan nolosha, badqabka iyo caafimaadka ama qeyb ka mid ah dadweynaha, adeegyada lagama maarmaanka u ah xaaladaha deg dega ah ama musiibo qaran.
4. Xaqa Shaqo joojin shaqaalaha waa waajib, hase yeeshee, waa in loo adeegsadaa si nabadgelyo ah

5. Cidna looma ogola in uu qeyb ka noqdo Shaqo joojin ama in uu u hawl galo abaabullidda Shaqo joojin muddo dheer, haddii:
   b) sharci kasta, xukun maxkamadeed, heshiis wadareed, heshiis wadaxaajood la isku raacay, heshiisyadaas oo reebaya in la sameeyo Shaqo joojin iyada oo la xushmeenayo arrimihii la isku khilaafay;
   t) arrimaha Shaqo joojinkeenaya lagu nidaamiyey heshiis wadareed iyo heshiis wadaxaajood oo ay isku raaceen dhinacyada is khilaafsan;
   j) dhinacyada heshiiyey ay isku khilaafaan, waxay dacwadooda u gudbinayaan Guddiga Sare Xallinta Khilaafaadka ee heer Federaal ama dhexdhexaadiye;
   x) khilaafku khuseeyo aqoonsiga urur shaqaale, ururkaas wuxuu dacwadiisa u gudbin karaa Guddiga Sare Xallinta Khilaafaadka ee heer Federaal;
   kh) dacwad urur shaqaale aan loo xallin hab garnaqid oo waafaqasan xeerkan, ama qodobbo heshiis wadareed lagu gaaray garnaqid;
   d) shaqaalaha iyo loo-shaqeeye ku hawlan yihiin adeegyada aasaasiga ah ee bulshada; ama
   r) shaqo joojin aan usii hurinayn ama uga dareyn khilaafka shaqada, mid leh dabeecad siyaasadeysan, ama marka laga reebo Shaqo joojin lagu raadinayo xaalado taabanaya siyaasadda dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada.
6. Urur kasta oo shaqaale ama koox shaqaale oo dooneysa in ay sameyso Shaqo joojin shaqo, waxaa looga baahan yahay in ay ku soo wargeliyaan loo-shaqeeyaha ama koox loo-shaqeeyeyaal ah iyo Wasiirka muddo 14 (afar iyo toban) maalmo shaqo gudahood oo ka bilaabata maalinta uu dhacaaayo bannaanbaxa shaqo.
7. Wargelintuwaa in ay tilmaantaa:
   b) Arrimaha saldhig u ah shaqo joojinta;
   t) Arrimaha khuseeya loo-shaqeeye ama koox loo-shaqeeyeyaal ah iyadoo looraaceynin cid gaar ah;
   j) Waqtiga Shaqo joojin shaqo, haddii aan la xallinin arrimaha Shaqo joojinkeenay, Shaqo joojin waa uu dhacayaa;

x) Haddii la isku dayey in laga heshiiyo arrimaha Shaqo joojin keenay ama qaabab kale oo xallin khilaafaad ah (QXKH) iyo in isku dayadaas lagu guuldareystay; iyo

kh) Haddii inta badan shaqaalaha ay si qarsoodi ah ugu codeyaan sameynta Shaqo joojin shaqo.

8. Waxaa mamnuuc ah Shaqo joojin laab-lakaca ah, marka laga reebo kuwa sharciga waafaqsan.
9. Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin in ay si nabad ah u sameeyaan Shaqo joojin shaqo, kaas oo aan ku lug yeelaneyn wax keeni kara fal dambiyeed, isla markaana aan faragelineyn xuriyadda shaqo ee kuwa aan qeybta ka aheyn Shaqo joojin.
10. Wasiirku wuxuu awood u leeyahay in uu go'aan ka gaaro adeegyada gaarka ah ee aasaasiga ah isaga oo latashanaya ururrada shaqaalaha iyo kuwa loo-shaqeeyayaasha ah.
11. Wasiirku wuxuu awood u leeyahay in uu ku soo rogo goobaha Shaqo joojinugu yaraan adeegyada badqabka xaalad kasta oo Shaqo joojinah iyada oo danta laga leeyahay xaqiijinta badqabka dadka, ka hortagga shilalka iyo ilaalinta mishiinada iyo qalabka.
12. Wasiirku wuxuu awood u leeyahay in uu dejiyo nidaamka adeegga ugu yar ee ay ku hawlgeli karaan hay'adaha ama ururrada ee uu saameynayo Shaqo joojingaar ahaan adeegyada guud iyo adeegyada kale ee aasaasiga ah oo muhiimka ah.
13. Wasiirka waa in uu xaqiijiyaain ururrada shaqaalaha, loo-shaqeeyayaasha iyo hay'adaha dawladda ee wadashaqeynta la leh in ay si wadajir ah u go'aamiyaan sida ugu yar ee shaqada loo qaban karo iyo badqabka lagama maarmaanka u ah shaqada.
14. Loo-shaqeeye kasta waxaa ka reeban in uu qorto shaqaale badala shaqaalaha Shaqo joojinta ku jira, marka laga reebo Shaqo joojinku aaddan adeegyada aasaasiga ah ama duruufaha culus ee gaarka ah iyo xaaladaha la xiriira musiibo qaran oo aad u daran.
15. Waa sharci daro in loo-shaqeeye eryo, ka qaado tallaabo anshax-marin ama si kale u xaddido xuquuqda saraakiisha urur shaqaale ama shaqaale in ay abaabulaan ama ka qeyb galaan dhaqdhaqaaq kasta oo la xiriira tallaabo lagu qorsheynayo qabashada shaqo joojin sharci ah.

16. Dacwad madani ah laguma soo oogi karo qof kasta oo ka qeyb-qaata ama ku dhaqma talaabo hore loogu qaadayo shaqo joojin sharci ah.
17. Shaqaale kasta oo ka qeyb-qaata, u yeero, kiciya ama abaabula dadka kale in ay ka qeyb-qaataan shaqo joojin aan waafaqsaneyn xeerkan, waxaana loo qaadanayaa in uu jibiyey heshiiskiisii shaqo iyo:
    b) In uu muteysanaya anshax marin; iyo
    t) Wax xaq ah uma yeelanayo in la siiyo mushaarkiisa iyo xuquuqaha kale ee ku xusan xeerkan muddadii uu ka qeyb-qaadanyey shaqo joojinta.
18. Qof kasta oo diida in uu ka qeyb-qaata ama ku adkeysta in aanu ka qeyb-qaadan shaqo joojin sharci darra ah:
    b) lagama saari karo urur shaqaale ama urur kale, kumana waayi karo diidmadaas awgeed xuquuq kasta ama wixii dheef ah ee uu xaq u lahaa; iyo
    t) Laguma meeleyn karo naafo kasta ama kuwa leh duruufo gaarka ah marka loo eego xubnaha kale urur shaqaale ama urur kale taas oo ay sabab u tahay diidmadaas.
19. Marka ay shaqaaluhu sameeyaan shaqo joojin sharci darro ah, loo-shaqeeyuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu dhaqangeliyo ujuuro jaris maalmaha shaqo joojinta.
20. Arrimo kasta oo khuseeya shaqo joojin amahanjabaad shaqo joojin oo la isku khilaafay waafaqsanaantiisa xeerkan, waxaa loo gudbin karaa maxkamadda awoodda u leh
21. Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin in ay u sameeyaan shaqo joojin si waafaqsan xeerka.
22. Waxaa reeban in loo-shaqeeyuhu ku dhaqaaqo xirasho goob shaqo (Lockouts) isaga oo ku cadaadinaya shaqaalihiisa dalabkiisa marka ay jirto shaqo joojin.

## QEYBTA IX
## QODOBBO GUUD

### CUTUBKA 35AAD
### CIQAABAHA

#### Qodobka 213aad
#### Is-hortaagista Baareyaasha Shaqada

Qof kasta oo si bareer ah isu hortaaga baare shaqo isaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo dhan **US $600** (lix boqol) doolar ama lacag Shillin Soomaali ah oo u dhiganta ama xabsi aan ka badneyn muddo 3 (seddax) bilood ah ama labadooda oo la isugu daro.

#### Qodobka 214aad
#### Xadgudubya Kale

Qof kasta oo jebiya qodobada xeerkan ama xeer-nidaamiyeyaashiisa oo aan ciqaabtiisa la xusin, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo u dhaxeya **$200** (labo boqol) doolar ilaa **$1000 (kun) doolar** ama lacag Shillin Soomaali ah oo u dhiganta ama xabsi aan ka badneyn muddo **6 (lix) bilood** ah ama labadooda.

#### Qodobka 215aad
#### Ganaax

1. Wasaaradda waxa ay abuureysaa Xisaabta Ganaaxyada (Fines Fund),oo ah xisaab gaar ah oo loogu tala-galay in  lagu shubo lacagta ganaaxyada ee ku xusan xeerkan, taas oo loo-shaqeeyayaasha ay bil kasta dhammaadkeeda ku soo shubayaan xisaabta kor ku xusan.
2. Wasiirka marka uu la tashado Agaasimaha Waaxda Shaqada iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda wuxuu amrayaa isticmaalka lacagtaas si looguabuuro mashaariic lagu taakuleeyo, laguna daryeelo arrimaha xoogsatada.
3. Xisaabta Ganaaxyada waa in loo sameeyaa habraac lagu maamulo dhaqdhaqaaqeeda.

## Qodobka 216aad
## Dembi ku Soo Noqnoqosho

Haddii dembi ku xusun xeerkan uu soo noqnoqdo, ciqaabta halkan lagu sheegay waa ay laba-laabmi kartaa.

## Qodobka 217aad
## Gal Furid Cabasho

haddii loo baahdo ka dib marka uu siiyo digniin dhinicii laga soo dacwooday, Baaraha Shaqada Degmada ama kan gobolka, wuxuu furayaa gal warbixineed oo la xiriira jebinta qodobbo ku aaddan xeerkan ama xeer-nidaamiyeyaashiisa, wuxuuna u gudbinayaa Maxkamadda awoodda u leh isaga oo nuqul u soo diraya Wasaaradda.

## Qodobka 218aad
## Xeer-Nidaamiye

Wasaaradda waxa ay soo saaraysaa xeer-nidaamiye lagu faahfaahinaayo dhaqan-gelinta xeerkan.

## Qodobka 219aad
## Baabi'in

Waxaa la baabi'iyey Xeerka ama qodob kasta oo ka hor immaanaya Xeerkan

## Qodobka 220aad
## Dhaqan-gal

Xeerkani wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JFS, isla markaana lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

## TUSOMO


**QEYBTA 1AAD** ........ 2

**QODOBBO GUUD** ........ 2

**CUTUBKA 1AAD** ........ 2

**MAGACA IYO QEEXITAANNO** ........ 2

*Qodobka 1aad* ........ 2

*Magaca Sharciga* ........ 2

*Qodobka 2aad* ........ 2

*Qeexitaanno* ........ 2

*Qodobka 3aad* ........ 13

*Baaxadda Xeerka* ........ 13

**CUTUBKA 2AAD** ........ 13

**MABAADDI'DA GUUD** ........ 13

*Qodobka 4aad* ........ 13

*Xaqa Xoriyadda Mihnadda* ........ 13

*Qodobka 5aad* ........ 13

*Ilaalinta Xeerka Shaqada iyo Aqoonsiga Kaalinta Shaqaalaaha* ........ 13

*Qodobka 6aad* ........ 14

*Sinnaanta iyo Takoor La'aanta* ........ 14

*Qodobka 7aad* ........ 16

*Shaqo-khasab ah ama Askareynta Carruurta* ........ 16

*Qodobka 8aad* ........ 17

*Xadgudub Damac Galmo iyo Faduullin (Faduullin, Qafal-xumo ama Qash-qashaad Dhaqan Xumo ah)* ........ 17

*Qodobka 9aad* ........ 19

*Xoriyadda Ku Biiridda* ........ 19

*Qodobka 10aad* ........ 20

*Xuquuqda Shaqaaluhu Waa Lama Taabtaan* ........ 20

*Qodobka 11aad* ........ 20

*Xallinta Khilaafaadka Shaqada* ........ 20

**QEYBTA II** ........ 21

**MAAMULKA, KORMEERKA IYO BAARISTA SHAQADA** ........ 21

**CUTUBKA 3AAD** ........ 21

**MAAMULKA HEER WASIIR** ........ 21

*Qodobka 12aad* ........ 21

*Wasiirka* ........ 21

*Qodobka 13aad* ........ 22

*Guddiga Sare Shaqada Federaalka* ........ 22

*Qodobka 14aad* ........................................................................................................ 23
*Agaasimaha Shaqada* ........................................................................................................ 23
*Qodobka 15aad* ........................................................................................................ 23
*Agaasimaha Bad-qabka Mihnadda iyo Caafimaadka Goobta Shaqada* ............................... 23
*Qodobka 16aad* ........................................................................................................ 24
*Magacaabidda Saraakiisha* ........................................................................................................ 24
*Qodobka 17aad* ........................................................................................................ 29
*Warqadda Awoodsiinta Iyo Kaarka Aqoonsiga* .................................................................. 29
*Qodobka 18aad* ........................................................................................................ 30
*Awoodda Gelidda Goobaha Shaqada* ........................................................................................ 30
*Qodobka 19aad* ........................................................................................................ 30
*Iskaashiga iyo IsGacansiinta Hay'adaha Dawladda* ............................................................ 30
*Qodobka 20aad* ........................................................................................................ 31
*Ka-reebbid* ........................................................................................................ 31
*Qodobka 21aad* ........................................................................................................ 31
*Xasaanadda Saraakiisha Idman* ........................................................................................ 31
*Qodobka 22aad* ........................................................................................................ 31
*Soo-gudbinta Warbixinnada iyo Ilaalinta Siraha* ................................................................ 31
*Qodobka 23aad* ........................................................................................................ 33
*Diiwaan-gelinta Ururrada Shaqaalaha iyo Ururrada Loo-Shaqeeyayaasha* ......................... 33
*Qodobka 24aad* ........................................................................................................ 33
*Daadejinta Awoodaha iyo Hawlaha Saraakiisha* ................................................................ 33
**CUTUBKA 4AAD** .............................................................. 34
**GUDDIGA SHAQADA FEDERAALKA** ............................................ 34
*Qodobka 25aad* ........................................................................................................ 34
*Asaasidda Guddiga* ........................................................................................................ 34
*Qodobka 26aad* ........................................................................................................ 34
*Xubnaha Guddiga* ........................................................................................................ 34
*Qodobka 27aad* ........................................................................................................ 35
*Awoodaha iyo Waajibaadka Guddiga* ........................................................................................ 35
*Qodobka 28aad* ........................................................................................................ 36
*Sameynta Guddiyada* ........................................................................................................ 36
*Qodobka 29aad* ........................................................................................................ 36
*Xuquuqda Guddiga* ........................................................................................................ 36
*Qodobka 30aad* ........................................................................................................ 36
*Habraacyada Xeer-Hoosaadka* ........................................................................................................ 36
**QEYBTA III** ........................................................................................ 37
**SAMEYNTA XEER-NIDAAMIYEYAASHA GOOBAHA SHAQADA** ............ 37

**CUTUBKA 5AAD** .......................................................... **37**
**MAAMULKA IYO DHAQAN-GELINTA** .......................................... **37**
*Qodobka 31aad* .......................................................... 37
*Agaasimaha* .......................................................... 37
*Qodobka 32aad* .......................................................... 37
*Awoodaha iyo Waajibaadka Agaasimaha* .......................................................... 37
**CUTUBKA 6AAD** .......................................................... **41**
**SAMEYNTA IYO DIIWAAN-GELINTA** .......................................... **41**
*Qodobka 33aad* .......................................................... 41
*Diiwaanka Goobaha Shaqada* .......................................................... 41
*Qodobka 34aad* .......................................................... 42
*Diiwaan-gelinta Goobaha Shaqada* .......................................................... 42
**CUTUBKA TODDOBAAD** .......................................................... **44**
**XAALADAHA GOOBAHA SHAQADA** .......................................... **44**
*Qodobka 35aad* .......................................................... 44
*Waajibaadka Guud Mas'uulka ka Goobta Shaqada* .......................................................... 44
*Qodobka 36aad* .......................................................... 47
*Daryeel* .......................................................... 47
*Qodobka 37aad* .......................................................... 47
*Caafimaadka Goobaha Shaqada* .......................................................... 47
*Qodobka 38aad* .......................................................... 49
*Badqabka Goobaha Shaqada* .......................................................... 49
*Qodobka 39aad* .......................................................... 52
*Diiwaan-gelinta Tababar* .......................................................... 52
*Qodobka 40aad* .......................................................... 52
*Wargelinta Cudurrada Mihnadda iyo Shilalka Ka Dhaca Goobaha Shaqada* .......................................................... 52
*Qodobka 41aad* .......................................................... 53
*Wargelinta Xogta Shillalka iyo Cudurrada Mihnadda ee Goobaha Shaqada* .......................................................... 53
*Qodobka 42aad* .......................................................... 53
*Xarumaha Caafimaadka* .......................................................... 53
*Qodobka 43aad* .......................................................... 53
*Gurmadka Shaqaalaha Dhaawacma iyo Kuwa Xanuunsada* .......................................................... 53
*Qodobka 44aad* .......................................................... 54
*Dhejinta Habraaca Badqabka Mihnaddaiyo Caafimaadka Shaqaalaha* .......................................................... 54
*Qodobka 45aad* .......................................................... 54
*Meel-marinta Hannaanka iyo Habraacyada Badqabka Mihnadda iyo Caafimaadka Goobaha Shaqada* .......................................................... 54
**QEYBTA IV:** .......................................................... **55**

**SHAQO-SIIN ..................................................................................... 55**
**CUTUBKA SIDDEEDAAD ............................................................ 55**
**ADEEGGA HESHIISKA CAADIGA AH ........................................... 55**
*Qodobka 46aad* ................................................................................................ 55
*Qaabka Heshiiska* ............................................................................................. 55
*Qodobka 47aad* ................................................................................................ 56
*Faahfaahinta Shaqo-siinta* ................................................................................ 56
*Qodobka 48aad* ................................................................................................ 57
*Waajibaadka Loo-Shaqeeyaha* ........................................................................... 57
*Qodobka 49aad* ................................................................................................ 58
*Waajibaadka Shaqaalaha* ................................................................................... 58
**CUTUBKA SAGAALAAD ............................................................ 58**
**HESHIISKA FARSAMOBARADKA ................................................ 58**
*Qodobka 50aad* ................................................................................................ 58
*Qeexid, Ujeedooyin iyo Wax-ka-Dhaafid* ............................................................. 58
*Qodobka 51aad* ................................................................................................ 59
*Faafaahin* ......................................................................................................... 59
*Qodobka 52aad* ................................................................................................ 59
*Muddada iyo Xaaladda Farasamo-baradka* ........................................................ 59
*Qodobka 53aad* ................................................................................................ 60
*Baaris caafimaad* ............................................................................................... 60
*Qodobka 54aad* ................................................................................................ 60
*Shaqo Sii-wadasho* ............................................................................................ 60
*Qodobka 55aad* ................................................................................................ 60
*Waajibaadka Loo-Shaqeeyaha* ........................................................................... 60
*Qodobka 56aad* ................................................................................................ 61
*Waajibaadka Farsamo-baradka (Apprentice)* ...................................................... 61
*Qodobka 57aad* ................................................................................................ 61
*Imtixaanka Qiimeynta* ........................................................................................ 61
*Qodobka 58aad* ................................................................................................ 62
*Shaqo-siin Khasab ah* ........................................................................................ 62
**CUTUBKA TOBANAAD ............................................................... 62**
**QANDARAASYO HOOSAAD........................................................ 62**
*Qodobka 59aad* ................................................................................................ 62
*Ogeysiiska iyo Soo-gudbinta Nuqullada* .............................................................. 62
*Qodobka 60aad* ................................................................................................ 62
*Mas'uuliyadda* .................................................................................................. 62
**CUTUBKA KOW & TOBANAAD .................................................. 63**

**XAALADAHA IYO SHURUUDAHA .................................................. 63**
*Qodobka 61aad* ........................................................ 63
*Xaaladaha ugu Yar ee Aasaasiga u ah Shaqo-siinta* ........................................................ 63
*Qodobka 62aad* ........................................................ 63
*Saacadaha Shaqada* ........................................................ 63
*Qodobka 63aad* ........................................................ 64
*Shaqooyinka aan Xiriirka Aheyn* ........................................................ 64
*Qodobka 64aad* ........................................................ 64
*Fasaxyada Nasashada ee Todobaadka* ........................................................ 64
*Qodobka 65aad* ........................................................ 65
*Fasaxyada Qaranka* ........................................................ 65
*Qodobka 66aad* ........................................................ 65
*Biyaha* ........................................................ 65
*Qodobka 67aad* ........................................................ 66
*Cuntada* ........................................................ 66
*Qodobka 68aad* ........................................................ 66
*Daryeelka Caafimaadka* ........................................................ 66
*Qodobka 69aad* ........................................................ 67
*Fasax Sannadeedka* ........................................................ 67
*Qodobka 70aad* ........................................................ 68
*Fasax Jirro* ........................................................ 68
*Qodobka 71aad* ........................................................ 69
*Fasax Gaar ah* ........................................................ 69
*Qodobka 72aad* ........................................................ 69
*Diiwaanka Fasaxa* ........................................................ 69
**CUTUBKA LABA & TOBANAAD .................................................. 70**
**GO'AAMINTA IYO ILAALINTA XUQUUQDA .................................................. 70**
*Qodobka 73aad* ........................................................ 70
*Xuquuq* ........................................................ 70
*Qodobka 74aad* ........................................................ 70
*Ku-filnaasho iyo U-sinnaansho* ........................................................ 70
*Qodobka 75aad* ........................................................ 71
*Hanaanka* ........................................................ 71
*Qodobka 76aad* ........................................................ 72
*Ujuurada Ugu Yar* ........................................................ 72
*Qodobka 77aad* ........................................................ 72
*Dheef Kale oo Dheeraad ah* ........................................................ 72
*Qodobka 78aad* ........................................................ 72

*Gunnooyinka Ciidaha* ........ 72
*Qodobka 79aad* ........ 74
*Nooca iyo Muddada Lacag Bixinta* ........ 74
*Qodobka 80aad* ........ 74
*Warqadaha Lacag Bixinta* ........ 74
*Qodobka 81aad* ........ 75
*Dhisidda Goleyaasha Xuquuqda* ........ 75
*Qodobka 82aad* ........ 75
*Waajibaadka iyo Awoodaha* ........ 75
*Qodobka 83aad* ........ 77
*Dalabka Xuquuqaha* ........ 77
*Qodobka 84aad* ........ 79
*Ilaalinta* ........ 79
*Qodobka 85aad* ........ 80
*Lacag Ka-jaris, Ganaax iyo Anshax Marin* ........ 80
**CUTUBKA SEDDEX IYO TOBANAAD ........ 81**
**DIIWAANNADA SHAQO-SIINTA ........ 81**
*Qodobka 86aad* ........ 81
*Diiwaannada Laga Rabo in uu Keydiyo Loo-Shaqeeyuhu* ........ 81
*Qodobka 87aad* ........ 82
*Qoraal Been-Abuur ah* ........ 82
**CUTUBKA AFAR IYO TOBANAAD ........ 83**
**CEYMISKA IYO ILAALINTA SHAQAALAHA ........ 83**
*Qodobka 88aad* ........ 83
*Ceymiska iyo Ilaalinta Shaqaalaha* ........ 83
**CUTUBKA SHAN IYO TOBANAAD ........ 83**
**HESHIISKA SHAQO-SIINTA DIBEDDA ........ 83**
*Qodobka 89aad* ........ 83
*Awoodda Gelidda Heshiiska* ........ 83
*Qodobka 90aad* ........ 84
*Dammaanad* ........ 84
*Qodobka 91aad* ........ 84
*Ku-qalqaalinta ama ku Khasbidda Shaqo Dibadeed Heshiis La'aan* ........ 84
**CUTUBKA LIX IYO TOBANAAD ........ 85**
**MAAREYNTA SHAQADA ........ 85**
*Qodobka 92aad* ........ 85
*Agaasime ama Sarkaal Idman* ........ 85
*Qodobka 93aad* ........ 85
*Ogeysiisyada* ........ 85

*Qodobka 94aad* .......................................................................................... *86*
*Diiwaan-gelinta Shaqaalaha* .......................................................................................... *86*
*Qodobka 95aad* .......................................................................................... *87*
*Meeleynta Shaqaalaha*.......................................................................................... *87*
*Qodobka 96aad* .......................................................................................... *87*
*Shaqosiinta Shaqo-doonka* .......................................................................................... *87*
*Qodobka 97aad* .......................................................................................... *88*
*Araajida Shaqo-siinta Shaqaalaha* .......................................................................................... *88*
*Qodobka 98aad* .......................................................................................... *89*
*Mudnaanta iyo TixraacaShaqo-siinta*.......................................................................................... *89*
*Qodobka 99aad* .......................................................................................... *89*
*Loo-Shaqeeyayaashu Way Diidi Karaan Inay Aqbalaan Shaqaalaha Qaarkood* .................. *89*
*Qodobka 100aad* .......................................................................................... *89*
*Hawlgelinta Tooska ah ee Shaqaalaha* .......................................................................................... *89*
*Qodobka 101aad* .......................................................................................... *90*
*Ka-dhaafid* .......................................................................................... *90*
*Qodobka 102aad* .......................................................................................... *90*
*Dembiyada ka Dhalan kara Jebinta Qodobbada Cutubkan* .......................................................................................... *90*
**CUTUBKA TODOBO IYO TOBANAAD ............................................ 90**
**SHAQO KA-SAARIS ............................................................ 90**
*Qodobka 103aad* .......................................................................................... *90*
*Shaqo Ka-saaris Ogeysiis Leh*.......................................................................................... *90*
*Qodobka 104aad* .......................................................................................... *91*
*Magdhawga Beddalka Shaqo Ka Saaris Ogeysiis La'aan* .......................................................................................... *91*
*Qodobka 106aad* .......................................................................................... *92*
*Muddada Tijaabada ah* .......................................................................................... *92*
*Qodobka 107aad* .......................................................................................... *92*
*Shaqaale Dhimis* .......................................................................................... *92*
*Qodobka 108aad* .......................................................................................... *94*
*Dhaqan Xumo* .......................................................................................... *94*
*Qodobka109aad* .......................................................................................... *94*
*Caddeynta Sababta Shaqo ka Saarista*.......................................................................................... *94*
*Qodobka110aad* .......................................................................................... *95*
*Shaqo Ka Saaris Degdeg ah* .......................................................................................... *95*
*Qodobka 111aad* .......................................................................................... *96*
*Shaqo Ka Saaris Caddaalad Darro ah* .......................................................................................... *96*
*Qodobka 112aad* .......................................................................................... *97*
*Ka Cabasho Caddaalad Darro iyo Shaqo Ka Saaris Degdeg ah* .......................................................................................... *97*

*Qodobka 113aad* ........ *97*
*Magdhawga Shaqo ka Saarid Khaldan ama Heshiis ka Bixid Cadaalad Darro ah* ........ *97*
*Qodobka 114aad* ........ *99*
*Hakinta Xiriirka Shaqo-siinta* ........ *99*
*Qodobka 115aad* ........ *100*
*Musallafidda Loo-Shaqeeyaha* ........ *100*
*Qodobka 116aad* ........ *101*
*Xaqsiinta Sannadka* ........ *101*
*Qodobka 117aad* ........ *102*
*La Kala Wareegid Goob Shaqo* ........ *102*
*Qodobka 118aad* ........ *102*
*Arrimaha Mamnuuca ka ah ee Qof Shaqada Looga Saari Karin* ........ *102*
*Qodobka 119aad* ........ *103*
*Dheefta Duugta (Geerida)* ........ *103*
*Qodobka 120aad* ........ *103*
*Shahaadada Adeegga* ........ *103*
**QEYBTA V ........ 104**
**DARYEEL GAARAH ........ 104**
**CUTUBKA SIDDEED IYO TOBANAAD ........ 104**
**QODOBBO GUUD ........ 104**
*Qodobka 121aad* ........ *104*
*Qeexidda "Shaqada Habeenkii"* ........ *104*
*Qodobka 122aad* ........ *104*
*Shaqo Reebban* ........ *104*
*Qodobka 123aad* ........ *105*
*Awoodaha Wasiirka ee la Xiriira Shaqada Habeenkii* ........ *105*
**CUTUBKA 19AAD ........ 106**
**CARRUURTA ........ 106**
*Qodobka 124aad* ........ *106*
*Macnaha "Shaqo-siin"* ........ *106*
*Qodobka 125aad* ........ *106*
*Carruur* ........ *106*
*Qodobka 126aad* ........ *106*
*Shaqo-siinta Carruurta* ........ *106*
*Qodobka 127aad* ........ *109*
*Diiwaanka Shaqo-siinta Carruurta* ........ *109*
*Qodobka 128aad* ........ *109*
*Baaris Caafimaad* ........ *109*

**CUTUBKA LABAATANAAD ........................................................ 110**
**HAWEENKA ........................................................................ 110**
*Qodobka 129aad* ........................................................................................................ *110*
*Shaqo-siinta Haweenka* ................................................................................................ *110*
*Qodobka130aad* .......................................................................................................... *110*
*Fasax Dhalmo* ............................................................................................................ *110*
*Qodobka 131aad* ........................................................................................................ *111*
*Naas-nuujinta* ............................................................................................................ *111*
**CUTUBKA KOW IYO LABAATANAAD ......................................... 112**
**DADKA NAAFADA AH ................................................................ 112**
*Qodobka 132aad* ........................................................................................................ *112*
*Xaqa Shaqada iyo Takoor La'aantaShaqo-siinta* ................................................................ *112*
*Qodobka 133aad* ........................................................................................................ *114*
*Hawl-gelin Shaqo oo ku Habboon* ................................................................................... *114*
*Qodobka 134aad* ........................................................................................................ *114*
*Bixinta Taageerada Lagama Maarmaanka ah* ...................................................................... *114*
**QEYBTA VI ...................................................................................... 114**
**CUDURRADA, DHAAWACYADA IYO SHILALKA MIHNADDA ............... 114**
**CUTUBKA LABO IYO LABAATANAAD ........................................ 114**
**MAAMULKA ...................................................................... 114**
*Qodobka 135aad* ........................................................................................................ *114*
*Agaasimaha* .............................................................................................................. *114*
*Qodobka 136aad* ........................................................................................................ *115*
*Diidmooyinka iyo Cabashooyinka Laga Qaato Go'aanadaAgaasimaha* ....................................... *115*
**CUTUBKA SADDEX IYO LABAATANAAD .................................... 116**
**WAAJIBAADKA AGAASIMAHA, LOO-SHAQEEYAHA, SHAQAALAHA EE KU AADDAN SHILALKA MIHNADDA, DHAAWACYADA IYO CUDURRADA SHAQADA ............................................................ 116**
*Qodobka 137aad* ........................................................................................................ *116*
*Waajibaadka Guud ee Loo-Shaqeeyaha* ............................................................................ *116*
*Qodobka 138aad* ........................................................................................................ *117*
*Waajibaadka Guud ee Shaqaalaha* .................................................................................. *117*
*Qodobka 139aad* ........................................................................................................ *118*
*Waajibaadka Agaasimaha* ............................................................................................ *118*
*Qodobka 140aad* ........................................................................................................ *119*
*Daryeel Caafimaad* ..................................................................................................... *119*
**CUTUBKA AFAR IYO LABAATANAAD ........................................ 121**

**MAGDHAWGA, DEMBIYADA, SHURUUCDA GAARKA AHIYO XEER-NIDAAMIYEYAASHA ............ 121**
*Qodobka 141aad* ............ 121
*Xaqa Magdhawga* ............ 121
*Qodobka 142aad* ............ 122
*Xad-gudubyada iyo Ciqaabaha* ............ 122
*Qodobka 14aad* ............ 123
*Ansixinta ShuruucdaGaarka ah, Xeer-Nidaamiyayaasha La Xiriira MagdhawgaShilalka Mihnadaha, Dhaawacyada iyo Cudurrada Shaqada* ............ 123
**QEYBTA VII ............ 125**
**XIRIIRKA SHAQO WADAREEDKA ............ 125**
**CUTUBKA 25AAD ............ 125**
**XORRIYADDA KU BIIRISTA ............ 125**
*Qodobka 144aad* ............ 125
*Xaqa iyo Xorriyadda ku Biirista Urrurada Shaqaalaha* ............ 125
*Qodobka 145aad* ............ 126
*Ilaalinta Xuquuqda Shaqaalaha* ............ 126
*Qodobka 146aad* ............ 127
*Xaqa iyo Xorriyadda ku Biirista Urrurada loo-shaqeeyaha* ............ 127
*Qodobka 147aad* ............ 128
*Ilaalinta Xuquuqda Loo-Shaqeeyaha* ............ 128
*Qodobka 148aad* ............ 129
*Xuquuqda Guud iyo Waajibaadka Ururrada Shaqaalaha, Ururrada Loo-Shaqeeyeyaasha iyo Xiriirrada Guud* ............ 129
*Qodobka 149aad* ............ 130
*Madax-bannaani* ............ 130
*Qodobka 147aad* ............ 130
*Ilaalinta xuquuqda loo-shaqeeyaha* ............ 130
*Qododka 148aad* ............ 131
*Xuquuqda guud iyo waajibaadka ururrada shaqaalaha, ururrada loo-shaqeeyeyaasha iyo xiriirrada guud* ............ 131
*Qodobka 149aad* ............ 132
*Madax-bannaani* ............ 132
*Qodobka 150aad* ............ 132
*Khilaafaadka ka dhalan kara cutubka* ............ 132
*Qodobka 151aad* ............ 133
*Xayiraadda ururrada, mas'uuliyadda dembiyada ciqaabta* ............ 133
*Iyo kuwa madaniga ah* ............ 133

*Qodobka 152aad* ........ 133
*Nuxurka dastuurka iyo qawaaniinta* ........ 133
*Qodobka 153aad* ........ 134
*Soo-gudbinta Nuqullada Xeerarka Asaaska Ururrada* ........ 134
**CUTUBKA LIX IYO LABAATANAAD ........ 134**
**SAMEYNTA IYO DIIWAAN GELINTA URURRADA SHAQAALAHA URURRADA LOO-SHAQEEYAYAASHA ........ 134**
*Qodobka 154aad* ........ 134
*Ururrada iyo ujeeddooyinka* ........ 134
*Qodobka 155aad* ........ 135
*Hawlaha Ururrada Shaqaalaha* ........ 135
*Qodobka 156aad* ........ 135
*Asaasid Urur* ........ 135
*Qodobka 157aad* ........ 136
*Arjiga diiwaan-gelinta urur shaqaale ama urur loo-shaqeeye* ........ 136
*Qodobka 158aad* ........ 136
*Shuruudaha Diiwaan-gelinta Urur Shaqaale* ........ 136
*Qodobka159aad* ........ 136
*Shuruudaha Diiwaan-gelinta Urur Loo-shaqeeye* ........ 136
*Qodobka 160aad* ........ 137
*Shuruudaha diiwaan-gelinta xiriirrada guud ee ururro shaqaale* ........ 137
*Qodobka 161aad* ........ 138
*Shuruudaha diiwaan-gelinta xiriirrada guud ee ururrada loo-shaqeeyeyaasha* ........ 138
*Qodobka 162aad* ........ 138
*Arjiga diiwaan-gelinta* ........ 138
*Qodobka 163aad* ........ 139
*Diiwaan-gelinta ururrada shaqaalaha, ururrada loo-shaqeeyeyaasha ama xiriirka guud.* 139
*Qodobka 164aad* ........ 140
*Diidista diiwaan-gelinta* ........ 140
*Qodobka165aad* ........ 140
*Waxyaabaha Sharci ahaan ka Dhalan Kara Diiwaan-gelinta* ........ 140
*Qodoka166aad* ........ 141
*Waxyaabaha ka dhalan Kara is-diiwaan-gelin la'aanta* ........ 141
*Qodobka 167aad* ........ 142
*Xafiis Diiwaan-gashan* ........ 142
*Qodobka 168aad* ........ 142
*Laamaha* ........ 142
*Qodobka 169aad* ........ 143

*Midoobid* ........ 143
*Qodobka 170aad* ........ 144
*Wargelinta Wax-ka-beddelka Magaca ama Dastuurka* ........ 144
*Qodobka 170aad* ........ 145
*Wargelinta Wax-ka-beddelka Magaca ama Dastuurka* ........ 145
*Qodobka 171aad* ........ 146
*Baabi'in ama Hakin Diiwaan-gelin* ........ 146
*Qodobka 172aad* ........ 147
*Kala-dirid* ........ 147
*Qodobka 173aad* ........ 148
*Cabasho ka Qaadashada Go'aanka Diiwaan-hayaha* ........ 148
**CUTUBKA TODDOBO IYO LABAATANAAD ........ 148**
**XUBINNIMADA IYO MAAREYNTA ........ 148**
*Qodobka 174aad* ........ 148
*Xubinnimada Urur Shaqaale* ........ 148
*Qodobka 175aad* ........ 149
*Xubnaha Cod-bixinta ee Urur Shaqaale* ........ 149
*Qodobka 176aad* ........ 149
*Saraakiil Sare* ........ 149
*Qodobka 177aad* ........ 150
*Doorashada Saraakiisha Sare* ........ 150
*Qodobka 178aad* ........ 150
*Wargelinta Saraakiisha Sare* ........ 150
*Qodobka 179aad* ........ 151
*Waajibaadka Saraakiisha Sare* ........ 151
**CUTUBKA SIDEED IYO LABAATAN ........ 151**
**LACAGAHA, HANTIDA, IYO XISAABAADKA IYO DHEEFAHA ........ 151**
*Qodobka 180aad* ........ 151
*Saraakiisha Sare oo ah Guddiga Sare ee Maamulka* ........ 151
*Qodobka 181aad* ........ 152
*Qaaraanka Xubnaha* ........ 152
*Qodobka 182aad* ........ 152
*Lacag ka Jarista Shaqaale la Ururreyn karo oo ku Jira Heshiis Wadareed* ........ 152
*Qodobka183aad* ........ 153
*Qodobbo Guud ee Lacag Ka-Jarista* ........ 153
*Qodobka 184aad* ........ 154
*Isticmalka  Lacagaha* ........ 154
*Qodobka 185aad* ........ 154

*Mamnuucidda Bixinta Ganaaxyada ama Lacagaha Ciqaabta* ........ 154
*Qodbka 186aad* ........ 155
*Ku-takrifalka Lacagta iyo Hantida Kale* ........ 155
*Qodbka 187aad* ........ 155
*Diyaarinta iyo Awoodda Xisaabaadka Faahfaahsan* ........ 155
*Qodbka 188aad* ........ 156
*Baarista Xisaabaadka iyo Xusuus Reebka* ........ 156
*Qodobka 189aad* ........ 156
*Ku-takrifal Hanti* ........ 156
*Qodobka 190aad* ........ 157
*Xisaab-xirka Sannadlaha ah* ........ 157
**CUTUBKA SAGAAL IYO LABAATANAAD ........ 158**
**AQOONSASHADA URURRADA SHAQAALAHA ........ 158**
*Qodobka 191aad* ........ 158
*Aqoonsasho* ........ 158
**CUTUBKA SODONAAD ........ 160**
**HESHIIS-WADAREEDYO ........ 160**
*Qodobka 192aad* ........ 160
*Dhinacyada Heshiisku Khuseeyo* ........ 160
*Qodobka 193aad* ........ 160
*Habraaca Diyaarinta Heshiiska* ........ 160
*Qodobka 194aad* ........ 161
*Dulucda Heshiis Wadareedka* ........ 161
*Qodobka 195aad* ........ 161
*Diiwaan-gelin Heshiis* ........ 161
*Qodobka 196aad* ........ 162
*Saameynta Sharciga ee Heshiis Wadareedka* ........ 162
*Qodobka 197aad* ........ 163
*Qodobbo Aad Ugu Roon Shaqaalaha* ........ 163
*Qodobka 198aad* ........ 163
*Ka Dhaafidda Khidmada Shaabadda iyo Diiwaan-gelinta* ........ 163
*Qodobka 199aad* ........ 163
*Xuduudaha iyo Muddada Ansaxnimada Heshiiska* ........ 163
*Qodobka 200aad* ........ 164
*Ka Qeyb Noqosho Heshiiska Xiga* ........ 164
*Qodobka 201aad* ........ 164
*Dhaqan-gal Heshiis Wadareed* ........ 164
*Qodobka 202aad* ........ 164

*Baabi'in Heshiis-wadareed* ........ 164
*Qodobka 203aad* ........ 164
*Heshiisyo Shaqo oo Dheeraad ah* ........ 164
*Qodobka 204aad* ........ 165
*Xiriirrada Shaqo-siinta ee Aan ku Xirneen Xeer-nidaamiyeyaal Wadareed* ........ 165
*Qodobka 205aad* ........ 165
*Xallinta Khilaafaadka* ........ 165
**CUTUBKA KOW IYO SODDONAAD** ........ **166**
**GUDDIGA BAARISTA** ........ **166**
*Qodobka 206aad* ........ 166
*Magacaabista iyo Waajibaadka* ........ 166
*Qodobka 207aad* ........ 166
*Warbixinnada* ........ 166
**CUTUBKA LABO IYO SODONAAD** ........ **167**
**XALLINTA KHILAAFAADKA SHAQADA** ........ **167**
*Qodobka 208aad* ........ 167
*Khilaafaadka Shaqada ee Dhinacyada* ........ 167
*Qod 209aad* ........ 167
*Baaraha Shaqada Gobolka* ........ 167
*Qodobka 210aad* ........ 168
*Khilaafaad Wadareed Shaqo* ........ 168
*Qodobka 211aad* ........ 168
*Cabashada Laga Qaato  Go'aannada Maxkamadda Gobolka* ........ 168
*Qodobka 212aad* ........ 168
*Xuquuqda Shaqo joojin iyo Xirasho Goob Shaqo (Lockouts)* ........ 168
**QEYBTA IX** ........ **172**
**QODOBBO GUUD** ........ **172**
**CUTUBKA 35AAD** ........ **172**
**CIQAABAHA** ........ **172**
*Qodobka 213aad* ........ 172
*Is-hortaagista Baareyaasha Shaqada* ........ 172
*Qodobka 214aad* ........ 172
*Xadgudubya Kale* ........ 172
*Qodobka 215aad* ........ 172
*Ganaax* ........ 172
*Qodobka  216aad* ........ 173
*Dembi ku Soo Noqnoqosho* ........ 173
*Qodobka 217aad* ........ 173

*Gal Furid Cabasho* ..... *173*
*Qodobka 218aad* ..... *173*
*Xeer-Nidaamiye* ..... *173*
*Qodobka 219aad* ..... *173*
*Baabi'in* ..... *173*
*Qodobka 220aad* ..... *173*
*Dhaqan-gal* ..... *173*